

Nofeembar 5, 2024 Doorashada Guud iyo Gaarka

Degmada King

Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Maxalliga ee Rasmiga ah

codeyn!

- ⓘ Warqaddaada codbixinta waxay imaan doontaa ugu dambeyn Oktoobar 21

206-296-VOTE (8683) | kingcounty.gov/elections



codeyn!

Warqad ka socota Agaasimaha



Saaxiibada Qaaliga ah,

Haddii aad codeysay Doorashada Hordhaca (oo waxaan filayaan inaad codeysay!) Waxa laga yaabaa in aad dareentay wax cusub oo lagu soo daray warqaddaada codbixinta – Istikar ah Waan Codeeyay! Istikarka cusub ee Waan Codeeyay waxa si gaar ah loogu qaabeeyay si ay uga tarjumto degmadeena, laga bilaabo cirifka sare ee Seattle ilaa iyo dhul beereedka ku nool harka Mount Rainier (Buurta Rainier).

Laga soo bilaabo 2009, markii Degmada King ay biloowday in ay gabi ahaanba ku codeeyso boostada, waxaanu kaa maqalnay inaad u baahan tahay istikar si aad u muujiso sharaftaada codeynta oo aad ugu dhiirigeliso kuwa kugu xeeran inay iyagana codeeyaan. Iyo sannadkan, aad ayaan ugu faraxsanahay inaan bixino!

Marka aad buuxiso warqadda codbixinta (qalin kasta oo midab ah waa caadi), aad saxiixdo bakhshadda, oo aad dib noogu soo celiso warqaddaada codbixinta (sida sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ama boostada), si sharaf leh ugu dhegso istikarka, oo u sheeg asxaabtaada, qoyskaaga, deriska, iyo bulshadaba inaad codkaaga ka dhigtay mid la maqlo.

Doorashadaan iyo doorasho kasta,
waxaad haysataa fursad aad ku doorato
hoggaamiyeaal ku matali doona. Ha lumin
fursaddaada. Codee ka dibna soo celi
warqaddaada codbixinta ugu dambeyn
Nofeembar 5!

Codeyn wacan,


Julie Wise

Julie Wise

*Fiiro Gaar ah. Nala wadaag
sawirkaaga codeynta barta
@kcelections!*



Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino!



206-296-VOTE (8683)
 1-800-325-6165
 TTY Relay: 711
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections



Uma codeyn doontid wax walba oo ku jira buug-yarahaan codbixiyeyaasha. Ka eeg warqaddaada codbixinta tartannada iyo cabbirrada sharciga.



Warka Faafi!

Wuxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeyn, iyo isgaarsiinta oo ku qoran afka Shiiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska. Eeg bogga 7-aad si aad wax dheeraad ah uga ogaato.

Macluumaadka Guud

Is diiwaan gelii si aad u codeyso	4
Xarumaha codbixinta	5
Hantidhawrada iyo	
Ilaalinta Tayada	6
Raad-raac warqaddaada codbixinta	7
Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta	8
Waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan	10
Khariiradda Degmooyinka Kongareeska ee 2	25
Khariiradda Degmooyinka Sharci Dejinta ee 2024	39

Federaalka

Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka	14
Senatarka Dalka Mareykanka	24
Wakiilka Golaha Dalka Mareykanka	26

Gobolka

Guddoomiyaha Gobolka	30
Ku-Xigeenka	
Guddoomiyaha Gobolka	31
Xoghayaha Gobolka	32
Khasnajiga Gobolka	33
Hantidhawraha Gobolka	34
Heer Ilaaliyaha Guud	35
Guddoomiyaha Dhulalka Dadweynaha	36
Kormeeraha Guud ee	
Waxbarashada Dadweynaha	37
Guddoomiyaha Caymiska	38
Degmada Sharci Dejinta Lr. 1	40
Degmada Sharci Dejinta Lr. 5	43
Degmada Sharci Dejinta Lr. 11	46
Degmada Sharci Dejinta Lr. 12	48

Degmada Sharci Dejinta Lr. 30	51
Degmada Sharci Dejinta Lr. 31	53
Degmada Sharci Dejinta Lr. 32	55
Degmada Sharci Dejinta Lr. 33	57
Degmada Sharci Dejinta Lr. 34	59
Degmada Sharci Dejinta Lr. 36	61
Degmada Sharci Dejinta Lr. 37	63
Degmada Sharci Dejinta Lr. 41	65
Degmada Sharci Dejinta Lr. 43	68
Degmada Sharci Dejinta Lr. 45	70
Degmada Sharci Dejinta Lr. 46	72
Degmada Sharci Dejinta Lr. 47	74
Degmada Sharci Dejinta Lr. 48	76

Garsoorka

Maxkamadda Sare ee Gobolka	78
Maxkamadda Rafcaannada, Qaybta Lr. 1, Degmada Lr. 1	80
Maxkamadda Sare	81
Degmada Doorashada ee Northeast	83
Degmada Doorashada ee Shoreline	84

Magaalada

Magaalada Seattle	87
<i>Bayaannada musharaxiinta federaalka, gobolka, iyo badankood garsoorka ee boggagga soo socda waxaa ansixiyay Xafiiska Xoghayaha Gobolka. Bayaannada musharaxiinta ee musharaxiinta Garsoorka Maxkamadda Degmada iyo musharaxiinta Magaalada Seattle ayaa waxaa loo daabacay sidii loo soo gudbiyay. Degmada King waxay si xushmad leh oo ku aaddan codbixiyeyaasha Degmada King buug-yarahaan ugu dartaa bayaanada ay ansixiyen Xafiiska Xoghayaha Gobolka.</i>	

Cabbirrada Sharciga

Cabbirka Hindisaha Lr. 2066	88
Cabbirka Hindisaha Lr. 2124	92
Cabbirka Hindisaha Lr. 2117	96
Cabbirka Hindisaha Lr. 2109	108
Magaalada Des Moines	112
Magaalada Seattle	114
Degmada Dugsiga Auburn Lr. 408	116
Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411	118
Degmada Dugsiga Kent Lr. 415	120
Degmada Dugsiga Lake Washington Lr. 414	122

Tusmada Musharaxa

Tusmada Musharaxa	143
-------------------	-----

Yaa is diiwaan gelin kara?

Si aad isku diiwaan geliso oo aad uga codeyso Washington, waa inaad tahay:

- Muwaadin Mareykan ah.
- Degane sharci ahaan ku nool gobolka Washington.
- Ugu yaraan 18 sanno jir.*
- Qof aan laga mamnuucin codeyn ta amar maxkamad awgeed.
- Qof aan lagu haynin xabsi guud oo hoos taga xukunka Waaxda Asluubta ee gobolka Washington xukun dambi-weyn oo ka dhacay Washington awgeed.
- Qof aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-weyn oo federaal ah ama mid ka dhacay gobolka Washington dibadiisa.



*Haddii aad tahay 16 ama 17 jir, waxaad isku diiwaan gelin kartaa kan Codbixiyaha Mustaqbalka ahaan oo si toos ah ayaa laguu diiwaan gelinaya marka aad u qalanto.

Sidee baan isku diiwaan geliyaa?



Oonleenka

Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka isaga diiwaan geliso si aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Guud waa Oktoobar 28.



Boostada

Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Oktoobar 28.




Shakhsii ahaan

Shakhsii ahaan isaga diiwaan geli mid ka mid ah Xarumaheena Codbixinta ilaa iyo Maalinta Doorashada, Nofeembar 5. Macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha Xarumaha Codbixinta iyo goobaha waxaa laga heli karaa bogga 5-aad iyo webseedkeena barta kingcounty.gov/elections.

Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?

Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Iisticmaalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.

OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadystaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.



Sida loo isticmaalo Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka kingcounty.gov/elections/obmp.
- Macluumaa dhaakaaga geli foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- AMA
- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah loo calaamadeeyay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama adoo soo marsiinaaya boostada.

Lacagta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.



Booqo Xarun Codbixin si aad u hesho caawinaad shakhsi ahaan ah

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan is diiwaan gelinta si aad u codeeyso oo aad hesho warqad codbixin ilaa iyo Maalinta Doorashada. Shaqaalo tababaran iyo qalab gaar ah ayaa diyaar u ah si loo caawiyoye aasha naafada ah in ay codkooda u dhiibtaan warqad codbixin qarsoon, oo madax banaan.

Goobaha

Renton **Doorashooyinka Degmada King**
919 SW Grady Way, 98057

Saacadaha Shaqada

Maalmaha shaqada, Oktoobar 16 – 25,
8:30 a.m. – 4:30 p.m.

Maalmaha shaqada, Oktoobar 28 –
Nofeembar 1, 8:30 a.m. – 6:00 p.m.

Sabti, Nofeembar 2,
10:00 a.m. – 4:00 p.m.

Isniin, Nofeembar 4,
8:30 a.m. – 6:00 p.m.

Maalinta Doorashada, Nofeembar 5,
8:30 a.m. – 8:00 p.m.

Bellevue **Xarunta Bulshada ee Crossroads**
16000 NE 10th St, 98008

Sabti, Nofeembar 2,
10:00 a.m. – 4:00 p.m.

Federal Way **Weyerhaeuser King County Aquatic Center**
650 SW Campus Dr, 98023
Ka soo gal halka Banquet Hall

Isniin, Nofeembar 4,
8:30 a.m. – 6:00 p.m.

Maalinta Doorashada, Nofeembar 5
8:30 a.m. – 8:00 p.m.

Kenmore **Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada)**
18120 68th Ave NE, 98028

Kent **Kambaska Green River College ee Kent**
417 Ramsay Way Ste 112, 98032

Seattle **Xarunta Dhacdooyinka ee Lumen Field /**
Tiyaatarka WAMU
800 Occidental Ave S, 98134

Ku yaal Xarunta Dhacdooyinka ee Lumen
Field ee uuna gelitaankeedu yahay
Occidental Ave S iyo S Royal Brougham Way.



Dhammaan baarkinka
xarumaha codbixinta
waa bilaash marka
laga reebu Xarunta
Dhacda ee Lumen
Field /Tiyaatarka
WAMU iyo Goobaha
Ka-qaybgalka Ardayga.

Goobaha Ka-Qaybgalka Ardayga

Kambaska University of Washington ee Seattle

Waxay ku yaallaan qolka 145 ee Husky Union Building (HUB),
goobaha ka-qaybgalka ardayga ee UW Seattle waxay ardayda
siisaa fursad ay isku diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan markii ugu
horeysay, cusboonaysiayaan diiwaan gelintooda, helaan warqadda
codbixinta beddelka ah, ama ay u isticmaalaan qalab caawinaad.
Shaqaalaha doorashooyinka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan
su'aalaha oo ay bixiyaan gargaar.

Kambaska University of Washington ee Bothell

Ardayda u diiwaan gashan inay codeeyaan waxay isticmaali karaan
goobta la siiyay si ay u daabacaan warqaddoda codbixinta.



Wax dheeraad
ah ka ogow
saacadaha
shaqada iyo
adeegyada.



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg macluumaadka ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta federaalka:
Guddiga Doorashada Federaalka
www.fec.gov
Lambarka Lacag La'aanta 1 (800) 424-9530

Eeg ku tabarruceyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga:
Guddiga Kashifaadda Dadweynaha
www.pdc.wa.gov
Lambarka Lacag La'aanta 1 (877) 601-2828



CODBIXIYAH
★ MUSTAQBALKA ★

Hore isku diiwaan geli si aad u codeyso.

Haddii aad tahay ugu yaraan 16 jir, waxaad wakhti kasta hore iskaga diiwaan gelin kartaa oonleenka ama boostada si aad u codeyso.

Waxaanu hayn doonaa diiwaan gelintaada oo aan si toos ah kuugu soo diri doonaa warqad codbixin markii aad u qalanto inaad codeyso.

Hantidhawrada iyo Ilaalinta Tayada

Kooxdeenu waxay fuliyaan tijaabooyin dhowr ah ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib doorashooyin kasta si loo hubiyo in codadkiina loo tirinaayo si sax ah.



Tijaabinta Caqli-galnimada & Saxnaanta

Waxa la qabtaa qiyaastii saddex toddobaad ka hor doorashada, tijaabada Caqli-galnimada & Saxnaanta waxay isticmaashaa warqado codbixin tijaabo ah iyo xirmooyin natijjooyin la filanaayay sii loo hubiyo in qalabka xisaabinta uu codadka u akhrinaayo si sax ah.



Hantidhawrka Dufcadda Kala Sooca Lahayn

Khamiista ku xigta Maalinta Doorashada, waxaan si kala sooc la'aan ah u soo xulanaa lix dufcadood oo aan ku tirinnaa gacanta si loo hubiyo in qalabka xisaabinta uu u sii wado akhrinta codadka sidii loogu talagalay.



Hantidhawrka Xaddidaada Khatarta

Waxaa la qabtaa inta u dhexeysha Maalinta Doorashada iyo shahaadaynta, nidaamkan hantidhawrku waxa uu hubiyaa warqado codbixin tusaale ah oo aan kala sooc lahayn si loo gaaro kalsoonida xisaabeed ee natijjooyinka doorashada.

Raad-raac warqaddaada codbixinta


Isku Qor Inaad Hesho Digniimaha Warqadda Codbixinta!

Waxaad ogaan doontaa halka warqaddaada codbixinta ay marayso inta lagu jiro tallaabo walba oo hannaanka ah, laga bilaabo marka boostada lagu soo diro ilaa iyo marka laga tiriyo halka Xarunta Guud ee Doorashooyinka. Digniimaha warqadda codbixinta waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto inay arrin ka jirto dhinaca saxiixaaga. Hubi in codkaaga la maqlo – Isku qor maanta inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Markaad doorato, waxaad diyaar u noqon doontaa inaad hesho ogeysiisaya doorashadaan iyo doorashooyinka mustaqbalka. Waad iska bixin kartaa wakhti kasta oo aad u baahato.



Raad-raac warqaddaada codbixinta oo isku qor si aad u hesho ogeysiisaya warqadda codbixinta halka kce.wiki/TrackMyBallot



Aaway warqaddayda codbixinta?

Booqo kce.wiki/TrackMyBallot si aad oonleenka uga raad-raacdoo ama aad isugu qorto inaad hesho digniimaha warqadda codbixinta oo aad ku heli doonto iimeel ahaan ama/ayo fariin qoraal taleefan.



Agabyada lagu heli karo 7 luqadood!

Waxaad heli kartaa warqadaha codbixinta, agabka codeynta, iyo isgaarsiinta oo ah afka Shiihaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, iyo Fiyatnamiiska.

Ka buuxi foomka codsiga oonleenka oo waxaad xafiiskeena ka heli doontaa dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqaddii dookhaaga ah.





Dhammaan sanduuqyada lagu rido ayaa la xiraa **8 p.m. oo gaw ah Maalinta Doorashada, Nofeembar 5.**

Auburn

Maktabadda Auburn, 1102 Auburn Way S, 98002
Auburn Park & Ride, 101 15th St NE, 98001



- * Xarunta Bulshada Muckleshoot, 17432 SE 392nd St, 98092
Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ee hore u yaalay halka Qabiilka Muckleshoot - Dhisimaha Philip Starr ayaa waxaa loo guuriyay Xarunta Bulshada Muckleshoot.

Bellevue

Maktabadda Bellevue, 1111 110th Ave NE, 98004
Xarunta Ganacsiga ee Crossroads (albaabka koonfurta), 15600 NE 8th St, 98008
Maktabadda Newport Way, 14250 SE Newport Way, 98006



- * North Bellevue Community Center (Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Bellevue), 4063 148th Ave NE, 98007

Black Diamond

Maktabadda Black Diamond, 24707 Roberts Dr, 98010

Bothell

- CUSUB** Maktabadda Bothell, 18215 98th Ave NE, 98011
Sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ee hore u yaalay halka Aqalka Magaalada Bothell ayaa waxaa loo guuriyay Maktabadda Bothell.
- University of Washington - Dhisimaheeda Bothell (u dhaw Xarunta Hawlaha & Madadaala), 18220 Campus Way NE, 98011

Burien

Maktabadda Boulevard Park, 12015 Roseberg Ave S, 98168
Fagaaraha Magaalada Burien (geeska 5th Ave SW iyo SW 152nd St), 480 SW 152nd St, 98166

Carnation

Maktabadda Carnation, 4804 Tolt Ave, 98014

Covington

Maktabadda Covington, 27100 164th Ave SE, 98042

Des Moines

- * Highline College (albaabka laga soo galoo ee ka soo horjeeda 27th Ave), 2400 S 240th St, 98198

Duvall

- * Duvall Police Department (Waaxda Booliska Magaalada Duvall) - Jardiinka Depot, 26225 NE Burhen Way, 98019

Enumclaw

Maktabadda Enumclaw, 1700 1st St, 98022

Fall City

Maktabadda Fall City, 33415 SE 42nd Pl, 98024

Federal Way

Maktabadda Federal Way 320th, 848 S 320th St, 98003
Federal Way City Hall (Aqalka Magaalada Federal Way), 33325 8th Ave S, 98003



- * Safeway - Star Lake, 28810 Military Rd S, 98003

Issaquah

Issaquah City Hall (Aqalka Magaalada Issaquah), 130 E Sunset Way, 98027

Kenmore

Kenmore City Hall (Aqalka Magaalada Kenmore), 18120 68th Ave NE, 98028

Kent

Maktabadda Kent Panther Lake, 20500 108th Ave SE, 98031
Kent YMCA, 10828 SE 248th St, 98030

Regional Justice Center (Xarunta Caddaalad Goboleedka) u dhaw alaabka laga galoo baarkinka, 401 4th Ave N, 98032

Kirkland

Maktabadda Kingsgate, 12315 NE 143rd St, 98034
Kirkland City Hall (Aqalka Magaalada Kirkland), 123 5th Ave, 98033

Lake Forest Park

Lake Forest Park City Hall (Aqalka Magaalada Lake Forest Park), 17425 Ballinger Way NE, 98155

Maple Valley

Suuqa Cuntada Hobart, 20250 276th Ave SE, 98038

- * Dhisimaha Degmada Dugsiga Tahoma, 25720 Maple Valley-Black Diamond Rd SE, 98038

Mercer Island

Mercer Island Community & Event Center (Xarunta Bulshada & Dhacda Mercer Island), 8236 SE 24th St, 98040

Newcastle

Newcastle City Hall (Aqalka Magaalada Newcastle), 12835 Newcastle Way, 98056

Normandy Park

Normandy Park Towne Center (Fagaaraha Magaalada Normandy Park), 19901 1st Ave S, 98148

North Bend

Maktabadda North Bend, 115 E 4th St, 98045

Pacific

Maktabadda Algona-Pacific, 255 Ellingson Rd, 98047

Redmond

- * Redmond City Hall (Aqalka Magaalada Redmond), 15670 NE 85th St, 98052

- * Redmond Community Center at Marymoor Village (Xarunta Bulshada ee Redmond ee Xaafadda Marymoor), 6505 176th Ave NE, 98052

Renton

Maktabadda Fairwood, 17009 140th Ave SE, 98058

- * Doorashooyinka Degmada King, 919 SW Grady Way, 98057

- * Powell Avenue, 725 Powell Ave SW, 98057
Sanduuqa warqadda codbixinta wuxuu yaalaa goob laba baloog u jirta Doorashooyinka Degmada King si fudud ayaana lagu tagi karaa wakhtiyada uu taraafik jaamka jiro.

- * Xarunta Caafimaadka Dadweynaha Renton, 3201 NE 7th St, 98056

Sammamish

Sammamish City Hall (Aqalka Magaalada Sammamish), 801 228th Ave SE, 98075

- * South Sammamish Park & Ride, 3015 228th Ave SE, 98075

Goobaha sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta

9

SeaTac

Angle Lake Transit Station (Saldhiga Gaadiidka ee Angle Lake),
19955 28th Ave S, 98188

Maktabadda Valley View, 17850 Military Rd S, 98188

Shoreline

Maktabadda Shoreline, 345 NE 175th St, 98155

Shoreline Park & Ride, 18821 Aurora Ave N, 98133

Snoqualmie

Maktabadda Snoqualmie, 7824 Center Blvd SE, 98065

Tukwila

* Tukwila Community Center (Xarunta Bulshada Tukwila),
12424 42nd Ave S, 98168

Vashon

Maktabadda Vashon, 17210 Vashon Hwy SW, 98070

Woodinville

Woodinville City Hall (Aqalka Magaalada Woodinville), 17301
133rd Ave NE, 98072

Maktabadda Woodinville, 17105 Avondale Rd NE, 98072

Sanduuqada Seattle

Ballard

Ballard Branch Library, Geeska NW 57th St and
22nd Ave NW, 98107

Beacon Hill

Maktabadda Beacon Hill, 2821 Beacon Ave S, 98144
Kambaska Xaafadda NewHolly, 7054 32nd Ave S, 98118

Broadview/Greenwood

Maktabadda Broadview, 12755 Greenwood Ave N, 98133

Bryn Mawr-Skyway

Maktabadda Skyway, 12601 76th Ave S, 98178

Capitol Hill

Seattle Central College (geeska waqooyi bari ee Broadway-
Edison Building), 1701 Broadway, 98122

Central District

Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield), 2323 E
Cherry St, 98122

CUSUB 12th & Cherry, 1223 E Cherry St, 98122

Chinatown/International District

Uwajimaya, 713 6th Ave S, 98104

Columbia City

Rainier Community Center (Xarunta Bulshada Rainier), 4600
38th Ave S, 98118

Crown Hill

CUSUB Safeway – Crown Hill, 8340 15th Ave NW, 98117

Downtown

Sanduuqa King Street (Kingdome Deli horteeda), Geeska 2nd
Ave S iyo S King St, 98104

Fremont/Wallingford

Waterway 19 Park (ku dhegan Jardiinka Gas Works),
2119 N Northlake Way, 98103

Green Lake/Phinney

Green Lake Community Center (Xarunta Bulshada Green Lake),
7201 E Green Lake Dr N, 98115

Lake City

Maktabadda Lake City, 12501 28th Ave NE, 98125

Magnolia

* Jardiinka Magnolia, 1461 Magnolia Blvd W, 98199

Northgate

North Seattle College (Baarkinka soo booqdaa koofurta ka
soo gal dhinaca N 95th St), 9600 College Way N, 98103

Queen Anne

* Maktabadda Seattle Pacific University, 310 W Berettona St,
98119

Rainier Valley

Rainier Beach Community Center (Xarunta Bulshada Rainier
Beach), 8825 Rainier Ave S, 98118

Sand Point/Laurelhurst

* Jardiinka Magnuson – Dhismaha 406, 6344 NE 74th St, 98115

South Lake Union

South Lake Union, 310 Terry Ave N, 98109

South Park

Maktabadda South Park, 8604 8th Ave S, 98108

University District

Kambaska University of Washington, Hoolka Schmitz (albaabka
dhanka Waqooyi NE 41st St), 1410 NE Campus Pkwy, 98195

Uptown

Suuqa Magaalo Weynta ee Queen Anne, Geeska
1st Ave N iyo Mercer St, 98109

West Seattle/Delridge

Isgoyska Alaska, Geeska SW Alaska St iyo 44th Ave SW, 98116

Maktabadda High Point, 3411 SW Raymond St, 98126

CUSUB Isgoyska Jardiinka Morgan, 6401 California Ave SW, 98136

South Seattle College (halka laga galoo ee dhismaha the Robert
Smith), 6000 16th Ave SW, 98106

White Center

Maktabadda White Center, 1409 SW 107th St, 98146

* Sanduuqada lagu rido warqadda codbixinta
adigoo gaariga saaran



Eeg webseedkeena si aad u hesho goobaha
sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta
oo dheeraad ah.

Ku Saabsan Doorashada Guud ee Nofeembar ee Washington


Haddii doorasho hordhac loo qabto jago xafiis, labada musharax ee helay codadka ugu badan ee Doorashada Hordhaca ayaa u gudbi doona Doorashada Guud.

Musharax kasta oo u tartamaaya xafiis xisbinimo loo doorto ayaa laga yaabaa inuu sheegto ama sheegato xisbi siyaasadeed oo ayaga dookhooda yahay. Dookha musharaxa micnaheedu ma aha in musharaxaas uu xisbiga soo magacaabay ama uu xisbiga taageero ka haysto, ama uu xisbigu ansixiyay ama musharaxaas xiriir la leeyahay.

Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka way ka duwan tahay. Musharaxiinta u taagan xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka waa lasoo magacaabayaasha rasmiga ah ee xisbigooda siyaasadeed.


FEDERAALKA

Doorashada Hordhaca ee madaxweynaha ayaa Washington lagu qabtay bishii Maarso. Musharaxiinta Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka waxaa soo magacaabay xisbiyada siyaasadda waxayna ka soo muuqan doonaan warqaddaada codbixinta ee Doorashada Guud.



Mushahar (2024):
\$400,000

Xil ah 4 sanno




Mushahar (2024):
\$230,700

Xil ah 4 sanno



Mushahar (2024):
\$174,000

Xil ah 6 sanno



Mushahar (2024):
\$174,000

Xil ah 2 sanno

Madaxweynaha Dalka Mareykanka

Madaxweynaha Dalka Mareykanka ayaa hoggaamiya Laanta Fulinta ee Dowladda Federaalka wuxuuna u adeegaa sida taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ee Dalka Mareykanka.

Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka

Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka waxa uu u shaqeeyaa sida la taliyaha Madaxweynaha ahaan iyo, sida uu dhigaayo dastuurka Dalka Mareykanka, waxa uu u shaqeeyaa ka sida guddoomiyaha Senatka Dalka Mareykanka.

Waxaa doorta dhammaan codbixiyeyaaasha Dalka Mareykanka iyada oo loo maraayo Hannaanka Doorashada

Senatarka Dalka Mareykanka

Senatka iyo Golaha Wakiillada ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Federaalka. Labada gole waxay leeyihin mas'uuliyyad siman oo ah dejinta sharciyada Federaalka.

Senatka waxa uu leeyahay dhowr awood oo gaar ah, oo ay ku jiraan oggolaanshaha heshiisaya, ansixinta magacaabista uu sameeyay Madaxweynaha, iyo xakamaynta saraakiisha Federaalka ee uu Goluhu mooshinka ka keenay.

Waxaa doorta dhammaan codbixiyeyaaasha gudaha Washington

Wakiilkha Golaha Dalka Mareykanka

Senatka iyo Golaha Wakiillada ayaa waxay isku noqdaan laanta sharci dejinta ee dowladda Federaalka. Labada gole waxay leeyihin mas'uuliyyad siman oo ah dejinta sharciyada Federaalka.

Waxaa doorta codbixiyeyaaasha gudaha Degmada Kongareeska

Waajibaadyada xafiisyada ee doorashadan

GOBOLKA



Mushahar (2024):
\$198,257

Xil ah 4 sanno

Guddoomiyaha Gobolka

Wuxuu kormeeraa dhaqan gelinta sharciga Gobolka, wuxuu magacaabaa jagooyinka maamulka iyo garsoorka, wuxuu soo jeediya miisaaniyadda Dowlad Goboleedka, wuxuna ansixin karaa ama diidi karaa sharchiyada ay ansixiyaan sharchi dejiyeyasha.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$145,714

Xil ah 4 sanno

Hantidhawraha Gobolka

Waxay qabtaan xisaabirkira dhammaan hey'adaha dowladda Washington, waxay baaraan khiyaannada iyo xadgudubka, oo waxay hoggaaminayaan baartaannada sirta ah ee ku saabsan hey'adaha Gobolka.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$124,127

Xil ah 4 sanno

Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Gobolka

Wuxuu guddoomiyaa Senatka Gobolka Washington, wuxuu matalaa Guddoomiyaha Gobolka marka Guddoomiyaha uu awoodi waayo gudashada waajibaadkooda rasmiga ah.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$187,543

Xil ah 4 sanno

Xeer Ilaliiyaha Guud

Waxay u adeegaan sida la taliyaha sharciga ee dowladda Gobolka waxayna fuliyaan Sharciga Ilalinta Macmalka.



Mushahar (2024):
\$145,714

Xil ah 4 sanno

Xoghayaha Gobolka

Waxay maamulaan fayl-gareynta shirkadaha iyo samafalka, ururiyaa oo xafidaa diiwaannada Gobolka ee taariikhiga ah, wuxuna bixiyaa maamulidda iyo kaabyaasha ee doorashada.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$161,905

Xil ah 4 sanno

Guddoomiyaha Dhulalka Dadweynaha

Kormeeraan maamulidda, dhowrista, iyo nidaaminta dhulalka dadweynaha, waxayna hoggaamiyaan ka hortagga dabaka duurjoogga iyo dadaallada dabdamiska.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*




Mushahar (2024):
\$162,555

Xil ah 4 sanno

Khasnajiga Gobolka

Waxay maamulaan baahiyaha bangiga, maaliyadda, iyo maalgashiga ee dowladda Gobolka.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$161,905

Xil ah 4 sanno

Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha

Kormeeraan maamulidda waxbarashada ee K-12.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$145,714

Xil ah 4 sanno

Guddoomiyaha Caymiska

Kormeeraan sharchiyeynta hey'adaha caymiska ee gudaha Gobolka Washington waxayna baaraan cabashooyinka macaamiisha.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Waa jibbaadyada xafiiisyada ee doorashadan



Mushahar (2024):
\$60,191

Xil ah 4 sanno

Senatarka Gobolka

Senatarka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharcii dejinta ee dowladda Gobolka. Labada gole waxa ay leeyihiiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta shariyada, canshur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Isagoo ka kooban 49 xubnood, Senatarka aaya sidoo kale mas'uul ka ah ansixinta magacaabisyada uu sameeyo guddoomiyaha.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Degmada Sharci Dejinta*



Mushahar (2024):
\$228,338

Xil ah 6 sanno

Garsooraha Maxkamadda Rafcaannada

Waxay dhegaystaan rafcaannada Maxkamadaha Sare. Maxkamadaha rafcaanka dib uma tijaabiyaan kiisaska ama ma dhegaystaan caddeymo cusub ee kiisaska horey looga soo tijaabiyyat maxkamadaha hoose.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Degmada Garsoorka*



Mushahar (2024):
\$60,191


Xil ah 2 sanno

Wakiilka Gobolka

Senatarka Gobolka iyo Golaha Wakiillada ee Gobolka ayaa waxay isku noqdaan laanta sharcii dejinta ee dowladda Gobolka. Labada gole waxa ay leeyihiiin mas'uuliyad siman oo ah dejinta shariyada, canshur ku soo rogidda iyo ururinta canshuuraha, iyo ka gorgortanka mudnaanta miisaaniyadda Gobolka.

Golaha Wakiillada Gobolka waxa uu ka kooban yahay 98 xubnood. Laba xubnood aaya laga soo doortaa mid kasta oo ka mid ah 49-ka Degmooyinka Sharci Dejinta ee Gobolka.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Degmada Sharci Dejinta*



Mushahar (2024):
\$217,391

Xil ah 4 sanno

Garsooraha Maxkamadda Sare

Waxay dhegaystaan dacwadaha shacabka ama dambiyada, oo ay ku jiraan furriinka, kiisaska dhallinyarada, iyo rafcaannada maxkamadaha hoose.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Degmada Garsoorka*



Mushahar (2024):
\$206,988

Waxay adeegayaan muddo-xilleed 2 sanno wakhtigeedu weli dhammaanin

Garsooraha Maxkamadda Degmada

Waxay dhegaystaan kiisaska dambiyada yar, dacwadaha sheegashada shacabka ee ka hooseeya \$100,000, dacwadaha sheegashada yaryar, kiisaska taraafikada, iyo codsiyada amarrada ilalinta rabshadaha qoyska.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Degmada Garsoorka*



Mushahar (2024):
\$239,868

Xil ah 6 sanno

Garsooraha Maxkamadda Sare ee Gobolka

Maadaama ay yihiin mas'uuliyiinta maxkamadaha ugu sareeya ee Gobolka, Garsooreyaasha waxay dhegaystaan rafcaannada waxayna dib u eegaan go'aannada Maxkamadaha Rafcaanka iyo kuwa kale ee hoose.

*Waxaa doorta dhammaan
codbixiyeyaasha gudaha Washington*



Mushahar (2024):
\$144,614

Waxay adeegayaan muddo-xilleed 1 sanno wakhtigeedu weli dhammaanin

Xubinta Golaha Magaalada Seattle

Waxay ansixiyaan miisaaniyadda magaalada, horumariyaan shariyada iyo xeerarka, waxayna kormeeraan adeegyada bulshada.

*Waxaa doorta codbixiyeyaasha
gudaha Magaalada Seattle*


MAGAALADA



**Doorashooyinka
Degmada King
ma saxaan
astaamaynta,
naxwaha, ama
hubinta xaqiiqda
saxda ah ee
bayaannada
musharaxa iyo
cabbirka.**



Doorashooyinka Degmada King ma waafajiyaan, wax kama beddelaan, ama dib ugu noqosho kuma sameeyaan musharaxiinta iyo bayaannada cabbirka warqadda codbixinta xaalad kasta oo lagu jiro. Dhammaan bayaannada waa tarjumaadda erey iyo erey ee dhabta ah, oo ah bayaannada ay soo gudbiyeen musharaxa ama guddiga, laguna dhammeeyay wakhti xaddidan. Sababtaas awgeed, bayaannada la tarjumay ayaa laga yaabaa in meelaha qaarkood aysan kaga caddeyn maxaa yeelay isticmaalka luqadda, fikradaha, iyo sharaxaadda ayaa ku kala duwan luqadaha.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka



Kamala D. Harris iyo Tim Walz

(Musharaxiinta Xisbiga Dimuqraadiga)

info@kamalaharris.com
www.kamalaharris.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka (laga bilaabo 2021 ilaa hadda), Senatarka Dalka Mareykanka ee California (laga bilaabo 2017 ilaa 2021), Xeer Ilaaliyaha Guud ee California (laga bilaabo 2011 ilaa 2017), Xeer Ilaaliyaha Degmada San Francisco (laga bilaabo 2004 ilaa 2011)

Khibrad Xirfadeed Kale: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Waxbarashada: University of California College of the Law, San Francisco (J.D.) (Shahaadada Sharciga); Howard University (B.A.) (Shahaado Jaamacadeedka Adabka)

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Gobolka Minnesota (laga bilaabo 2019 ilaa hadda), Wakiilka Dalka Mareykanka ee Degmada 1-aad ee Kongareeska Minnesota (laga bilaabo 2007 ilaa 2019)

Khibrad Xirfadeed Kale: Ilaalada Qaranka Mareykanka (laga bilaabo 1981 ilaa 2005), Macallin iyo Tababarre (laga bilaabo 1989 ilaa 2006)

Waxbarashada: Chadron State College, B.Sc., 1989


Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Bayaanka: Madaxweyne Ku-Xigeen Harris waa halgamaa dadka u dagaalama. Laga soo bilaabo wakhtigeedii ay dacwad oogaha ahayd ilaa iyo adeeggeedii Madaxweyne Ku-Xigeenka ahaan, waxay difaacday xuquuqda dadka maalinlaha ah iyadoo hor istaagtay ugaarsatada, khiyaannada, iyo kuwa danaha gaarka wata ee awoodda leh. Waxay ahayd mid aan cabsan oo qabata qof kasta oo khatar ku ah xuquuqda iyo xorriyadda Mareykanka.

Dacwad ooge ahaan, waxay xabsiga dhigtay gacan ku dhiigleyaal iyo xadgudubleyaal, waxay u istaagtay haweenka iyo carruurta. Ka Xeer Ilaaliyaha Guud ee California ahaan, waxay la dagaalantay burcadda caalamiga ah ee ka ganacsata maandooriyaha iyo qoryaha laga gudbiyo xuduudah si bulshooyinka looga dhigo kuwo ammaan ag. Waxay sidoo kale hor istaagtay bangiyada waaweyn ee sameeyay khiyaannada deynya guryaha, iyada oo ku guuleysatay in bilyanno lacag gargaar ah la siyo mulkiileyaasha guryaha. Ka Senatar iyo Madaxweyne Ku-Xigeen ahaan, waxay hor istaagtay shirkadaha waaweyn ee daawada si ay u yareeyaan sicirka daawada insalinta ee waayeellada, waxayna horseeday dagaalka xorriyadda taranka. Waxay sidoo kale horumarisay danaha Mareykanka ee masraxa adduunka, oo ay ku jiraan inay ka hor timaado hoggaamiyaha Ruushka Vladimir Putin oo ay garab istaago NATO.

Ka Madaxweyne ahaan, waxay xoojinta dadka bulshada dakhliga dhexe ka dhigi doontaa inuu qeexo yoolka madaxweyeninemadeeda. Waxay la dagaalami doontaa kor u kaca qiimaha, waxay ka shaqeeyn doontaa inay hoos u dhigto kharashaadka, oo ay balaarisoo fursadda si qof kasta oo Mareykan ah uusan fursad u helin oo keliya, laakiin uu horumaro. Waxayna sii wadi doontaa dagaalka ay ku soo celinayo xorriyaddeena, laga bilaabo xuquuqda taranka ilaa xuquuqda codeynta.

Guddoomiye Tim Walz waa horyaalka qoysaska shaqeeya. Wuxuu hoos u dhigay qiimaha insalinta, wuxuuna ilaliyay xuquuqda haweenka inay doortaan. Jaamacadda taas oo ay u suurto gelisay deeqda waxbarashada GI Bill, Walz wuxuu ahaa macallin dugsi sare iyo tababarre kubadda football-ka Mareykanka - isagoo kooxdisa geeyay ilaa iyo horyaalnimada gobolka markii ugu horeysay taariikhda dugsiga. Waxa uu ahaa xubin ka tirsan Kongareeska u ahaa degmo u janjeerta xsibiga Jamhuuriiga, wuxuu leeyahay diiwaanka la shaqeeynta labada xisbi. Ka Guddoomiye ahaan, Walz wuxuu jaray canshuuraha qoysaska shaqeeya, wuxuu hoos u dhigay qiimaha insalinta, wuxuuna ilaliyay xuquuqda haweenka inay doortaan.



Donald J. Trump iyo JD Vance

(Musharaxiinta Xisbiga Jamhuuriga)

(617) 303-6800

info@djtp24.com

www.DonaldJTrump.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxweynihii 45-aad ee Dalka Mareykanka

Khibrad Xirfadeed Kale: Ganacsade, maalqabeen hantida maguurtada ah, jilaa telefishin, iyo qoraa.

Waxbarashada: Wharton School of Business (Dugsiga Ganacsiga ee Wharton), University of Pennsylvania, Philadelphia; New York Military Academy (Kulliyadda Militariga ee New York)

Adeegga Bulshada: Madaxweynihii 45-aad ee Dalka Mareykanka

Khibradda Jago Loo Doortay: Loo Doortay Senatarka Dalka Mareykanka ee gobolka Ohio sannadkii 2022

Khibrad Xirfadeed Kale: Ka diiwaan gashan Ciidamada Mariiniska ee Dalka Mareykanka oo kasoo adeegay dagaalka Ciraaq

Waxbarashada: Ohio State University; Yale Law School

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Bayaanka: Siddeed sanno ka hor, Donald J. Trump waxa uu ku tartamaayay ballanqaad ah in uu Mareykanka Ka Dhigo Midda Koowaad, welina waxa uu ku adkaysanayaa aragtidaas. Oo uu la socdo Madaxweyne Ku-Xigeenka la magacaabay JD Vance, hadafkeenu wuu ka sii xooggan yahay sidii hore.

Donald J. Trump wuxuu hor istaagi doonaa kuwa bidix ee xagjirka ah ee doonaya inay diciifyaan qarankeena. Wuxuu u heellan yahay xoojinta xuduudaheenna si aan u joojinno socdaalka sharci darada ah iyo hubinta inaan Mareykanka Ka Dhigno Midda Koowaad. Fashilka maamulka hadda jira waxa uu keenay sicir bararka baxsaday, dhaqaalihiina curyaamiyey oo culays saaraya qoysaska sida adag u shaqeysta. Donald J. Trump waxa uu hirgelin doonaa siyaasado lagu dhimmayo sicir bararka, abuurista heshiisyoo ganacsi oo wanaagsan, iyo mudnaanta la siinayo shaqooyinka iyo warshadaha Mareykanka.

Donald J. Trump waxa uu aaminsan yahay Mareykanka oo xooggan oo barwaalo ah. Wuxuu soo celin doonaa xasillooni dhaqaale, wuxuu sugi doonaa xuduudaheenna, wuxuuna Mareykanka mar kale ka dhigi doonaa hoggaamiyaha masraxa adduunka. Hanjabaadaha aan kala kulmayno cadowga dibadda, sida Shiihaha iyo quwadaha kale ee shisheeye, waxay la kulmi doonaan tallaabo adag oo lagu ilaalinayo danaha qarankeena.

Dhaqdhaqaqaan aan ku doonayno in aan Mareykanka Mar Kale Ka Dhigno Mid Weyn waa xoogga keliya ee soo celin kara badbaadada, barwaqaada, iyo nabadda dalkeenna. Wuxaan hor istaagi doonaa kuwa danaha gaarka ah leh ee awoodda badan, waxaan joojin doonaa dagaallada shisheeye, waxaan hubin doonaa in qof kasta oo Mareykan ah uu helo fursad uu ku horumaro. Si wada jir ah, waxaan Mareykanka Ka Dhigi Doonaa Midda Koowaad oo aan awoodda ugu soo celin doonaa Dadka Mareykanka.

U codee si aad Mareykanka ugu dhigto midda Koowaad oo aad Mar Kale Mareykanka Uga Dhigto Mid Weyn. U codee Donald J. Trump Madaxweyne.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka



Robert F. Kennedy Jr. iyo Nicole Shanahan

(Musharaxiinta Xisbiga Anaga Dadka)

(508) 543-1720

info@teamkennedy.com

www.kennedy24.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma khusayso

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaa lagu magacaabaa Time Magazine's "Hero for the Planet (Halyeeyga Meeraha)," Robert F. Kennedy Jr. wuxuu ku guuleystay inuu wax badan qabto oo ku aaddan biyaha nadifka ah in ka badan qof kasta ee taariikhda Mareykanka. Isagoo u shaqeeynayay qareen deegaanka 40 sanno, Kennedy wuxuu ku guuleystay dacwado ka dhan ah hey'adaha dowladda ee musuqmaasuqa si uu u difaaco xuquuqda dastuuriga ah iyo xorriyadaha Mareykanka iyo ilaalinta hawada, ciidda, cuntada iyo caafimaadka wasakhda shirkadaha.

Waxbarashada: Harvard University, Shahaado Jaamacadeedka Adabka; University of Virginia School of Law, Juris Doctor (Shahaadada Sharciga); Pace University, Master of Laws

Adeegga Bulshada: Kennedy wuxuu aasaasay Isbahaysiga Waterkeeper Alliance, kooxda u doodista biyaha nadifka ah ee ugu weyn adduunka, iyo Difaaca Caafimaadka Carruurtta, si loo soo afjaro cudurrada daba dheeraaday ee carruurnimada.

Bayaanka: Robert F. Kennedy Jr. waxa uu u tartamayaan madaxweynenimo si madax-banaan ahaan si uu u soo afjaro isku-dhafka musuqmaasuqa ee shirkadaha iyo dowladda, lana hagaajiyoo nidaamka labada xisbi ee jabay ee wiiqay hab-nololeedka Mareykanka. Kennedy waxa uu soo jeedinayaa "dowlad midnimo" oo ay dhammaan dhinacyada ka wada muuqdaan. Nicole Shanahan aaya ku biirtay tikidhka si uu awoodda ugu soo celiyo dadka.

Madaxweyne ahaan, Kennedy wuxuu soo afjaro doonaa dagaalladii shisheeye, wuxuu xukumi doonaa dhismaha warshadaha militariga wuxuuna dib u maalgelin doonaa trillions-kii lagu badbaadiiyay wadanka si loo soo celiyo dabqaqada dhexe. Wuxuu leeyahay qorsheyaal uu: 1) In 20% qandaraasyada dowladdu ka fogato shirkadaha waaweyn lana siyo ganacsiyada yar-yar, taasoo abuuraysa malaayiin shaqo iyo kobac dhaqaale; 2) la bixiyo biilka cusub ee GI qof kasta oo raba in uu u adeego bulshadooda gudaha Peace Corps, iyada oo la siinayo xubnaha barnaamijka hanti ku filan oo noloshooda wax ka beddelaysa si ay u awoodaan inay iska baxshaan jaamacadda, lacag raxan u dhigan karaan guri, ama u bilaabaan ganacsi yar; 3) in laga caawiyo guryaha iibsigooda 3% dammaanad ay dowladdu leedahay; iyo 4) kor u kaca daryeelka carruurta 10% dakhliga, si qoysasku u gaaraan riyada Mareykanka ee lahaanshaha guri iyo waalidnimada la awoodi karo.

Madaxweyne Ku-Xigeen ahaan, Shanahan waxa ay kala shaqeeyn doontaa Madaxweyne Kennedy si ay u xalliso cudurka faafa ee daba dheeraada, ilaalinta ubadkeena iyo xaqiijinta xorriyadda caafimaadka.

Kennedy iyo Shanahan waxay ku guulaysan doonaan beeraha dib-u-soo-noolaynta. Horumarinta dhaqamada beeralayda ee soo celiya caafimaadka ciidda korna u qaadaya kala duwanaanshaha noolaha, waxay horumarin doonaan nidaam cunto oo adkaysi leh, faa'iido u leh dadka iyo beeraha.

Kennedy iyo Shanahan waxay sugi doonaan soohdinta koonfureed waxayna soo afjaro doonaan dhibaatada soogalootiga ee wiiqaysa miisaaniyadda magaaloooyinka. Waxay wax ka qaban doonaan cudurka faafa ee ku tiirasanaanta maandooriyaha waxayna ilaalin doonaan xuquuqda taranka.


Soo celinta dowladnimo daacad ah, Kennedy iyo Shanahan waxay cirib tiri doonaan musuqmaasuqa waxayna xaqiijin doonaan hufnaanta iyo isla xisaabtanka. Waxay siin doonaan dadka Mareykanka cod ku haga sharciga iyada oo loo maraayo dadaallo dimuqraadiyadeed oo toos ah. #AmericaStrong

Khibradda Jago Loo Doortay: Ma khusayso

Khibrad Xirfadeed Kale: Nicole Shanahan waa qareen iyo ganacsade teknolojiyadeed. Waxay aasaastay ClearAccessIP sannadkii 2013, iyada oo casriyaysay maamulka shariyaynta oo lagu maamulo teknolojiyada Al. Iyadu waa qaataha CALI Excellence ee Abaalmarinta Mustaqbalka waxaana loo aqoonsaday inay tahay 50-ka ugu sareeya ee Saamaynta Daryeelka Caafimaadka ee Femtech & Hoggaamiyaha Cimri Dhererka.

Waxbarashada: Jaamacadda Puget Sound, Shahaado Jaamacadeedka Adabka; Santa Clara University, Juris Doctor (Shahaadada Sharciga)

Adeegga Bulshada: Shanahan waxay aasaastay Hey'adda Bia-Echo, kaas oo taageera isbeddel-sameeyayaal cusub oo wax ka qabta caqabadaha waaweyn ee caalamiga ah sida caafimaadka taranka iyo dheef-shiid kiimikaadka, dib-u-habeynta caddaaladda dambiyada iyo badbaadada bulshada, sii jiritaanka deegaanka iyada oo diiradda la saarayo beeraha dib-u-soo-saarka, iyo in ka badan.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka



Jill Stein iyo Rudolph Ware

(Musharaxiinta Xisbiga Cagaaran)

(425) 691-6631

info@jillstein2024.com

jillstein2024.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubinta Kulanka Magaalada, Lexington MA

Khibrad Xirfadeed Kale: Doctor of Internal Medicine (Dhakhtarka Daawada Jirka Gudahiisa), Harvard Medical School Instructor of Medicine (Baraha Caafimaadka ee Harvard Medical School)

Waxbarashada: Harvard Medical School

Adeegga Bulshada: Jill Stein waa u doodaha caafimaadka deegaanka iyo qaban qaabiyyaha muddo dheer. Sida musharaxa madaxweynaha ee Cagaaran ee 2012 iyo 2016 ahaan, waxay ku hoggaamisay dariiqa arrimaha muhiimka ah ee ka yimid Heshiiska Cusub ee Cagaaran si loo dhammeeyo deynya ardayda. Waxay muddo dheer u halgamaysay joojinta dagaalka aan dhammaadka lahayn, dhaqaalaha u shaqeeya dadka shaqeeya, iyo mustaqbal lagu noolaan karo oo carruurteena ah. Waxay hadda u sharaxan tahay madaxweynaha keliya ee ka soo horjeeda xasuuna, taageeraha shaqada, musharaxa ficiika cimilada oo leh waddo loo maro Aqalka Cad.

Bayaanka: Nidaamkii siyaasadeed wuu jabsan yahay. Labadii xisbi ee Wall Street waa la iibsaday oo lacagtoodana la bixiy. Labaduba waxay ka tageen dadka shaqeeya, waxay ka sii darayaan xiisadda cimilada, waxay wiiqayaan dimuqraadiyadda, waxayna ku luminayaan trillions mashinika dagaalka ee aan dhammaadka lahayn halka tobanaan milyan oo Mareykan ah ay hayso guryo, cunto, daryeel caafimaad iyo in ka badan.

In ka badan 60% waxaynu dhahnaa hannaankii labada xisbi wuu fashilmay, waxaan u baahanahay xisbi dadka u adeegga. Waaan u tartamayaan Madaxweynaha si aan doorashadaas dadka ugu soo bandhigo. Ololaheenu kan keliya ee ah dagaal-diid, xasuunq-diid, shaqaalaha taageersan, dookha waxqabadka cimilada oo leh waddo loo maro Aqalka Cad.

Dadka siyaasadda u dhuun daloola ayaa ku xumeya codbixiyeyasha doonaya doorashooyin wanaagsan. Laakiin xorriyadda doorasho la'aanteed, ma jirto dimuqraadiyad. Markaa iska illow dadka wax akhyaarta ah ee ku leh halgankiina iska daaya oo u codeeyaa siyaasiyiintii sababta u ahaa. Isbeddel iyaga ka iman maayo; waa inay ka timaadaa dadka.

Haddii aan isku tagno, waxaan abuuri karnaa dhaqaale inoo wada shaqeeya oo leh shaqooyin nololeed, daryeel caafimaad, guri, cunto, xannaano carruur, waxbarasho deyn la'aan ah, iyo dammaanad dakhli lagu noolaan karo oo ah xuquuqul insaanka. Waxaan abuuri karnaa Heshiis Cusub oo Cagaaran oo leh malaayiin shaqo si aan ula dagaallanno burburka cimilada, loo sugo hawo nadif ah, biyo, iyo cunto, una ilaalino Dhulka Hooyo.

Waxaan joojin karnaa dagaalka aan dhammaadka lahayn, militariga baahsan, iyo xasuunq, waxaanan bilaabi karnaa siyaasad cusub oo dibadeed oo ku saleysan diblomaasiyad, sharciga caalamiga ah, iyo xuquuqul insaanka. Waxaynu dimuqraadiyaddeena ku soo noolayn karnaa anagoo adeegsanayna codeynta doorashada la darajeyay, saami-qaybsi, iyo maalgelin ololaha dadweynaha si aan lacag badan uga helno siyaasadda. Waxaan joojin karnaa xabsiyada faraha badan, hagaajin karnaa nidaamkeena socdaalka, waxaanan xaqiijin karnaa xuquuqdeena, xorriyaddeena, iyo caddaaladda dadka oo dhan.

Waxaan leenahay awood aan ku samayn karno waxaas oo dhan iyo in ka badan – waxaana 2024 u isticmaali karnaa si aan u bilowno dhisidda Ameerika iyo adduun noo shaqeeya dhammaanteen.

Khibradda Jago Loo Doortay: Midna

Khibrad Xirfadeed Kale: Tan iyo 2004 Barafasoor Ware wuxuu xubin buuxda ee waxbareyaasha ka ahaa Norhtwestern, Michigan, iyo hadda UC Santa-Barbara, oo wax ku dhiga Taariikhda, Barashada Madow, iyo Daraasaadka Islaamka.

Waxbarashada: University of Minnesota '91; PhD (Taariikhda) UPenn '04.

Adeegga Bulshada: Professor Ware waa barre ku taqasusay taariikhda boqortooyada, gumeysiya, xasuunq iyo kacaanka. Labaatankii sanno ee la soo dhaafay waxa uu abaabullay macallimiinta, manhajka waxbarashada bulshada, iyo dhaqdhaqaqyo kale oo abaabul iyo hindisooyin. Waxa uu ka shaqeyay guud ahaan dalka iyo adduunka oo dhan si uu uga hortago boqortooyonimada, isir sifaynta, iyo dagaalka aan dhammaadka lahayn, iyo in la dhiso sii haysashada, caddaalad ah, beddelaad nabadeed oo xidid ku leh caadooyinka Afrika, dadka asalliga ah, iyo Ibraahimka.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka ➔

Claudia De la Cruz iyo Karina Garcia

(Musharaxiinta Xisbiga Hantiwadaaga iyo Xoraynta)

Jane Cutter 206-992-7266
votesocialist2024.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Claudia De la Cruz waa hooyo, barre caan ah, qaban qaabiyyaha bulshada iyo fiqiga.

Waxbarashada: City University of New York, Columbia University and Union Theological Seminary (Jaamacadha Diinta Midowga)

Adeegga Bulshada: ku dhashay South Bronx iyada oo ay u dhalleen waalidiinta soogalootiga ah ee ka yimid Dominican Republic, waxay shaqadeeda abaabulka siyaasadeed ka bilowday markay ahayd 13 jir kaniisadda gurigeeda, iyada oo saldhig u ah shaqadeeda mabaadii'da fiqiga xorriyadda. Waxay si firfircoor uga qayb qaadatay ololihii lagu xoraynayey maxaabiista siyaasadda; in Ciidanka Badda Mareykanka laga saaro Vieques, Puerto Rico; si loo soo afjaro go'doominta Mareykanka ee ka dhanka ah Cuba; xorriyadda Falastiin; iyo ka dhanka ah argagixisada – anigoo magacaabya xoogaa.

Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Karina waa hooyo, Chicana qaban qaabiyyaha iyo barre caan ah.

Waxbarashada: Columbia University


Adeegga Bulshada: Karina iyada oo ka mid ah aasaaseyaasha Xarunta Caddaaladda ee El Barrio ee magaalada New York iyo xubin ka tirsan Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaaga iyo Xoraynta, Karina waxay nolosheeda u hurtay shaqadeeda abaabule bulsho. Sida garab soogalootiga ah, sheekada qoyskeeda waxay ku dhiirigelisay inay ku koraan geesnimada iyo go'aanka ay ugu dagaalamaan adduun wanaagsan.

Bayaanka: Bini'aadanimada waxa ay la kulmaysaa dhibaato weyn oo jirta - masiibo cimilada, shaqo la'an baahsan, iyo dagaal u dhexeeyaa Mareykanka iyo quwadaha kale ee hubka nukliyeerka leh. Dowladda hantigoosiga ah wax jawaab ah uma hayso xasaradahaas, run ahaantiina hore ayay dhibka u sii wadayaan, iyada oo u adeegta sida Bangiyada Waaweyn, Teknolojiyada Weyn, Shidaalka Weyn iyo Isku-dhafka Ciidanka iyo Warshadaha. Dhibaato kasta oo ay dadku la kulmaan, hadday tahay duufaanno, dab-damis ama masiibo, dowladdu waxay caddeeysay inay gebi ahaanba qummanayn oo ay daneysyo faa'iidata oo keliya. Nagama leexin karaan xasaradaha - waxay qayb ka yihiin dhibaataada.

Inta badan dadka dalka ku nool waxa ay ku nool yihii jeegga mushaharka ilaa jeegga kale ku gaar, wax kastana waxa ku kacaaya qimahooda, tobanka nin ee ugu taajirsan ayaa laban laabay hantidooda. Laakiin labada xisbi waaweyn, xisbiyada u oboleeyaa hantigoosadka ayaa sheegaaya inaan waxba laga qaban karin - in tani ay tahay sida dhaqaaluhu u shaqeeyo. Anaga ku raacsanni!

Kheyraadka wuxuu u jiraa si loo xalliyi dhibaatooyinka bini'aadanka la kulmo. Wixa keliya ee horaagan waa siyaasiyiinta maamula arrimaha bilyaneerrada kuwaas oo soo saara macaash-weyn oo ka yimaada shaqalaaha adduunka oo dhan.

Waxaan u taaganahay hantiwadaaga - nidaam ay dadka saboolka ah iyo kuwa shaqeeyaa ay haystaan awood siyaasadeed iyo dhaqaale oo ay u isticmaalaan si ay u daboolaan baahida dadka oo dhan iyo si ay u ilaaliyaan qoysaska. Faa'iidooyin kasta oo ay helaan dadka shaqeeya waxay ku yimaadeen halgan abaabullan iyo dhaqdhaqaqaqyo ballaaran. Wixaan qayb ka nahay dhisidda dhaqdhaqaqa dadka shaqeeya ee ay ka go'an tahay cirib tirka kali talisnimada bilyaneerrada, iyo dhisidda mustaqbalka aan mudannahay. Ku biir dhaqdhaqaqa, u codee hantiwadaaga 2024!



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka



Rachele Fruit iyo Dennis Richter

(Musharaxiinta Xisbiga Shaqaalaha Hantiwadaaga)

(347) 871-0282

socialistworkers2024@gmail.com

www.themilitant.com

**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin**Khibrad Xirfadeed Kale:** Ka firfircoor ururada shaqaalaha warshadaha muddo tobanaan sanno ah, hadda shaqaalaha hoteelka ee Miami Beach, xubin ka ah UNITE/HERE Local 355.**Waxbarashada:** Ka qaybqaate dhaqdhaqaqyada ka dhanka ah Dagaalkii Vietnam, ka soo horjeeda kala soocidda Jim Crow iyo taageeraana xoraynta haweenka, waxaan bartay in dadka shaqeeya ay beddelaan hantigoosadka oo uu u dagaalamo awoodda siyaasadeed sida shaqaalaha iyo beeralayda ay sameeyeen 1959 Kacaankii Cuba.**Adeegga Bulshada:** Ka hadlaysay guud ahaan Mareykanka ee u doodaysay dadka shaqeeya si ay u sameeyaan xisbi shaqo, oo ka madax-banaan xisbiyada raasumaalka, iyo ka soo horjeeda dhammaan falalka iyo hanjabaadaha naceybka ku aaddan Yahuudda iyada oo difaacaysa xuquuqda Israa'iil inay jirto ee ah inay magangelyo u tahay Yahuudda adduunka oo dhan.**Khibradda Jago Loo Doortay:** Wax macluumaad ah lama soo gudbin**Khibrad Xirfadeed Kale:** Shaqaalaha adeegga cuntada ee diyaaradda iyo xubin dhawwaan ka tirsan ururka UNITE HERE. In ka badan 50 sanno u shaqeynaysay sidii shaqaalo warshadeed ee ururka shaqaalaha jidka tareennada, birta, iyo baakadaynta hilibka.**Waxbarashada:** Dugsigii sare ee 1960-kii Richter waxaa soo jiitay dhaqdhaqaqii weynaa ee shaqaalaha ee Madowga hoggaaminayay kaas oo burburiyay kala soocidda Jim Crow, taas oo xoojinaysa dadka shaqeeya ee Mareykanka.**Adeegga Bulshada:** Ka soo horjeeda siyaasadda boqortooyada Washington ee adduunka oo dhan ee ah ka faa'iidsiga shaqaalaha iyo beeralayda. Abaabulay oo ka qaybqaatay mudaaharaadyo looga soo horjeedo dagaalladii taliyeyaasha Mareykanka ee Vietnam, Ciraaq, iyo Afgaanistaan. Ka qeyb qaataay shaqo joojinta shaqaalaha oo dhisay midnimada UAW shaqo joojinta sannadkii hore iyo waxaan xirnay dab-damiska 2024.**Bayaanka:** Wuxuu ku nool nahay wadan aad u kala qaybsan oo ay maamulaan tiro yar oo bilyaneerro ah iyo dowladdooda. Dadka shaqeeya waxay wajahayaan saamayn xun oo ah qiimaha sare, la'aanta shaqooyin mushahar wanaagsan, xaalado shaqo oo aan ammaan ahayn iyo jadwal kuwaas oo inta badan ka dhigaaya nolosha siyaasadda, qoyska, bulshada iyo ururka shaqaalaha mid aan macquul ahayn. Cimrigu wuxuu joogaa meeshii ugu hoosaysay rubuc qarni, dhalashaduna waxay jarantay kala bar tan iyo 1950kii.

Maanta shaqaaluhu waxay ku jiraan niyad dagaal, abaabul, iyo adeegsiga ururadooda si ay u difaacaan noloshooda.

Waxaan u baahanahay inaan u dagaalanno barnamijka hawlaha guud si malaayiin loogu shaqeeyo mushaharka ururka, mushaharka iyo qiimaha maciishadda si loo daboolo qiimaha kororka, iyo in shaqaaluhu ay xakameeyaan wax soo saarka si loo dammaanad qaado badbaadada shaqada oo ay ka noqdaan burburka faa'iido doonka ah ee deegaanka.

Waa in aan difaacnaa xoriyaadka dastuuriga ah ee lagu helay dhibka—xorriyadda cibaadaysiga, hadalka, saxaafadda, ururada, xaqa hubka iyo qaar kale. Isku dayga qaabaynta ee xabsiga lagu geliyo oo lagu aamusiiyo kuwa ka soo horjeeda siyaasadda waxay dhaawac ku tahay xuquuqda ay u baahan yihiin dadka shaqeeya.

Bulshada shaqaalaha ee dhammaan wadamada ayaa leh awood ay ku joojiyaan socodka boqortooyada ee u gaardinaya dhanka faashiistantimada iyo dagaalka adduunka ayagoo ku dagaalamaya danteena guud. Laga soo bilaabo duulaankii dilaaga ahay ee Vladimir Putin ee Ukraine si uu u diido madax-banaanideeda qaran, Xamaas 'Oktoobar 7-dii, cirib tirka Yahuud naceybka, talisyada Mareykanka' ayaa xukumay nidaamka caalamiga ah tan iyo Dagaalkii Labaad ee Adduunka ayaa ku socda burbur. Waxaan difaacaynaa xaqa ay Israa'iil u leedahay in ay jirto oo is difaacdo, ayna magan gal u noqoto Yahuudda marka ay wajahayaan weerarrada sii kordhaaya.


Waxaan u baahanahay inaan dhisno xisbi ay ku midoobaan dhammaan shaqaalaha iyo wax soo saareyaasha laga faa'iidaysto, iyadoo laga salaynayo ururada, ka go'a dhammaan wada-shaqeynta kooxda xukunka haya, la dagaalama danaha dabaqadaheena, oo u halgama halganka awoodda shaqaalaha.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka ➔

Joseph Kishore iyo Jerry White

(Musharaxiinta Xisbiga Sinnaanta Hantiwadaaga)



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharaxa Xisbiga Sinnaanta Hantiwadaaga ee Madaxweynaha Dalka Mareykanka 2020.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xoghayaha Qaranka ee Xisbiga Sinnaanta Hantiwadaaga ilaa iyo 2008; Qora sare oo ka tirsan Shabakadda Hantiwadaaga Adduunka ee siyaasadda Mareykanka, sinnaan la'aanta bulshada, dhaqanka, waxbarashada, sayniska, halganka shaqaalaha, dagaalanka ka dhanka ah dagaalka, iyo taariikhda dhaqdhaqaqa hantiwadaaga

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka xisaabta iyo shahaadada Mastarka ee Hawlaha Warshadaha iyo Injineernimada, labadaba ka qaataj Jaamacadda Michigan

Adeegga Bulshada: Shan iyo labaatan sanno oo waayo-aragnimo ah dhaqdhaqaqa hantiwadaaga, u dagaalamaya danaha dabaqada dadka shaqeeya iyo kuwa dulman, oo ka soo horjeeda sinnaan la'aanta iyo dagaalka.

Bayaanka: Xisbiga Sinnaanta Hantiwadaaga waxa uu ku baaqayaa dib-u-habeynta hantiwadaaga ee bulshada taas oo soo afjaraysa kali talisnimada damaca awoodda-maaliyadeed ee shirkadaha iyo ku wareejinta awoodda siyaasadda dabaqada dadka shaqeeya; waxay aasaastaa lahaanshaha dhaqaalaha si loo daboolo baahiyaha bulshada-shaquo wakhti buuxa, badbaadada goobta shaqada, baabi'inta faqriga, daryeelka caafimaadka caalamiga ah, guri la awooddi karo, waxbarasho tayo leh, daryeelka carruurta, hawlgab sugar, balaarinta tas-hiilaadka dhaqanka iyo madadaalada-halkii la ururin lahaa faa'iidooyinka waaweyn ee soo gala shirkadaha iyo hantida gaarka ah; waxay xaqijisaa nabadda iyo dimuqraadiyadda iyada oo la baabi'inaayo dhismaha militariga iyo warshadaha iyo isku xirkira balaaran ee hey'adaha sirdoonka dowladda.


Xisbiga Sinnaanta Hantiwadaaga waxa uu caddeynayaa in doorashada 2024 ay u badan yihii saddex arrimood oo xasaasi ah:

Marka hore, militariga taxaddar la'aanta ah ee xisbiyada Dimuqraadiga iyo Jamhuuriga - oo raadinaaya in la sugo danaha caalamiga ah ee damaca awoodda -maaliyadeed ee shirkadaha - waxay keentay Mareykanka qarka Dagaalkii Adduunka III. Dagaalka Mareykanka iyo NATO ee Ukraine iyo dagaalka xasuuga ah ee Gaza ayaa qayb ka ah halganka balaaran ee loogu jiro xukunka adduunka.

Midda labaad, dimuqraadiyadda Mareykanka ayaa fursad siinaysa kali talisnimo, taas oo ay ku lug leeyihiin Dimuqraadiyadda iyo Jamhuuriga. Kali talis siyaasadeedku waa natijada awoodda dhaqaale ee shirkadaha oo aan la xakamayn.

Saddexaad, sinnaan la'aanta bulshada ayaa gaartay heerar aan horey loo arag taariikhda Mareykanka ee casriga ah. Dalkaan waxa uu leeyahay tirada ugu badan ee bilyaneerrada adduunka, kuwaas oo hantidooda wadar ahaan ay taagan tahay diiwaanka \$ 5.2 trillion. Hantida 10-ka bilyaneer ee ugu taajirsan ayaa ka badan hantida guud ee kala bar dadka Mareykanka. SEP waxa ay ku baaqaysaa in lala wareego hantida bilyanka doolarka ah iyo kordhinta weyn ee canshuuraha ee dadka leh dakhliga toddobada tiro ah.

Hantigoosadka wuu fashilmay waana in la soo af jaraa. Hantiwadaaga waa mustaqbalka. U codee Kishore iyo White.



Chase Oliver iyo Mike ter Maat

(Musharaxiinta Xisbiga Libertariyanka)

(470) 737-4090

info@votechaseoliver.com

votechaseoliver.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma laha khibrad kor loogu qaadayo canshuuraha, u diridda ciidamideena si ay uga dagaalamaan dagaallo aan loo baahnayn, ku qaadid Dagaalkii fashilmay ee Maandooriyaha, faragelinta suuqyada xorta ah, ama kharash gareynta lacagta sida adag ay u shaqeystaan canshuur bixiyeyaasha.

Khibrad Xirfaadeed Kale: Khibrad u leh warshado kala duwan, laga soo bilaabo mashiinka digsi dhaqitaanka ilaa iyo la taliye ganacsi iyo maarynta saadka badaha ee mid ka mid ah shirkadaha maraakiibta ugu waaweyn adduunka. Xubin ka tirsan Guddiga Qaranka ee LGBTQ waxbarasho aan faa'iido doon ahayn.

Waxbarashada: Labaatan sanno oo ku saabsan tababarka shaqada iyo aqonta.

Adeegga Bulshada: Ku biir Chase si aad u qaaddo tallaabo toos ah si loo horumariyo bulshooyinkeena, sida jardiinooyinka iyo nadifinta waddooyinka, ugu deeqidda bangiyada cuntada iyo hooyga, iyo tabarucadka iyo lacag u ururinta ururada siiya gargaarka tooska ah kuwa aan guri la hayn.

Bayaanka: Noloshayda oo dhan sida kan Millennial ahaan, labada Xisbi ee Waaweyn waxay ku hawlanaayeen ka dhigista dowladda Mareykanka mid aan caddaalad ahayn, lala xisaabtami karin, oo aan sii jiri karin. Waxa ina soo jiidaya hey'ad ay ka soo jeedaan siyaasiyiin aan cidna la tashan. Waxaan leeyahay aragt kale.

Aynu ilaalinoo deegaanka anagoo jarayna kabista kuwa sshidaalka soo saaraya, oggolaanayna tamarta nuukliyeerka ee ammaanka ah, oo meesha ka saaraya ilaalinta hantigoosadka ee wasakheeyaha. Aynu dib u soo celino caddaaladda anagoo joojinayna xasaanadda aqooneed iyo dacwaynta dambiyada dhibaneyaasha ah. Aynu dib u soo noolayno Riyada Mareykanka anagoo goyna xeerarka kordhinaaya qiimaha dhismaha guriga in ka badan 25%. Aynu xoojino kuwa ku kooraysan deymaha arday ee ugaarsiga ah anagoo ka dhigayna kuwo aan dulsaarlahayn oo laga bixi karo markay kacayaan. Aan rayuno kharashka daryeelka caafimaadka anaga oo joojinayna shatiyada weligood cagaarka ah ee ilaalinaya qiimaha daawooyinka sida insalinta oo sareeya.

Waa inaan isku dheelitirnaa miisaaniyaddeena jiilasha soo socda. Tobnaneyyo sanno oo kharash la'aan ah ayaa horseeday sicir-bararka waxyello u gaystay qof kasta oo Mareykan ah. Aan soo afjarno Dagaalka qashinka ah ee Daroogada lagula jiro, dib u habeynta socdaalka, aan yarayno ilaalininta dadka kor laga ilaalinayo ee wadanka, oo aan xirno saldhigiyada militari ee dibadda ee aan loo baahnayn.

Labada Xisbi ee Waaweyn waxay taageeraan tarif taas oo ah canshuur laga qaado macaamiisha. Tariifyadu waxay horseedaan dagaallo ganacsi, kuwaas oo si gaar ah u dhaawacaya qoysaska Gobolka Washington halkaas oo ku dhawwaad 40% shaqooyinka ay ku tiirsan yihiin ganacsiga caalamiga ah.

Marka ay alaabta joojiyaan ka gudbidda xuduudaha, ciidamo ayaa beddelkeeda ka gudbi doona. Ameerika waxay muudo dheer haysatay moniker 'hoggaamiyaha adduunka xorta ah'. Waa wakhtigii aan ku adkaysan lahayn farqigaas anaga oo ku adkaysanayna in Nabadda ay tahay waddada loo maro heshiisyada ganacsiga iyo diplomaasiyadda.

Dhammaan dhinacyada siyaasadda, Libertariyanka waxay raacaan dib-u-habeyn hal ujeeddo ah: inay awood yeeshaan dadka, maaha dowladda. Goorma ayay fikradaha caqli galka ahi noqdeen fikrado xagir ah? Haddii aad ku nooshahay noloshaada oo aadan isticmaalin xoog, khiyaanno, qasbid ama tuugnimo, noloshaadu waa noloshaada, jirkaaga waa kaaga, ganacsigaagu waa ganacsigaaga, hantidaaduna waa hantidaada; aniga ma lihi, waana hubaal in aanay dowladdu lahayn.

Khibradda Jago Loo Doortay: Adeegga guud ee nolosha oo dhan.

Khibrad Xirfaadeed Kale: Shaqo xirfaadeedka Mike ee maaliyadda iyo dhaqaalaha waxaa ka mid ahaa la shaqeysta Xafiiska Aqalka Cad ee Maamulka iyo Miisaaniyadda (OMB) oo ah dhaqaale yahan maaliyadeed, iyo sidiid dhaqaale yahan la-talin ah saddex hey'adood oo kale oo federaal iyo caalami ah oo ku saabsan horumarinta dhaqaalaha. Mike wuxuu u dooday DC ee suuqyada xorta ah ee warshadaha adeegyada maaliyadeed.

Waxbarashada: BS (Shahaado Jaamacadeedka Adabka) ee injineernimada Duulitaanka. MBA (Shahaadada Mastarka) ee Rensselaer Polytechnic Institute. Shahaadooyinka MS iyo PhD ee dhaqaalaha ee George Washington University.

Adeegga Bulshada: Mike waa sarkaal hore oo booliis ah oo hadda u ooleeya dib u habeynta booliiska.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka ➔

Cornel West iyo Melina Abdullah

(Musharaxiinta Xisbiga Caddaaladda ee Dhammaan)

Ceyanna@cornelwest2024.com
www.CornelWest2024.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Tartanka siyaasadeed ee ugu horeeya.

Khibrad Xirfadeed Kale: Barafasoor Hore ee Jaamacadda Harvard iyo Professor Emeritus (Barafasoor Hawlgab) ee Princeton University. Wuxuu qoray in ka badan 20 buug oo ay ku jiraan: Arrimaha Jinsiyada, Arrimaha Dimugraadiyadda, iyo Walaal West: Ku noolaanshaha iyo jaceylka qaylo dheer. Waxaa lagu bixiyay casharadii Gifford ee taariikhiga ahaa ee University of Edinburgh ee Scotland gugii 2024. Soo saaray saddex album oo muusig.

Waxbarashada: Ka qalin jebiyay Magna Cum Laude ee Harvard saddex sanno gudahood, Shahaadada Mastarka iyo Ph.D. ee Falsafadda ka qaatay Princeton; Qofkii Madow ee ugu horeeyay ee qaata Ph.D. ee Falsafadda ee Jaamacadda Princeton.

Adeegga Bulshada: Dr. West waxa uu ka qaybqaatay mudaaharaadyo badan (bulsho, isir, deegaan iyo caddaalad shaqaale) oo wax ku bari jiray xabsiyada in ka badan 50 sanno.

Khibradda Jago Loo Doortay: Tartanka siyaasadeed ee ugu horeeya; Muslimaddii ugu horeysay ee tartamaysa jagada madaxweyne ku-xigeenka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Barafasoorka Waxbarashada Pan-African ee California State University; hoggaamiyaha Ururka Kulliyadda California (Ururka macallimiinta), gudaha iyo gobolka oo dhan. Qoraaga maqaallo badan, cutubyo buug; soo saare, daadihiye, iyo soo saaraha barnaamijyada raadiyaha; loo aqoonsaday inay tahay khabir ku taqasusay jinsiyadda, jinsiga, fasalka, iyo dhaqdhaqaqa bulshada.

Waxbarashada: B.A. (Shahaado Jaamacadeedka Adabka) ee Waxbarashada Ameerikaanka Afrika (Howard University); Ph.D. in Political Science (Cilmiga Siyaasadda) (University of Southern California).


Adeegga Bulshada: Aasaasaha iyo Agaasimaha Black Lives Matter (Nolosha Dadka Madow Way Quseeysa) – Dhaqdhaqaqa Aasaasiga ee Los Angeles iyo Black Lives Matter.

Bayaanka: Qorshaha Isbeddelka Wax Ka Beddelka ee Maamulka West/Abdullah

Maamulka West/ Abdullaah 100-ka maalmood ee ugu horeeya ee uu xafiiska joogo waxay keenni doonaan isbeddel muuqda oo ku yimaada siyaasadda Mareykanka, oo ku qotoma tiirarka saddex-geesoodka ee ah runta, caddaaladda iyo jaceylka. Qorshahaan dhammaystiran, oo si habboon loogu sifeeyey "kacaanka qiyaamka," ayaa qeexaaya qorsheyaal dhiiran oo taxane ah oo loogu talagalay in lagu wajaho sinnaan la'aanta nidaamka iyo kobcinta bulsho sinnaan leh.

Waxqabadyada muhiimka ah: Amarka fulinta ee ah in mudnaanta la siiyo hoy la'aanta iyo faqriga; Dib u habeynta waxbarashada xagjirka ah (ay ku jirto amarka federaalka si loo simo kharashaadka arday kasta ee degmooyinka) iyo tallaaboooyinka ilaalinta deegaanka (laga bilaabo ku dhawwaqidda xaaladda degdegga ah ee cimilada); tallaaboooyinka geesinimada leh ee helitaanka daryeelka caafimaadka iyo sinnaanta jinsiga (sida daabacaadha Wax-Ka-Beddelka Dastuurka ee Xuquuqda Sinnaanta iyo habeynta xuquuqda ilmo soo rididda iyo madax-banaannida jirka); siyaasadda arrimaha dibadda ee wax-ka-beddelka ah iyo dib-u-habeynta socdaalka (oo ku lug leh joojinta dhammaan maalgelinta iyo hubka lagu wareejyo Israa'iil); waxqabadyo la taaban karo oo ku saabsan caddaaladda jinsiyadda iyo dib-u-habeynta dimuqraadiyadda (oo ay ku jiraan magdhowga maliyyadeed iyo barnaamijyada dib-u-celinta dhulka); iyo kala horumarinta xuquuqda shaqaalaha iyo ilaalinta shaqada (laga bilaabo diyaarinta Sharciga Xuquuqda Shaqaalaha).

Wax badan ka baro www.CornelWest2024.com/100_days.



Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dalka Mareykanka

Shiva Ayyadurai iyo Crystal Ellis

(Musharaxiinta Madax-Banaan)

Shiva4President@Shiva4President.com

Shiva4President.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax Jagada Senatarka Dalka Mareykanka ee ka socday Massachusetts 2018 & 2020.

Khibrad Xirfadeed Kale: MIT PhD, Hal-Abuuraha limeelka, Saynisyahanka Nidaamyada, Injineer, Ganacsade. Aasaasaha toddoba ganacsiyo oo guuleystay. Guddoomiyaha & Maamulaha CytoSolve, Inc., EchoMail, Inc., Agaasimaha Fulinta ee Xarunta Caalamiga ah ee Nidaamyada Isku-dhafka.

Waxbarashada: Afar MIT Shahaadooyin: PhD ee Nidaamyada Bayoolajiga, Shahaadada Mastarka ee Injineerka Makaanikada, Shahaadada Mastarka ee Naqshadaynta Muuqalka, Shahaadada Mastarka ee Injineerka Korontada iyo Sayniska Kombuyuutarka. Aqoon yahan Fulbright.

Adeegga Bulshada: InnovationCorps.Org, Bixiyay 5,000+ Deeq waxbarasho oo buuxda oo la siinayo carruurta Sayniska Nidaamyada.

Khibradda Jago Loo Doortay: Kabtanka Xaafadda ee 2020 Shirka Iowa

Khibrad Xirfadeed Kale: Hawl-wadeenka Hantida Ma Guurtada ee Ganacsiga iyo Guryaha, Naqshadeeyaha Dahabka, Ganacsade.

Waxbarashada: Isgaarsiinta Ururka, Creighton University

Adeegga Bulshada: Tabaruc u ah Siena Francis House, Macbadka Hindiga ee Omaha, iyo Truth Freedom Health ®

Bayaanka: Laga soo bilaabo 1970-meeyadii, siyaasadaha "The Swarm"(Raxanka) - kuwo si adag isugu xiran iyo kuwa dabaqada sare ee guud ahaan ka socda Bidixda iyo Midigta oo lagu qeexay ShatterTheSwarm.com - waxay si ula kac ah kor ugu qaadeen qiimaha nolosha ee dadka maalinlaha ah waxayna burburiyeen rajada nolosha dadka Mareykanka.

Haddii aad maanta ilmo dhasho, wiilkaaga ama gabadhaada aaya adiga kaa cimri gaabnaan doona.

Tani waa waxa dhacaya marka aad sii wadato u codeynta "kan xumaantiisu ka yar tahay kan kale" adigoo u malaynaya in midka kale ee xun "ku badbaadin doono." Wax dan ah kama laha inay ku badbaadiyaan, in ay ku dilaan mooyaane. Xalka - Runtu waxay tahay inaad u baahan tahay inaad Naftaada Badbaadiso! Waxaan u baahanahay *dib u habeynta hannaanka*, kaas oo dalbanaaya dhaqdhaqaq ilaa hoos gaara oo shacbiigumayno, anaga iyo adigaba. Shiva 4 President - Markaad Shiva ugu codeyso Madaxweyne, waxaad qiraysaa in "Raxanka" iyo dabahilifkooda ay u joogaan inay ku addoonsadaan. Waxaad qiraysaa in xalka keliya uu yahay Anaga, adigoo dooranayo mid Naga mid ah inuu noqdo hoggaamiye.

Raxanka aaya nagu qasba madaxdooda. Midkoodna nagama mid aha Anaga. Dr.Shiva waa mid Naga mid ah.

Waxa uu ka soo kacay hoos oo uu tagay kor, isaga oo ka baxsanaaya nidaamka qalafsan iyo dulmiga ee Hindiya. Isaga oo 14 jir ah, waxa uu abuuray nidaamka limeelka ugu horeeyay adduunka, isaga oo la siiyay Xuquuqdii u horeysay ee Mareykanka ee limeelka, isaga oo loo aqoonsaday in uu yahay sharciilaha iyo hindisaha rasmiga ah ee limeelka. Wuxuu sii waday inuu afar shahaado ka qaato MIT, wuxuuna bilaabay 7 shirkadood oo guuleystay, waligiisna kama qaadan wax maalgelin ganacsi ah oo ka yimid dadka caanka ah ee Silicon Valley. Dr.Shiva wuxuu leeyahay taariikh cad oo muujinaysa inuu karo xalalka dhabta ah si loo beddelo nolosha dadka maalinlaha u shaqeysta.

Shatter The Swarm (Kala Jebi Raxanka): Dhaqdhaqaqa Caafimaadka Xornimada Runta® iyo Shiva oo Madaxweyne loo doorto (Shiva 4 President) wuxuu ku siinaya fursad aad ku Jebinayso Raxanka oo aad ugu guuleysato nolosha aan u baahanahay oo aan u qalanno. U codee Shiva inay noqoto Madaxweyne.



Senatarka Dalka Mareykanka

Maria Cantwell

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 682-7328

info@cantwell.com

www.cantwell.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatka Dalka Mareykanka 2001-illaa iyo hadda, Aqalka Wakiillada Dalka Mareykanka 1993-1995, Xubinta Baarlamaanka Gobolka Washington 1987-1993.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Real Networks, Guddoomiye Ku-Xigeenka Suuqgeynta iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka Sare ee Waaxda Alaabaha Macaamiisha 1995-2000.

Waxbarashada: Qofkii ugu horeeyay qoyskeeda oo ka qalin jebisay jaamacad ayadoo caawinaad kaalmo dhaqaale heshay. Waxay Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Maamulka Dadweynaha ka Qaadatay Miami University.

Adeegga Bulshada: Ururka Henry M. Jackson, Xubin Sharafeedka Hore ee Guddiga Talo Bixiyeyasha; Xubinta Hore ee Guddiga Waaxda Ganacsiga ee South Snohomish, Xubinta Hore ee Guddiga; Alderwood Rotary, Xubinta Hore ee Guddiga; Apollo Alliance, Xubin ka mid ah Aasaaseyaasha

Bayaanka: La awoodi karo. Shaqooyinka. Xuquuqda. Ammaanka. Taas ayaa ah waxa aan ogaaday intii aan ahaa wakiilkiina Washington, D.C., ma'aha siyaasadda kacsan ee xisbiyaysan.

Qimaha Jaban: Cuntada, tamarta, guryaha, waxbarashada, daryeelka carruurta, iyo daawada dhakhtarka qoro dhammaantood waa qали. Waa taas sababta aan gaacanta uga gaystay in daawada insalinta bishii qimahaedda laga dhigo \$35 macaamiisha Medicare waxaanada dagaal kula jiraalaalinta daawada ee qimaha cirka geeyay. Sharcigayga ayaa ka dhigay bedbeddelka suuqa tamarta dambi, asagoo u sahlaaya dowladda soo celinta balaayin doolar oo ah faa'idooyinka sida xun lagu qaataay. Waxaan hormuud u noqday canshur dhaafyo lagu dhisay malaayiin guryaya qimaha jaban ah waxaana ka dhigay daryeelka carruurta mid qimhiisa la awoodi karo.

Shaqooyinka: Ku soo celinta ganacsiyada wax soo saarka iyo jumlada gobolka ayaa muhiim u ah abuurista shaqooyinka, kordhinta mushaharaadka, iyo kobcinta dadka dabaaqada dhexe. Waxaan abuuray sharci cusub kaasoo kobcinaaya waxbarashada STEM iyo tababarada xirfadda, saddex jibaarna ka dhigaaya awoodda wax soo saarka agabka korontada ee Mareykanka. Dhaqaalheenna beeraha ayaa sidii hore ka awood badan waayo waxaan hor istaagnay dadka dibadda ka keena waxaana dib ugu furnay suuqiyada tufaaxda iyo misirta ka soo go'da Washington. Waxaan sii wadnay isku socodka maraakibta anagoo heer cusub gaarsiniy maalgeshiyada kaabayaasha dhaqaalaha. Waxaan kordhiyay helitaanka deynta ganacsiyada yaryar waxaana fursado cusub u abuuray haweenka iyo ganacsiyada ay leeyihiin dadka laga tirada badan yahay.

Xuquuqda: Xorriyadaha oo aan markii hore u qaadanay wax iska dabiici ah ayaa khatar ku jira. Waxaan isku dayaayay inaan shariyeeyo Roe v. Wade, ilaa lihelitaanka daawooyinka ka hortagga ururka iyo IVF, aana ka hor istaago gobollada diiddan dookha qofka inay xukunno ku ridaan haweenka. Dadka reer Washington ayaa xaq u leh hawo iyo biyo nadif ah, taasoo ah sababta aan u hoggaanshay dadaallada si aan u difaaco dhlulka dadweynaha ee qaaliga ah, u soo celiyo noolaha kaluunka saamanka, lagana guuro shidaalka hawada wasaqaaysa.

Ammaanka: Daroogada Fentanyl waxay masiibo ku tahay qaybo badan oo bulshooyinka Washington ka mid ah, marka sharcigayga cusub ayaa u aqoonsanaya Fentanyl xaalad qaran oo degdeg ah wuxuuna siinayaan booliiska maxalliga ak kheyraad badan si ay uga hortagaan in daroogadaan ka soo gudubto xuduudhaheenna. Hawlgabka ciidanka ayaa u adeegay waddanakeena, taasoo ah sababta aan ugu dagaalamay ilaalinta caafimaadkooda, ayna ku jiraan 124,000 oo reer Washington ah oo ku sumoobay waxyaabo sun ah.

Waxaan codsanaya inaad igu taageertaan tartanka Senatka Dalka Mareykanka.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqaad ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Dr Raul Garcia

(Dookh Ahaan Xisbiga GOP-ga)

(206) 274-5859

info@garciaforwa.com

www.garciaforwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Dr Garcia ma ahan siyaasi xirfaddiisu tahay siyaasad. Waa hoggaamiye shaqadiisa, waxaa loo doortay ururada caafimaadka qaran sida Jaamacadda Mareykanka ee Daawada Xaaladaha Degdegga ah, Ururka Caafimaadka Guud ee Mareykanka, iyo Xafiiska Dhakaatiirta yaryar iyo kuwa tababarka ku jira.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Dhakhtar, Wuxuu ka shaqeynayay Daawooyinka Xaaladaha degdegga ah, 25 sanno. Wuxuu hadda madax ka yahay Xafiiska Caafimaadka, Astria Toppenish Hospital. Mulkiile hore ee xarun caafimaad; Maareeye qayb ka ahaa aasaasidda, laba dugsi oo caafimaad; Agaasimaha Caafimaadka, laba isbtaiila.

Waxbarashada: Wuxuu haystaa Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Sayiska, Bayoolajiga/Cilmiga Nidaamka Difaaca Jirka, University of Miami. Ka qalin jebiyay New York College of Osteopathic Medicine.

Adeegga Bulshada: Wuxuu wax ka aasaasay, Iskaashatada Haqab-beelka Cuntada (Partnership for Food Security). Ololeyaasha maxalliga ah ee hooyga rabshadaha qoyska, alaabta ay ku ciyaraan carruurta xanuunsan, baaskiilad ee buugaagta, iyo quudintu dadka hooy la'aanta ah.

Bayaanka: Doorashadaan waxay fursad u tahay dadka reer Washington inay wax ka beddelaan habka dowladnimada, si ay u joojiyaan meertada siyaasadda is diiddan ee la iskaga indho tiro danaha ugu wanaagsan ee dadkeena.

Dhibaatooyinka aadka u daran ee dhacaya ma helaan feejignaanta ay mudan yihiin. Daroogada Fentanyl waa deroogo aad khatar u ah oo disha malaayiin Mareykan ah. Dr Garcia, maadaama uu ahay dhakhtarka Xaaladaha Degdegga ah, wuxuu arkaa qiyas xad dhaaf ah oo aad u badan, wuxuuna yaqaan qoysas aad u badan oo waayay/ka dhinsteen dad ay jeclaaheyen. Dr Garcia waa musharaxa keliya ee Senatarka ah ee leh qorshe si dhab ah lagula dagaalamayo dhibaataada daroogada Fentanyl keento, iyadoo la adeegsanayo hab la xaqiijiyay oo bartilmaameedsanaya ganacsatada ka ganacsata si ay xabsi wakhti ugu qaataan, iyo inuu dadka daroogada bartay ka caawiyo barnaamij adag oo daaweyn iyo soo kabasho ah.


Dhibaato kale oo jirta waa qimaha maciishadda. Washington waa gobolka afaraad ee ugu maciishadda sareeya, iyo gobolka sideedaad ee ugu qaalsan guud ahaan. Dad badan ayaa ku jira ama u dhow dhammaadka awoodoododa dhaqaale sicir barar baahsan awgiis. Waxaan gacan ka geysan karnaa wax ka qabashada sicir barar anagoo joojinayna kharashaadka federaalka ee aan isla xisaabtanka lahayn ee si kordhiya deynta qaranka, iyo kor u qaadidda wax soo saarka si loogu fududeeyo qimaha macaamiisha Dr Garcia wuxuu u doodi doonaa miisaaniyad caqli gal ah.

Maadaama uu yahay dhakhtar qaabilan caafimaadka degdegga ah, Dr Garcia wuxuu maalmihiisa ku qaataa caawinaadda dadka. Maadaama uu yahay qaxooti kasoo jeeda Cuba oo uu Mareykanka hooy u noqday, wuxuu si qoto dheer u jecel yahay dalkeenna. Maadaama uu yahay wiil ay soo korisay hooyo keligeed, wuxuu xushmeeyaa raga iyo dumarka sida dadaalka leh u shaqeeya si ay nolol iskugu abuuraan una abuuraan qoysaskooda.

Dr Garcia ma ahan siyaasi xirfaddiisu tahay siyaasad. Laakiin guud ahaan noloshiisa wuxuu ahaa hoggaamiye - ka shaqeeya xirfadda caafimaadka iyo gudub bulshada. Wuxuu bukaanada ugu adeegaa sida dhakhtar, wuxuuna dadka reer Washington ugu adeegi doonaa sida Senatarkooda Mareykanka.

Gobolkeenu waa goob cajiib ah oo xoogaa ka leexday waddada. Xaqiijdi waxaan samayn karnaa sidaan si ka wanaagsan, haddii uu na hoggaamiyo Dr Raul Garcia

Degmooyinka Kongareeska ee 2022



Calaamooyinka

- Xuduudaha Degmooyinka Kongareeska ee 2022
- Magaalooyinka


0 1 2 4 6 8 Miles



King County

Waxaa soo diyaariiyay:
Qaybta GIS
Waaxda Doorashooyinka

Febraayo 2022





Wakiilka Golaha Dalka Mareykanka

Suzan DelBene

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 483-1500
info@delbeneforcongress.com
www.delbeneforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 2012-illaa iyo Hadda. Guddiga Qaabilsan Kordhinta Dakhliga Canshuurta.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xirfad 20 sanno ah oo guul leh ka ganacsade iyo iskeed u shaqeysato ahaan. Hore u ahaa Maamule Sare ee Microsoft, hoggaaminayay aasaasidda shirkadaha teknolojiga ee maxalliga. Agaasimihii hore ee Waaxda Dakhliga ee Washington, halkaas oo aan ku hoggaamiyey dadaallada lagu fududeynayoo nidaamka canshuuraha iyo caawinaadda ganacsiyada yaryar. La-taliyaha maaliyadda-yar oo aan faa'iido doon ahayn oo caawiya qoysaska dhibban.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Bayoolajiga, Reed College; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, University of Washington.

Adeegga Bulshada: Wuxaan la taliye u ahaa ardayda UW Business School. Wuxaan si firfircooni uga dhix muuqday kaniisaddayda, anigoo xubin ka ahaa guddiga. Si iskaa wax u qabso ah ula shaqeeyaa PTA, Girl Scouts iyo YWCA, taageeraya guriyeenta ku meel gaarka ah, tababarka shaqada iyo adeegyada si looga caawiyo qoysaska inay dib cagahooda ugu soo laabtaan.

Bayaanka: Doorashadaan waxay ku saabsannaan doontaa xuquuqaheena, xorriyaddeena, dimuqraadiyaddeena, iyo mustaqbalkeena. Waana dadaal aan dib ugu soo celinayo dhaqalaheenna waddada saxda ah. Ka Xubintina Golaha ahaan, wuxaan dhinac iska dhigay xisbinimada si aan natijjooyin u helno: wuxaan caawiyyaa qoysaska dabaqada dhexe iyo dadka waayeekla ah, wuxaan taageeraa halyeeyadii hore, iyo dhisidda mustaqbal ifaya oo carruurteena helaan. Wuxaan u taaganahay qiyamkeena aan wadaagno.

Waxaa Kongareeska ka jira qalalaaso badan. Waxaa jira dad badan oo xanaaqsan oo qaylinaaya. Waxaa ka jira shaqo xumo badan. Qoysaska shaqeeyaa ee Degmada 1-aad waxay rabaan tallaabo in la qaado. Taasi waa sababta aan xoogga u saaro bixinta natijjooyinka dhabta ah oo la xiriira arrimaha jeebka, iyo ka fogaanshaha fowdada iyo shaqo xumada qeexaysa Kongareeska maanta.

Waxaan taageeraa siyaasadda lagu yaraynayo maciishadda maalin walba, canshuur dhimmista loo sameeyo dadka shaqeeyaa iyo sidii dadka maalqabeennada ah iyo kuwa hantida haysta u bixin lahaayeen qaybtu canshuurtooda saxda ah. Wuxaan gacan ka geystay meel marinta siyaasadaha hoos u dhiga qiimaha daawooyinka la qoro iyo insalinta dadka waayeellada ay helaan qiimahaedda lagu xaddiday \$35. Laakiin waxaa weli jira wax badan oo ay tahay in la qabto si loo dhimma kharashaadka daryeekla caafimaadka, la balaariyo helitaanka daryeel tayo leh, iyo xaddidaada kharashka daawooyinka laysku qoro ee dhhammaan dadka Mareykanka.

Waxaan ahaa hoggaamiye awoodda saaray meel marinta balaarinta Child Tax Credit (Canshuurta la isugu siyo), oo ah arrin labo meeloof meel hoos u dhigaysa saboonlimada. Wuxaan soo bandhigay sharci waddaniyad ku dheehan tahay si loo meel mariyo abuuritaanka labo milyan oo guri oo qiimo jaban. Aad ayaa looga daahay inaan wax ka qabano dib u habeyn lagu sameeyo nidaamka soo galootiga iyo soo celinta amniqa xuduudaha - wuxaan diyaar u ahay inaan ka shaqeeyo helitaanka caqli galnimo, xalal ay u wada dhan yihiin labada xisbi. Si ka duwan siyaasiyiinta Jamhuuriiga daran, waxaa iga go'an inaan awooddha siyo Gunooinka Amniga Bulshada (Social Security) iyo Medicare. Waxaa si xoog ah u taageerayaa xuquuqda taranka waxaana ahay kafaala-qaadaha asalka ah ee Xeerka Ilaalinta Caafimaadka Haweentka si loo ilaliyo Roe.

Waxaa sharaf ii ah in aan helo taageerada kooxaha Dimuqraadiga, ururada shaqaalaha, hoggaamiyeeyasha maxalliga, iyo kuwo badan oo kale.

Anoo awoodda saaraya natijjooyinka, oo aanan awoodda saarin hadal ahayn, wuxaan ku kalsoonahay inaan samayn karo horumar sax ah si aan u caawiyo qof walba oo ku nool Degmada 1-aad. Wuxaan kaa codsanayaa taageeradaada.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Jeb Brewer

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 760-0814
jeb@voteforjeb.com
www.voteforjeb.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Waa muwaadin niyad jaban oo samayn doona isbeddel, ma ahan maaha siyaasi xirfadeed.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wax ka badan 30 sanno ayaan ka shaqeeyayaay hawgallada iyo dhismaha anoo si joogto ah xoogga u saaraya isla xisaabtanka kharashka, horumarinta hufnaanta, iyo la xisaabtanka dadka. Wuxaan shaqo ka dhigay xirfad raadin, dhagaysi, waxaana la shaqeeyay dadka qaba fikradaha is diidin si loo helo xal sax ah oo dhibaatooyinka jira wax looga qabto, waayo aragnimadaan waa waxa qarankeena u baahan yahay.

Waxbarashada: Shahaadada Cilmiga Sayniska ee Teknolojiyada Warshadaha Colorado State University.

Adeegga Bulshada: Wuxaan si mutadawacnimo ah uga shaqeeyaa kaniisaddayd. Wuxaan ka shaqeeyay hey'adda Dwelings Now waxaana dhisaaay guryo taasoo aan qiimeeyo inaan dadka kale ka caawiyo inay dhisaa guryahooda iyada oo loo maraayo inay xooggooda geliyaah dhisitaanka.

Bayaanka: Wuxaan fahamsanahay in shaqada keliya ee wakiilka Mareykanka ay tahay inuu dheyasto dadka soo doortay iyo inuu taageero sharciga kor u qaadaya noloshooda iyo dalkeenna. Nasib xumo siyaasiyiintu waxay iloobaan arrintaan waana sababta aan ugu baahannahay matallaad fikrudo cusub wadata iyo sababta aan u taageerayo xaddidaada muddada iyo hufnaanta dheeraadka ah ee dadka la doortay. Wuxaa la joogaa wakhtigii la joojin lahaa siyaasadda sidii caadada ahayd, lana joojin lahaa in la doorto isla dadkii ballanqaadyadii isbeddelka sameeyay, laakiin xaqiiqdu noqotay inay iyaga noqodeen dhibaataada.

Waxaa jira dhibaatooyin badan oo khatar oo aan u baahannahay inaan wax ka qabano, wuxaan kugu dhiirigelinaya inaad firiso boggayga si aad u heshi fikradahayga ku saabsan sidii aan u xallin lahayn. Hase yeeshi ujeeddadayda koowaad waa dhaqalaheenna wuxaana si gaar ah diiradda u saarayaan soob celinta wax soob saarka. Mareykanka wuxuu noqday dhaqaale adeeg ah oo haddii aynaan soob saarin wax soob saar keenayaa ma abuurayno shaqooyin, maal, iyo xasilloonida aan u baahannahay si aan u si wadno dal xoog leh. Haddii uusan jirin dhaqaale aad u xooggan ma heli doono lacag aan ku samayno waxbarasho tayo leh, kaabayaal, iyo barnaamijyada kale ee loo siman yahay. Marka la i doorto, Wuxaan awoodda saari doonaa sharci kor u qaadaya wax soob saarka iyadoo loo maraayo: waxbarasho leh kharashaad qimo jaban, siyaasadaha ganacsiga ee kor u qaadaya wax soob saarka Mareykanka iyo wax dhoofinta, iyo tamarta iyo barnaamijyada deegaanka ee noo oggolaanaya inaan noqono maamuleyaasha wanaagsan ee deegaanka iyadoo la hubinaayo inaysan jirin culaysyo iyo kharashaadka kor u sii kacaaya ee canshuur bixiyaha iyo ganacsiyada.

Kuma qanacsani arrimaha jabsan, wuxaan filayaa natijjooyin wanaagsan inay ka dhalato lacagta canshuurta lagaaga qaado, wuxaan filayaa wax ka fiican waxa aan hadda haysano. Haddii ay jiraan wax aan wax tarlahayn, hagaaji, beddel, meesha ka saar, ha aqbalin. Inkastoo aan ahay musharaxa keliya ee ay taageerayaa Xisbiga Jamhuuriga ee Gobolka Washington, haddana waxaa i qeexa qiyamkayga gaarka ah. Waan ku matali doonaa, kana shaqeeyn doonaa si aad noloshaada u wanaajiso una dhisto mustaqbal ifaaya. Wuxaan idin ka codsanayaa codkiina.



Wakiilka Golaha Dalka Mareykanka

Pramila Jayapal

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

info@pramilaforcongress.com
www.pramilaforcongress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 2017-illaa iyo Hadda; Senatarka Gobolka Washington, 2015-2017

Khibrad Xirfaadeed Kale: Aasaasaha/Agaasimaha Fulinta, OneAmerica; Agaasimaha, Maalgelinta Wareejinta Teknoloyiyada ee PATH; Falanqeeye Dhaqaale; Qore

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Ingiriiska iyo Dhaqaalah, Georgetown University; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga, Northwestern University

Adeegga Bulshada: Guddoomiye, Guddiga Horusocodka Kongareeska. Xubin, Guddiga Garsoorka ee Aqalka, Xubin Darajo Sare oo ka tirsan Guddi hoosaadka Arrimaha Soo Galootiga. Xubin, ka tirsan Guddiga Aqalka ee qaabilan. Waxbarashada iyo Hawlaha Shaqada. Wakiil Sare, Guddiga Dimuqraadiga. Xubin, Guddiga Sinnaanta Kongareeska. Xubin, ka tirsan Guddiga Kongareeska ee Aasiyaan Baasifigga Ameerikaanka ah (Congressional Asian Pacific American Caucus, CAPAC). Xubin, Guddiga Arrimaha Xaqquqda. Waxaan biladda Abaalmarinta Horyaalka Isbeddelka (Champion of Change Award) ka helay Madaxweyne Obama. Horey uga tirsanaa Guddiga La-talinta Sinnaan la'aanta Dakhliga Seattle (\$15 mushaharka ugu yar) iyo Guddoomiyaha Labaad, Guddiga Raadinta Taliyaha Booliiska.

Bayaanka: Waxaan ku hanweynahay inaan matalo degmada 7-aad ee Seattle oo aan u istaago dadka saboolka ah iyo dadka shaqeeya ee bulshadeena oo dhan. Ka Xubintiina Kongareeska ahaan, Waxaan ka shaqeyay inaan kor u qaado heerka mushaharka, dhimmista kharashaadka, ilaalinta xuquuqda ilmo iska soo rididda, inaan qaado tallaabo jawi geesinimo leh, iyo maalgelinta guryo la awoodi karo.

Ka Guddoomiyaha Guddiga Horusocodka ee Kongareeska, waxaan u soo bandhigay sharcii deejin Medicare for All (Daryeel Caafimaad oo dadka oo dhan), jaamacadda lacag la'aanta ah, guriyeenta ah xuquuqaha dadweynaha, balaarinta xuquuqda shaqaalah, kor u qaadista heerka mushaharka ugu yar ee federaalka si loo gaarsiiyo \$15, dib u habeynta arrimaha solo galootiga, iyo canshuurta laga qaado dadka taajiriinta ah. Waxaan soo bandhigay sharcii deejinno badan si aan lacagta looga saaro siyaasadda iyo sidii loo xaqijin lahaa anshaxa Kongareeska iyo Maxkamadda Sare.

Waxaan door muhiim ah ka ciyaaray gudbinta Xeerka Yaraynta Sicir Bararka, taasoo qiiimaha insalinta ka dhigay \$35 ee ay helaan dadka waayeeellada ah, waxaan Medicare awood oo siinay si ay uga gorgortamaan daawooyin qiiimo hoose ah, waxaan samaynay maalgashiga cimilada ee ugu weyn taariikhda. Sidoo kale waxaan meal marinay sharcigii ugu horeeyay ee badqabka hubka muddo ka badan 30 sanno waxaana samaynay maalgashi kaabayaal oo taariikhii ah.

Xubintiina Kongareeska ahaan, waxaan qabtay in ka badan 100 shirar magaalo si aan fikirkaga u maqlo iyo fikirkumanaan qof oo ka mid ah dadka deegaanka - oo ay ku jiraan halyeyadii hore iyo dadka waayeeelka ah - si ay u helaan malaayiin dheefaha federaalka ah. Xafiiskayu wuxuu si adag uga shaqeyay sidii uu u sugi lagaa tobanaan milyan oo maalgashi cusub oo federaal ah oo lagu bixinaayo hindiseyaasha maxalliga ah ee guryaha, shaqooyinka, iyo waxyaabo badan oo kale.

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan matalo degmo hal abuur badan, ku nool yihiin dadyowga kala duwan, leh naxariis. Waligey ma qaadan lacagta shirkadda PAC sababtoo ah waxaan u dagaalamaa dadka shaqeyya, uma dagaalamo dadka hodanka ah iyo kuwa sida fiican xiriirku u leh. Waxaan Mareykanka imid keliya anoo jira 16 sanno, waxaana ku noolalaat Seattle muddo ka badan 30 sanno. Sharaf weyn ayay ii noqon lahayd inaan helo codkiina.


Taageerooyinka: In ka badan 20 urur oo ah ururada shaqaalah oo ay ku jiraan Golaha Shaqaalah Gobolka Washington, SEIU, UFCW 3000 iyo Golaha Shaqooyinka Dhismaha iyo Dhisitaanka Gobolka Washington. Waalidnimada la qorsheeyay (Planned Parenthood), Ururka Ilaalinta Codbixiyeyaasha (League of Conservation Voters), Sierra Club, iyo Dimuqraadiviinta Degmada King.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Dan Alexander

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 590-0620
info@da4congress.com
www.da4congress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Loo doortay (aan lagula tartamin) oo ah Madaxa Guddiga Xaafadda (SEA 43-3934); Mutadawacnimo si kooban ugu shaqeyay ololaha dib u-doorashada Senatarka Mareykanka. Xitaa wakhti hore noloshayda, waan ogaa in maalin uun aan u tartami doono xafiis. Tani waa bilowga.

Khibrad Xirfaadeed Kale: Waxaan ahaa Hoggaamiyaha Injineernimada ee shirkad diyaaraadeed oo weyn tan iyo sannadkii 2001; Khibrad ganacsii dhisitaanka shirkad koronto dhalisa

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Injineernimada Makaanikada/Duulimaadka, Rensselaer Polytechnic Institute (RPI); Qayb ahaan MS ee Aeronautics/Astronautics Engineering (Injineernimada Duulimaadka/Socdaalka Hawada), Stanford University; Waxbarasho Dheeraad oo ah cilmiq dhaqaalah

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga, Artsfund (Guddoomiyaha Guddiga Xiriiryaha); Xubinta Guddiga, Tiyaatarka ACT (Ku-Xigeenka Joogitaanka iyo Guddoomiyaha Maamulka); Xubinta Guddiga, Isbahaysiga Horumarinta Ganacsiga; Xubin ka ah, Isbahaysiga CleanTech; Tababaraha ciyaaraah lakarooska ee dugsiga sare

Bayaanka: Waxaan rajo weyn ka qabaa mustaqbalka dalkeenna si uu u noqdo iftiinka adduunka oo dhan. Anagoo adeegsanayna mabda'a Mareykanka ee la xiriira is-xukunka waa inaan ilaalinaya xorriyaddeena iyo xaga aan u leenahay inaan wax doorano.

Yoolka ugu weyn ee Kongareeskeena waa inaan gaarno heshiis aasaasi ah oo ku saabsan arrimaha soo ifbxayaa iyadoo la kobcinayo horumarka la xiriira badqabka, xorriyadda, iyo sharafka. Kala qaybsanaanta dowladeena ka dhex jirta waxay sababty hoos u dhaca awoodda, saamaynta iyo wax soo saarka dalkeenna. Waa inaan mideynaa ururada aanaa mee marino sharciyada muhiimka ah.

Waxaan u baahannahay dad caafimaad qaba, nafaqo leh oo awoodi kara inay kor u qaadaan qiiimaha noloshooda. Waxaynu u baahannahay kaabayaal kor u qaadista nolosha casriga ah ee heerka sare iyadoo la isku dheelitirayo dhibaatooyinka sii kordhaaya ee wasakhaa iyo qashinka. Maalgelinta gudaha iyo dib u soo celinta shaqada aaya loo baahan yahay si loo cusboonaysiyo mabaadii'da aasaasiga ah oo aan aasaas cusub u samayno horumarka Mareykanka.

Farshaxanka waa shay qeexaaya dhaqankeena. Dunida teknoloyiyada xoogga sii saaraaya, waxaa suurtagal ah in la lumiyo nafta; Farshaxanadu waxay bixiyaan degaan. Maalgelinta farshaxanka wuxuu muhiim u yahay badqabka bulshada; mid keenaya in qarnigaan la helo xasillooni.

Waxaan u baahannahay nabad gelyo caalami ah. Dalkeenna waa inuu u istaagaa xorriyadda iyo fikradaha dimuqraadiga ah, laakiin sidoo kale waa inuu awoodda saaraa badqabka iyo nabad gelyada waarta. Waa qasab inaan ku dadaalno inaan dhammaan dalalka ku toosino nidaamkeena adduunka; Sugidda amniga dhulalka, qaadista cunaqabataynta, iyo kor u qaadista ganacsiga kordhay ee warshadaha soo jireenkay ah iyo kuwa soo koraya. Waa qasab inaan awooddeena u adeegsanayna adeeqsiga naxariista iyo horumarinta aadanah; anagoo ku dhaqmayna anshaxeena ah inaan farxada aan lagu raadin qaab hunguri-xumo ah iyo kala duwanaansho balse waa inaan ku raadino qaab deeqsinimo iyo mahadnaq leh.

Waxaan deganaa bartamaha magaalada Seattle muddo 14 sanno ah. Waxay iyi ahaan layhad mudnaan aad u sareysa in aan isticmaalo awoodddayda iyo khibraddayda ka wakiil ka tirsan Kongareeska ahaan. Waxaan idin ka codsanayaa codkiina, iyo deeq haddii aad awoodo. Mahadsanidiin.



Wakiilka Golaha Dalka Mareykanka

Kim Schrier

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 395-4775

info@drkimschrier.com

www.drkimschrier.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 2019-illaa iyo hadda, ka tirsan Guddiga Tamarta & Ganacsiga

Khibrad Xirfaadeed Kale: Dhakhtarka carruurta ee Issaquah muddo 17 sanno; Dhakhaatiirta Carruurta ugu Wanaagsan ee loo Codeeyay, aagga weyn ee Seattle (Wargeyska Parent Map, 2013)

Waxbarashada: Shahaadada Dhakhtarka Carruurta ka qaataj Jaamacadda Stanford, 2000; UC Davis School of Medicine, 1997; UC Berkeley, Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Astrophysics, 1991

Adeegga Bulshada: Dib u soo celinta deegaanka Green River, waxaan la shaqeeyay Mountains to Sound Greenway

Bayaanka: Waxaad ii doorateen Kongareeska sababtoo ah waxaad ogayd inaan kuu dooddi doono si la mid ah sidii aan ugu istaagay carruurta iyo qoysaska in ka badan 20 sanno anigoo ah dhakhtarka carruurta. Waxaan ballan qaaday inaan u noqon doono cod madax banaan oo wax ku ool u ah dadka degmadedena, qof diyaar u ah inuu la shaqeeyo labada dhinacba si loo gaaro natijjooyinka wanaagsan.

Waxaan aad awoodda u saaray shirkadaha batroolka ee waaweyn iyo dukaamada raashinka si aan uga joojiyo inay qiimaha kor u qaadaan. Waxaan u codeeyay Xeerka PACT si loo habiyo in malaaiyin kale oo ah halyeyadii hore inay helaan daryeekla caafimaadka ee ay mudan yihiin. Waxaan kordhiiy maalgelinta sharci fulinta federaalka si loola dagaalamo daroogada fentanyl waxaana helnay \$4.4 milyan oo lagu maalgelinayo kaamaradda jirka, ka jawaabeeyaasha iyo tababarka booliiska maxalliga ah. Qof walba wuxuu istaahilaa inuu badqab ku dareemo xaafadaheen.

Maadaama aan ahaa dhakhtarkii carruurta ee ugu horeeyay ee ku biiray Kongareeska, waxaan gacan ka gaystay anxiinta sharciyo hoos loogu dhigayo qiimaha daawooyinka la soo qoray, oo ay ku jiraan in qiimaha insalinta lagu xaddido \$35 bishii ee dadka waayeellada ah. Dhakhtar ka ahaan, waxaan had iyo jeer u dagaalami doonaa sidii aan u ilaalin lahaa xuququqda haweenka si ay u gaaraan go'aanno daryeel caafimaad oo u gaar ah iyadoo aysan faragelin dowladda.

Waxaan la shaqeeyay labada dhinacba aniga oo ku hadlaya magaca bulshooyinkeena beeralayda ah si aan u dhiirigeliyo waaraitaanka beeralayda, u doodista wax ka beddel caqligal leh ee dadka soo galootiga, iyo hagaajintu carqaladaha silsiladaha saadka (supply chain disruptions) si beeralayda ay u helaan qaabka ay u suuq geyn lahaayeen alaabahooda. Waxaan sii wadi doonaa inaan u dodo arrimaha dhulalka dadweynaha ee aan qimeyno, hawo nadiif ah, iyo biyaha nadiifka ah.

Ayadoo aan qabtay wax ka badan 100 shir oo magaalo, waxaan dhegastay, wax ka bartay, oo aan idinkaga dooday gudaha Kongareeska. Waxay ii tahay xushmad inaan idin matalo, waxaana si xushmad ku dheehan tahay idiin weydiisanayaa codkiine.

Taageerooyinka: League of Conservation Voters (Ururka Ilaalinta Codbixiyeyaasha), Washington State Labor Council (Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington), Planned Parenthood Action Fund, Alliance for Gun Responsibility Isbahaysiga Mas'uuliyyadha Hubka), Chelan County Sheriff Mike Morrison, iyo duqa magaaloooyinka ee degmooyin kala duwan, oo ku jiro Duqa Magaalada Issaquah Pauly iyo Duqa Magaalada Wenatchee Poirier.

Carmen Goers

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 579-4538

Goerscampaign@gmail.com

www.CarmenForWashington.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddiga Adeegyada Bini'aadamka Auburn; Xarunta Dhacooyinka Gaarka ah ee Xarumaha Dadweynaha Degmada **Khibrad Xirfaadeed Kale:** Waxaan ahay shaqaale ka shaqeeyaa bangi ganacsiga waxaana ka soo shaqeeyay Degmada 8-aad ee Kongareeska muddo 20+ sanno ah. Horey, markii qoyskeena dibadda loogu diray adeeg qaran, waxaan ka shaqeeynaayay maaliyadda oo aan u adeegayay xubnaha adeegga federaalka.

Waxbarashada: University of Phoenix - Shahaadada Jaamacadda-Maamulka Ganacsiga

Adeegga Bulshada: Xarumaha Ganacsiga ee South Sound ee Isbahaysiga Sharci dejinta, Eileen & Callie's Place- Guddiga Agaasimeyaasha, Kooxda Wasaaradda Xabsiyada ee Haweenka ee Xarunta Diinta Kirishtaanka, Guddiga Badbaadinta Kirishtaanka ee Baasifigga, Guddiga Arrimaha Ganacsiga iyo Dowladda ee Kent, Ventures (oo horey loo aqoon jiray Washington Community Alliance for Self Help), Guddiga Agaasimeyaasha ee Dugsiga New Horizon

Bayaanka: Waxaan ku noolaa oo aan ka shaqeeyay Washington 20+ sanno. Gabdhahayga halkaan ayaan ku koriyay, haddana waxaan ku faraxsanahay inaan arko carruurta aan ayeyeeda u ahay oo halkaan ku koraya. Waxaan u tartamayaan Kongareeska sababtoo ah waxaan rabaa qoyskaaga iyo qoyskaygaba inay helaan Washington horumar leh oo fursado leh. Waxaan ku dhawwaqay musharaxnimadaya Kongareeska sannadkii 2023, iyo in ka badan hal sanno waxaana ku socdaalnay gudaha degmada oo aan socod ku marnay 7,000 mayl. Fariinta aan ka maglo codbixiyeyaasha ayaa ah inay doonayaan haweeney Kongareeska ka mid ah oo dhegysta ayaga qaaddana tallaabo!

Anoo ku salaynaayo waayo aragnimadaya, waxaan jagadaan kusoo kordinayaa aragtii cusub. Maadaama aan ahay xaaska nin horey uga tirsanaa militariga, waxaan arkay muhiimadda xorriyadda iyo dadaal ay u baahan tahay inaan joogteeny badqabka. Waxaan si mutadawacnimoo ah ula shaqeeyay heyd' maaliyadeed oo yar oo taageera ganacsatada leh yoolalka isku filnaan shada iyadoo loo maraayo shaqo iskaa wax u qabso ah. Waxaan ka soo shaqeeyay oo aan ahaa guddoomiyaha guddiga arrimaha dowladda ee Rugta deegaankeena, taageerada iyo u doodista mulkiileyaasha ganacsiga. Marka aan ku biiro Kongareeska, waxaan sii wadi doonaa inaan taageero hal abuurka ganacsiyada iyo inaan nadiifyo yoolalka ganacsiyada yaryar si ay u sameeyaa horumar.

Shaqale bangi ahaan, waxaan sameeyaa qiimeyn dhaqaale. Marka aan ku biiro Kongareeska, waxaan si dhow u eegi doonaa miisaaniyaddeena waxaana heli doonaa nidaamyo aan ku taageero mulkiileyaasha ganacsiga yaryar iyo qoysaska. Muddo aad u dheer ayaa na lagu qaadaayay canshur aad u badan: waxaa la joogaa wakhtigii aan heli lahayn haweeney Kongareeska ku biirta oo taqaan sida loo dheelitiro miisaaniyadda. Waxaan ka shaqeeyn doonaa sidii aan gacan u siin lahaa wax soo saareyaasheena beeraha, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ah ay codsanayeen caawinaad laakiin la iska indho tiray. Waxaa la joogaa wakhtigii la taageeri lahaa gargaar bixiyeyaasha koowaad. Waxaan filayaa inaan wax ka qabto arrimaha daroogada ee faafa iyo inaan siyo gargaar bixiyeyaasha ugu horeeyaa qalabka ay u baahan yihiin. Hoggaamiyeeyaasha bulshada ee degmada oo dhan waxay isla waafaqueen inaan u baahannahay isbeddel, waxaana i taageeray mas'uuliyyinta deegaanka laga soo doortay iyo codbixiyeyaasha ka kala yimid dhammaan qaybaha degmada.

Washington waxay u baahan tahay haweeney Kongareeska ku biirta oo qaadda tallaabo!



Wakiilka Golaha Dalka Mareykanka

Adam Smith

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 308-8986

info@electadamsmith.com

www.electadamsmith.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Dalka Mareykanka, 1997-illaa iyo Hadda; Senatarka Gobolka Washington, 1991-1996

Khibrad Xirfaadeed Kale: Xeer ilaaliye, Magaalada Seattle, 1993-1995; Qareen, Cromwell, Mendoza iyo Belur

Waxbarashada: J.D. (Shahaadada Sharciga), University of Washington, 1990; Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Fordham University, 1987

Adeegga Bulshada: Xubin: Guddiga La-talinta Sharafka ee Jaamacadda Washington Dugsiga Evans; Guddiga Xiriirkha Dibadda; Guddiga Agasimeyaasha Mashruuca Borgen. Xubin hore: Naadiga Kubadda Cagta ee Issaquah, tababarre mutadawac; PTA-ga Dugsiga Sare iyo Dhixe ee Issaquah; PTA-ga Dugsiga Hoose ee Northeast Tacoma, halkasoo xaaskaya, Sara, ka noqotay madaxweynaha PTA-ga; Naadiga Kiwanis ee Federal Way; Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Tom Lantos; Kaniisadda Episcopal ee St Matthew.

Bayaanka: Degmadeena waxaa ku nool bulsho aad u kala duwan oo dadaan badan, waana degmo aan ku faano inaan ugu yeero guri noloshayda oo dhan. Waxaan kuusoo koray magaalada SeaTac. Sara iyo aniga waxaan halkaan ku korsanay labo carruur ah, oo dhigtagtay dugsiyadeena dadweynaha, ka dibna aaday UW iyo WSU.

Maadaama qarankeenu uu wajahaayo caqabado aan horey loo arag, waxaan diiradda saarayaa xoojinta dadka dabagyada dhexe, xaqiijinta sinnaanta fursadaha loo siman yahay ee dadka oo dhan, iyo maalgashiga mustaqbalkeena. Waa inaan bixinaa wado la heli karo oo hore loogu socon karo oo qof walba uu ku horumari karo. Qoysaka shaqeeyaa, sida kan ururka shaqaalaha aan kuusoo dhex koray, ma haystaan fursado la mid ah kuwii jilashii hore heli jireen. Arrintaan waa in wax laga beddelo. Waa inaan ka gudubnaa heerka dhexe, kor u qaadnaa fursadaha dhaqaale, ilaalinta ururada shaqaalaha, ka dhignaa waxbarashada sare mid la awoodi karo oo la heli karo, iyo inaan bixino shaqooyin mushahar fiican leh.

Dhammaan dadka, aydoon la eegayn meelaha ay ka soo jeedaan, waa inay helaan daryeel caafimaad tayo fiican, oo qimo jaban lana awoodi karo. Nidaamkeena daryeekla caafimaad wuxuu u baahan yahay in dib loo habeeyo si loo abuurro wado loo maro qorshe hal bixiye ah sida Medicare for All (Daryeekla Caafimaadka Loo Dhan Yahay). Anigoo ah Guddoomiyihii hore iyo Dimuqraadiga ugu sareeyaa Guddiga Adeegyada Hubka ee Aqalka, waxaan sidoo kale mudnaata siinayay inaan hubiyo in dhammaan xubnaha adeeggeena iyo qoysakooda, iyadoo aan loo eegin cidda ay yihiin, inay helaan taageerada ay u baahan yihiin oo ay u qalmaan.

Waxaan u shaqeeyaa si dadaal badan si aan u hubiyo in qof kasta oo degmadeena ku nool uu heli karo waxa ugu wanaagsan ee uu dalkaan bixiyo; sababtuna ma ahan oo keliya inay tahay waxa saxda ah ee la sameeyo, laakiin sababtoo ah tani sidoo kale waa gurigaya—waa arrin si shakhsii ah ii taabanaysa.

Waxay ii tahay mudnaan weyn inaan u adeego bulshadeena waxaana jeelaan lahaa inaan helo codkiina.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo baaannada cabbirka.

Melissa Chaudhry

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 271-2240

Hello@VoteMelissa4Congress.com

www.VoteMelissa4Congress.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfaadeed Kale: Waayo aragnimmo balaaran u leh adeegyada aadanaha iyo hey'adda aan faa'iido doonka ahayn, dadaal saara guryaha qiimaha jaban, dib uga soo kabashada ku tiirsanaanta maandooriyaha, iyo taageerada dadka soogalootiga ah. Xubin ka tirsan midowga ururada shaqaalaha. Shaqo hormuud ah kasoo qabtay Gaana, Bakistaan, Ameerikada Dhexe, Kanada, iyo Indoniisiya, si aan u xoojiyo fahamkayga iyo khibraddayda dhaqamada kala duwan.

Waxbarashada: Sooyaal waxbarasho oo kala duwan, Baraayaana Ganacsiga, Dhaqaalaha, Bi'i'ada, Taariikhda, Siyaasadda Guriyeenta, Kaabayaasha Dhaqaalaha Cagaaran, Tirakoobka, iyo Horumarka Joogtada ah, iyo waxyabo kale. Shahaadada Mastarka ee Cilmiga nidaamka Sayniska. Waxaan qaataay tababaralaan oo la xiriira Guryaha La Awoodi Karo, Xiriirada Saameynita leh, Maamulka Wada Shaqeynta, iyo Ganacsiyada Iskaashiga ku dhisan.

Adeegga Bulshada: Mashaariicda horumarinta beeraha iyo bulshada waara ee saddex qaaradood. Waxaan ahaa Xoghaye iyo Xubin ka tirsan ururada ka qaybgalka bulshada/adeegyada aadanaha/ururada samafalka. Waxaan ahaa qof qayb ka gaysta hawlaha diinta ee bulshada dhexdeeda. Qoyska BIPOC ee soogalootiga ah - kooxaha iyo u doodista.

Bayaanka: Waxaan idinku salaamay nabad. Waxaan ahay hooyo, aababay iyo ninkaygana waa halyeeyo naafu ah. Waxaan fahmayaa waxyaabaha laga dhaxlo dagaallada, waxaana u ololeeyaa nabadda ilaa waagaan yaraa. Mas'uulka xilka haya wuxuu hoggaaminaya guddiga Adeegyada Ciidamada asagoo aan lahayn wax khibrad ciidan ah. Miisaaniyaddiisa militariga keliya waxaa \$2 bilyan looga jarraad degmadeena sannadkii, wuxuuna ku faanaa in uu dib u soo celiyo ~\$24 milyan... oo ah 1%

Waxaan u taaganahay siyaasad dibadeed oo mabaa'dii leh oo mudnaanta koowaad siinaysa nabadda, ka hor imaanasya xasuuqa, ilaaalinaysa nafta aan waxba galabsan - gaar ahaan carruurta. Mareykanka waa inuu awooddiiisa u isticmaalo dhanha wanaagsan - sida horumarinta xuquuqaha aadanaha iyo xallinta khilaafaadka, waa inuuusan militari wax u adeegsan.

Cidda maalgelinta ugu badan siisa mas'uulka xilka haya waa AIPAC iyo qolyaha Bombada sameeya (opensecrets.org). Wuxuu u codeeyay xirmo kasta oo gargaar militari ah oo la siinaayo Israa'iil. Wuxuu taageeray in la jaajuuso dadka Mareykanka, dambii ka dhigista hadalka xorriyadda ah, ku xadgudubka xuquuqaha, iyo dagaallo badan - taasoo taajir ka sii dhigta ku deeqayaasha ugu weyn.

Ololahayga wuxuu salka ku hayaa dhaqaalaha, waxaana ka soo horjeedaa dhammaan kaalmada militari ee loo fidyo maamulada dulmiga samaynaya. Waxaan mudhaanta koowaad siin doonaa arrimaha ugu muhiimsan bulshooyinkeena kala duwan ee quruxda badan - sida kor u qaadista dhaqaalaha, daryeekla caafimaad oo la heli karo, guryo la awoodi karo, waxbarasho tayo sare leh, shaqo abuur wanaagsan, taageeridda ganacsiyada yaryar, tababaraka xirfada, xanaanada carruurta, socdaalka caddaalad iyo sharaf leh, ilaalinta badqabka bulshada, iyo kaabayaasha dhaqaalaha ee casriga ah. Waan awoodi karnaa dhammaan waxyaabahan marka aan yarayno maalgelinta dagaallada banaanka.

Waxaan u taaganahay xuquuqaha Dastuurka: sida asturnaanta xogta, hadalka xorriyadda ah iyo isku imaatinka, u sinnaanta sharciga. Xirfaddaydu ma-aan siyaasad. Waxaan ahay qof ku faraxsan Amerikaanimada — aad u niyad jabsan, dadaal badan, oo leh rajo aad u sareysa. Waxaan kasoo shaqeeyay beero, guriyeyn, iyo xakamaynta cimilada. Sidoo kale waxaan soo saaray aragtida juqraafiga aadanaha ee madaxda qaranka. Waxaan ahay qof rajo degdeg ah leh lehna khibrad dhab ah, naxaris qoto dheer, iyo maskaxda saxda ah si aan idinkugu hoggaamiyo mustaqbalka ka dhigaaya Mareykanka dal horumarsan, barwaqo ah, dimuqraadiyad jinsiyado badan leh ay ka jирto ahna dalka ugu nabadda badan adduunka.

I doorta si aad u heshaan matallaad micno leh oo ku dhisan qiyaamka la wadaago. "Xorriyadda iyo Caddaaladda Dadka oo dhan" waa ballantayda iyo waxyaabaha iga go'an.



Guddoomiyaha Gobolka

Bob Ferguson

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 202-5092

info@bobferguson.com
bobferguson.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xeer Ilaaliyaha Guud. Dib loogu doortay codad dhan 67, oo ku guuleystay 37 ka mid ah 39 degmo ee Washington. Hoggaamiye madax banaan, Bob wuxuu maamulaa xafiiska ugu weyn ee sharciga ee gobolka Washington. Wuxuu ilaaliyaa xuquuqdha dhammaan dadka Washington, wuxuu xukumaa dambiileyaasha, wuxuu ka hortagaa kor u kaca sicirka waxyeellada u gaysta qoysaska.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Bob ayaa xirfaddiisa shaqo ka soo bilaabay Bariga Washington. Wuxuu lasoo shaqeeyay garsooreyaasha federaalka oo ay magacaabeen madaxweynyeaasha labada xisbibaa. Bob ayaa soo matalay canshuur bixiyeyaasha, dowladaha hoose, iyo ganacsiyada yaryar. Markii uu soo koraayay, wuxuu ka soo shaqeeyay geynta wargaysyada iyo dhaqista weelasha ee xarunta waayeeleka.

Waxbarashada: University of Washington; Shahaadada Sharciga, NYU.

Adeegga Bulshada: Bob ayaa ka soo shaqeeyay Jesuit Volunteer Corps (Hey'adda Mutadawaca ee Jesuit), asagoo soo maamulay xafiiska adeegyada gurmadka degdeega ah oo caawiya shahksiyadka nugul iyo waxbaritaanka caruruu.

Bayaanka: Wiil uu dhalay macallinka waxbarashada gaarka ah ee dugsiga dadweynaha iyo shaqaalaha Boeing, Bob ayaa gala dagaallada ugu adag, xalliya dhibaatooyinka, idiiна qabanaayo shaqada—kuma shaqeeyo masaalixda dadka awoodda badan. Waa musharaxa keliya ee diida tabarucaadaha ololaha ee ka yimaada shirkadaha PAC iyo shirkadaha waaweyn. Marna kuma qanco masaalixda dad gaar ah, wuxuu difaacaayaa xuquuqdina wuxuuna isbeddel uu u abuurayaa dadka reer Washington.

Ka Guddoomiyaha Gobolka ahaan, muhiimadda koowaad ee Bob waa kor u qaadiista badqabka dadweynaha. Wuxuu shaqaaleysiin doonaa ciidanka booliiska oo dheeraad ah si ay uga hortagaan dambiyada iyo fentanyl. Wuxuu sameeyay ololeyaasha awoodda badan ee ka hortaga darroogada, asagoo ku guuleystay \$1.2 bilyan oo lagu baxshay kordhiinta daaweynta iyo shaqaalaha gurmadka degdeega ah. Kalkalisooyinka, shaqaalaha dab-damiska, iyo dacwad ogeyeasha ayaa taageeray Bob waayo waxay ku kalsoon yihiin inuu la dagaalami doono isticmaalka daroogada ee dadweynaha uuna kor u qaadi doono nidaamka caafimaadka dhimirkka. Bob ayaa la shaqeeyay booliiska si loo soo afjaro falalka kufsiga caddaaladna ay u helaan dhibaneyaasha. Wuu yaqaanaa sida bulshada loogu mideeyo xal u helidda caqabadaha waaweyn.

Bob iyo xaaskiisa Colleen, oo ka shaqeysa Jaamacadda Bulshada, ayaa koriya labo ilmood oo dhowr iyo tobani jiro ah. Bob wuu ka warqabaa in qiimaha sii kordhaaya ee guryuhu uu dhibaato weyn ku abuuray qoysas badan. Wuxuu la shaqeey doonaa labada xisbibaa si loo helo xal macqul u oo wax looga qabto hooy la'aanta iyo qiimaha sii kordhaaya ee guryaha—ayadoo la dhisaayo 200,000 oo guryaha la awoodi karo ah afar sanno gudahood. Bob ayaa kordin doona fursadaha qof kasta oo reer Washington ah uu horumar ku gaaraayo asagoo maal gelinaya waxbarashada xirfadda, tababarka xirfadaha, iyo tababarada shaqada.

Bob wuxuu fahmayaa in dimuqraadiyaddeena dhibaato lagu hayo wuxuuna si guul leh uga hortagay dhowr iyo tobani ka mid ah tallaabooyinka sharci darada ah ee uu sameeyay maamulka Trump. Ka Guddoomiyaha Gobolka ahaan, wuxuu ilaalin doonaa dimuqraadiyaddeena wuxuuna difaaci doonaa dadka reer Washington. Hormuudka xorriyadda taranka, Bob waa musharaxa keliya ee ay taageereen Pro-Choice Washington iyo Planned Parenthood.

Taas beddelkeeda, Xubinta Golaha Wakiillada Dave Reichert ayaa yiri, "Waan jeclahay siyaasadaha Donald Trump," waxaana uu la codeeyay Trump 92.5% ee wakhtigii. Reichert ayaa marar badan u codeeyay soo rogista mamnuucidda ilmo iska soo ridista wadanka oo dhan kaasoo dambiileyaalka ka dhigaaya dhakaattiirta meeshana ka saaraaya Sharciga Daryeekal Qiimaha Macqulka ah (Affordble Care Act). Reichert ayaa diiddan guurka dadka isku jinsiga ah.

Bob anaga ayuu noo dagaalamaa.


Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Dave Reichert

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 410-2322

info@reichertforgovernor.com
reichertforgovernor.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Sharifowga Degmada King (Madaxa Ilaalada Nabadgelyada), 1997-2005; Xildhibaanka Aqalka Wakiillada ee Dalka Mareykanka, 2005-2019

Khibrad Xirfaddeed Kale: Keydka Ciidanka Cirka ee Dalka Mareykanka (1971-1976). Waxaan ku Biiray Xafiiska Nabadgelyada ee Degmada King sannadkii 1972. Sannadkii 1997 ayaa noqday sannadkii ugu horeeyay ee Degmada King ay dooratay madaxa nabadgelyada muddo 30 sanno ah. Guddoomiye Ku-Xigeenka, Gordon Thomas Honeywell laga bilaabo 2019 ilaa 2023.

Waxbarashada: Concordia Lutheran College, Shahaado Jaamacadeedka Labada Sanno ah

Adeegga Bulshada: Waxaan ka soo Shaqeeyay Guddiga La Dagaalanka Rabshada Qoyska ee Degmada King. Guddiga Agaasimeyaasha Mashruuca Borgen. Aasaasaha Isbahaysiga La dagaalanka Rabshada Hubeyns ee Degmada King. Xubinta Hore ee Guddiga Degmada King ee Soo Afjirida Hooy La'aanta. Aasaasaha Naadiga Shaqooyinka Booliska Nabadgelyada Degmada King. Tababaraa iyo la taliyaha Dhallinyarada. Guuleystaha Biladda Valor ee Washington Labo jeer. Madaxa Nabadgelyada Sannadka ee Qaranka.

Bayaanka: Muddo ku dhow muddo 40 sanno ah gobolkeena ayaa ku lumay qarbudaada hal xisbi. Maxaan ka faa'iidnay taas? Heerkii ugu sareeyay ee rabshada ee dambiyada taariikhdeena, saaxibada iyo qoyska oo u dhimanaayo doroogada fentanyl, hooy la'aantii ugu saraysay, iyo laamiyadii, waddooyinka waaweyn, iyo doomada gaariga qaado ee ugu liita Amerika. Ka guddoomiyaha gobolka ahaan, waxaan si hagar la'aan ah uga shaqeeyn doonaa horumarinta dhaqaalaha qof kasta u shaqeeynaya, waddooyinka ammaanka ah iyo xaafadaa, iyo xaqijinta in caruruut gobilkeenu helaan waxbarashada heerka ugu sareeyaa. Laga bilaabo Ciidanka Cirka ee Mareykanka ilaa Xafiiska Nabadgelyada Degmada King, waxaan soo arkay tusaaleyaasha samirka hagar la'aanta, shahksiyadka naftooda geeyaa safka hore. Khibraddaas ayaa i bartay waxay ka dhigan tahay lahaanshaha qalbiga adeegaha, oo lagugu maamuusay sharafka caawinta, kuna socda inuu hagaayo geesinimada iyo qashuuca ay u baahan tahay qabashada shaqada. Intaan ahaa Madaxa Nabadgelyada ee Degmada King, waxaan soo xiray dambiileyaasha hubeysan waxaa soo xiray afduubeyaasha dadka oo soo afduubtay dumar iyo carruur. Markii aan xilkha hayay dambiyada ayaa yaraadaya maadaama aan fulinayay sharciga qof kastana lala xisaabtamaayay. Khibraddaan ayaa si wanaagsan iigu adeegtagt markii dadka Washington ii dirsadeen Kongareeska halkaas oo aan lasoo shaqeeyay Jamhuuriinta iyo Dimuqraadiyinta si loo ansixiyo siyaasadka waaweyn ee geesinimada leh ee khuseeyaa wax kasta laga bilaabo canshuuraha ganacsiga ilaa ilaalinta bi'iadeenna kuruxda badan.

Waxaan ku noolayn gobil hoggaamiyeeyasheenu iska horkeeneen deegaannada, ay iska hor keeneen jiiil ka jiiil, iyo sidoo kale xataa qoys ka qoys. Kala qaybinta dadku ma'aaha xalka. Waa inaan wada shaqeeyno, isgarab istaagno, aana xal u helno dhibaatooyinka na wada haysta. Waxaaa i taageeray ku dhawwaad madax kasta oo nabadgalka oo gobolka ka shaqeeyay iyo dadka dhammaan xisbiyada - Jamhuuriga, kuwa Madaxa banaan, Dimuqraadiga - ayaa ku biiraaya olaheena waayo waxay fahmayaan in aan shaqadu sidii hore ku si socon karin.

Waxaa sharaf ii ah inaan helo taageeradiina xilkha xiga ee guddoomiyaha Gobolka.



Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Gobolka

Denny Heck

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 259-6400

info@dennyheck.com

dennyheck.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiye Ku-Xigeenka Gobolka. Wakiilka Mareykanka, Xubin ka tirsan Guddiga joogtada ah ee Loo xulay Aqalka ee Sirdoonka iyo Guddiga Aqalka u qaabilsan Adeegyada Maaliyadda. Wakiilka Gobolka Washington, la doortay shan muddo-xilleed. Guddoomiye u noqday Guddiga hoosaadka taariikhiga ah ee Waxbarashada Aasaasiga. Madaxa Guddiga Dimuqraadiga ee Xaafadda.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Wax ka aasaasay Intrepid Learning Solutions; Wax Ka Aasaasay iyo Guddoomiyaha, TVW – Nooca Washington ee TV-ga C-SPAN; Madaxa Shaqaalaha, Xanaaneeyaha Beerta Guddoomiyaha.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Evergreen State College.

Adeegga Bulshada: Denny iyo xaaskiisa oo 48 sanno is qabeen, Paula (maamule dugsiga dhexe oo shaqada ka fariisatay), xubnaha aasaasay Waxbarashada Dugsiga Degmada Olympia Sanduuqa Xaaladaha Degdegga ah ee Mu'asasada Maamulaha, siinta caawinaadda carruurta dakhligoodu yar yahay si ay dugsiga guul uga keenaan.

Bayaanka: Waad ku mahadsan tahay mansabka iyo fursadda aan soo ahaa Guddoomiye Ku-Xigeenkaaga afartii sanno ee lasoo dhaafay. Qaybta ugu muhiimsan ee Guddoomiye Ku-Xigeenimada Gobolka waa inaan ahaado Madaxweynaha Senatka Gobolka si sax ahna ula socdo, si caddaalad ahna ugu adeegsado shuruucda qof walba iyo labada xisbiba. Waanu samaynay arrinkaan.

Laakiin Xaafiska Guddoomiye Ku-Xigeenka Gobolku wuxuu sidoo kale awoodaa fursad uu ugu qareemi karo muhiimadaha siyaasadda hor-u tabinta leh. Waaanu muddo dheer, oo joogto ah oo cad ugu soo qareemaynay baahida loo qabo in si intaan ka xooggan wax looga qabto dhibaatooyinka guryaha gobolkeena, khaasatan guryaha qimaha jaban ee loogu tala galay qoysaska dakhligoodu yar yahay iyo kuwa uu meal dhexaadka yahayba. Shaqadeenu waxay horseeday inaan dhammaystirno shaqooyin badan sannadkii tagay, taasoo keentay in 2023 loogu yeero Sannadkii Guryaha. Shaqo badan aaya hartay. Waan sii joogtaynaynaa.

Waxaan sidoo kale ku dadaalnay si labada xisbiba ah, inaan horumarinno caafimaadka bulshadeena. Waaanu dhammaanteen ognahay in arrintaani u baahan tahay in la beddelo. Waaanu u baahan nahay inaan si intiraam leh uga hadalno barxadda dadweynaha, dabacsanaan si aan isugu dayno inaan helno tanaasulka mabda' ku salaysan marka aan awoodi weynana, awood balaaran oo aan si wanaagsan ugu kala duwanaan karno. Halkaan, sidoo kale, waan joogteynaynaa.

Aragtidaan darteed, waxaan si xushmad leh ku weydiisanayaa taageeradaada.

Dan Matthews

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 300-0652

Dan@electdanmatthews.com

ElectDanMatthews.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubin horey uga tirsanaa Golaha Dugsiga: Horey ugu dooday carruurta, waalidiinta, arrimaha Waxbarashada ee Gobolka Washington D.C.; Guddiga Dib u eegista Waaxda Degmada Snohomish.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Halyeey Duuliye: Vietnam, iyo Dessert Storm; Korneel ka tirsan Ciidamada Mareykanka Cirka. Hagaha Kabtanka Diyaaradda Ganacsiga 747; Hagaha Qandaraaska Boeing, 747 La-taliye Duuliye; La-taliyaha Isku diyaarinta Aafooyinka; Xubin ka tirsan Ururka Duuliyeeyasha Diyaaradaha.

Waxbarashada: BA, Cilmiga Siyaasadda, University of Puget Sound ; Ardayga Shaqada Senatarka Gobolka Washington; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, Dowladda.

Adeegga Bulshada: Ilaalinta Bii'ada, Bulshada Cousteau (xubin aasaasay), Rotary International, Tababaraha Ururka Yar, Xirfadaha Shaqada STEM, Xarunta Siyaasadda Washington, Adeegyada Xadgudubka Rabshada Guriga, Hope House, American Legion, Halyeeyadii Dagaalka, Hoggaanka kaniisadda maxalliga ah, Union Gospel Mission.

Bayaanka: Xirfad ahaan, Doorkeygu wuxuu ahaa inaan si badqab leh u maro meel kasta, anigoo og in nolosha dadku ay aniga igu tiirsan tahay. Ku xigeenka Guddoomiyehaaga ka ahaan, diiraddaydu waxay ahaan doontaa: Wada shaqeeynta dadka. Laga soo bilaabo maamulidda golaha Senatarrada ilaa isku xirkha guud ahaan dowladda, Waxaan raadinayaa inaan abuurno jawi wada shaqeeyn iyo hoggaan wax dhisaaya, soona celinaaya kalsoonida dowleedena.

Siyaasiyiintu waxay noqdaan kuwo aan ku qasaarno marka ay maamulka gacanta gashtaan, dadka kala qaybiyaan, ayna isku tiirsanaadaan halkii ay diblomaasiyad iyo xushmad samayn lahaayeen. Waxaan u tartamayaan inaan sameeyo nidaamka burburay. Hal xisbi siyaasadeed ayaa maamulaayey gobolkeena muddo tobanaan sanno ah, waxayna muujiyeen awood, xiisaha lacag badan, sii burburinta sharciga, iyo xataa inay noqdaan xagjir. Waa inaan beddelnaa arrintaan nahaysata, aana helo waxyaabaha aan u taaganahay.

JFK nagu xujeeyay: "Ha dalban wax dalkaagu uusan kuu samayn karin, laakiin iswaydii waxa aad dalkaaga u samayn karto." Waxaan raadin doonaa inaan had iyo jeer horumariyo cilaqaadka, dheelitirka, iyo isgaarsiinta, anigoo bixinaaya cod iyo aragtí mideeya dhammaanteen.

Anoo u hoggaansamaaya diin, rajo iyo jaceyl, waxaan u istaagi doonaa xuquuqahaaga iyo mustaqbalka carruurteena, anigoo fulinaaya baaqa sare ee ah ugu adeeggida kalsoonida shacabka si sharaf iyo hufnaan ku dheehan tahay, adeegga ka horumarinta waxyabaha gaarka ah. Tani waa ballanta aan kaa qaadaayo. Waad ku mahadsan tahay inaad igu kalsoon tahay, oo aan wakiil ka noqdo isbeddelka mustaqbalkaaga.



Xoghayaha Gobolka

Steve Hobbs

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 322-4637

info@electhobbs.com

www.electhobbs.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xoghayaha Gobolka Washington, 2021-ilaan iyo hadda. Ka Senatarka Gobolka ahaan laga bilaabo 2007-2021, Hobbs ayaa sumcad ku helay inuu hormuud u noqday xalalka labada xisbi ka siman yihiin.

Khibrad Xirfadeed Kale: In ka badan soddon sanno ayuu ka mid ahaa Ciidanka Militariga Dalka Mareykanka iyo Ilaallada Qaranka, asagoo ka gaaray darajada Gaashaanle Sare. Wuxuu loo diray Kosovo iyo Ciraaq. Taliyaha Ciidanka Hawlgelinta - hawlgalka gurmadda Galbeedka Washington ee COVID-19. Guddoomiye Ku-Xigeenka Gobolka Galbeedka, Ururka Qaranka ee Xoghayeyaasha Gobolka.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha iyo Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee University of Washington. Taliska Ciidanka Mareykanka iyo Kulliyadda Shaqaalaha Guud, Dugsiga Macluumaadka Difaaca.

Adeegga Bulshada: Rotary, American Legion, Guddiga Halyeyyadii Hore ee Nisei, Ciyaaraha Olombokada Gaarka ah ee Washington.

Bayaanka: Intaan ahaa Xoghayaha Gobolka, muhiimadahayga koowaad waa xaqijinta in doorashooyinka Washington ku dhacaan si ammaan ah uuna ka qayb geli karo codbixiye kasta oo u qalma. Ilaa sannadkii 2021, waxaan ilaaliyay sharafta doorashooyinkeena anoo maalgeliyay ammaanka oonleenka iyo goobta, la dagaalamay war xumo tashiilka doorashooyinka, siiyayna codbixiyeasha u qalma qaab kasta oo ay uga qayb geli karaan nidaamkeenna dimuqraadiyadha.

Waxaan ilaalin doonaa nidaamka la mahadiy ee la isku halayn karo ee codeynta boostada lagu diro ee Washington. Waxaan u dagaalamay balaarinta diiwaan gelinta codbixiyaha ee tooska ah iyo kordhinta la shaqeeynta bulshada, taasoo yaraynaysa caqabadaha ku gudban muwaadiniinta u qalma.

Markii aan kormeeraayay Maktababadda Gobolka Washington, waxaan ka hor imaaday mamnuucidda buugaagta iyo xayiraadda buugta ee ka jirta maktababada dhammaan gobolkeena. Waxaan kordhiyay helitaanka adeegyada ganacsiga waxaana u diyaarshay kheyraad lagu ilaaliyo taariikhda gobolkeena. Waxaa i taageeray Hantidhawreyaasha Degmada kuwasoo sameeyaa doorashooyinka, Guddiga Shaqaalaha ee Gobolka Washington, hoggaamiyeasha ganacsiga, u doodeyaasha xuquuqda codeynta, hoggaamiyeasha caanka ah ee gobolka iyo federaalka, Guddoomiyeashii Hore ee Gobolka oo kala ah Gary Locke iyo Christine Gregoire.

Waxaan ku faraxsan nahay xirfaddayda adeegga bulshada anoo lasoo shaqeeyay xubnaha Dimuqraadiga, Jamhuuriga, iyo kuwa Madaxa banaan. Xoghayaha Gobolka Washington waa inuu leeyahay heerarka ugu sareeya ee sharafta iyo hoggaaminta waana inuu noqdaa u doodaha adag ee helitaanka codeynta. Sharaf ayay ii ahayd inaan soo noqday Xoghayihiina Gobolka, sharaf ayayna ii ahaan lahayd haddaan helo codkiina.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiilqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Dale Whitaker

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 856-8076

info@whitakerforwa.com

www.whitakerforwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Sarkanla Madaxa Maaliyadda - Augusta Precious Metals; Hadda leh oona maamula shirkad yar ee canshuuraha oo ku taalla Spokane

Waxbarashada: Qalin Jebin ay la socoto Sharaf Shahaadada Jaamacadda ee Xisaabta ee Kulliyadda Ganacsiga iyo Teknolojiyada ee Forbes ee halka Ashford University; Shahaadada Shaqaalaha Diiwaan Gashan ee IRS

Adeegga Bulshada: Agaasimaha Fulinta, WBWV 2 ½ sanno ee lasoo dhaafay

Bayaanka: Waxaan u tartamaya Xoghayaha Gobolka waayo Hufnaanta Doorashada ayaa ah arrimaha ugu muhiimsan ee ku jira warqadda codbixinta. Waa inaan soo celinaa kalsoonida lagu qabo doorashada si hawsha doorashooyinkeena iyo kaabayaasha doorashadu u noqdaan kuwo la heli karo, hufan, oo ammaan ah. Tan waxaa ku jira tusidda dadweynaha nidaamkeena gudaha ee doorashada iyo soo celinta nidaamka codeynta shakhsi ahaan loo tagaayo oo ay la socoto codeynta boostada lagu soo diro.

Xafiiska Xoghayaha Gobolka ayaa sidoo kale leh mas'uuliyadda muhiimka ah ee ganacsiyada muhiimka ah ee dhammaan Washington ee ku aaddan xaqijinta in sharciyada dowladdu aysan caqabad ku noqon awoodda ganacci abuureyaasha si ay u abuuraan una maamulaan ganacsigooda gudaha gobolka. Marka la ii doorto Xoghayaha Gobolka waxaan kala shaqeyn doonaa Guddoomiyaha Gobolka iyo Baarlamaanka Gobolka in Washington noqoto gobolka ugu habboon in lagu ganacsado wadanka.

Waxaan ku noolaa Spokane ilaa sannadkii 2008 markii aan ka soo guuray Boqortooyada Ingiriiska aana soo degay Mareykanka. Xaaskayga iyo aniga ayaa labadeenaba maamulhaa ganacsijo yaryar oo ku yaala Spokane, waxaan haysanaa labo carruur ah iyo mid aan awoowe u ahay, waxaan la qabsanay gobolkaan, waxaana dhab ahaantii jecel nahay nolosha qurxoon ee aan ku haysano Gobolkaan Washington.



Khasnajiga Gobolka

Mike Pellicciotti

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(253) 874-7934

info@electmikep.com

www.electmikep.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Khasnajiga Gobolka, 2021-ila iyo hadda; Wakiika Gobolka, 2017-2021.

Khibrad Xirfadeed Kale: Dacwad oogaha dambiyada dhaqaalaha (Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud), Mike ayaa soo maamulay koox ahayd baareyaasha dhaqaalaha, hantidhawrada, iyo taxliileyaasha soo celiyay \$30 milyan canshuur bixiyeasha kuwaasoo laga soo ceshay khyiannada dhaqaalaha iyo khasaaraha dowladda. Ka xubin sharci dejinta ahaan, wuxuu abuuray shariyada si "lacagta laaluushka ah" looga dhex saaro siyaasadda loo lana dagaalamo dambiyada shirkadaha waaweyn.

Education

Shahaadada Jaamacadda (Maamulka Ganacsiga, taqasus yar oo ah dhaqaalaha); Shahaadada Mastarka ee Horumarinta Reer Miyiga (Fulbright Scholar, horumarinta dhaqaalaha); Shahaadada Sharciga, Gonzaga.

Adeegga Bulshada: Ka Guddoomiyaha Isbahaysiga Caddaaladda Loo Siman Yahay ahaan, Mike ayaa u dooday mulkiileyaasha guryaha ee sharci darada loo lagala wareegay guryaha, hawl gabka ciidanka ee loo diiday gunnooyinka, iyo dhibaneyaasha deynta dhaca ah. Waaxda Ganacsiga ee Federal Way. Ka soo shaqeeyay Guddiga Ardaydii Hore ee Jaamacadda Gonzaga.

Bayaanka: Mike wuxuu diidaa dhammaan deeqaha ay shirkadaha waaweyn ku bixiyaan ololeyaasha. Wuxuu muhiimadda koowaad siyyaa masaalidhiina dhaqaalaha. Ka Khasnajiga Gobolka ahaan, Mike ayaa dib u baxshay dhammaan deymihii u qalmay, asagoo dib ugu celiyay in ka badan \$550 oo milyan oo faa'iidooyinka Wall Street dadweynaha.

Mike ayaa dhaqan geliyey siyaasad ka mamnuucaysa Khasnajiyada Gobolka Washington inay maalgashadaan shirkadaha maal geliyaha ololahooda. Maalgelinadiisa ayaa u soo xareeyay Washington \$1.8 bilyan afarta sanno ee soo socota si loo yareeyo culeysyada canshuur bixiyaha. Faa'iidooyinka maalgeshiyada dowladda hoose ee uu Mike soo xareeyay ayaa 50 jibaar ka badan kuwii 2021, asagoo lacag \$3 milyan oo dhereer ah maalin kasta u dira dowladaha hoose si loogu bixiyo dugsiyada, shaqaalaha gurmadka, iyo baahiyaha kale ee bulshada.

Intii uu Mike ahaa Khasnajiga Gobolka, Washington ayaa hadda leh tiirarka miisaaniyadda. U.S. News ayaa hadda ku qiimeysay xasilloonida dhaqaalaha ee muddada fog ee gobolkeena *midka ugu wanaagsan wadanka*. Gunnooyinka hawl gabka ee gobolkeena ayaa ah kuwa ugu maaliyadda fiican Mareykanka oo dhan. Washington ayaa haysta qiimeynta deynta ee Moody's AAA, darajada sare ee maareynta dhaqaalaha. Tan ayaa ka dhigaysa dhismaha guryaha, waddooyinka, gaadiidka badda, iyo dugsiyada mid qimo jaban. Mike ayaa yareeyay qarashaadka waxbarashada GET/529 ee qoysaska, asagoo haddana joogteeyay maalgelinta buuxda ee barnaamijkan muhiimka ah.

Mike ayaa balaariyay fursadaha dhaqaalaha waxbarashada. Wuxuu sidoo kale abuuray "Bogga Hufnaanta ee oonleenka" si la idii la wadaago sida *lacagtiina dadweynaha* loo maareeyo. Waxaa taageeray Guddiga Shaqaalaha Gobolka Washington iyo Planned Parenthood, Mike ayaa mar kasta muhiimadda koowaad siinaaya u shaqeeynta qoysaska iyo hawl gabka!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Sharon Hanek

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 854-7075

SharonHanek@gmail.com

www.SharonHanek.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Guddiga Dib u Eegista Xeerka ee Degmada Pierce iyo Khasnajiga ururada aan faa'iido doonka ahayn iyo ururada siyaasadda, ayna ku jiraan Little League (Horyaalka Dhallinyarada) iyo dugsi gaar loo leeyayah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Mukilialha shirkad CPA (Xisaabiye Dadweyne oo Shahaadaysan) ah iyo aasaasaha shirkadaha cilmi baarista siyaasadda dadweynaha. Shaqooyinka Degmada Pierce: Guddoomiyaha Qorshaynta, Guddiga Birth to 25, Guddoomiyaha Dib u Kala Qaybinta degmada.

Waxbarashada: Shahaadada Maamulka Ganacsiga iyo Xisaabinta, University of Washington; CPA ilaa sannadkii 1980; Guddoomiyaha Ururka Ardayda Ganacsiga Caalamiga ee UW.

Adeegga Bulshada: Ka soo mid noqday guddiyada dhallinyarada/adeegga qoyska, guddiyada bulshada, Little League, dugsiyada gaarka loo leeyayah, ururada siyaasadda, isbahaysiyada xuquuqda guryaha, iyo guddiyada maaliyadda iyo qorshaynta istaraatijiiga ah.

Bayaanka: Marka aan noqdo Khasnajigiina Gobolka, waxaan u doodi doonaa ilaalinta hantida gobolkeena iyo xaqiijinta in koontooyinka hawl gabku sameeyaan maalgeshiyo macno leh. Waxaan ku dadaalli doonaa in nidaamka xisaabta uu noqdo mid hufan oo ay la xisaabtami karaan muwaadiniintu. Anoo kaashanaya khibraddayda shaqada, waxaan qiimeyn doonaa buugaagta waxaana ku cadaadin doonaa baarlamaanka inay taxaddar dheread ah ku muujiyaan go'aannada canshuurta iyo kharash gareynta lacagta.

Intaa ahaa CPA, waxaan muhiimadda saaray inaan ka caawiyo macaamiisha ilaalinta hantidooda, yareynta canshuuraha, iyo xaqiijinta mustaqballoodaa. Waxaan abuuray aana soo baray casharada cilmiiga dhaqaalaha ardayda fasallada hoose ee dugsi sare waxaana ka marag furay baarlamaanka hortiisa kana soo horjeeday canshuuraha sii kordhaaya iyo shariyada xad dhaafka ah ee lagu soo rogay ganaciyadeena.

Khibraddayda waxaa ku jira la talinta canshuur bixiyeasha iyo ganaciyada bulshadeena si ay u sameeyaan maalgeshiyo cagli ku dhisan iyo abuurista shaqada. Wakhtigan ee ay shaqooyinku ciriri galteen, qiimeyaashu sii kordhayaan, si joogto ahna loogu baahan yahay maal gelinta waxbarashada, xalka ay Olympia mar kasta samayso waa inay kordhiso canshuuraha iyo qarashaadka dadka laga qaado. Qaabkayga waa in la iskula xisaabtamo lacagihi horey loo isticmaalay muhiimaddana la saaro xasaasiyadda arrintaan. Waxaan noqon doonaa Khasnajiga kaasoo ku hoggaamiya gobolkeena jiilka cusub ee mas'uuliyadda maaliyadda.

U codee si aan u ilalino mustaqbalka maaliyaddeena. U codee isla xisaabtan. U codee Sharon Hanek.



Hantidhawraha Gobolka

Pat (Patrice) McCarthy

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 682-7328

patmccarthy4auditor@gmail.com

PatMcCarthyAuditor.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Hantidhawraha Hadda ee Gobolka Washington 2017-ilaa iyo hadda; Waaxda Fulinta ee Degmada Pierce 2009-2016; Hantidhawraha Degmada Pierce 2003-2008; Agaasimaha Dugsiga Tacoma 1987-1999.

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiyaha la doortay, Ururka Qaranka ee Hantidhawreyaasha Gobolka; Guddiga Fulinta, Ururka Qaranka ee Hantidhawreyaasha Gobolka, Hantidhawreyaasha iyo Khasnajiyasha.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, University of Washington Tacoma

Adeegga Bulshada: Guddiga Talo Bixinta Xarunta Dhaqanka Asian Pacific. Xarunta Kufsga Galmada ee Degmada Pierce, Emeritus. Tacoma South Rotary 1999-2016, Honorary Commander (Taliye Sharafeed), 62nd Airlift Wing, 2005-2009. Abaal Marinta Muhiimka ah, Isbahaysiga Washington ee Dowladnimada Furan. Abaal Marinta Star of Destiny, Tacoma Historical Society. Abaal Marinta Aqoon Yahanka Gaarka ah, University of Washington Tacoma; Hantidhawraha Sannadka ee Xoghayaha Gobolka, 2005.

Bayaanka: Anigoo ah haweeneydii ugu horeysay ee noqoto Hantidhawraha Gobolka Washington, waxaan hoggaamiyaa xafiiska mas'uulka ah samaynta xisaab xirada madaxa banaan ee dhammaan dowladaha hoose iyo wakaaladaha gobilka, anoo xaqiijiya isla xisaabtan iyo hufnaan ku aaddan hantida dadweynaha. Muddadii siddeedda sanno ahayd ee aan shaqeynaayay, waajibaadka ayaa balaartay, ayna ku jireen xisaabaadka joogtada ah ee lacagaha masiibada COVID-19. Maamulkayga ayaa sidoo kale aad u yareeyay tirada dowladaha "aan lala xisaabtami karin", taasoo kordhisay xajmiga xisaabaadkeena iyo wuxtarkiisa.

Hoggaankayga, waxaan fashilinay ku dhawwaad \$7 milyan oo ah lacag ay dhunsatay wakaalad guryo oo maxallii ah, oo ah kiiskii ugu weyna oo khinyaanno ah oo ka dhaca taariikhda gobilkeena. Waxaan xoojinay awoodaheena anagoo tababaray baareyaasheenna khinyaannada furnayna barnaamijyo hal abuur. Kuwaan waxaa ku jiray u ololeeynta isla xisaabtanka isticmaalka booliiska ee hubka wax dila, ilaalinyana ammaanka onleenka anagoo kordhinay isla xisaabtanka IT-ga iyo "baaritaannada onleenka" ee ka horttaga ah, iyo barnaamijka cusub ee qimeynata xogta si khinyaannada iyo khasaarahaa loogu ogaado si hufan.

Waxaan sii wadi doonaa dadaalladan muddo xilleedkayga labaad, diiradda saaraaya u maaraynta hantida ummadda si nidaam leh. Hiigsegayga waxaa ku jira horumarinta awoodaha teknolojiyada si loo difaaco hantida dadweynaha korna loogu qaado sharafta dhammaan Gobolka.

Dad badan ayaa i taageeray; faahfaahinta ka fiiri webseedkayga. Waxaan leeyahay hoggaaminta caddeynta leh ee la tijaabiyyay ee adeegga dadweynaha. Waxaan si xushmad leh idin ka codsanayaa codkiina si aan u sii wado horumarkeena.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Matt Hawkins

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 422-1165

matt@mchawkins.org

www.mchawkins.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubinta Guddiga Gobolka ee Degmada Spokane (R) 4 sanno, Hoggaamiyaha Degmada 2 sanno, waxaa loo doortay xubinnimada guud ee PCO, PCO 4 sanno.

Khibrad Xirfadeed Kale: 36 sanno oo khibradda ganacsiga ee heerka sare ah oo uu la shaqeynaayay mulkileyaasha ganacsiyada iyo hoggaamiyeyaasha warshadaha, ayna ku jiraan Guryaha Ganacsiga iyo kuwa Maalgashiga, Bangiga Maalgashiga, Maalgashade, iyo Mas'ulka u ah Isfaliska aan Iktiayaarka ahayn. Guddiyada Kala Duwan ee Talo Bixinta Qaranka. La shaqeynta kooxaha Hanti dhowrk.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Maaliyadda ee Brigham Young University, Shahaadooyinka Xirfadaha ee CCIM iyo CM&AA.

Adeegga Bulshada: Guddiga Sharaf dhownrka Doorashooyinka Gobolka si kor loogu qaado hufnaanta. Boy Scouts of America- doorarka kala duwan, Camp Fire Girls- Xubinta Guddiga, Tababarka barnaamijyada dhalliniyaraada, Tiyaatarka Dugsiga Sare ee University, shaqooyinka kala duwan ee PTO iyo PTA.

Bayaanka: Asagoo ka shaqeynaayay ganacsiyada gaarka loo leeyahay muddo 35 sanno ah, ee ganacsiyada noociyada kala duwan, Hawkins ayaa leh xirfadaha uu kula shaqeyn karo kooxaha xirfadleyaasha ah si kor loogu qaado shaqada iyo nidaamyada. Xalalka lagula tacaalaayo dhibaatooyinka waxbarashada, hooy la'aanta, caafimaadka dhimirka, xuquuqda waalidiinta, xuquuqda guryaha, canshuraaha iyo siyaasadda tamarta ayaa dhammaan laga heli karaa isla xisaabtanka hanti dhownrka.

Asagoo eegaayay kala qaybsanaanta wadanka ka jirtay 4-tii sanno ee lasoo dhaafay, Hawkins ayaa bilaabay inuu is weydiyo su'aalo si uu fahmo waxa socda. Daraasadda socota ee nidaamka doorashada ee gudaha Washington intii lagu jiray wakhtigaan ayaa lagu ogaaday xaqiiqada ah inaysan jirin Hantidhawrka nidaamyada doorashada ee Gobolka Washington, kuwaasoo leh heerka xirfadda ee laga filaayo hey'adaha loo leeyahay. Hawkins ayaa sidoo kale ogaaday caqabado dhawwaan la abuuray oo ku gudban hufnaanta bulshada, maadaama dadweynuhu raadinayaan jawaabo. Canshurr bixiyeyasha ayaa ka faa'iideysta hufnaanta iyo isla xisaabtanka. Raadinta Xaqiiqdu waa muhiim.

Hawkins ayay xaaskiisu tahay Paula waxayna haystaan 10 carruur ah. Waxay xaqiiqsan yihiin in bulshooyin xooggan ay ka faa'iideystaan siyaasad diiradda saaraaya qoyska. Isla xisaabtanka iyo hufnaanta ayaa tiir dhexaad u ah xaqiijinta in carruurtu door la aqoonsan yahay ka qaataan bulshada.

Hantidhawrku waa qaab wanaagsan oo lagu fahmo wixii nasoo maray, marka aan gaarayno go'aannada mustaqbalkeena.



Xeer Ilaaliyaha Guud

Pete Serrano

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 204-9509
info@serranoforag.com
www.serranoforag.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Duqa Magaalada Pasco; Xubinta Golaha Magaalada ilaa 2018.

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareenka Guud, Ururka Silent Majority; Qareenka Bii'ada, Waaxda Tamarta ee Mareykanka, Energy Northwest; Kormeeraha Bii'ada- Mashruuca Nukliyeerka Cusub, Energy Northwest; Barafasoor Wax ka dhiga, Jaamacadha Gobolka Washington

Waxbarashada: Dugsiga Sharciga ee Vermont, LLM—Sharciga Bii'ada, 2010; Dugsiga Sharciga ee Florida Coastal, Shahaadada Sharciga, 2009; University of California, Davis, Shahaadada Jaamacadha ee Farshaxanka, Talyani, 2004

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga ah, Degmada Franklin Guddiga Talo Bixinta ee Qashinka; Eagle Scout, Boy Scouts of America

Bayaanka: Inaan Washington u soo guuro sagaal sanno ka hor waxay ahayd go'aankii noloshayda ugu wanaagsanaa. Waaan u imid inaan ilaaliyo bii'ada aniga oo ka shaqeynaya Goobta Hanford anigoo ahaa qareen dhanka bii'ada ah. Intaas ka dib, waxaan si guul ah ugu dagaalamay sidii aan Washington uga dhigi lahayn mid ammaan ah una kordhin lahayn hufnaanta dowladda. Waaan ka hor imid shuruucda aan dastuuriga ahayn ee ka yimid Olympia waana ku *guuleystay!* Waaan siddoo kale halkooda ku *joojiyay* shuruuc aan wanaagsannay! Waaan hoggaamiyey Magaalada Pasco aniga oo xubin golaha magaalada ah ka noqday, haddana waxaan ahay duqa magaalada.

Washington waxay leedahay kheyraad heer caalami ah, laakiin siyaasiyiinteenaa ayaa ku fashilmaya. Ma haysano waddooyin ammaan ah; mukhaadaraadka, sida fentanyl ayaa waddooyinka buuxiyay. Ka Xeer Ilaaliyaha Guud ahaan, waxaan adeegsan doonaa wixii aan ka bartay Hanford si aan u saxo khaladaadka jira.

Sida laga soo tobiyay FBI, Washington waa magaalada 8-aad ee wadanka ugu khatarta badan. Waaan haysanaa kheyraad aan wax ku hagaajin karno, laakiin waxaan u baahannahay Xeer Ilaaliye Guud oo xaqiijiyaa in Hey'adaha Sharciga iyo Dacwad oogeyaasha Degmooyinka meel marin karaan sharciga si Washington mar kale looga dhigo Mid Ammaan ah!


Haddii aan noqdo Xeer Ilaaliyihiina Guud ee soo socda, waxaan diiradda saari doonaa Gobolka Washington, ma'han Washington D.C. Ka Xeer Ilaaliyaha Guud ahaan waxaan meesha ka saari doonaa kuwa xisbinimadu indha tirtay si aan u ilaaliyo *dhammaan* dadka reer Washington. Waaan rajeynayaa inaan idin matalo aniga oo ah Xeer Ilaaliyihiina Guud. Waad ku mahadsan tiihiin codkiina.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiijqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Nick Brown

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 202-5287
info@NickBrownforAG.com
www.NickBrownforAG.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareenka Mareykanka ee Galbeedka Washington; La taliyaha Guud ee Guddoomiye Inslee; Sarkaalka JAG ee Ciidanka Mareykanka, anoo kasoo shaqeyyay Saldhiga Guud ee Lewis-McChord (WA), Fort Bliss (TX), Waaan bilad ku Qaatay kasoo shaqeynta Iraq; Iskaashade, Pacifica Law Group.

Waxbarashada: Jaamacadha Sharciga ee Harvard (Guddiga Jaamacadha Sharciga ee Harvard, Wargeyska Caalamiga ah ee Sharciga); Kulliyadda Morehouse, Shahaadada Heerka Koowaad ee Cilmiga Siyasadda, Phi Beta Kappa, Magna Cum Laude (Ciidanka ROTC, Dowladda Ardayda)

Adeegga Bulshada: Ololaha Caddaaladda Loo Siman yahay, Guddiga Agaasimeyaasha (2018-2021); Treehouse, Guddiga Agaasimeyaasha (2014-2021); Seattle Works, Guddiga Agaasimeyaasha (2007-2013); Guddoomiye, Guddiga Asluubta iyo Doorashada ee Seattle (2019-2021); Tababaraha Ciyaaraha ee gabadhyada 11 sanno jirka ah, iyo wiilka 9 sanno jirka ah.

Bayaanka: Nick Brown wuxuu kusoo koray Degmada Pierce oo waalidiintiisa, kalkaalso iyo halgabka ciidanka, ku bareen muhiimadda adeegga iyo u adeegista bulshada. Nick wuxuu dhigtay Kulliyadda Morehouse asagoo helay deeqda waxbarashada ee ROTC ka dibna Kulliyadda Sharciga ee Harvard, asagoo ahaa sarkaalka JAG ee ciidanka iyo dacwoodaha federaalka.

Intii uu ahay La taliyaha Guud ee Guddoomiye Inslee, Nick ayaa kormeer shaqada si loo soo afjaro xukunka dilka ah wuxuuna abaabulay jawaabta maamulku ka baxshay mammuucidda muslimiinta ee naceybku ku dhisnay ee Donald Trump. Sannadkii 2021 Madaxweyne Biden ayaa u magacabey Nick Qareenkii koowaad ee Mareykanka oo madow ah taariikhda gobolka. Xilkas, Nick ayaa muhiimadda saaray xal u helidda masiibada fentanyl, difaaca macaamiisha, kahortaga qafaalka galmeda, iyo la dagaalanka dambiyada hubaysan.

Intii uu ahay Qareenka Guud, Nick ayaa ka shaqeyyay ilaalinta badqabka dhammaan dadka Washington - si looga difaaco dambiga, rabshadaha hubeysan, takoorka, iyo dhibaatada sii kordhaysa ee guriyeynta. Nick ayaa aaminsan in Donald Trump uu khatar weyn ku yahay waddankeena wuxuuna ka difaaci doonaa gobolkeenna weerarrada ka dhanka ah xorriyadda shacabka. Nick ayaa aaminsan in go'aanka ilmo iska soo ridista uu u yaalo qofka haweenka ah, qoyskeena, iyo dhakhtarkeeda. Wuxuu la dagaalami doonaa isku dayo kasta oo lagu burburinaayo xuquuqda taranka.

Nick waxaa taageeray Guddoomiye Inslee, Ururka Waxbarashada ee Washington, Ololaha Ilaalinta Bii'ada Washington, iyo Guddiga Shaqaalaha Gobolka Washington.



Guddoomiyaha Dhulalka Dadweynaha

Jaime Herrera Beutler

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(360) 559-0133
info@jaimeforlands.com
www.jaimeforlands.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Baarlamaanka Mareykanka, 2011-2023, markaa oo aan soo saaray sharchiyo labada xisbibaa u dhan yihiin si aan u hagaajino awoodeenna la dagaalanka dabka kaymaha, kordhinta lacagta dab-damiyeeyashaa, sare u qaadidda maaryunta firfircooniida leh ee kaymaha ee sayniskana ku salaysan, hagaajinta waddooyinka kaymaha iyo balaarinta isticmaalka dhulka ee bulshada, ilaalinta meelaha duurjoogta ku nooshahay iyo meelaha kaluunka saamanka maro, taageerada meelaha kaluunka shellfishku ku nool yahay, ilaaliinta shaqooyinka mushaharka qoysa iyo u helista lacag lagu maalgeliyo dugsiyada Washington. Wakiilka Golaha Baarlamaanka ee Gobolka Washington, 2007-2010.

Khibrad Xirfadeed Kale: La taliye Istiraatijiyadeed, Ururka Isbitaalada Carruurga. Kaaliye Sare oo Baarlamaanka ah, Golaha Wakiilada Mareykanka.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, University of Washington, Isgaarsiinta.

Adeegga Bulshada: Wawaan helay abaalmarinta ugu sareysa ee Ururka Kaymaha Gobolka ee heer Qaran, Abaalmarinta Bernard L. Orell ee Iskaashiga. Guddiga Agaasimeyaasha, Hey'adda Keliyaha ee Qaranka.

Bayaanka: Tobanaan sanno oo la dayacay ayaa kaymaheena ka dhigay kuwo ciriiri ah, lana xanuunsan qashin. Dab ayaa guba kaymaheena bulshadeenana neefeta ku celiya xagaa walba. Waxay sanbabadeena ka buuxiyaan qiiq, waxay burburuyaan dhirtii hore iyo deegaankii, waxay hawada ku sii daayaan tan fara badan oo kaarboon ah, waxay sare u qaadaan qimaha caymiska guryaha waxayna guryaha ka dhigaan kuwo aan qimahooda la goyn karin. Waxayna sababaan madax xanuun aan la qiyasi karin oo ku dhaca kuwa aan awoodin inay isku filnaadaan.

Kagama tagi lahayn carruurteena dhaxal ah kaymo gubanaya iyo qiiq neefeta ku celiya. Waan awoodnaa waana samayn doonaa inaan dhirta dhimatay iyo tan dhimanaysaba ka saarno meesha kuwas oo noqda shidal, dab-damiyeeyal degdeg ah marka dabku kaco, waxaan ilaalin doonaa shaqooyinka, waxaana ilaalin doonaa nafaha iyo nolosha bulshooyinka.

Waxaan Wakaaladda Kheyraadka Dabiiciga ah ee gobolkeena ku hoggaamin doonaa inay u adkaysato cadaadiska siyaasiga ah ayna ka gudubto caqabadaa dhanqa sharciga ah si dadka kaymaha ka shaqeeyaa ee caaqiliinta ah iyo saynisyahanada bii'ada ee halkaas ka shaqeeyaa shaqadooda u qabsadaan. La shaqeeynta Qabiilkha, saynisyahanada, mulkiileyaasha dhulka, cayaartoyda, kooxaha qaabilsan kaymaha iyo ilaalin kaymaha, waxaan soo celin doonaa badqabka kaymaha Washington aniga oo adeegsanaya nidaamyo maareeyn oo cilmi ku dhisan si jaadadka kala duwan ee wada noolaanshaha u sii horumaro. Waxaana mar walba ilaalin doonaa adeegsiga dhulka dadweynaha ee arrimaha madadaalada ee mulkiileyaashhooda -- dadka reer Washington.

Fadlan dooro Jaime Herrera Beutler si aad u hesho kayn iyo hawo caafimaad qabta.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Dave Upthegrove

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 303-0531
dave@upthegrove.org
www.upthegrove.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha, Golaha Degmada King, markii koowaad la doortay 2013; Wakiilka Gobolka (Degmada 33aad), 2001-2013, Guddoomiyaha, Guddiga Golaha Deegaanka; Guddoomiyaha, Guddiga Gaarka Golaha ee Puget Sound.

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiyaha, Degmada Xakamaynta Daadadka ee Degmada King; Shaqaalaha Siyaasadda Kheyraadka Dabiiciga ah, Golaha Senatka Dimuqraadiga ah ee Washington; Garsoore Kubadda kolleyga ah, Ururka Maamulka Kubadda Kolleyga ee Pacific NW.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Ilaalinta Deegaanka, University of Colorado; Shahaadada Mastarka ee Siyaasadda Tamarta, University of Idaho.

Adeegga Bulshada: Madaxa hagaha; Agaasimaha Barnamijkha, Camp Parsons BSA; Matt Griffin Xubinta Guddiga YMCA; Kooxda Wax ka qabashada Cimilada ee Guddoomiyaha Gobolka; Highline Citizens for Schools; Kafii, Xeerka Xuquuqaha Codbixiyaha ee Washington; Kafii, Sharciga Sinnaanta Guurka; Abaalmarinta Hoggaaminta Baarlamaanka ee Bulshada (Humane Society Legislative Leadership Award); Xildhibaanka Sannadka ee Ururka Ganacsiga Badaha ee NW.

Bayaanka: Hoggaamiye bii'ada ilaaliya oo ay si weyn u taageerayaan bulshada deegaanka iyo Dimuqraadiyiinta ku sugar guud ahaanba Washington, waxaa iga go'an inaan ilaaliyo hawadeena nadifka ah, biyaha nadifka ah iyo deegaanka aan ku nool nahay, aniga oo horumarinaya ka hortaggaa dabka kaymaha, iyo sare u qaadidda fursadaha madadaalada loogu isticmaali karo dhulka dowladda.

Ayada oo ay jирто dhibaatada isbeddelka cimilada, dabka kaymaha, iyo abaruuhu, maamulista Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah waa shaqo weyn, oo culus. Waxaan leeyahay labadaba khibradda iyo qiyamka aan ku xaqiijin karo in dhulkeena dadweynuhu taageerayo saraynta tayada nolosheena. Ka Gudgoomiyaha Dhulalka ahaan waxaan miiska keeni doonaa fikrado cusub oo dhiiранаan leh. Waxaan hayaa qorshe aan ku ilaalinayo 77,000 akar ee Washington ee leh dhaxalka kaymaha muhiimka ah, iyo inaan bilaabo maalgelin tamarta nadifka ah qaabilsan si aan taageero bii'adeena sare ugu qaado horumarinta shaqaalaha miyiga. Waxaan ilaalin doonaa xuquuqaha qabaa'ilka waxaana soo celinaya Puget Sound si aan u ilaaliyo dhaqaalaheena saamanka iyo orkaha.

Waxaan ahay musharaxa keliya ee tartankaan ku jira ee aan qaaraan ka qaadanayn ganacsiga alwaaxda. Codbixiyeyaashii Hore ee Ilaalinta Washington "Xildhibaanka Sannadka," waxaan ahay musharaxa keliya ee ay taageereen Washington Conservation Action iyo Sierra Club.

Waxaan idin ku casuumayaay inaad kusoo biirtaan hoggaamiyeeyashaa ilaalin kaymaha ee aasaaska ah, Guddoomiyihii hore ee Dhulka Peter Goldmark, Dimuqraadiyiinta iyo hoggaamiyeeyashaa la doortay ee Washington oo dhan si aad u taageertaan ololahaan lagu ilaalinayo laguna hagaajinaayo dhulkeena dadweynaha. Waxaan kaa codsanayaa taageeradaada.



Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha

Chris Reykdal

chris4wakids@gmail.com
www.chrisreykdal.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha, Agaasimaha Guddiga Dugsiga Maxalliga, Xildhibaanka Gobolka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin Dugsi, Fulinta Maamulka Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda Tacliinta Sare, Taxliliye Maaliyadeed ee Senatka Gobolka Washington.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Bulshada iyo Shahaado Macallinnimo, Washington State University. Shahaadada Jaamacadda ee Maamulka Dadweynaha taqasuska Miisaaniyadda, Maaliyadda, iyo Maaraynta Heerka Shaqada, University of North Carolina - Chapel Hill.

Adeegga Bulshada: Waalid mutadawac ah ee dugsiyada, tababarre kubadda cagta dhallinyarada, guddoomiyaha qorshaynta magaalada maxalliga, mutadawaca keydka cuntada, xubinta guddiga hey'adda waxbarashada, aasaasaha hey'adda deeqaha waxbarashada, iyo deeq aruuuriye aan faa'iido doon ahayn.

Bayaanka: Waad mahadsan tiihiin Codbixiyeyaasha Washington! Waxaan ku faraxsanahay inaan idhii shaqeeyo anigoo ah Kormeerihiina Guud ee Gobolka. Shaqadaan waxay u baahan tahay khibrad iyo hoggaamin lasoo tijaabiyay si aan u horumarinno soo kabashadeena cudurkii safmarka ahay ka dib. Dardar gelinta waxbarashadeena xooggani ayaa halis ku jirta haddii aan la helin maalgelin joogto ah iyo diiradda aan kala joogsiga lahayn oo looga dhigaayo dugsiyadeena kuwo dadweyne iyo la xisaabtanka codbixiyeyaasha maxalliga ah. Waajibaadka ugu weyn ee gobolkeen waa sidii si dhamaaystiran loogu maalgelin lahaa dugsiyadeena dadweynaha. Maalgelinta dugsiyadeena dadweynaha ah iyo bareyaasheena si loo xoojiyo guulaha ardayda ayaa ah muhiimaddayda koowaad!

Hal aburnimada ayaa hagaya shaqadeenna kaasoo leh nidaamyo xirfadeed iyo kuwo farsamo oo la balaariyay, heer qalin jabin oo sareeyaa, horumar muuqda oo ku yimaada caafimaadka dhimirkha ardayda oo ay la socoto maalgelin lo qorsheeyay, iyo cuntada dugsiga oo bilaash ah oo loogu tala galay in ka badan 700,000 oo arday. Waaanu nahay gobol shaqo wanaagsan ka haya xisaabta iyo wax akhriska, cilmiga bulshaduna waa shuruu kale oo laga rabo ardayda qalin jabinayo inta aan xika hayo!

In ka badan saddex meelood laba meal ardaydeenna ayaa hadda hela dhibaha jaamacadda lagu galo ayagoo weli dhigta dugsiga sare, kaa soo qoysaska u badbaadiyay in ka badan \$100 milyan sannad walba oo ah lacagta waxbarashada jaamacadda hore loo sii qorsheeyay, waxaana laba jibaarnay maal geshigeena goobaha dugsiyada miyiga ah. Cunug walba wuxuu xaq u leeyahay fursad waxbarasho oo tayo sare, asaga loogu tala galay, loona siman yahay oo bulsho kasta hesho!

Waxaa i taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha, Ururka Waxbarashada Washington, Ururka Macallimiinta Mareykanka -WA, Washington Conservation Action, iyo kuwo kale.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaanada cabbirka.

David Olson

(253) 267-8555
david@electdavidolson.com
electdavidolson.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Agaasimaha Guddiga Dugsiga Peninsula (2013 – ilaa iyo hadda); Guddiga Dib U Eegista Axdira Degmada Pierce (2016); horey loogu doortay Guddiyada Sharci Dejinta iyo Shuruucda ee WSSDA; kasoo shaqeeeyay Wakiilka Sharci Dejinta ee guddiga dugsiga muddo 10 sanno ah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Dhaqaalaha iyo Bangiyada; Qandaraasle u shaqeeya Waaxda Difaaca; Sarkaal Alifle ah oo ka tirsan Ciidanka Badda Mareykanka (hawlgabay)

Waxbarashada: SNHU, Shahaadada Jaamacadda Hoggaaminta Ururada, Magna cum Laude; Dugsiga Musharaxa Sarkaalka, Ciidanka Badda Mareykanka; Tababarka Quusaha Biyaha Buuxa, Ciidanka Badda Mareykanka; Dugsiga Farsamada, Ciidanka Badda Mareykanka

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga, Hey'adda Greater Gig Harbor; Gig Harbor Rotary; Guddoomiyaha iyo Xubinta Guddiga, City Club of Tacoma; Guddoomiye Ku-Xigeen, Ururka Ganacsiga Hilltop; Xubinta Guddiga, Xarunta Ganacsiga Adduunka Tacoma (World Trade Center Tacoma)

Bayaanka: In ka yar 50% ardayda Washington ayaa akhrin kara oo qori kara heerka fasalka ay marayaan ayada oo ay sidaas tahay haddana canshuurtu gurigaaga cirka ayay isku shareertay. Carrurtaada iyo dugsigu waxay xaq u leeyihii si sidaan ka wanaagsan. OSPI ma gudanayaan waajibaadkooda si ay ugu qareemaan maalgelinta ku filan hawlahu dugsiyada. Ka Kormeere Guud ahaan, waxaan riixi doonaa in qaabkan la beddelo, aniga oo xaqijinaya in kheyraadka gaaro dugsiyada iyo ardayda baahida weyn u qaba – ayada oo aan loo eegayn qolada, isirka, ama marxaladda dhaqan-dhaqaale.

Maamulka hadda jira, dugsi ka maqnaanshaha ayaa laba jibaarmay, taasoo carruurta ka hor istaagtay fursadaha waxbarashada muhiimka ah. Aniga oo kasoo qaadanaya guusha degmadayda, halkaasoo ka qaybgalka waalidka oo xooggan ay horseeday mid ka mid ah heerarka dugsi ka maqnaanshaha ee ugu hooseeya, waxaan u doodi doonaa siyaasadaha dhiirigelinaya iskaashiga waalidka.

Waxaa iga go'an inaan soo celiyo maamulka deegaanka ee guddiyada dugsiga, aniga oo xoojinaaya dadka fahamsan baahiyaha gaarka u ah bulshadooda, aniga oo xaqijinaya waxbarasho caddaalaad ah oo waxtar u leh cid walba. *Waxaan riixi doonaa balaarinta barnaamijiyada xirfadaha ganacsiga, aniga oo ardaydeenna u diyaarinaya xirfadaha kala duwan ee mustaqbalka.*

Si aan ula dagaalamo dhibaataada wakhtigaan casriga ah, waxaan soo saari doonaa xeerar u diidayaa in taleefannada iyo baraha bulshada lagu dhix isticmaalo dugsiyada, aniga oo abuuraya jawi waxbarasho oo ammaan ah, wacyiguna joogo. *Seattle Times wuxuu sheegay in Kormeeraha Guud uu yahay "farkad dhex dhextaadnimo taageere."* Heer dhexe Naguma Filna! Waa wakhtigii isbeddelka. Waan idin ka mahad celinaya codkiina.



Guddoomiyaha Caymiska

Patty Kuderer

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 593-2203

info@pattykuderer.com

www.pattykuderer.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka, 2017-ila iyo hadda, Wakiilka Gobolka, 2015-2016. Guddoomiyaha, Guddiga Guriyeynta 2019- ilaa iyo hadda; Guddoomiyaha Ku-Xiggenkii hore, Dowladda Gobolka & Doorashooyinka 2018-2022; Xubin hore ee Daryeelka Caafimaadka - Shaqada & Ganacsiga - Ganacsiga, Hey'adaha Maaliyadda & Guddiyada Caymiska.

Khibrad Xirfadeed Kale: Qareenka maxkamadda muddo 35+ sanno ah; hore u ahay xeer ilaaliye iyo qareenka magaalada; waayo-aragnimada muhiimka ah ee maaraynta sheegashooyinka caymiska, takoorka shaqada iyo kisaska dhaawacyada halista ah.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, University of Minnesota. JD (Shahaadada Sharciga), Jaamacadda Sharciga ee William Mitchell.

Adeegga Bulshada: Lagu abaal mariyay "Golden Acorn" adeegga mutadawacnimo ee Dugsiga Dhexe ee Chinook PTS. Si mutadawacnimo ah ula shaqeyay dugsiyada carruurtayda, Sacred Heart Social Concerns, Congregations for the Homeless, NARAL Pro-Choice Washington, Virtue's Children Nepal, and Chrysalis Domestic Violence Center.

Bayaanka: Tan iyo markii ay gabadhadaya ku dhalatay NICU ayadoo si xun u xanuunsan iyo aniga waxay noqotay inaan la dagaalamo shirkaddayda caymiska si ay ugu oggolaadan dhakhaatierteeda inay siyyan daryeelka badbaadinta nolosha, waxaan ka dhigay hadafka noloshayda inaan xaqijijo in qoys dambe uusan waligis soo marin dhibaatadaas oo kale. Khibraddayda ka dacwoode ahaan oo mataleya shaqaalaha kiisaska takoorka shaqada iyo asalkayga xooggan ee u doodista iyo u adeeggida dadweynaha, waxaan ku soo kordhinayaa tiro aqoon oo gaar ah doorka Guddoomiyaha Caymiska.

Ka sharci-dejiye ahaan, waxaan ahaa cod hormuud u ah arrimaha daryeelka caafimaadka, kafaala qaado sharciga si loo abuuro xulashooyinka dadweynaha ee daryeelka caafimaadka ee Washington, iyo u doodista helitaanka weyn oo adeegyada caafimaadka dhimirka iyo ka hortaga biilasha caafimaadka kadiska ah.

Ka Guddoomiyaha Caymiska ahaan, waxaan u shaqeyn doonaa si hagar la'aan ah si aan u dejijo sharciyada mudnaanta siinaya ilaalinta macaamiisha iyo hoos u dhigista kharashaadka, kor u qaiddida daah furnaanta gudaha waaxda caymiska, iyo balaarinta helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee muhiimka u ah dhammaan dadka reer Washington. Waxaan sidoo kale hoggaamin doonaa wax ka qabashada kharashaadka caymiska ee kordhay ee ay abuureen isbeddelka cimilada iyo ilaalinta caymiska daryeelka caafimaadka taranka.

Noloshayda waxaan ku dhammaystay inaan caawiyo dadka aan awoodin inay ka hortagaan kuwa ugu awooda badan, waxaan si xushmad leh kaga codsanaya codkaaga si aan adigana kuugu dagaalamo.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiilqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.


Phil Fortunato

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 680-9545

Phil@VoteFortunato.org

www.VoteFortunato.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Degmada 31-aad ilaa iyo 2017; Wakiilka Gobolka ee Degmada 31-aad ee la doortay 2016; Wakiilka Gobolka ee Degmada 47-aad 1998-2000

Khibrad Xirfadeed Kale: Tababarka iyo la-talinta deegaanka. Ganacsiga caalamiga ah ee Yurub iyo Aasiya. Mulkiilaha ganaci yar ee qandaraasyada. Agaasimaha Aasaasay iyo Guddoomiyihii ugu horeeyay ee Ururka Xakamaynta Nabaadguurka ee PNW.

Waxbarashada: Rutgers University, Cook College of Agriculture (Jaamacadda Beeraha); Qaab-dhismeedka Muuqaalka Dhulka.

Adeegga Bulshada

Waxaan xaasle ahay 45 sanno, waxaan dhalay 5 carruur ah, 3 ka mid ah ayaa halyeyadii hore ee Ciidanka Mariiiska ee Dalka Mareykanka oo lagu qurxiyay billado. Knights of Columbus - Heerka 4-aad, Project Rachel, Amarka Walaalaha ee Eagles, Wiilasha & Gabdhaha Talyaaniga, Ururka Laybeeriya ee WA.


Bayaanka: Waaan u taaganahay inaan ka dhigo suuqa caymiska Washington mid ay qiima ahaan awoodi karaan qoysaska iyo waayeellada. Sharciyada dhaqdhaqaqeyasha marin habaabinta ee Sharci dejinta iyo Guddoomiyaha Caymiska waxay leeyihiin doorasho xaddidan waxayna caymiska ka dhigee mid aan qiima ahaan la awoodi karin.

Intee in la'eg oo meheraduhu ku bixiyaan caymiska ayaa saamayn toos ah ku leh qiimaha aad wax ku bixiso, oo ay ku jiraan raashiinka iyo xitaa kiradaada. Ku darsa taas kororka 20% ee kharashka caymiska, oo xitaa way ku adag tahay waayeellada dakhliga go'an iyo qoysaska inay helaan nolol maalmeedka. Waaxda caymiska waxay u baahan tahay xeerar macquul ah, oo aan ahayn kuwo culus. Ka Senatarka gobolka ahaan, waxaan u halgamay fursadaha la awoodi karo oo ay macaamiisha wadaan kuwas oo dhiirigeliyo tartan badan, doorashooyin badan, iyo kharashaadka hooseeya ee macaamiisha. Waan ogayah waxa shaqeeyaa mana ahan xeerar uu riixayo ajeendo oo kor u qaada kharashaadka iyaga oo aan keennin daryeel wanaagsan oo qiima ahaan la awoodi karo.

Waxaan si toos ah ula kulmay caqabadaaha caymiska caafimaadka ee uu la kulmay wiilka aan awoogga u ahay ee qaba cudur naadir ah. Isaga waxay u tahay halganka nolosha iyo geerida. Waa inaad adiga iyo dhakhtarkaaga go'aamisaan go'aamada daryeelka caafimaadkaaga, ee maahan shirkadaha caymiska.

U codeyenta Phil Fortunato waxay hoos u dhigi doontaa kharashaadka, waxay keenni doontaa saadaalin iyo helitaan suuqyada caymiska Washington, si aad u heli karto ilaalinta caymiska ee uu qoyskaagu u qalmo.


Degmooyinka Sharci Dejinta ee 2024



King County

Waxaa soo diyaariiyay:
Qaybta GIS
Waaxda Doorashooyinka

Abriil 2024



Khariiradda Goobta



Senatarka Gobolka

Derek Stanford

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 481-6231

DerekStanford@pm.me

www.DerekStanford.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Sharci Dejiyaha Gobolka ilaa sannadkii 2011; Madaxa Ganacsiyada, Adeegyada Dhaqaalaha, Ciyaarta, iyo Guddiga Ganacsiga; xubin ka tirsan Shaqaalaha iyo Guddiga Ganacsiga iyo Beeraha, Ilaha Biyaha, iyo Guddiga Jardiinka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Derek wuxuu xirfad ahaan u bartay xisaabta waana saynisyahan xog. Wuxuu hadda ka shaqeeya warshadaha hawada sare, sidoo kale doorarka uu kasoo shaqeeyay waxaa ka mid ah hoggaaminta falanqeeynta iyo sayniska xogta ee la xiriira teknolojiyada iyo shirkadaha teknolojiyada.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga Xisaabta, Harvey Mudd College; Shahaado Jaamacadeedka Mastarka ee Qaybta Cilmiga Xisaabta, Claremont Graduate University; Shahaadada PhD-ga ee Xisaabta, University of Washington

Adeegga Bulshada: Dugsiga Dhexe ee Canyon Park PTS, Kooxaha Cub, Ururka Shelton View Forest

Bayanka: Anigoo ah xisaabiyyaha keliya ee ka tirsan laanta sharci dejinta Gobolka, waxaan had iyo jeer ku tiirsanaan doonaa sayniska, xogta, iyo xaqiiqooyinka si aan u gaaro go'aamada ugu fiican ee ku habboon dadka Washington. Hadafkayga waa inaan dhiso is afgarad, oo aan gaaro yoolka degsan helana natijjooyin ku habboon degmadeena iyo gobolkeena.

Waxaan gaarnay horumarka kordhinta saadka guryaha la awoodi karo, laakiin waxaan jira shaqo badan oo ay tahay inaan qabanno. Gobolku wuxuu u baahan yahay inuu sare u qaado oo uu caawiyo dowladaha hoose si ay u yareeyaan dib u dhaca oggolaanshaha oo ay si degdeg ah u kordhiyaan guryaha si qoysaska da'da yar ay awood ugu yeeshaan inay halkan ku noolaadaan. Waa inaan sidoo kale hubinno jawaab bixiyeyaaasha ugu horeeyaa inay haystaan agabka iyo qalabka ay ku ilaalinyayaan ammaanka xaafadaha. Waxaan mudnaan koowaad siin doonaa balaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka oo la awoodi karo waxaana mar walba difaaci doonaa xuquuqdaada xorriyadda taranka.

Waxaan u baahanahay inaan hubinno in lacag kasta oo doolar ah oo lagu qaado canshuur ay ku baxdo si hufan iyo isla xisaabtan leh. Waan ogahay inay tahay lacagtaada, mas'uuliyaddayaduna waa inaan si caqli gal ah u isticmaalno. Tani waxay ka dhigan tahay samaynta miisaaniyad waarta oo mustaqbalka fog ah la xiriirta oo mudnaanta siinaysa dugsiyada una dhista fursad qof walba.

Waxaa taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Pro-Choice Washington, Ururka Kalkaliyeyaa Gobolka Washington, iyo qaar kale oo badan.



Ma Guurtay? Magacaaga ma beddeshay?

Cusboonaysii
Diiwaan Gelintaada
Codbixiyaha! Tag
barta **VoteWA.gov**
ugu dambeyn 28-ka
Oktoobar si aad uga
codeyso Doorashada
Guud.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Davina Duerr

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 219-7945

davina@electdavina.com
electdavina.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, Guddoomiyaha Guddiga Dowladda Hoose; Xubin Hore Golaha Magaalada Bothell

Khibrad Xirfadeed Kale: Injineerad ay ka go'an tahay naqshad waarta, oo qimo jaban; kasoo shaqeeysay Eastside Transportation Partnership; Kooxda Talo bixinta Golaha WSDOT; Baska Sound Transit Kooxda Hoggaminta La doortay ee Rapid Transit; Guddiga Siyasadda Gaadiidka PSRC ee matalaya Ururka Sound Cities, iyo Guddiga Agaasimeyaaasha ee Ururka Sound Cities

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Dhismaha, Jaamacadda Syracuse

Adeegga Bulshada: Kasoo shaqeeysay Hey'adda Dugsiyada Northshore asaga oo Madaxweyne ka ahaa iyo xubin Guddiga kamid ah, 2009-2015; Wax ka aasaasay waxna ka maamulay barnaamijka M.I.L.K. Money; Kasoo shaqeeyay Guddiga Bothell Landmark Preservation, Madaxa Guddiga 2008-2015, 2005-2015

Bayaanka: Adeegga dadweynuhu waa dhegaysiga bulshadeena iyo helitaanka xal guud oo macquul-gal ah. Waa xaan ku faanayaan horumarkeena ku saabsan dhisidda guryo la awoodi karo, qaadista tallaabo degdeg ah oo ku saabsan isbeddelka cimilada, iyo sare u qaadista gaadiidka oo ay ku jiraan gaadiidka iyo socodkuba. Waa xaan u baahan nahay inaan intaas kasii badino si aan u xaqqijino dugsiyo dadweyne oo wanaagsan, wax ka qabashada hoy' la'aanta, balaarinta adeegyada caafimaadka habdhqaanka, la tacaalidda dhibaatada fentanylka, iyo hagajinta ammaanka xaafadaha. In Washington laga dhigo 100% gobol rabitaankiisa ku socda waa mid muhiim ah.

Albaabkaygu mar walba waa uu kuu furan yahay - adiga iyo fikradahaagaba. Waxaa i taageeray: Ururka waxbarashada Washington, Washington Conservation Action, Golaha Shaqaalaha Gobolka WA, Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay), Suzan DelBene, Madaxda Dave Somers & Dow Constantine, iyo kuwo kale...

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Mark Davies

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 770-5278

mark2olympia@gmail.com
www.Mark2Olympia.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Guddiga Ardayda ee Dugsiga Hoose ee Lockwood 1967/68

Khibrad Xirfadeed Kale: Farsameeyaha Barnaamijka/Taxliiliye/Maamulaha Mashruuca 35 sanno, (32 sanno ka shaqeynaayay Boeing). Mulkiilaha hore ee Ganaci yar iyo Dhisaha Guriga Journeyman Log. Waa xaan ahay qof dhallinyaro ah, waxaan kasoo shaqeyay gurista miraha beeriga, ilmo ilaalim, Tuuraha Wargeyska, kabab-yeeri, cunto geeye, guryo riiniyeeeye, karaaniga dhoofinta iyo qabashada badeecada, makaaniga matoorada yaryar iyo gaariyaasha, sifeeyaha foornada, qaadaha hod, iyo qabri qode.

Waxbarashada: Dugsiga Northshore, Brigham Young University - Injineernimada Makaanikada

Adeegga Bulshada: 20 sanno oo adeeg ah anoo ahaa hoggaamiyaha Qaangaarka ah ee Naadiyada Wiilasha, adeegga intaan noolaa oo dhan ee kanisadda dhallinta iyo dadka, mutadawac ahaa uga soo shaqeeeyay Habitat for Humanity, iyo ku deeqaha joogtada ah ee dhiiga iyo xinjiraha.

Bayaanka: Waa xaan ahay waayeel, xili ay sii kordhaysana qiimaha maciishadu, wali waan shaqeyayaa waxaana daryeellaa xaaskayga oo qayb ahaan naafo ah. Waa xaan fahmayaa halganka nolosha. Anoo ah wakiilkiina la doortay waxaan gacan ka gaysan doonaa in caqliga wanaagsan lagu soo celiyo Olympia.

Waxaan taageeraa xuquuqda iyo xorriyadda dastuuriga ah, yareynta qarashka dowladda, hoos u dhigista canshuuraha xadka dhaafay, hufnaanta doorashada, xuquuqda waalidka, dookha dugsiga, xaddaynta iyo qorshaynta xaafadaha, guryaha halka qoyska, iyo yareynta dambiyada (ganacsiga daroogada, tahriibinta dadka). Waan kasoo horjeedaa canshuurta dakhliga ee gobolka iyo maxalliga ah, awoodaha balaaran ee fulinta ee la siyyo guddoomiyaha gobolka, lacag ka jarrista booliiska, dulsaarka iyo ganacsiga, iyo mashruucyada caymiska ee dowladda.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Shelley Kloba

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 522-2096

info@votekloba.com

www.votekloba.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka; Guddoomiyaha Labaad ee Daroogada La Xakameeyo iyo Guddiga Ciyaaraha; xubin ka tirsan Guddiyada Beeraha iyo Kheyraadka Dabiiciga ah; Xubin hore oo ka tirsan Guddiga Khamaarka Gobolka WA; Shirka Qaran ee Sharci Dejiyeeyasha Gobolka Sirdoonka Teknolojiyada cusub, Amniga Internetka, iyo Kooxda Hawlgalka Xogta Gaarka ah; Golaha Sharci dejinta Qaranka ee xubin ka ah Guddiga Fulinta ee Gobolka. Xubin ka tirsan Golaha deegaanka Kirkland 2013-2016

Khibrad Xirfadeed Kale: Bixiye daryeel caafimaad oo shahaadaysan in ka badan 20 sanno

Waxbarashada: B.S. Kinesiology, University of Illinois; Shahaadada Qorshaynta Siyaasadda Tamarta, University of Idaho; Seattle Massage School

Adeegga Bulshada: Xubinta ka tirsan kooxda Kirkland Kiwanis; hore: Mas'uulka Aasaaska Dugsiyada Lake Washington, Xubin ka tirsan Guddiga Kirkland Park, Agaasimaha Sharci dejinta ee PTA ee Gobolka WA

Bayaanka: Sharaf bay ii ahayd inaan afar xilli oo wakiil kuu ahaado. Qoto dheerida u doodista bulshada ee qotada dheer waxaan ka dhaxlay aqoonta habka maamulka. Waxyabaha mudnaanta ii leh waxaa ka mid ah helitaanka caalamiga ah ee daryeelka caafimaadka, ilaalinta xogta gaarka ah ee macaamiisha, dhimmista dambiyada, rabshadaha qoryaha, iyo guri la'aanta, kordhinta fursadaha qoysaska shaqeeya, hubinta xuquuqda madaniga ah ee dadka LGBTQIA, horumarinta fursadaha gaadiidka, iyo ilaalinta deegaankeena. Marka aan si wada jir ah u shaqeyno, waxaan ka gudbi karnaa caqabadaha hadda ina haysta si aan u abuurno fursad, caddaalad, iyo ammaan dhammaanteen aan helno.

Taageerooyinka: Degmada 1-aad ee sharci dejinta, King, iyo Dimuqraadiiinta Degmada Snohomish; Pro-Choice Washington; Kutlada Siyaasadeed ee Haweenka Qaranka; Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington AFL-CIO, Isbahaysiga WA ee Mas'uuliyadda Hubka

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Sugidda Doorashooyinkeena Si Codeyn Kasta Loo Tiriyo



Halkan Doorashooyinka
Degmada King, hadafkeenu
waa inaan qabanno doorashooyin
sax ah, sugaran, oo la heli karo.

Ammaanka Goobta



Xarunteena waxaa kormeera in ka badan ku dhawwaad 80 kaamirooyinka amniga ah.



Dadweynaha ayaa naga daawan kara in ka badan 14 kaamiryoona tooska ah anagoo shaqeynayna inta lagu jiro habeynta warqadda codbixinta.



Shaqaalaha iyo goobjoogeyaasha waa inay aqoonsi ku soo galaan ugana baxaan goobta looga shaqeeyo warqadaha codbixinta.



Aagga lagu keydiyo iyo xisaabinta warqadda codbixinta ayaa u baahan aqoonsi iyo mashiinka suulka la saaro labadaba.

Ammaanka Oonleenka



Khobaro ku taqasusay amniga internetka oo shahaadeysan ayaa shaqaale ka ah waaxda doorashooyinka iyo IT-ga Degmada King.



Dhammaan shaqaaluhu waxay qaataan tababarka sannadlaha ah ee ammaanka oonleenka.



Nidaamyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo xisaabinta codeynta ayaa la kala soocaa si loogu ilaaliyo ammaanka ugu sareeyaa.



Nidaamka xisaabinta codeynta waa nidaam gebi ahaanba ah shabakad xiran, kumana xirna internetka.



Senatarka Gobolka

Bill Ramos

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 208-5882

bill@voteramos.org

voteramos.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, Degmada 5-aad (2019-hadda); Xubin Golaha Magaalada Issaquah (2015-2019).

Khibrad Xirfadeed Kale: Wuxuu maamulay kaymaha iyo dhulku danta guud ee Adeegga Kayamaha ee Mareykanka (16 sanno). Wuxuu gacan ka gaystay helitaanka gaadiidka miyiga asaga oo kaashanaya Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka (8 sanno). Wuxuu lahaa ganacsyo yaryar oo ku yaala North Bend muddo 17 sanno ah iyo ganacsii Issaquah ku yaala oo soo saara mashaariicda gaadiidka.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Humboldt State University. Shahaadooyinka Injineernimada Kayamaha, Oregon State University, iyo Maamulka Madadaalada, Utah State University.

Adeegga Bulshada: Issaquah Rotarian (2013-hadda); Xubin Hore oo Guddiga ah, Encompass (horey loogu yaqaanay Snoqualmie Valley Children's Services); Kasoo shaqeeyay Guddiga Dhaqaalaha Issaquah, Guddiga Siyaasadda iyo Qorshaynta, iyo Guddoomiyaha Guddiga adeegga Aadanaha.

Bayaanka: Ka wakiilkiina ahaan, waxaan la hadlay kumanaan deris, ayaga oo gurigooda jooga iyo bulshada dhexdeedaba, waxaa la wadaagay waxyabaha mudhaanta leh ee aan wadaagno. Olympia dhexdeeda, waxaan muhiimadda siiyay qiimo jabnaanta, badqabka, iyo ku noolaanshaha aniga oo adeegsanaya siyaasado iyo maalgeshiyo xoojinaaya bulshooyinka oo sare u qaadaya caafimaadka gobolkeena oo dhan. Waxaan hoggaamiyeel mee marinta xirmada taariikhiga ah ee gaadiidka Washington, aniga oo maalgeliyay badqabka iyo dayactirka waddooyinka waaweyn ee wakhtigoodii dhaafay —ay ku jirto horumarinta maalgelinta buuxda ee lagu samaynayo Highway 18. Waxaan ku faraxsanahay diiwaankayga xooggan ee ku saabsan wax ka qabashada cimilada si aan u gaarno hadafyadeenna dhimmista kaarboonka, iyo ilaalinta kayamaha, tayada hawada, iyo dhaqaalaha.

Waxaan ku faraxsanahay inaan cod u noqdo xalalka cagli-galka ah ee ku salaysan isla xisaabtanka iyo natijiada.

Ka Senatarkiina Gobolka ee soo socda ahaan, waxaan sii wadi doonaa hoggaamtintu shaqooyinka wanaagsan iyo maalgelinnada kaabayaasha, qiiimo jabnaan ay helaan qoysaska shaqeeya, xuquuqaha taranka, iyo xaqijijinta in carruurteenu helaan mustaqbalka ay u qalmaan — oo leh dugsiyo wanaagsan, bulshooyin ammaan ah, iyo in wax laga qabto isbeddelka cimilada. Waxaan ku faraxsanahay inaan noqdo 100% Taageeraha Dookha (Pro-Choise). Waxaan leeyahay diiwaan la xaqijijay oo ku saabsan mulkiyadda hubka si mas'uuliyad ku jirto.

Taageerooyinka: Dab-damisyada, Booliska, Kalkaliyeeyasha, Macallimiinta, Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay), Alliance for Gun Responsibility, Golaha Shaqaalaha Gobolka, Aerospace Machinists, Snoqualmie Tribe, Golaha Sare u Qaadista Muslimiinta Mareykanka, Progreso, U doodeyaasha Deegaanka, Xildhibaannada Kongareeska Kim Schrier, Xeer Ilaaliyaha Guud Bob Ferguson, duqyaasha magalooyinka iyo golaha xubnaha ee degmada oo dhan, iyo kuwo kale.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Chad Magendanz

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 395-4895

info@magendanz.com

www.Vote4Chad.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyihii hore ee Guddiga Dugsiga Issaquah oo loo doortay Golaha Wakiilada sannadkii (2013-17); U adeegay Education (Xubinta Kamid ah), Tacliinta Sare, Farsamada iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Xeerarka, iyo Guddiyada qondeyneysta; Waxaa loo magacaabay shan dugsi oo maalgeelin iyo guddiga hawlaha tayada

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallinka sayniska kombuyutarka (Bellevue SD); Abuuraha softiweerka (Microsoft, Nike, Panasonic, iwm.); Sarkaal ka tirsan Sabmariinka Ciidamada Badda ee Mareykanka

Waxbarashada: Shahaadado Jaamacadeedka Mastarka Waxbaridda oo uu ka helay CWU; Shahaadado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga Injineernimada Korontada iyo Kombuyutarka ee Cornell University

Adeegga Bulshada: U doodaha Sare ee PTA; Si mutadawac ah uga shaqeeyay Microsoft TEALS; marti geliyaha AFS; Shabakkada Education Eastside; Kiwanis; Ciidamada Mareykanka; degan Tiger Mountain leh xaa (35 sanno jir ah) iyo laba wiil (MIT iyo University of Utah)

Bayaanka: Lyada oo lagu jiro xilli xisbiyadu aad u kala firkrad fog yihiin, codbixiyeyaashu waxay haystaaa fursad ay sannadkaan ugu diraan cod madax banaana Golaha Senatarrada Gobolka: Chad Magendanz.

Chad wuxuu muhiimadda saaraa xal u helidda oo uu ka hor mariyaa siyaasadda xisbiga. Seattle Times waxay ammaantay "diawaankiisa la xaqijijay ee fikirka madax banaannida, ka shaqeynta dariqa, iyo shaqada sida wanaagsan loo ixirtaamo" ee la xiriirta maalgelinta dugsiga. Horyaalka Waxbarashada Olympia, wuxuu laban laabay maalgelinta dugsiga isagoo hoos u dhigay qiimaha canshurta hantida in dhan 44% ee degmooyinka dugsiyada. Wuxuu sameeyay isbahaysi laba geesood ah oo meal mariyay sharci taariikhii ah oo ku saabsan waxbarashada sayniska kombuyutarka, dugsiyada cusub, baabuurtu korontada, iyo dambiyada internetka.

Waxaa la joogaa wakhtigii isbeddelka Olympia. Maamulka hal xisbi ee sharci dejinta ayaa keenay sharciyo aad u xad dhaaf ah, oo ay ku jiraan canshur kordhin la sameeyay, in dadka Washington ay si xad dhaaf ah u saxiileen hindiseyaal lagu burinaayo. Dadka reer Washington waxay sidoo kale la daaldhacayaan dhibaatooyinka sida sicir bararka sare ee nolosha, dambiyada baahsan iyo isticmaalka maandooriyaha, iyo dhuminta waxbarashada ee ka dhashay dugsi xirista COVID. Xisbiga aqlabiyyadda ah ee golaha sharci dejinta ayaa ku guul daraystay inuu wax ka qabto dhibaatooyinka halista ah. Way caddahay inaan u baahannahay hoggaan cusub si aan gobolkeena dib ugu soo celino waddadii saxda ahayd. Haddii aad u codeyso Chad Magendanz, waxaad hubin kartaa inuu diiradda saari doono arrimaha muhiimka ah, oo uu adiga iyo qoyskaaga wax walba ka hor marin doono.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Victoria Hunt

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 331-9814

victoria@victoriahunt.com

victoriahunt.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubinta ka tirsan Golaha Magaalada Issaquah (2018-hadda), Guddoomiyaha Golaha (2020-2021), Qorshaynta, Horumarinta, iyo Guddoomiyaha Guddiga Deegaanka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Madaxa Xogta ee Shaybaaraad Crosswalk, bixinaysaalaabada sii daynta gaaska aqalka dhirtha lagu koriyo ee dowladaha hoose. Kulliyaddii hore ee Xiririnta ee Waaxda Naqshadaynta iyo Qorshaynta UW Urban, iyo saynisyahanka Breakthrough Energy oo qaabeeynaya kala-guurka tamarta nadiifka ah iyo korontada.

Waxbarashada: Shahaadada Ph.D.-ga ee Cilmiga Deegaanka, University of Illinois; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga ee Bayoolajiga, Cornell University.

Adeegga Bulshada: Mutadawac Kooxda Waxqabadka Xaaladaha Degdegga ah ee Bulshada; Mutadawac maktabadda dugsiga carruurtayda; Xubin ka tirsan guddiyada gobolka ee ka hadlaya arrimaha degmada iyo ilaaliinta kalaunku; U adeegay Guddiga Sharciga Qorshaynta ee Issaquah.

Bayaanka: Saynisyahan ahaan, Xubinta ka tirsan Golaha Issaquah, iyo ka hooyo ahaan, waxaan u olooleeyay guriyeenta la awoodi karo, badbaadada dadweynaha, iyo ilaaliinta deegaanka. Olympia, waxaan kasii dhisii doonaa rikoorkan oo waxaan hoggaamin doonaa mudnaanta bulshada: Maalgelinta waxbarashada K-12, maalgashiga gaadiidka iyo gaadiidka dadweynaha, daryeekla ilmaha ee qiima ahaan la awoodi karo, guriyeenta si loo daboolo baahiyaha bulshada, bixinta daaweynta dadka dhibaataysan, iyo taageero ganacsiyada yaryar. Oo codkaaga dartiis, waxaan had iyo jeer u dagaalami doonaa si aan u ilaaliyo daryeelka caafimaadka taranka.

Waxaa I taageeray Dimuqraadiyiinta 5th LD & King County; Dabdamiyeeyasha Eastside; Tallaabada Ilaaliinta Washington; Ururada Shaqaalaha; Qabilka Snoqualmie; Xubinta Golaha Degmada ee Perry; Wakiilada Ramos iyo Callan; Duqa Magaaloyinka Issaquah, Maple Valley, Snoqualmie, Sammamish, North Bend; iyo qaar kaloo badan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Mark Hargrove

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 632-0736

HargroveMD@aol.com

www.MarkHargrove.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka 2011-2019

Khibrad Xirfadeed Kale: Ciidanka Cirka ee Mareykanka (8 sanno) – Kabtan/Duuliyaha Gaadiidka, Macallinka Xisaabta ee Dugsiyada Diyaar garoowga ee Machadka USAF. Shirkada Boeing (34 sanno) – 737, 747, 757, 767, 777, 787 Kabtanka/Macallinka Duuliyaha, Aasaasaha iyo Xoghayaha/Khasnajiga Midowga Duuliyeyasha Macallinka Boeing

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Sayniska Makaanikada Injineernimada, Machadka Ciidanka Cirka ee Mareykanka.

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga ee Terry Home (Guryaha Dadka Soo maray Dhaawaca Maskaxda), Xubinta Guddiga Dugsiyada Rainier Christian, Xubinta Guddiga Xuquuqda Guryaha ee Citizens' Alliance, Young Life leader, Cilmi Baaraha Xabsiga, Make a Difference Day, PTSO, Macallinka Xisaabta ee Dugsiga Sare, Tababaraha Kent Parks, Adeegga Bulshada ee Kaniisadda Lake Sawyer, Guddoomiyaha HOA

Bayaanka: Mar wuxuu ka qalin jebiyay Machadka Ciidanka Cirka, wuxuu qabiy xaaskiisa Sandy muddo 45 sanno ah, wuxuuna dhalay labo gabdhood oo xasas leh iyo tobantarrur ah oo uu awoowe u yahay. Kadib isbeddeladii dhawwaa ee xuduudaha degmada, wuxuu hadda matali karaa bulsho ka balaaran kuwa xaafaddiisa, oo aad adigu ku jirto!

Marka wuxuu xiiso u qabaa sugista ammaankiina, yareynta dambiyada asagoo fulinaaya sharciyada hadda, lacagiitina idlii ilaaliinaaya asagoo meesha ka saaraaya qarashaadka maalaayacniiga ah ee dowladda hoosena u dhigaaya canshuuraha, gaar ahaanna canshuurta dhaqaalaha curyaamisay ee gaaska. Wuxuu ka shaqeeyayaa inuu diiradda lagu saaro waxbarashada ubadkeena waxbarista dhabta ah, waxbarashadooda iyo badqabkooda iyo ka caawinaadda ganacsiyada inay guul gaaraan, asagoo joogtaynaaya shaqadiina hoosna u dhigaaya qiimeyasha. Wac khadka tooska ah ee Mark oo ah (253)632-0736 marka aad doonto!



Wakiilka Jagada Lr. 2

Lisa Callan

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 260-4878

elect.lisacallan@gmail.com
electlisacallan.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Xildhibaanka Hadda ee Gobolka, Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Miisaaniyadda Qarashka; Xubinta Guddiga Qoondoda Miisaaniyadda Baarlamaanka iyo Adeegyada Aadanaha ee Baarlamaanka, Guddiga Dhallinta iyo Waxbarashada Dhallaanka; Agaasimaha Hore ee Guddiga Dugsiga Issaquah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Injineerka hore ee hoggaanka iyo maamulaha mashruuca ee Boeing. La taliyaha hore ee maaraynta barnaamijiyada horumarinta softiweerka ee waaweyn ee ganacsiyada.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee xisaabaadka oo muhiimadda saaraaya cilmiiga kombuyutarka oo aan ka qaataj Northern Arizona University.

Adeegga Bulshada: Xubin kamid ah Waaxda Ganacsiga ee Kiwanis iyo Issaquah. Xubinta hore ee daymaha United Way ee Degmada King, Xubinta hore ee guddiga Garage Teen Center, iyo Isbahaysiga Saamaynta Dookha ee Ka hortagga Daroogada ee Dhallinyarada.

Bayanka: Siyaasad wanaagsan waxay ka timaadaa dhisidda talo dadweyne, ma'aha xulufaysi iyo kala qaybin. Waaan muhiimadda saaraaya dhegaysiga dhammaan fikradaha si aan u helo natijjooyin. Waaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo guul laga gaaro dugsiyada dowladda, xaqijinta in Washington noqdo gobol taageera dookha dadka, aan ka dhigno xaaftadaheena kuwo ammaan ah sida ugu macquulsan, hoos u dhigno qarashaadka guryaha, aana xal u helno xaaladda taagan ee isbeddelka cimilada. Waaan ka shaqeyn doonaa helitaanka daryeelka carruuta oo tayo leh iyo caafimaadka dhimirkha waayo labadaba waxay muhiim u yihiin mustaqbalka caafimaadka qaba ee Gobolka Washington.

Waxaa taageeray: Planned Parenthood NW (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay), Washington Fraternal Order of Police, Dab-damiska Eastside, Macallimiinta, Kalkaalisooyinka, Midowga Shaqaalaha, Ururka Ilaalinta Washington iyo dhinacyo kale...

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Patrick Peacock

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 929-9970

patrick@electpeacock.org
electpeacock.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Anigu horey siyaasi uma ahayn. Waaan u tartamayaa inaan xal keeno.

Khibrad Xirfadeed Kale: Khabiirka Ammaanka Ganacsiyada ee Sare; Sarkanla Dammaanadda Sirta Ciidanka.

Waxbarashada: MBA, Xoojinta Dhaqaalaha, Webster University; BA, Falsafadda, University of Washington.

Adeegga Bulshada: Kadib shan sanno oo aan ciidanka ku jiray, waxaan kasoo shaqeyay 15 sanno Ciidanka Keydka ah. Qoyskaygu waa Horyaalka Gobolka Washington, anagoo si joogto ah u deganayn Hobart, WA ilaa sannadkii 1887. Adeegga Bulshada ayaa ahaa dhaqan soo jireen noo ahaa jiilal badan.

Bayanka: Aan qabano waxa suuragalka ah. Dowladdu waa inay muwaadiniinta siiso adeegyada aasaasiga ah; bi'o ammaan ah oo ay horumar ku gaaraan. Dhawwaan, waxaan markhaati u noqday dhaca hubeysan ee ka dhacay dukaan ku yaala xaafaddayda. Waa arrin qarracan ku ah waalidka maadaama ay tahay meel uu wiilkaygu badanaa tago. Tan ayaa muujinaya in aan dadku aadi karin dukaannada adeegga joojinta dambiyadana laguma guuleysan. Kuwaani waa arrimaha badanaa dhaca oo ay qasab tahay in xal loo helo.

Anoo ah Sarkanla Dammaanadda waxaan qoraa xeerkarka iyo habraacyada ay qasab tahay inay shaqada qabtaan. Waaan Hannaankan horumarka leh kusoo kordhinayaa Baarlamaanka Gobolkeena si loo xalliyo dhibaataadaan. Waan naqaannaa waxa shaqeynaaya, xeerkarka ku habboon dhaqaalaha, iyo booliiska u qalma. Aan samayno.



Senatarka Gobolka

Bob Hasegawa

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 322-4804

votebobhasegawa@gmail.com

votebobhasegawa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka (3 muddo-xilleed) iyo Wakiilka Gobolka (4 muddo-xilleed); Ergada Shirweynaha Qaran ee Dimuqraadiga Bernie (2016, 2020)

Khibrad Xirfadeed Kale: Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, AFL-CIO, Madaxweyne ku xigeenka; Ururka Shaqaalaha Local 174, Xoghayaha-Khasnajiga (3 muddo-xilleed; xubin 34 sanno ka ahaa); Hawlwadeenka ruqsadda haysta ee ATU; Injineer IUOE ee qaabilans xaaladda Socdaalka; Ururka Shaqaalaha Wakiilka Qorsheyaasha Daryeelka Caafimaadka

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha (MPA)-UW Evans School ee Siyaasadda Dadweynaha iyo Maamulka; B.A.-Barashada Shaqada iyo Isbeddelka Abaabulka iyo Bulshada, Antiyohk University; A.A.-Barashada Shaqada, Shoreline Community College; Teknolojiyada macluumaaadka ee Seattle Central Community College, Dugsiga Sare ee Cleveland, Seattle

Adeegga Bulshada: Bd.-UW Evans School ee qaabilans Siyaasadda Dadweynaha iyo Maamulka (hore); Bd.-UW Xarunta Arrimaha Daraasaadka Shaqada; Bd.-Seattle JACL

Bayaanka: Anigoo ah degane degmada 11-aad, waan fahmay waxa muhiimka u ah degmadeena waxaana u shaqeeyaa si adag maalin kasta si aan kuugu adeego. Wuxaan ku qaataay xirfaddayda u dagaalanta shaqoyinka qoyska, qoysaska shaqeeya, xuquuqda madaniga ah, sinnaanta iyo ganacsiyada yaryar. Wuxaan taaganahay mabaadii'deyda oo aan dhammeyyo shaqada, taas oo ah sababta asxaabtayda ay iigu doorteen Guddoomiyaha Golaha Dimuqraadiga ee Senatarka. Wuxaan ka tarjumaya anshaxa shaqada ee bulshadeena, wuxaan sharaf ii ah inaan keeno qiyaamka caddaaladda bulshada iyo dhqaalaha Olympia.

Waxaan aaminsanahay taxaddarka maaliyadeed, oo ay ku jiraan daah furnaan, isla xisaabtan iyo dakhli soo saarid iyadoo aan kor loo qaadin canshuuraha sa'a'dka ah. Abuuritaanka bangi dowladdeed oo dowladdu leedahay ayaa intaas oo dhan qabta iyo in ka badan: wuxuu abuuraa tobanaan kun oo shaqo, wuxuu nood badbaadiyaa deyn badan, dulsarka iyo lacgata ujrada iyadoo sidoo kale si weyn u kordhinaysa awooodda maalgelinta kaabayaasha dhqaalaha, wuxuuna ilaaliyaa lacagaha canshuuraha ee Washington inay nooga shaqeysyo, halkii ay ahaan lahayd abuurista faa'iidata Wall Street. Hadda in ka badan sidii hore, wuxaan u baahannahay xalal maaliyadeed oo cusub, wuxaan ku hanweynahay in aan horseedo tan iyo siyaasadaha kale ee muhiimka ah sida daryeelka caafimaadka caalamiga ah iyo awood siinta guryaha qiimaha jaban.

Waad ku mahadsan tiihiin sii wadista inaad igu kalsoonaataan inaan idin matalo. Aynu dhisno guulaheenna sharci dejinta oo aanu abuurno mustaqbal wanaagsan bulshadeena.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.



Wakiilka Jagada Lr. 1

David Hackney

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

david@hackney4the11th.com

www.hackney4the11th.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka 11-aad LD (Degmada Sharci Dejinta), Pos 1 (2021-ilaah hadda); Madaxa Guddiga Xaafadda Dimuqraadiga (Tuk 11-1167)

Khibrad Xirfadeed Kale: Kaaliye hore ee Xeer Ilaaliyaha Mareykanka, Xeer Ilaaliyihii hore ee Dambyuada Dagaalka ee Qaramada Midoobay, La-taliye Sare oo hore ee oo qaabilansaa Kheyraadka Aadanaha Caalamiga ah ee Ilaalinta bi'ada, iyo La taliyaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga, Cornell University; MPA, Harvard University; Shahaadada Sharciiga, Harvard Law School

Adeegga Bulshada: Xubin hore uga tirsanaa Guddiga, Ururka Carruurga ee Tukwila; Xubin Guddiga hore uga tirsanaa, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Xubin hore uga tirsanaa Guddiga, Tabor 100 (Rugta Ganacsiga Afrikaanka Amerikaanka); Guddoomiyihii hore, Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka Washington; Horey uga soo shaqeeyay shaqo mutadawacnimo, Mashruuca Dib u-habeynta Caddaaladda Dambyada ee Uzbekistan; Xubin ka tirsan Guddiga, Ilaalinta deegaanka Dadweynaha ee Seattle-King & Kittitas.

Bayaanka: Waad ku mahadsan tahay fursadda aad ii siisay inaan kuugu adeego labadaan muddo-xilli ee ugu dambeeyay. In kastoo aynu soo marnay wakhtiyadii ugu qalafsanaa ee soo mara gobolkeena, haddana wuxa jira hawlo badan oo u baahan in la qabto si qof kasta uu u helo fursad uu ku horumariyo bulshadeena.

Muddadayda soo socota, wuxaan mudnaan siin doonaa siyaasadaha wax looga qabanayo awood siinta guryaha, fursadda dhaqaalaha, badqabka dadweynaha, iyo sii jirista deegaanka. Taageeradaada joogtada ah marka aan helo, wuxaan samayn doonaa wax kasta oo suurtgal ah si aan kor ugu qado nolosha dadka ku nool degmada 11-aad ee sharci dejinta.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Steve Bergquist

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 390-4527

steve4house@gmail.com

www.steve4house.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka

Khibrada Xirfadeed Kale

Macallinka Taariikhda/Cilmiga Bulshada ee Degmo Dugsiyeedka Renton, Mulkiilaha Hore ee Ganacsiga Yar ee Aces Tennis, soo maamulay Barnaamijyada Jardiinka iyo Madadaalada ee Magaalada Renton iyo Tenniska.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Hazen, Renton; Shahaadada Jaamacadda, Cilmiga Siyaasadda iyo Taariikhda oo aan labadaba ku taqasusay, University of Washington; Shahaadada Mastarka ee Waxbarista, Western Washington University

Adeegga Bulshada: Xubinta hadda ee guddiga Ciyaaraaha Gaarka ah ee Gobolka Washington, Bulshada Dugsiyada Gobolka Washington iyo Sanduuqa Bulshada ee Gobolka Renton. Waaan sidoo kale kala shaqeeyaa bulshadeena, anoo la kaashada hey'adaha kheyriga ah, degmooyinka dugsiga iyo magaaloooyinkeena sidii loo heli lahaa maal gelinta sugar ee deeqaha waxbarashada ee kulliyadda oo u sahlaaya arday kasta fursad qimo jaban kadib marka uu ka qalin jebiyo dugsiga sare.

Bayaanka: Khibraddayda anoo ah waalid shaqeeya iyo mid kamid ah macallimiinta wali shaqeeya ee ka shaqeeya baarlamaanka ayaa fikir muhiim ah ku soo kordhinaysa miisaaniyadaheena gobolka. Waaan sii wadi doonaa balaarinta barnaamijyada si qoysaska shaqeeya ay u awoodaan daryeelka carruurta, dugsiga barbaarinta (Ready K) iyo kulliyadda (oo Bixinaaya Barnaamijyada sida Renton Promise) iyo inaan sidoo kale gacan ka gaysto abuurista guryo dheeri ah si dadku u awoodaan inay ku noolaadaan aagga meesha ay ka shaqeeyaan. Sharaf ayay ii ahaan lahayd haddaan helo codkaaga!

Waxaa sharaf ii ah inay i taageereen macallimiinta, kalkaalisooyinka, shaqaalaha dab damiska, iyo Dimuqraadiyiinta Degmada 11aad iyo xubno kale oo badan oo ka tirsan bulshada, ururada, iyo madaxda lasoo doorto.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Justin Greywolf

(Dookh Ahaan Xisbiga Libertariyanka)

(253) 595-0113

votegreywolf@gmail.com

www.vote4greywolf.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Waaan rajeynaya inaan helo fursad aan ku matalo dhammaan dadka degmadaan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Maadaama aan qarniyo kasoo shaqeynayay shirkadaha softiweerka, waxaan rajo weyn ka qabaa midaynta dadka kala duwan si aan u abuurro xalal wax ku ool ah. Waaan aad awoodda u saaraa dhegaysiga, wada shaqeynta, iyo xirfadaha ku saleysan tallaabo qaadista si aan qaab wax ku ool ah ugu adeego dadka reer Washington.

Waxbarashada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Adeegga Bulshada: Ballanqaadkayga ku aaddan adeegga bulshada waxaa ka mid ah dadaallo mutadawacnimo ah oo kala duwan, gaar ahaan waxbarashada teknolojiyada iyo la-talinta, gacan ka gaysashada xakamaynta ka kala qaybsanaanta dhijitaalka iyo taageeridda jiilalka mustaqbalka si ay u gaaraan awooddooda ugu sareysa.

Bayaanka: Hadafkeena barwaqaqada iyo xorriyadda wuxuu u baahan yahay sharci dejin ku salaysan mudnaan iyo wakiilo iska kaashada dhinacyada xisbiyada. Yoolkayga waxaa ka mid ah adeegsiga xalalka caddeynta ku salaysan si wax looga qabto dhibaatooyinka dhabta ah ee maanta jira: sida yareynta culeysyada canshuuraha ee la saaro dadka dabaqada dhexe, wax ka qabashada hoy la'aanta, maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha, yareynta dambiyada rabshadaha ka dhasha, difaaca xuquuqda dastuurka, jarista kharashaadka khasaarahaa ah, ilaalinta deegaanka, iyo xaqijintaa doorasho hufan, oo ammaan ah oo leh dammaanad qaad codbixin. Waaan ballan qaadayaa inaan matali doono dhammaan waxyaabaha ay doonayaan dadka reer Washington si aan ugu matalo Qaranka. Si wadajir ah, waxaan wada abuuri karnaa mustaqbal ifaaya anoo kobcinayna wada jirka iyo horumarka.



Senatarka Gobolka

Keith W. Goehner

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 669-7338

Keith@keithgoehner.com

www.keithgoehner.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Wakiillada 2019-2024, Xubinta Sare ee Guddiga Dowladda Hoose, Guddoomiyaha Degmada Chelan 2003-2018, Guddiga Winter Pear, Guddiga Dugsiga Peshastin-Dryden, PCO ga Jamhuuriga, Guddoomiyaha Jamhuuriyiinta Degmada Chelan, Guddoomiyaha Guddiga Khatarta ee Degmooyinka WA

Khibrad Xirfaddeed Kale: Macallinka Dugsiga Hoose ee Moses Lake, Beeralayda Canabka ee Jiilka Saddexaad, Guddoomiyaha K&L, Inc., Maamulka Guryaha ee Gobolka WA, Hey'adda Waxbarashada Beeraha iyo Kayamaha ee Washington, Iskaashadaha Ganacsatada Kafeega, Xubin kamid ah Laanta Beeraha

Waxbarashada: Dugsi Sare ee Peshastin-Dryden, Wenatchee Valley College, Seattle Pacific University (Shahaadada Waxbarashada)

Adeegga Bulshada: Guddiga Talo bixinta Kheyraadka Kaynta ee Okanogan-Wenatchee, Guddiga Nazarene ee Kaniisadda Leavenworth, Rotary, Xubin kamid ah Hey'adda Isbitaalka Confluence, Hey'adda Waxbarashada ee Cascade, tababaraaha kubadda kolleyga iyo kubadda baseball-ka.

Bayaanka: Sharaf ayay ii ahayd inaan idin ku matalo Xaaafadda 12aad 6-dii sanno ee lasso dhaafay. Maadaama aan kasoo shaqeeynay caqabado badan aana higsanayno mustaqbalqa, waa inaan wax ka barano go'aanadii hore iyo cawaqibyada ay abuureen. Dadka ku dhaqan Washington waa inay helaan ammaan iyo badqab ay ku helaan deegaannadooda. Kheyraadka nagu filan ee tamarta ayaa arrin muhiim ah noo ah taasoo ay qasab tahay in xal loo helo si loo difaaco dadka bulshada ugu nughul. Dayactirkha waddooyinka, buundooyinka, iyo marinnada biyaha ayaa ah aasaaska shaqada dowladda una baahan in muhiimadda koowaad la siiyo. Dowladda gobolku waa inay qadarisaan doorka dowladda hoose ayna ka fogaataa inay ku adkayso bixinta adeegyada dadweynaha. Gobolku waa inuu dhiiri geliyaa guusha shahsiga ah ee dhammaan dadka deegaanka. Waxaan abuurnay barnamijyo ka caawinaaya bulshooyinka iyo bixiyeyaasha adeegyada waxaana mas'uuliyyad naga saaran tahay si aan maal gelin buuxda u siino adeegyadaan. Inkastoo aan qabno arrimaha qalafsan ee bulshada, dhaqaalaha, iyo bi'i'ada oo u baahesta xal, wali waxaa jirta rajo weyn oo u furan Washington. Waa inaan taageereno ganacsiyada hal abuurka iyo ikhtiraaca leh si loo sii wado bixinta shaqooyinka wanaagsan ee qoysaska reer Washington. Si wadajir ah, waxaan ku soo celin karnaa gobolkeena inuu hormuud noqdo anagoo abuurayna muhiimadaheena kana shaqeeynaya inaan ka guul gaarno. Sharaf ayay ii tahay inaan u adeego bulshada Degmada 12-aad anoo ah Senatarkiina.

Jim Mayhew

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(650) 740-2187

info@jimmayhew.com

jimmayhew.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Magaalada ee Magaalada Snoqualmie 2017-2023 - wuxuu ku faanaa inuu u adeego xafiis dhedhexaad ah oo bixiya adeegyada aasaasiga ah, badqabka dadweynaha, iyo khibradda miisaaniyadda.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Leh xirfad 30-sanno ah oo ku saabsan dhaqaalaha ganacsiga - markii ugu horeeyay lasoo shaqeeyay shirkad xisaabiye oo caalami ah ka dibna noqday CFO-da shirkad Fortune 1000 ah oo gacan ka geysata xasilloonida, koritaanka, iyo ilaha si loo abuurro loona ilaaliyo shaqooyinka - xirfadaha aan ku isticmaali karno Olympia!

Waxbarashada: Wuxaan shaqeeyay saddex sanno si aan lacag ugu helo jaamacad, anigoo helay shahaadada B.A. ee Maamulka Ganacsiga ee University of Washington iyo Shahaadada Xisaabiyyaha Guud.

Adeegga Bulshada: Kubadda Cagta Wildcat Junior iyo Khasnajiga Ururka Cheer, Ka ahaa mutadawac Xafladda PTA, iyo waxyaabo badan oo kale!

Bayaanka: Ma helaysaa qiimaha ugu sareeya ee lacagta canshuurtada ee aad Olympia u dirto? Taasi waa su'aasha aan weydiyo deriskaya oo dhan ee ku nool degmadeena, waxaana filayaa in qof kasta aaminsan yahay inaan awoodno oo ay tahay inaan samayno si ka sii wanaagsan sidii hore si loo xaqiijiyo natijoooyinka, hufnaanta, iyo hufnaanta dowladda gobolka.

Haddii aan helo codkaaga waxaan ku dhaqmii doonaa tallaabooyin wadaninimo iyo khibradda aan leeyahay iyo xirfad ku saabsan maaliyadda ganacsiga iyo xisaabaadka si aan kor ugu qaadno horumarka aan samaynayno oo aan sare ugu qaado kheyraadka aan ku maalgelino amniiga dadweynaha, guryaha la awoodi karo, ku tiirsanaanta doroogada iyo daaweynta caafimaadka dhimirk, waddooyinka iyo buundooyinka, iyo waxbarashada K-12.

Waxaa i koriyay hal hooyo oo ku dhibootay inay hesho nolol maalmeedkeeda, waxaan ogahay caqabada haysta qoysas badan. Iskama iloobi karno dadka, ama uma oggolaan karno carruurta inay la ildaran yihiin deganaansho la'aanta la xiriirta guriyeynta iyo waxbarasho la'aanta. Waxaa iga go'an deganaansho dhaqaale iyo fursado - tababarka xoogga saaraya shaqada, daryeelka carruurta la awoodi karo, iyo maalgelinta Waxbarashada taasoo ka caawisa dhammaan carruurta inay gaaraan awooddooda si ay u sii wataan barashada xirfadda ama isku diyaarinta kuleejka.

Waxaan ku faraxsanahay inay i taageereen laanta sharci fulinta, shaqaalaha safka hore ku jira iyo hoggaamiyeeyasha magaaloooyinka yaryar iyo bulshooyinka miyiga degan. Sidoo kale waxaan ahay musharax ku jira tartankaan oo ilaalin doonaa daryeelka caafimaadka ee taranka kana ilaalin doonaa weerarrada bahalnimada ah. Aynu uga wada shaqeeyno sidii aynu u dhisi lahayn buundooyin - in aynu ku midowno qiyamka la wadaago si aynu u helno natijoooyinka aan u qalano!



Wakiilka Jagada Lr. 1

Heather Koellen

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

info@heatherforhouse.org
heatherforhouse.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubin ka tirsan Golaha Magaalada North Bend

Khibrad Xirfadeed Kale: Khibrad Xirfadeed/Shaqo: Kalkaalo Sooqashan, Neuroscience ICU, Xarunta Caafimaadka ee Harborview, 2003-hadda

Waxbarashada: Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Kalkaalisada, University of Washington (Bothell)

Adeegga Bulshada: Adeegga Bulshada: Xubin hore uga tirsanaa Wakiilada Qorshaynta North Bend, Xubin Guddiga ka tirsan, Guddiga Caafimaadka Degmada King, Xubin kale oo Guddiga ka tirsan, Dabka iyo Badbaadinta Eastside, Xubin, Ururka Mareykanka ee Kalkaaliyeasha Daryeelka Halista

Bayaanka: Kalkaalisada Qaybta Daryeelka Degdegga ah ee Isbitaalka Harborview ahaan, waxaan safka hore ugu jiraa wax ka qabashada qaar ka mid ah caqabadaheena ugu degdegga badan. Waaan go'aansaday inaan u tartamo Wakiilka Gobolka sababtooh ah ka jawaabayasheena ugu horeeyaa waxay hoggaamin uga baahan yihii Olympia. Waaan si degdeg ah ugu baahan nahay inaan wax ka qabanno ku tiirsanaanta maandooriyaha, gaar ahaan dhibaatada fentanyl iyo daaweynta caafimaadka dhimirkha. Waaan u baahan nahay bixiye caafimaad oo doorasho leh kaas oo taageera haweenka si ay u helaan daryeelka caafimaadka taranka.

Waxaan keenayaa caqli-galnimo, hab facil ah oo dhisa is-afgarad si natijjooyin loo helo. Waxaa i taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada Snohomish, Dimuqraadiyiinta Degmada Chelan, Dimuqraadiyiinta Degmada Douglas, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Xildhibaan Bill Ramos, Xubinta Golaha Degmada King ee Sarah Perry

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Brian Burnett

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 699-3700
brian@burnettforstaterep.com
Burnettforstaterepresentative.com



Khibradda Jago Loo Doortay: 3 - Muddo-xilleed xilka Booliiska Shariifowga Degmada Chelan iyo Madaxa Guddiga Xaafadda.

Khibrad Xirfadeed Kale: Xiriirkha Maamulka ee Ururka Booliiska Gobolka Washington ee hadda. Madaxweynaha, VP, Khasnajiga Ururka Booliiska ee Gobolka Washington. Madaxweyne, VP (Madaxweyne Ku-Xigeen), Xubinta Guddiga Washington ee Ururka Booliiska iyo Taliyeeyaasha Booliiska. Guddoomiyaha Tababarka Caddaaladda Dambiyada ee Gobolka Washington (waxaa magacaabay Guddoomiyaha Gobolka). Guddiga Toogashada Dadweynaha ee Gobolka Washington. Ogeysiiska Dambiilaah Galmada iyo Guddoomiyaha Guddiga Diwaan Gelinta. Guddoomiyu kuxigeenka Guddiga Badqabka. Guddoomiyaha Kooxda Daawooyinka ee Gobolka Chelan.

Waxbarashada: Tababarka Hoggaaminta West Point Model, FBINA National Academy, Command College, Dhaqan Gelinta Sharciga, Asluubta iyo Akadeemiyaha Sergeants.

Adeegga Bulshada: Agaasiimaha Xanaanada Carruurta ee Qoyska Boqortooyada (Carruurta la korsado), Adeegyada Caafimaadka Dhimirkha ee UVCare, Khadadka Qoyska, Ururka NCW Chaplain.

Bayaanka: Maadaama ay si qoto dheer iiga go'an tahay ballanqaadka iyo rikoorka la xaqiijiyay oo hoggaamineed oo hufan, Brian wuxuu diyaar u yahay inuu aragti cusub keeno sharciga dejinta. Ka dib qabashada shaqo guul leh oo uu ku helay abaalmariinta Dhaqan Gelinta Sharciga, Brian wuxuu ku faraksan yahay inuu ka faa'iidaysto xirfadhiisa nololeed si uu ugu adeego muwaadiniinta Degmada 12-aad. Brian wuxuu ka faa'iideysan doonaa waayo aragnimadiisa balaaran si uu si wada jir ah ula shaqeeyo laamaha sharci dejiyeasha kale si loo ilaa liyo oo kor loogu qaado layada nolosha dhammaan dadka deegaanka. Ku biir Brian sidii loo heli laaha mustaqbal ifaya ee jiilalka soo socda waxna aan ka qabano arrimaha dhabta ah ee taagan. Si wada jir ah ayaan u keeni karnaa isbeddel!



Wakiilka Jagada Lr. 2

Mike Steele

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 679-7085

Mike@votemikesteele.com

www.votemikesteele.com



Khibradda Jago Loo Doortay: 2016-illaa Hadda: Wakiilka Gobolka, Degmada 12aad, Ku xigeenka Hoggaamiyaha Dadka laga tirada badan hayah ee Golaha Wakiillada Gobolka; Laba muddo-xilleed ka shaqeyay Golaha Magaalada, Magaalada Chelan

Khibrad Xirfadeed Kale: Xafiiska Aqalka Cad ee Arrimaha Siyaasadda, Shaqaalaha Aqalka Gobolka Washington ee Hoggaanka Jamhuuriga, Agaasimaha Fulinta ee Rugta Ganacsiga Lake Chelan, CFO ee jiiinka 5aad ee Apple iyo Cherry Orchard.

Waxbarashada: Salutatorian, Dugsiga Sare ee Manson. Ka qalin-jebiyay Pacific Lutheran University oo shahaadooyin ka qaataay Maamulka Ganacsiga iyo Sayniska Siyaasadda.

Adeegga Bulshada: Madaxweynihii hore, Kooxda Rotary ee Chelan, Madaxweynihii hore ee Lake Chelan Health iyo Ururka Wellness, Ururka Trustee Community ee NCW, Guddoomiyihii hore ee Rugta Ganacsiga ee Gobolka Washington. Wakiil, Ururka Ganacsiga Washington

Bayaanka: Mike Steele wuxuu hadda ka shaqeynaya markii afaraad Aqalka Wakiillada ee Gobolka Washington. Mike wuxuu ku qaatay wakhtigisa sharci dejinta iyo waa xirfadle qaabilسان u doodista baahiyaha ganacsiyada yaryar. Qoto dheeridda qoyskiisa ay u leeyihiin warshadaha beeraha oo ay si toos ah ula shaqeyyaan boqolaal ganacsii oo kala duwan maalin kasta, waxay siyeen aragti ku saabsan sida arrimaha iyo siyaasadaha ay si toos ah u saameeyaan dhaqaalaha degmada 12-aad. Mike wuxuu si gaar ah ugu qalmaa inuu ku matalo Olympia. Mike wuxuu rajeynayaan markii shanaad in loo doorto Aqalka Gobolka si uu si firfircoo ugu adeego dadka Degmada 12-aad.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Daniel Scott

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(509) 668-2921

dansarahs@gmail.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Magaalada Cashmere

Khibrad Xirfadeed Kale: Hadda ka shaqeeya waaxda Gudbinta iyo Qaybinta injineernimada, Degmada Chelan PUD.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Cashmere; Wenatchee Valley College; Washington State University, Shahaado Jaamacadeedka Injineernimada Korontada

Adeegga Bulshada: Xubin ka ah Mutadawaca Mission Ridge Ski Patrol iyo Kooxda Ciyaaraha Leavenworth Ski Patrol. Si mutadawacnimo ah ayuu uga qayb qaataay hawlo badan oo bulshada dhexdeeda laga qabto sannadihii la soo dhaafay. Daniel Scott waa nin u dhashay Washington; ku dhashay Everett kuna koray Wenatchee Valley. Daniel waa hoggaamiye la xaqiijiy, sida ka muuqata adeegiisa Xildhibaanka Magaalada Cashmere. Waxa kale oo uu xiriir qoto dheer la leeyahay Washington oo dhan, iyadoo taageereyaa badan ay degan yihiin degmada.

Bayaanka: Sharci dejinta Gobolka Washington waxay lumisay hadafkeedii waxayna ka leexataay badqabka dadweynaha. Dib u eegis dib loogu noqonaayo taageeridda sharci fulinta iyo waaxaha dab-damiska, iyo sidoo kale taageerada diiradda saaraya ardayga iyo macallinka la cusboonaysiyyay ayaa loo baahan yahay. Isbeddel ku saabsan sida aan hadda wax uga qabanayno caafimaadka dhimirka iyo la'aanta ku tiirsanaanta daroogada ayaa si ba'an loogu baahan yahay.

Celcelis ahaan qofka shaqeyya wuxuu bixiyya canshuur cusub iyo mid aad u sareysa si uu u taageero barnamijyada dad badan oo aan isticmaali karin. Inta badan barnamijyadaan cusub iyo canshuuraha waxay ka yimaadeen Sharci dejinta Gobolka, ee ma'aha kuwo ku yimid muwaadiniinta hawkarka ah. Dadka reer Washington waxay u baahan yihiin u doode la socda qiyaamkooda.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Jamila E. Taylor

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 486-5493

info@electjamilataylor.com

www.electjamilataylor.com



Khibradda Jago Loo Doortay: *Wakiilka Gobolka, Degmada 30-aad:* Guddiga Xuquuqaha Madaniga iyo Garsoorka (Guddoomiyaha); Ururka U Doodista Kooxda Naafada Koriinka (Guddoomiyaha); Xubnaha Ururka Dadka Aan Caddaanka ahayn (Guddoomiyeh Ku Xigeenka Koowaad); u adeegga Guddiga Guriyeynta iyo Adeegyada Aadanaaha, Dhallinyarada iyo Guddiga Waxbarashada Hore.

Khibrad Xirfadeed Kale: *Qareen:* La-taliyihii hore ee u doodista gobolka oo dhan maamula qareennada gargaarka sharciga caawinaaya kuwa ka badbaaday rabshadaha qoyska iyo dhibaneyasha kale ee dambiyada la kulmay. *U doodaha Dhallinyarada:* Dadaalka yareynya rabshadaha dhallinyarada ee la maareeyay. *Mulkiilaha Ganacsi Yar:* Ku dhaqanka sharciga gaarka ah iyo la-taliyaha aan faa'iido doonka ahayn.

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, University of Oregon Law School; BA (Shahaadada Jaamacadda), Virginia State University

Adeegga Bulshada: Si mutadawacnimo ah uga shaqeeyay BlackPast.org, Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Federal Way, Ururka Highline College, iyo Girl Scouts; iyo daryeellaha xubnaha qoyska ee la nool xanuunnada joogtada ah.

Bayaanka: Waxaan mudnaanta siiyay dadaalladayda sharci dejinta si aan ula shaqeeyo bixiyeyaasha adeegga, dhibaneyasha dambiyada, sharci fulinta, qareennada, u doodeyaasha, iyo kuwa nugul si aan kor ugu qaadno amniga dadweynaha, caafimaadka, iyo kalsoonida bulshooyinkeena. Waxaan bixiyay maalgashti deegaan oo kor u qaaday hoos u dhigista qiimaha, wax ka qabanaya sababaha aasaasiga ah ee dambiyada, deriska nugul, iyo balaarinta helitaanka daryeelka caafimaadka dabeeecadha. Maadaama ay iga go'an tahay dhaqaale adag, waxaan la dhisay iskaashi ganacsi oo maxallii ah, ururo, iyo dugsiyo si aan u soo celiyo shaqooyinka, balaariyo tababarada, oo aan u bixiyo dariiqyo shaqo oo loogu talagalay dhallinyarada.

Waxaa i taageeray: Waalidnimada la qorsheeyay (Planned Parenthood), Golaha Shaqaalaha Gobolka WA, Ganacsiga Dhismaha Gobolka WA, Codbixiyeyaasha Ilaalinta, Dimuqraadiiyinta Degmada 30-aad, u doodeyaasha guryaha, xirfadleyaasha badqabka dadweynaha, macallimiinta, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, ka badan!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Melissa Hamilton

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(360) 791-2589

melissaforwa@gmail.com

melissaforwa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Musharax markii koowaad doorasho u taagan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Melissa waxay leedahay khibrad shaqo oo dadweyne waxayna ka shaqeysay waaxyada booliiska ee Lacey iyo Federal Way iyadoo ah sarkaalka Adeegga Bulshada iyo khabiirka diiwaanka labadaba. Sooyaalkaan taariikhed kala duwan ee adeegga dadweynaha ayaa si gaar ah u qalabeeya inay matasho oo ay fahmaan baahiyaha kala duwan ee bulshooyinkeena.

Waxbarashada: Jaamacadda Saint Martin, B.A. ee Caddaalaladda Dambiyada

Adeegga Bulshada: Xubin firfircoo oo ka tirsan Kooxda Kiwanis oo u adeega la-taliye ahaan Kooxda Furaha ee Dugsiga Sare ee Thomas Jefferson. Melissa waa xubin codbixeeneed oo ka tirsan Guddiga Adeegga Dadweynaha ee Federal Way iyo Guddiga Degmada Maareynta Steel Lake. Intaa waxaa sii dheer, waxay si mutadawacnimo ah uga shaqeysaa Waaxda Beeraha ee Federal Way.

Bayaanka: Melissa waxay mudnaan siisaa abuurista iyo ilaalinta fursadaha gobolkeena. Dambiga wuxuu wiqaa kobaca bulshada, waxaana la joogaa wakhtigii mudnaanta la siin lahaa dhibaneyasha iyo la-xisaabtanka dambiliyeasha. Sida qof ka badbaaday xadgudubka carruurta la kulmaan, Melissa waxay fahamsan tahay in caddaaladdu ay bogsiiso dhaawacyada. Waxay u doodaa dhibaneyasha dambiyada iyo soo celinta amniga dadweynaha. Inkastoo kharash badan la bixiyay, guri la'aanta iyo si xun u isticmaalka daroogada ayaa sii kordhaysa. Melissa waxaa ka go'an inay la xisaabtanto dowladda iyadoo meesha ka saaraysa kharashaadka khasaaraaha keena iyo dhimmista culayska canshuurtta. Lacag badan oo jeebkaaga ku jirta waxay la micno tahay fursado waaweyn. Waxay hiigsanaysaa inay dib u saarto diiradda waxbarashada dadweynaha ee aasaasiga ah—waxbaridda ardayda si ay guul u gaaraan mustaqbalka. Melissa waa u doodaha baahiyaha Gobolka Washington ee Olympia.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Kristine M. Reeves

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(360) 359-1910
 electkristinereeves@gmail.com
 www.kristinereeves.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolkaaga, 2017-2019 & 2022-hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Hadda ah mulkiilaha ganacsi yar oo ku yaala Federal Way, oo ku taqasusay la-talinta horumarinta ururka. Markii hore waxay u shaqeysay sidii maamulaha horumarinta dhaqaalaha ee gobolka Washington ee qoysaska militariga iyo halyeeyada Waaxda Ganacsiga ee Gobolka Washington. Sidoo kale waxay ka soo shaqeysay Senatarka Mareykanka Patty Murray Iskuduwaha Deegaanka ee Halyeeyga Gobolka iyo Koonfurta Sound, Kitsap, iyo Agaasimaha Gobolka Peninsula Olympic.

Waxbarashada: Ka qalin jebisay, Dugsiga Sare ee Moses Lake; Shahaadada Jaamacadda, Washington State University (Pullman); Shahaadada Mastarka, Gonzaga University (Spokane).

Adeegga Bulshada: Xubin, Zeta Phi Beta Sorority; Mutadawaca PTA, Dugsiga Hoose ee Brigadoon; Tabaruc, Federal Way National Little League; Mutadawac, Rugta Ganacsiga; Mutadawac, Masraxa Qoob ka Ciyaarka Carruurga.

Bayaanka: Albaab furan, maskax furan, iyo u heellanaanta natijjada. Taasi waa yoolka adeeggaya dadweynaha, waana ku faraxsanahay inaan sii wado shaqadaas. Waxaan gacan ka gaystay in la meel mariyo siyaasadaha horumarka leh sida fasaxa qoyska ee mushaharka lagu helo, daryeelka ilmaha la awoodi karo, tababar shaqo iyo tababar shaqo oo ay helaan kumanaan aan tagin kulliyadda, dhammaan aniga oo u dagaalamaya hoos u dhigista canshuuraha. Waxaan diiradda saarayaan inaan matalo bulshadeena waxaana iga go'an inaan xallijo dhibaatooyinka dadka haysta. Waxaan haystaa rikoor raad-raac ah oo u dagaalamaa carruurteena, dhaqaalaha sida ugu fiican ugu shaqeeya qoysaska shaqeeya, iyo mustaqbalkeena guud.

Waxaa i taageeray: Golaha Shaqaalaha Gobolka, Kalkaaliyeaal, Macallimiin, Booliska, Ganacsiga Dhismeyaasha, iyo Deegaanka u doodeyaasha

Quentin Morris

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 852-9852
 Qjmorris2@gmail.com
 QMorris4WA.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Agaasimaha Guddiga Dugsiga, Dugsiyada Dowladda ee Federal Way: 2021 ilaa hadda (xilkha ayaa dhammaanayo Diseembar 2025)

Khibrad Xirfadeed Kale: Maareeyaha Fulinta Shirkadda Boeing: 41 sanno oo adeeg aan marna kala go'in ah iyo dalacaadha xirfadaha injineernimada, dhaqaalaha, maaliyadda, suuqgeynta badeecada/adeegga, iyo iibabka maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Injineernimada Makaanikada, Seattle University 1984 (Seattle); Shahaadada Mastarka ee Suuqgeynta iyo libabakka, The George Washington University 1990 (Washington DC)

Adeegga Bulshada: Macallinka Mutadawaca Manhajka k-12 ee Nidaamka Maktabadda Degmada King; La taliyaha Hoose ee Ardayda Waaxda Ganacsiga

Bayaanka: Anigoo muddo 50 sanno ah deganaa LD (Degmada Sharci Dejinta) 30-aad, waxaan khibrad u leeyahay isbeddelada dhawwaan ka dhacay deegannadeena maxalliga ah: qimaha sii koraaya, guryaha aan qimahooda la goyn karin, canshuuraha sii kordhaaya, ganacsiyada burburay, iyo xaafado aan ammaan ahayn. Guddiga dugsiga, waxaan u jeedaa faro gelin heer gobol oo sii kordhaysa taasoo keentay waxbarasho dabaqyo leh iyo kala qaybin bulsho oo arday badan ku reebtay inaysan si fiican ugu diyaar garoobin jaamacadda iyo shaqada.

Qoyskayga iyo khibradda aan soo maray ee ganacsiga caalamka ayaa i siisay jaceylka waxbarashada, safarka, dhaqanka iyo mabaadii'da anshaxa shakhsiga ah iyo ilaaliinta. Waxaan u taaganahay u dagaalanka caddaaladda, badqabka, ammaanka iyo qoyska. Waxaan kaa codsanayaa taageeradiina si aan u noqdo Wakiilka xiga ee LD 30-aad.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Drew Stokesbary

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 550-5501

drew@drewstokesbary.com

drewstokesbary.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (Hoggaamiyaha Dadka laga tirada badan yahay ee Aqalka Wakiilada ee hadda, Guddoomiyihii hore ee Guddiga Doorashada ee Siyaasadda Hawlgabka, Xubinta Darajooinka ee Guddiga Qoondeynta Aqalka, iyo Hoggaamiyaha bulshada laga tirada badan yahay ee Aqalka)

Khibrad Xirfadeed Kale: Iskaashatada Chalmers, Adams, Backer & Kaufman (la-talinta ganacsiyada bilowga ah iyo ganacsiyada yaryar ee ku saabsan arrimaha sharciga shirkadaha iyo amniga)

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga (cum laude), University of Notre Dame Law School; Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga Dhqaalaah, Duke University

Adeegga Bulshada: Xubin ka tirsan Golaha Maamulka ee Auburn Valley YMCA; wax ka aasaasaha Sanduuqa Difaaca Waxqabodka Muwaadinka (oo siinaya la-talin sharci oo bilaash ah kaniisadaha deegaanka, ururada aan faa'iido doonka ahayn iyo kuwa kale ee taageeraya xuquuqda dastuurka); diyaariyaha canshuur oo mutadawac ah

Bayaanka: Maadaama aan waligey reer Washington ahaa, waxaan ogahay awoodda cajibka ah ee uu gobolkeenu leeyahay. Nasiib darro, sharcayo badan oo ka soo baxay Olympia ayaa Washington u qaaday jicho qaldan, oo keenay inaan bixino kharashaadka gaaska iyo guryaha ee ugu badan iyo heerarka dambiyada ugu xun ee dalka.

Waxaa la joogaa wakhti isbeddel la samayn lahaa. Wuxaan u taaganahay dib u doorasho si aan ugu dagaalamo waxyabaha muhiimka ah — xaafado ammaan ah oo sharciga laga fuliyo, dambileyaashana lagu qabto, dugsiyo wanaagsan oo ardayda oo dhan u diyaariya jaamacadda ama xirfad shaqo, iyo dhaqaale xooggan oo leh shaqooyin mushahar fiican lagu helayo iyo kharashaadka gaaska, raashinka, guryaha iyo daryeekha ilmaha oo la awoodi karo. Si wadajir ah, ayaan u xallin karnaa dhibaatooyinka Washington.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Sara Sutterfield

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(435) 669-5759

sarasutterfield.lid31@gmail.com

sarasutterfield.com



Khibradda Jago Loo Doortay: U doodaha Bulshada

Khibrad Xirfadeed Kale: Xasuuso Wilkeson (Mulkiile), hooyo, daryeelle, farshaxaniiste, warie, maamulaha waaxda ranjiga, tafaariiqda, adeegga macaamiisha. Dhegayste Firfircoo.

Waxbarashada: Naqshadaynta Sawirka, Green River College; Nolosha

Adeegga Bulshada: La taliyaha Guddiga iyo xubinta Bulshada Taariikhiga ah ee Foothills ee Buckley, WA. Mutadawac la shaqeeya Guddiga Sanduuqyada White River Hometown. Agaasimaha Farshaxanka iyo Shaqada ee Midweek Manna Kids Club ee Kaniisadda Bulshada Carbonado. Ka qalin jebiyay Machadka Muwaadiniinta ee Waaxda Booliska ee Buckley. Ka shaqeeya Saaxiibada Carbon Canyon, PTA ga Dugsiga Hoose ee Wilkeson, Beautify Buckley, Foothills Isbahaysiga Rails-to-Trails, iyo Tenino Stone Carvers Guild. Taageeraha Qorshaha Tallaabada Carbon River Corridor Cooperative. Waa la idin jecel yahay.

Bayaanka: "Casaankaygu waa Buluuug" waxaan ula jeedaa isbeddelkayga iyo muhiimad saaridda mabaadii'da midnimada iyo horumarka. Wuxaan u doodaa helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka, waxbarashada loo dhan yahay, ilaalinta bi'iada loo siman yahay, iyo kaabayaasha adag ee magaalada yar. Fikradaha iyo mabaadii'da wanaagsan ayaa beddela midabyada xisbiga. Si wadajir ah, waxaan isla dhisi karnaa mustaqbalka wanaagsan ee bulshadeena iyo dhulkeena. Anoo ah xubinta firfircoo ee bulshada, hooyada afar ilmood, iyo Taageeraha Qorshaha Tallaabada Carbon River Corridor Cooperative, waxaan aaminsanahay awoodda dadaal wadareedka iyo xalalka hal abuurka leh. Aan iskaashano si aan u abuurno Degmada Sharci Dejinta 31-aad oo ah mid loo dhan yahay, loo siman yahay, oo xasillooni leh. Mahadsanidiin.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Joshua Penner

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 224-4226

Josh@votepenner.com
votepenner.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Duqa Magaalada, Magaalada Orting (2018-Hadda); Xubinta Golaha Magaalada, Magaalada Orting (2012-2017); Guddoomiyaha Dib u eegista Axdiya Degmada Pierce (2016); Guddiga La-talinta ee Halyeeyadii Hore ee Degmada Pierce; Wakiilka Guddiga AWC Kalsoonida Faa'iidooyinka Shaqaalaha iyo Barnaamijka Daryeelka Caafimaadka; Guddiga La-talinta NLC AI; Guddoomiye, Golaha Deegaanka ee Gobolka Pierce (2021-2022); Xubinta Guddiga, Ururka Magaaloooyinka Washington (2022-Hadda).

Khibrad Xirfaddeed Kale: Madax Guud, Inquisio; Ciidamada Badda ee Mareykanka

Waxbarashada: Harvard University, Shahaado Jaamacadeedka Mastarka ee (ALM); St. Martin's University, Shahaadada Jaamacadda (BA - Ganacsiga); Ka qalin jebiyay Sumner High School

Adeegga Bulshada: Josh wuxuu wax ka aasaasay PNW Vets, shabakadda ugu balaaran ee taageerta halyeeyadii hore PNW. Xarunta Wax ka qabashada Dhibaataada WA-CJTC (2013-2022). Naqshadeeyaha manhajka Xadgudubka Galmaadha Militariga iyo tababaraha ee Degmada King (2014-2015).

Bayaanka: Josh Penner wuxuu ku koray Bonney Lake, wuxuuna ka qalin jebiyay Dugsiga Sare ee Sumner, wuxuu guursaday gacalisiisii dugsiga sare, waxaanu si mutadawacnimo ah ugu biiray Ciidanka Badda, isagoo ka shaqeeynayay Ciraaq. Duqa Magaalada Orting ahaan, Josh wuxuu miisaamay miisaaniyadda, wuxuu kor u qaaday badqabka dadweynaha, waxaana uu hoggaaminayay bulsho si degdeg ah u koraysa iyadoo la ilalinayo qiyamka aasaasiga ah: shaqo adag, Miisaaniyadaynta adag, ka qayb qaadashada bulshada, iyo u doodista xooggan.


Josh waxaa ka go'an inuu dhowro xorriyaddeena, xaqiijinta dugsiyo wanaagsan, iyo abuurista shaqooyin. Waa hoggaamiye wax ku ool ah oo lehna diiwaanka shaqo oo habboon marka la eego labada dhinac si loo dhiso bulshooyin nabadoon oo xoog badan. Josh wuxuu samayn doonaa isla ballanqaadkan iyo dadaalka uu kugu matali doono.

Brian L. Gunn

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(509) 818-0824

brian@peopleforbriangunn.com
www.peopleforbriangunn.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda

Khibrad Xirfaddeed Kale: Hubinta tayada softiweerka ee Boeing, PEMCO, Isbitaalka Carruurta Seattle

Waxbarashada: BA, Shahaadada Jaamacadda Ingiriiska, USF; Hoggaanka Xaqqiida Cimilada

Adeegga Bulshada: Waaan aaminsanahay inaan dhammaanteen wax wanaagsan samayno marka aan dhammaanteen arrin wanaagsan qabanno. Taasi waa sababta aan ugu tabarucay barnaamijyada xisaabta iyo sayniiska ee dugsiyadeena, ku beerista geedaha goobaha dadweynaha, iyo dayactirka guryaha dadka u baahan caawinaadda. Waaan si joogto ah ugala hadlaa saraakiisha la soo doortay go'aamada siyaasadda deegaanka ee saameeya nolol maalmeedkeena. Wakiilkaaga Gobolka ka ahaan, waxaan noqon doonaa shaqaale dowladeed oo dhegaysta oo aad uga shaqeeya sidii ay bulshadeenu u heli lahayd waxay u baahan tahay. Waaan rajeynayaa in aan codkiina helo.

Bayaanka: Waaan helay taageerada keliya ee Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington. Waaan taageerayaa xorriyadda dadka shaqeeya si ay ugu biiraan urur shaqaale si ay u baahan mushahar caddaalad ah. Waaan diiradda saarayaa arrimaha aasaasiga ah sida dayactirka loo baahan yahay ee Jidatka 164 iyo 410, buundo cusub oo u dhaxaysa Enumclaw iyo Buckley, kor u qaadista tayada biyaha ee beeraheena yaryar ee deegaanka iyo meelaha saamanka ku nool yahay, iyo dugsiyo wanaagsan -- anoo wax ka qabanaya xeerka canshuuraha ee gobolkeena iyo hubinta in shirkadaha hodanka ah iyo shakhsiyadka ay bixiyaan waxa dhabta ah ee lagu leeyahay. Si ka duwan dadka iga soo horjeeda, waxaan taageersanahay xorriyadda aan ku go'aansanayno goorta iyo inaan carruur dhalno.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Cindy Ryu

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 605-1588

friendsforcindryru@yahoo.com
cindryru.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka 2011-hadda. Guddoomiyaha Guddiga Hal abuurka, Bulshada iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Halyeyada. Xubin: Qoondeynta iyo Ilaalinta Macaamiisha iyo Guddiyada Ganacsiga. Duqa Shoreline, Xubin Golaha 2006-2009.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wakiil Canshuur. Mulkiilaha ganacsi yar. Maamula Hanti ganacsi Falangeeyaha Maareynta Diiwaanka iyo Nidaamyada, Magaalada Seattle. Sarkaal qaabilسان diiwaanka Medicaid, Isbitaalka Jaamacadda. Sarkalka Oggolaanshaha, Xarunta Caafimaadka ee Harborview. Qoraaga qoraal.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee iyo Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga Noolaha ee UW-Seattle

Adeegga Bulshada: Golaha: Xirfadaha iyo Education Farsamada ee Dugsiyada Shoreline; Xarunta Horumarinta Ganacsiga iyo La-talinta UW; Horumarinta Dhaqaalaha Lynnwood; Ururka Bulshada ee Richmond Beach; Shoreline Chamber; Dollars for Scholars; Ururka Haweenka Kujira Dowladda; Gobolka Dhaqaalaha Waqooyi Galbeed ee Baasifigga. Macallinka Dugsiga Presbyterian Church USA Sunday, barnaamijka Quudinta Xagaaga.

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ah inaan kuu adeego oo aan noqdo wakiilkaaga, u ololeynaya kharashaadka si loo dhimo dambiyada, loo balaariyo marin ka balaaran, taageero horumarinta dhaqaalaha, iyo maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo u diyaargarowga degdegga ah. Muhiimaddaya ayaa ah ilaalinta maalgelinta waxbarashada, xaqiijinta amniga dadweynaha, ilaalinta deegaanka, iyo kordhinta guryaha qiimaha jaban. Waxaan sii wadi doonaa u doodista ganacsiyada deegaanka iyo shaqooyinka, ka dhigista Washington meel ka wanaagsan sida ay tahay hadda oo lagu noolaado, laga shaqeeyo, oo lagu koriyo qoysaskeena. Waxaan idii kaga mahad celinaya codkiina.

Waxaa taageeray: Duqa Magaalada Lynnwood, Mountlake Terrace, Shoreline, Seattle; Tallaabada Ilaalinta Washington; Dimuqraadiyinta Snohomish; Ururka Siyaasadda Haweenka; Doorashada Pro WA; Ururka Education Washington, Golaha Shaqada iyo Dhismaha iyo Golaha Ganacsiga; iyo qaar kale oo badan

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Lisa Rezac

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(800) 348-2097

info@electlisarezac.com
www.electlisarezac.com



Khibradda Jago Loo Doortay: LD32 Guddoomiyaha Xisbiga Jamhuuriga, 2023 - hadda; Kabtanka Xaafadda 2024 - hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaan soo fududeeyay 150 munaasabadaaha kooxaha deeqda ah oo loo qabtay hey'adaha kheyriga ah laguna baxshay kumanaan baaskil oo la siiyay Naadiga Wiilasha iyo Hablaha, xirmooyinka daryeelka loo diro ragga iyo dumarka militariga ah, iyo kiishadaha STEM oo la siiyay dugsiyada 100% ka hooseeya heerka fakhriga. libka qaaraan-uruurinta ah oo lagu ururiyay in ka badan \$1,000,000; macaamiisha waxaa kamid ahaa Crime Stoppers, United Indians of All Tribes, Survive the Streets, Mary's Place, PTA-ga Dugsiga.

Waxbarashada: Jaamacadda Washington, Shahaado Jaamacadeedka, Cilmiga Siyaasadda; Columbia Business School, Barnaamijka Hoggaamiyaha Tababaraha ah; Waxbarashada Aasaasiga ah, Tababarka Hoggaaminta

Adeegga Bulshada: Dacwada Midowga Gospel, PAWS, Food Bank ku yaala St. Mary's, Xarunta Qadada Bulshada bilaa Hooya ah.

Bayaanka: Tubta aan hayno ma'aha mid sugar, ayadoo aan fursad fiican siinayn qoysaska dadaalka badan, shakhsiyadka iyo dhallinta. Anigoo 25 sanno u codeynaayay Dimuqraadiga, xeerarka xisbiga Dimuqraadiga ayaan hadda waxba noo tarayn.

Mashruucyada Let's Go ee ay taageeraan Xisbiga Jamhuuriga ayaa ah codka waxa dadku doonayaan. Muhiimadahayga waxaa ku jira ku celinta dugsiyadeena guusha waxbarashada anagoo difaacayna xuquuqda waalidinta; abuurista xeerarka taageeraaya ganacsiyada yaryar; ku celinta lacagta gacmaha ragga, dumarka iyo qoysaska sida adag ku soo shaqeeyay; iyo xaqiijinta in waa lagu daraayo biyaheena, cuntadeena, ama lagu buufinaayo hawadadaada ay ammaan u yihiin qof kasta.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Lauren Davis

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 745-2010

lauren@electlaurendavis.com

www.electlaurendavis.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (2019 - hadda); Guddiyada: Qoondeyni, Daryeelka Caafimaadka, Badbaadada Bulshada, Xeerarka; Guddoomiye-ku-xigeenka, guddi-hoosaadka caafimaadka dhimirkha ee carruurta

Khibrad Xirfadeed Kale: Agasimaha Fulinta ee Aasaasay Isbahaysiga Soo-kabashada Washington ahaan, waxaan qaabeeyay sharciga guud ee ku saabsan daaweynta balwadda. Wuxaan sidoo kale sharciga caafimaadka maskaxda ee barnaamijka Mastarka baray Dugsiga UW ee Shaqada Bulshada. Markii hore, waxaan ka shaqeeyay horumarinta caalamiga ah ee Gates Foundation, anigoo ah aqooniyahan Fulbright ka ah Galbeedka Afrika, waxaan ganacsyi yar ka bilaabay Gaana si aan u taageero waxbarashada gabdhaha. Wuxaan shaqadayda ku bilaawey macallinka dugsiga barbaarin.

Waxbarashada: Brown University (Shahaadada Jaamacadadda, Waxbarashada Qowmiyadaha)

Adeegga Bulshada: Guddiga La-talinta Xarunta Cilmii-baarista Daryeelka Is-dilka ee UW

Bayaanka: Sharaf weyn ayay ii tahay inaan adiga ku matalo! Shaqadaya sharci-dejineed waxay diiradda saarta arrimaha caafimaadka habdhaqanka, guriyeynta, iyo badbaadada dadweynaha. Wuxaan dejiyay sharci taariikhii ah si loola dagaalamo fentanyl iyo balaarinta adeegyada ka soo kabashada ee gobolka oo dhan. Wuxaan xaqijiyyat maalgelinta xabsiga keliya ee degmadeena ku yaal si aan u bilaabo barnaamijka dib ugu soo noqoshada oo aan hormuud uga noqdo abuurista xarunta qalalaasaha caafimaadka habdhaqanka ee Lynnwood. Wuxaan sidoo kale malaayiin doolar u ururiyay adeegyada kuwa ka badbaaday rabshadaha qoyska. Wuxaan rajeynayaan inaan kasbado codkaaga!

Taageerada: Duqa Magaaloooyinka Seattle, Shoreline, Lynnwood, iyo Mountlake Terrace, Bob Ferguson, kalkaaliyeeyaa, macallimiin, iyo shaqaalaha raashinka, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka

Lori Theis

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

lori@vote4lori.com

vote4lori.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha, Jamhuuriyinta Degmada 32aad; Guddiga Fulinta ee Xaafadda 7-aad, Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King.

Khibrad Xirfadeed Kale: Aasaasaha iyo madaxweynaha ganacsyi yar oo guuleystay oo ku yaala Seattle kaasoo shaqeeynaayay ilaa 2011; la taliyaha siyaasadda; qorsheeyaha munaasabadda; la taliyaha manhajka dugsiga guriga; taariikh yahanka dadweynaha; ardayga madaxa banaan.

Waxbarashada: Waxbarashada Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Luqadda Ingiriiska iyo Fanka/Taariikhda Farshaxanka, University of Washington.

Adeegga Bulshada: Door kasoo qaataay tiro badan oo ururada bulshada ah, oo u dhexeeya barnaamijyada dhallinta bilaa hooyga ah, barnaamijyada hawl gabka ciidanka, iyo hooyga xayawaannada - ilaa shaqooyinka waxbarashada, wadaniyadda, iyo adeegga taariikhiga ah ee ilaalintha bii'ada.

Bayaanka: Codbixiyeyaashu waxay ku daaleen in ay iska indho tiraan wakiillada gobolka oo aan gebi ahaanba lala xiriiri karin, kuwaasoo si joogto ah u ansixiya sharci uga sii daraaya xaaladaha jira. Dimuqraadiyiinta ayaa gacmaha ka xiray booliiska, dambiyada ayaana labo kacleeyay. Washington hadda waa gobolka 8aad ee ugu khatarta badan, waana hormuudka masiibida fentanyl. Dadka xilka noo haya ayaa u codeeyay kordhinta qiimaha gaaska siina kordhiyay canshuuraha ayadoo sicir bararku heerkii u xumaa gaaray.

Wuxaan doonayaa inaan noqdo wakiilkiina idin ku matalaaya Olympia oo, ayadoo ay la socdaan waxyaabo kale, aan taageeri doono liixa mashruuc ee muhiimka ah ee lasoo gudbiyay sannadkaan oo ah soo celinta awoodda booliiska, xaqijintaa ogeysiiska waalidka, iyo dhimmista canshuuraha. Waan ka mahad celin lahaa codkaaga!



Wakiilka Jagada Lr. 1

Tina L. Orwall

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 409-3038

tina.orwall@gmail.com

www.electtinaorwall.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, (2009-hadda); Afhayeenkha Pro-Tempore; Guddoomiyaha Labaad Golaha Qaranka ee Sharci dejinta Qaranka Halyeeyada iyo Arrimaha Militariga; Xubinta, Daryeelka Caafimaadka iyo Badqabka, Miisaaniyadda Raasumaalka, Waxyaalahi iyo Ciyaaraha la Xakameeyo, iyo Guddiyada Xeerarka

Khibrad Xirfadeed Kale: Xiriir La Leh Jaamacadda UW, La-taliye/qoraa leh 20 sanno oo waayo aragnimo ah lana xiriira la shaqeeynta wakaaladaha dowladda iyo ururada. Shaqadaydu waxay diiradda saartaa horumarinta dhaqamada hal abuurka leh ee sida wanaagsan loogu adeego bulshada, oo ay ku jiraan guriyeynta shaqaalaha iyo guriyeynta marka hore la siyo dadka aadka u baahan.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka, Maamulka Shaqada Bulshada, University of Washington; Shahaadada Cilmi Nafsiga, University of Washington

Adeegga Bulshada: Rugta Ganacsiga ee Kent, Xubin ka tirsan Guddiga Hawlgabka Judson, United Way, Hawlwadeenka Ka hortagga Is-dilka ee Halyeeyada, PTSA

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ah inaan kugu matalo Olympia, anigoo u taagan bulshadeena oo aan meel marinayo sharciga lagu ilaalinyo xuquqdeena iyo badqabkeena. Waan ku hanweynahay shaqadadya ku saabsan tijaabada xirmada kufsiya, anigoo la kaashanaya badbaadeyaasha iyo sharci fulinta, si aan u xaqiijiyo caddaaladda oo aan ula xisaabtamo dambiliyaasha taxanaha ah. Waxaan door muhiim ah ka qaataay in gobolkeenu hirgeliyo 988, is dilka cusub iyo habka nolosha dhibaatada si loo caawiyo dadka loona badbaadiyo nolosha.

Taageeradiina markaan helo, waxaan sii wadi doonaa ka shaqeeynta guriyeynta la awoodi karo, daryeel caafimaad oo dhammaystiran, dhimista dhibaatooyinka garoonka diyaaradaha, helidda xanaanada carruurta ee qoysaska shaqeeyya, luqad ku helidda dugsiyada, yareynta rabshadaha qoryaha, iyo ficiila cimilada. Si wadajir ah aan u dhisno badqab, caafimaad qabka, bulshooyin isku dhafka ah.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

George Richter

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 470-9851

gwrichter@gmail.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax Macluumaad ah Lama Soo Gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Waxaan Maamule Guud ka ahaa Kooxda Caymiska Revere iyo Kooxda Caymiska ee Provident. Hadda waxaan ahay Khabirka Gunnada Shaqaalaha oo leh shirkado caymis oo badan oo ku yaala West Coast. Waxaan laaha ganacsi ii gaar ah waxaana maamule ka ahaa ganacsigaya caymiska 24-tii sanno ee lasoo dhaafay.

Waxbarashada: MA oo ah Maamula libka, Webster University; Maamulka Ganacsiga BA, Webster University

Adeegga Bulshada: Waxaan ahaa xubin sare oo ka tirsan hey'ad samafal oo weyn oo carruurta qaabilسان، waxaana gacan ka geystay sidii loo heli laaha maalgelinta iyo kormeerka dhismaha xarunta deegaanka carruurta. Waxaan aad u xiiseeyaa waxbarashada, horumarka iyo daryeelka dhallinyaradeena.

Bayaanka: Waxaan u tartamayaan booskaan si aan nidaamka caqli galka ah ugu soo celiyo dowlad goboleedkeena oo aan u taageero sharci soo celinta badqabka, amniga iyo wanaagga maaliyadeed ee bulshadeena. Muddo sannado ah, sharciyo aaya la sameeyay iyadoo aan loo eegin cawaqaqib xumada ka dhalanaysa ayadoon qorshe loo dejin qoysaskeena, iyo ganacsiyada taageera. Dowladeena waxa loo qaabeeyey inay ku shaqeeyo hubinta iyo dheelitirnaanta. Arrintaan waa ay ka maqan tahay Olympia waxayna keentay sharciyo aan ka tarjumay baahida bulshadeena qabaan. Aniga oo asal ahaan leh waayo aragnimada ganacsi iyo ururada samafalka, waxaan ka shaqeeyn karaa soo celinta dheelitirka aadka loogu baahan yahay inuu helo dowlad goboleedkeena.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Mia Su-Ling Gregerson

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 795-1950
PeopleForMia@gmail.com
MiaGregerson.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Xubin Hore Golaha Magaalada SeaTac; Wakiilka hadda ee Gobolka Ku Mataal Xaafadda 33-aad

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiye ku-xigeenka, Guddiga Qoondeynta Maaliyadda Gobolka; in ka badan 20 sanno oo khibrad ah oo uu ahaa bixiyaha daryeelka heerka dhexe iyo maamulaha ganacsiga caafimaadka ilkaha.

Waxbarashada: A.A., Ganacsiga, Highline College; B.A. Shahaadada Jaamacadda, Taariikhda, University of Washington

Adeegga Bulshada: Waxaan geliyey wakhti badan booqashada deegaannada doorashada, kooxaha bulshada iyo iskaashatada ganacsiga si aan u dhegaysto aana xog uga helo arrimaha maxalliga ah iyo kuwa gobolka.

Bayaanka: Qof kasta oo ku nool Koonfurta Degmada King wuxuu xaq u leeyahay in walaacyadiisa la dhegaysto. Yoolkaygu waa in aan ururiyo fikirka aana kor u qaado nolosha dadka degan halkaan. Haddii ay tahay guryaha qiimaha jaban, hagaajinta waddooyinka, kor u qaadista dugsiyadeena, xallinta isbeddelka cimilada ama xaqijinta in gobolkeenu mar kasta taageero dookha qofka, waxaa noo dhimman shaqo aad u badan. Maadaama aan ahaa Guddoomiyaha Guddiga Qoondeynta Maaliyadda, waan aqaanaa waxa ay tahay lacagtiinu. Waaan ka shaqeeyaa xaqijinta in halkii doolar kasta lagu maal geliyo qaab hufnaan iyo isla xisaabtan ku dhisan. Waaan ku faraxsanahay inaan dhegaysto ka dibna aan hoggaamiyo Olympia. Waxaa i taageeray: Guddiga Shaqaalaha Gobolka Washington, Pro-Choice WA, WCV, Sanduuqa Shaqada ee Isbahaysiga Guriyeeynta Washington.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Casey Esmond

(Sheegaaya Ma Jirto Dookh Xisbi)

(206) 387-2567
CaseyEsmondDist33@gmail.com
www.ElectCaseyEsmond.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: In ka badan 15 sanno oo khibradda hoggaaminta ah oo aan ka helay shirkadaha maraakiibta ee LTL (less than truckload), qaybinta badeecooinka bakhaarada, iyo wax soo saarka iyo tijaabada nidaamyada hawada.

Waxbarashada: A.A., Highline College; Shahaado Jaamacadeedka, Ganacsiga iyo Gaadiidka Caalamka, Highline College.

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Bayaanka: Codka aad i siisaan waa cod aad siiseen caqliga saliimka ah iyo mas'uulyad gaar ah. Waaan aaminsanahay yareynta faro gelinta dowladda, yareynta canshuuraha, iyo isku filnaansho. Aan ka dhigno deegaankeena meel shaqada adag la abaal mariyo, la yareeyo isku dul-noolaanshaha, uusana jirin qofna, ayna ku jiraan kuwa dakhligoodu kooban yahay, aan lagu canshuurin gurigisa. U codee Casey Esmond si aad u heshaan mustaqbal wanaagsan, oo fudud.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Emily Alvarado

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 745-2010
emily@emilyalvarado.com
emilyalvarado.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, 2023-hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Hoggaamiye aan faa'iido doon ahayn oo dhisaya guryo qimma ahaan la awoodi karo oo tayo leh iyo daryeelka carruurta; Agaasimihii hore ee Guriyeynta Seattle oo \$290 milyan ku maalgeliyay si looga hortago barakaca, taageerad u adkeysiga cimilada, u dhisidda guryo taageero ah deriska guri la'aanta ah, ilaalinta kiraysteyaasha, iyo balaarinta lahaanshaha guriga; Abaabulaha Waalidnimada la qorsheeyay ee abaalmarin ku guuleystay; Qareen

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Scripps College (summa cum laude); JD (Shahaadada Sharci), University of Washington School of Law (Aqoon Yahanka Sharci Adeegga Dadweynaha ee Gates)

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga, Isbahaysiga Guriyeynta Dakhliga Hoose ee Washington; Xubin hore, Guddiga Haweenka Seattle; Qareen Mutadawac ah, Ururka Baareyaasha Latino ee Rugta Sharci ee Bulshada Washington; Waalidka PTA ee laba arday oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha Seattle

Bayaanka: Hoggaamiyaha guriyeynta, qareen, iyo ka hooyo ahaan, waxaan u heellannahay abuurista bulsho dhan oo caafimaad qabta, nabadna ah. Ka Wakiilkaa ahaan, waxaan u hiiliyay xasilloonida dhaqaalah, daryeelka carruurta iyo helitaanka daryeelka caafimaadka, iyo maalgashiga muhiimka ah ee bulshooyinkeena. Taageeradaada joogtada ah darteed, waxaan diiradda saari doonaa facil geesinimo leh si aan uga dhigo guryaha kuwo qiima ahaan la awoodi karo, xoojinta dugsiyada K-12, horumarinta fursadaha dhaqaalah iyo caddaaladda, yaraynta rabshadaha qoryaha, iyo bixinta jiilkha soo socda.

Taageero balaaran: Xubin ka tirsan Golaha Degmada Teresa Mosqueda, Duqa Magaalada Bruce Harrell, Dimuqraadiyiinta 34-aad, Codadka Waalidnimada la Qorsheeyay, Ficil Ilaalinta, Golaha Shaqaalaha Gobolka, Sanduuqa Waxqabadka Isbahaysiga Guriyeynta, Codeynnta Hal Ameerika, Kalkaliyeyasha, Macallimiinta, Dhismaha Ganacsiga, iyo in ka badan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Kimberly M. Cloud

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(253) 304-6990
thekimberlycloudshow@yahoo.com
www.facebook.com/
thekimberlycloudshow39



Khibradda Jago Loo Doortay: Waan idin salaamay, magacaygu waa Kimberly M. Cloud. Wuxaan leeyahay Kimberly Cloud Show Ilc. Wuxaan u adeegsadaa aaladaan inaan isku dayo aana ugu gudbiyo erayo awood badan dhegasteyaashayda. Wuxaan doonayaa inaan idin caawiyo sidoo kale.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wariye, Baahiyaha Raadiyaha kknw 1150am, Wuxaan leeyahay Kimberly Cloud Show Ilc wuxaana ahay CEO ga iyo Soo saaraha bandhiga. Kasoo shaqeysay Ciidanka Mareykanka. Wuxaan la taliye ka ahaa Maryland Rugta caafimaadka ee Methadone.

Waxbarashada: Shahaadada Sayniska, Shahaadada Jaamacadda, daba jooga Shahaadada Mastarka ee Maamulka Ganacsiga: Janaayo 2025

Adeegga Bulshada: Daryeelka Caafimaadka dadka bilaa Hooya ah, Our Daily Bread, Anoo u Soo Ol-oleeyay Hawlgabka Ciidanka ee bilaa Hooya ah!

Bayaanka: Shaqadeedu waa inaan difaaco muwaadiniinta shaqeeya ee Seattle. Wuxaan doonayaa inaan ka dhabeeyo in aan dhammaanteen si nabad ah baabuurteena ugu lugay karno iyada oo aan cidna la toogan ama la dilin. Wuxaan doonayaa inaan carruurta ka ilaaaliyo dhammaan rabshada. Wuxaan rajeynaya inaad dhammaantiin ii codeyn doontaan, waayo wuxaan doonayaa inaan isbeddelo adag ka sameeyo Seattle. Yaa noqonaaya dhibanaha xiga? Waxay noqon kartaa ilmahaaga, ama xubin qoyskaaga ah. Dhammaan nolosha waa Muhiim ayadoo aan loo eegayn isirka!!



Wakiilka Jagada Lr. 2

Joe Fitzgibbon

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 949-5127

jcfitzgibbon@gmail.com

www.joefitzgibbon.com

Khibradda Jago Loo Doortay: Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka, 2010-hadda; Guddoomiye, Guiddiga Bi'iada iyo Tamarta ee Baarlamaanka, 2014-2022; Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Baarlamaanka, 2022-hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Khibrad Xirfadeed Kale; kaaliyaha sharci dejinta; la taliyaha siyaasadda bi'iada

Waxbarashada: Waxbarashada: BA, Taariikhda iyo Cilmiga Siyaasadda, Principia College

Adeegga Bulshada: Adeegga Bulshada: Agaasimaha Guddiga, Futurewise (Urur Kheyri ah oo ka Shaqeeyaa bi'iada gobolka oo dhan), 2016-19; Guiddiga Agaasimeyaasha, Guiddiga Ololaha Baarlamaanka ee Dimuqraadiga, 2019-hadda

Bayanka: Waad ku mahadsan tiihin inaad igu sharafeen inaan idin ku matalo Olympia. Waan ku faanayaan horumarka gobolkeenu sameeyay - ku hoggaamtina gobilka la dagaalanka isbeddelka cimilada, difaaca xorriyadda taranka, ka hortagga rabshada hubaysan. Muddo-xilleedkan, waxaan noqday Hoggaamiyaha Aqlabiyada Baarlamaanka, kaasoo ah xil aan gacan uga gaystay qorista miisaaniyadaha gobolka ee dhaqaale ahaan mas'uuliyadda leh kuwaasoo lagu maal geliyay waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo badqabka dadweynaha.

Dhammaan arrimahaan, shaqo badan ayaan noo hartay - guryaha qimaha jaban, badqabka, sinnaanta, iyo xasilloonida. Gaadiidka, waxbarashada, iyo guriyeynta ayaan u baahan taageero iyo maal gelin dheeri ah.

Waxaan idin ka codsanayaan codkiina, si aan u sii wado siinta adeegyada bulshooyinkeena aana u sii xoojino gobolkeena.



Jolie Lansdowne

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

jolie@jolieforthehouse.com
jolieforthehouse.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Degmada 34 ee Xisbiga Jamhuuriga

Khibrad Xirfadeed Kale: Dalaalka Guryaha ah muddo 22 sanno ah. Si Kas Ah U Ah Mulkiilaha Guri Sect 8. Mulkiilaha Ganacsi Yar - Dhismaha. Macallinka Guriga iyo Qoraaga manhajka.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Highline. FIDM LA - Samaynta Dharka.

Adeegga Bulshada: Foster Child Respit. Orion Youth Center. NW Harvest. Ballard Food Bank. PCO.

Bayanka: Degmada King aayaaha jirtay goob ammaan ah oo horumar leh, laakiin waxaa fawdo ka dhigtau siyaasad xumo. Saraakiisha la doorto waxay haysteen sannado badan inay xal helaan, laakiin xaaladaha aaya kasii daray. Awoowgay aaya ka qayb galay Dagaalkii Labaad ee Adduunka (WWII). Wuxuu i baray in marka aduunyada kharibanto, ay qasab tahay inaan samayno waxa loo baahan yahay si aan u saxno. Marka, doorkayga aayaan qaataay - anoo markii koowaad noqday Guddoomiyaha PCO iyo LD, ka dibna gacan ka gaystay qorista siyaasaadka xisbiga. Hadda waxaan u tartamayaa inaan u adeeggo Olympia.

Marka aad igu taageertaan, waxaan xallin karnaa dhibaatadaan. Marka aad ii codeysaan, waxaan wakiil mar kale gaysan karnaa baarlamaankeena.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Julia Grant Reed

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 682-7328

Info@votejuliareed.com

Www.votejuliareed.com

Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka ee Hadda, 36-aad LD (Sharci Dejinta); Guddoomiyaha Hore ee Dimuqraadiyinta 36-aad LD

Khibrad Xirfaadeed Kale: La taliyaha Kinetic West, oo siya adeegyada siyaasadda dadweynaha, qorshaha istaraatijiga ah, iyo maamulka ururka barnaamijyada horumarinta shaqaalaha iyo dhaqaalaha. La taliyaha Hore ee Sare ee Siyaasadda iyo Agaasimaha Arrimaha Gobolka ee Magaalada Seattle, anoo soo hogganshay shaqo siinta dhallinta, shaqaalaha, xuquuqda madaniga ah, u diyaar garoowga xaaladaha degdegga ah, xeerka farshaxanka. Shaqaalaha hore ee Maamulkii Obama, Waaxda Gudaha ee Mareykanka iyo Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda.

Waxbarashada: MPA, Princeton University; Shahaadada Jaamacadda, Smith College

Adeegga Bulshada: Xubinta la magacaabay ee Guddiga Baarlamaanka ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Xiriirada Caalamiga ah. Daaciga Hadda ee Kaniisadda Kaatoliga ee St. Anne. Xubinta Guddiga, Golaha Hoggaaminta Caalamiga ah. Xubinta Guddiga ee hor, Xarunta Saamaynta Bulshada ee YMCA.

Bayaanka: Intaan ahaa Wakiilka Gobolka, waxaan sii waday dadaalka deegaanno badqabka, qimaha jaban iyo soo dhawweynata leh. Marka aan helo codkiina, waxaan sii wadi doonaa inaan cuskado khibraddayda taageerada dhallinta iyo horumarinta shaqaalaha - ka caawinta jiilka xiga gaarista yoolalkooda. Waxaan sii wadi doonaa horumarinta xeerarka guriyeenta si loo daboolo baahiyaha taagan iyo kuwa muddada fog ee Seattle, maal gelinta waxbarashada carruurta ee goorta hore iyo K-12, difaaca xuquuqda ilmo iska soo ridista, iyo inaan u ololeeyo isbeddelka cimilada.

Waxaa i taageeray: Isbahaysiga Macallimiinta ee Am; Ururka Waxbarashada ee WA; Guddiga Shaqaalaha ee Gobolka; Isbahaysiga WA ee Shaqaalaha Gobolka WA; Dimuqraadiyinta Degmada King; Isbahaysiga Kalkaalisooyinka WA; Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Xildhibaannada, Hoggaamiyeeyasha Shaqaalaha iyo Bulshada, iyo dhinacyo kale.



Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Su'aalah Soo Noqnoqda ee Codeynta

○ Sidee baan u codeeyaa?

Buuxi goobaabinta ku dhinac taal musharaxa ama cabbirka sharciga ee aad dooranayso.

○ Ma waxaan isticmaala qalin?

Waxaad isticmaali kartaa qalin, qalin qori, qalinka kalarka, ama wax kasta oo si cad u buuxiya goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga.

○ Ma inaan ka codeeyaa tartan kasta?

Adiga ayay ku xiran tahay tartannada aad ka codeynayso. Wuxaa ku codeyn kartaa hal tartan, laba tartan, ama dhammaan tartannada. Wuxaanu xisaabin doonaa codeyn kasta oo aad samayso.

○ Maxaa dhacaaya haddii aan fikradayda beddelo ama aan khalad sameeyo?

Xariiq dul mari dookha aadan doonaynin. Markaa ka dib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga saxda ah.

○ Ma inaan warqaddayda codbixinta saxiixaa?

Waa in aad saxiixdo xagga dambe ee bakhshadda soo celinta si warqaddaada codbixinta loo tiriyo. Saxiixaagu uma baahna inuu noqdo mid nidaamsan ama la akhrin karo, laakiin waa inuu u dhigmo saxiixyada aan ku hayno faylkaaga diliwaan gelinta codbixiyaha.

○ Sidee baan u soo celiyaa warqaddayda codbixinta?

Waxaad warqaddaada codbixinta ku ridi kartaa sanduuq kasta oo boostada (USPS) ah haddii la xaqiijiyo inay lahaan doonto shaabadda boostada oo ah Maalinta Doorashada. Wuxaa kale oo warqaddaada codbixinta ku soo celin kartaa mid ka mid ah in ka badan 80 sanduuqyada lagu rido warqadda codbixinta ee yaala agagaarka degmada King. Wuxaan kugula talinaynaa inaad warqaddaada codbixinta ku soo dirto boostada Jimcaha ka horeeya Maalinta Doorashada ama aad isticmaasho sanduuqa lagu rido inta lagu guda jiro maalmaha ugu dambeeyaa ee doorashada.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Liz Berry

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 923-9296
liz@lizberry.com
lizberry.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (2021-hadda); Madaxa Guddiga Xaafadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Agaasimihii hore ee fulinta ururka aan faa'iido doonka ahay ee u heellan ilaalinta xuquuqda macaamiisha, shaqaalaha, iyo bukaanada. Waaan sidoo kale soo noqday Agaasimaha Sharci-dejinta Xildhibaannada Kongareeska ee Gabby Giffords, samaynta sharci si loo caawiyo qoysaska iyo inaan kor ugu qaado tamarta nadifka ah.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Sharciga, Isgaarsiinta, Dhaqaalaha, iyo Dowladda, American University

Adeegga Bulshada: Xubin hore oo guddiga xaqa doorashada ee Washington iyo u doodaha nolosha oo dhan ee caddaaladda taranka, waxaan u dagaalamay inaan ilaaqyo oo aan balaariyo helitaanka adeegga ilmo soo rididda. Waxaan ka shaqeeyay inaan u doorto xaqa doorashada haween inay noqdaan Guddoomiyaha Kutlada Siyaasadda Haweenka Qaranka ee Washington oo aan ahay hooyada sharafta leh ee George (8) iyo Eleanor (5).

Bayaanka: Sharaf bay ii tahay inaan kuugu adeego Aqalka Dowladda. Afartii sanno ee la soo dhaafay, waxaan u oboleeyay maalgelinta sinnaanta ah ee daryeelka carruurta, Waxaan bixiyay Fasaxa Qoyska iyo Fasaxa Caafimaadka, Guryaha qiima ahaan la awoodi karo, iyo baaskillka, lugeynta, iyo kaabayaasha gaadiidka. Waxaan qoray sharci aasaasi ah si loo yareeyo qashinka balaastikada ah iyo balaarinta dib u warshadaynta. U doodaha badbaadada qoryaha ahaan, waxaan gudbiyay sharchiyo lagu mammuuucayo hubka wax lagu weeraro iyo hirgelinta sugitaanka 10-ka maalmood ah ee dhammaan iibashada hubka. Waaad u qalantaa hoggaamiyeeyaa u heellan ilaalinta qoysaska shaqeeyaa, ilmo iska soo rididda, iyo deegaanka iyo caafimaadka bulshadeena. Taasi waxay ahayd shaqada noloshayda: u istaagidda dadka iyo riixida isbeddel geesinimo leh.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Victoria Palmer

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 756-6835
electVictoriaPalmer@gmail.com
electVictoriaPalmer.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Degmada Sharci Dejinta 36-aad ee Xisbiga Jamhuuriga

Khibrad Xirfadeed Kale: 22 sanno oo Wax Soo Saarka Elektaroonigga
Waxbarashada: Ka qalin Jebiyay Dugsi Sare ee Ballard, 2 sanno dhiganaayay UW

Adeegga Bulshada: Xubin ka mid ah aasaaseyaasha Guddiga Xuquuqda dadweynaha ee Washington; Mutadawac kasoo shaqeeyay Difaaca Caafimaadka Carruurta (Laanta Washington); Aasaasaha March For Freedom WA; Abaabulaha Nadifinta Xaafadda Greenwood ee Maalinta Adeegga One Seattle.

Bayaanka: li oggolaada inaan noqdo codkiina dowlad kooban. Waaan u dagaalami doonaa canshuur dhaaf, isla xisaabtan, iyo is hortaaga faro gelinta dowladdu ku hayso sirteena iyo xorriyaddeena. Kama bixi karno dhibaataada guryaha qaaliga noqday marka sababta keenaysa ay tahay deyn culayskeeda wadata. Waxaan joogtayn doonaa adeegyadeena muhiimka ah ee bulshada laakiin aan u oggolaano in Jamhuuriyiinta hagaajyaan shaqada barnaamijyada taageeraaya hab dhismeedka qoyska oo dhiiri gelinaaya lacag keydsiga.

Waxaan ahay Jamhuuri Taageersan Xorriyadda Dookha. Sharciyadeena Gobolka Washington ee la xiriira ilmo iska soo ridista aaya ku xiran sharciyadeena caanka ah ee soo jireenka ahaa waana in la difaaco. Mabaadii'da dhanka midig u janjareera aaya soo kordhaaya - *haa* ugu codee mashruucyada bisha Nofeembar.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Sharon Tomiko Santos

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 326-9042

Info@FriendsofSantos.com

friendsofsantos.nationbuilder.com



Khibrad Jago Loo Doortay: La doortay 1998. Guddoomiyaha, Guddiga Waxbarashada; Xubin, Guddiga Dhaqaalah; Xubin, Guddiga Difaaca Macaamiisha iyo Ganacsiga.

Khibrad Xirfadeed Kale: Maamulka Kheyriga ah; Horumarinta siyaasadda dowladda hoose; bangiyada tafaariiqda.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Franklin, Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle; B.A., Evergreen State College; M.A., Northeastern University.

Adeegga Bulshada: Xubinta Guddiga, Neighborhood House; Xubin, Washington Civil Rights Coalition; Guddiga Aasaaseyaasha, Hate Free Zone of Washington (OneAmerica); Guddiga Aasaaseyaasha, Puget Sound Public Radio, KUOW; xubinta aasaaseyaasha, Washington Tax Fairness Coalition; xubinta aasaaseyaasha, Task Force on Immigration and the States, National Conference of State Legislatures (NCSL); xubinta hore ee guddiga, Seattle Chapter JACL; xubinta hore ee guddiga, Wing Luke Museum; xubinta hore ee guddiga, YMCA Youth and Government.

Bayanka: Waxaa la igu soo koriyay Koonfurta Seattle, oo ahayd gurigaya in ka badan 50 sanno, waxaana si sharaf leh u matalayaan codadkeena gudaha Olympia. Waxaan kula xisaabtamy dowladda gobolka Ilaalinta xuquuqdeena madaniga ah, waxaan ilo dhaqaale u abuuray hey'adaha kheyriga ee deegaankeena, waxaana ka shaqeeyay abuurista fursado caddaalad ah oo ay helaan ardayda iyo ganacsiyada yaryar.

Waxaan u taaganahay baabi'inta sinnaan la'aanta dhanka waxbarashada dadweynaha anoo ka bilaabaya isbeddel lagu sameeyo nidaamkeena waxbarashada ee la sameeyay qarnigii 19-aad. Taas beddelkeeda, waa inaan dhaqan gelino xeeladaha wada shaqeeynta waxbarashada oo diiradda saaraaya wakaaladda ardayga iyo bixinta khibradaha waxbarashada qotoda dheer si loo daboolo baahiyaha qarniga 21-aad ee ardaydeena iyo bulshadeena, hadda iyo mustaqbalinka.

Codeyntaadu waa mid tirsanta. Waad hubin kartaa.

Ka raad-raac warqaddaada codbixinta halka
kce.wiki/TrackMyBallot



Baraheena Bulshada!

Ka taag-garee @kcelections goobaha bulshada halka kore ku xusan waxaana laga yaabaa inaan wadaagno sawirkaaga.

**Nala wadaag sawirkaaga
codeynta #VotingSelfie!**



Wakiilka Jagada Lr. 2

Chipalo Street

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 705-3585

info@electchipalo.com

electchipalo.com



Khibrad Jago Loo Doortay: Xildhibaanka Gobolka 2023 - hadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Intaan joogay Microsoft waxaan ka shaqeeyaa xaqijinta in Al-geenu ku hago ganacsiyada badqab iyo ammaan. Waxaa intaas dheer, waxaan leeyahay ganacsi yar wawaana ahaan jiray rifariiga ciyaaraha. Waxaan hami u qabaa abuurista guryo qimo jaban iyo dhallinteen, si gaar ahna ciyaaraha iyo waxbarashada STEM.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Heerka Koowaad iyo Shahaadada Mastarka ee Cilmiga Sayniska Kombuyutarka, Brown University

Adeegga Bulshada: Waa xaa u taagan nahay sinnaanta nidaamka casriga ah waxaana cilmiga kombuyutarka kasoo dhigay Technology Access Foundation. Shaqadeena mutadawacnimada ayaa xoojisay bulshadeena: Xubinta Guddiga, Machadka Mustaqbalka Dimuqraadiga ah; Wada Shaqueynta Ardayda Hore, Xubinta Golaha Deegaanka ee Saarmaynta Siyasadda Dadweynaha, United Way oo ka mid ah Degmada King; hoggaamiyaha labaad ee, National Society of Black Engineers.

Bayaanka: Anigoo ku soo koray xaafad danyar ah kana baxay dugsiyada dowladda, waxaan fahmayaa caqabadaha ay qoysasku wajahaan. Tan ayaa hagaysa shaqadeyda Olympia halkaasoo aan hormuud u noqday guryaha qiimaha jaban, ilaalinta xuquuqda taranka, maal gelinta caafimaadka habdhaqanka iyo dhimirka, xallinta xeerkeena sii baaba'aaya ee canshuuraha. Kuwaani waa arrimo adag, waxaana ka keenaa natijo. Waxaan xaqijiyyay in ka badan \$69 milyan oo lagu bixiyey mashruucyo ka hirgalay xaafadda 37-aad ee LD si looga caawiyo horumarka bulshadeena. Dhisidda xiriirada ayaa dhalisay in la ii doorto Hoggaanka Baarlamaanka anoo noqday Guddoomiye Ku xigeenka golaha Dimuqraadiga.

Waxaa i taageeray midowga shaqaalaha, ururada caafimaadka taranka, iyo u doodeyaasha guriyeynta. Waxaan rajeynayaan inaan kasbado codkiina mar kale.

Matt McCally

(Dookh Ahaan Xisbiga Libertariyanka)

Sawir lama
soo gudbin

Khibradda Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Waxbarashada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Adeegga Bulshada: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Bayaanka: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.



Senatarka Gobolka

Lisa Wellman

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 420-3351

email@SenatorLisaWellman.com
www.SenatorLisaWellman.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Senatarka Gobolka 2016 - hadda. Guddoomiyaha Guddiga Aqalka Sare ee Waxbarashada Dhallaanka iyo Fasallada K-12. Xubinta Guddiga: Qaababka iyo Marinnada iyo Tamarta, Bi'iada iyo Teknolojiyada. Ka shaqeeya Guddiga Farshaxanka ee WA, Guddiga Haweenka ee WA, Guddiga Baarlamaanka ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Xiriirada Caalamiga ah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallinka Dugsiga Barbaarinta.

Guddoomiye Ku-Xigeenka Suuqyada Caalamiga ah ee Hal abuurka, Apple. Guddoomiye, CEO, Deep Canyon (HP), Guddoomiye iyo CEO, SustainCommworld. Guddoomiye, Digital Marketing Corp.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda Waxbarashada iyo Cilmi Nafsiya, Barat College, Summa cum Laude

Adeegga Bulshada: Tababarre, Kulliyadda Ganacsiga ee UW Forster. Wax ka Aasaasay, Iskaashatada Miyiga Washington. Xubinta Guddiga, Madxfafka Xisaabtu Guud ee Seattle. Xubinta Guddiga, Mashruuca Song Catchers Living Culture

Bayaanka: Gobolkeenu wuxuu wajahaya caqabado: guryaha, caafimaadka dhimirkha, maal gelinta buuxda ee waxbarashada, isbeddeleka cimilida iyo abuurista dhaqaale qof kasta ka faa'iideysto. Arrimahaan waa kuwo isku dhafan waxayna u baahan yihin hannaanka nidaamyada, fikradaha sharciga, barashada qaabka iyo khibradda ganacsiga ee adag.

Waxaan hoggaanka u hayay arrimahaan intaan ahaan Senatarkiina. Waxaan aaminsanahay in waxbarashadu tahay mustaqbalkeenna marka waxaan ka shaqeeyaa markasta kor u qaadista dugsiyadeena. Dadaaladeena wadajirka ah ayaa abuurur diyaar garoowga ugu sareeyay abid ee dugsiga barbaarinta iyo heerarka qalin jebinta. Buundooyinka laga keenay imtaxaanaadka gobolka aaya kor u soo kacay kadib aafadii COVID. Caqabaddeena xigta waa in si buuxda loo maal gelyo dugsiyada loo suurta gelyo internetka arday kasta oo jooga guri kasta.

Waxaan muddo sannado ah ka shaqeeyaaay Guddiga Qaab Dhismeedka Canshuuraha si aan u qiimeeyo sida loo dhiibo qarashka adeegyada anagoo aan culeys saarin qoysaska. Anigoo aha CEO ga hore, Guddoomiyaha shirkadaha waaweyn iyo mulkiilaha ganacsiga yar, waxaan khibrad ganacsi oo awood badan kusoo kordhinayaa xaqijinta in Washington - iyo Eastside - ay ahaadaan hoggaamiyeasha dhaqaalaha. Waxaa sharaf ii ah taageeradiina siddeedii sanno ee lasoo dhaafay iyo taageerooyinka aan ka helay xubnaha Guddiga Dugsiga, isbahaysiyada macallimiinta iyo kalkaalisooyinka, Codadka Planned Parenthood, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Xubnaha Golaha Deegaanka iyo Duqyaasha Magaalada. Waxaan idin ka codsanayaa codkiina si aan u sii wado shaqadaan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Jaskaran Singh Sarao

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 647-0455

singhforstatesenate@gmail.com
www.singhforstatesenate.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Midna

Khibrad Xirfadeed Kale: Maamulaha sare ee mashruuca ee 20 sanno ka shaqeeyaaay shirkadaha deegaanka, ayna ku jiraan AT&T iyo T-Mobile

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Elektarooniga iyo Isgaarsiinta oo an ku qaataay India; Ka qalin jebiyay Bellevue Essentials; Fasalka 2017; Shahaadada Maamulka Mashruuca, University of Washington.

Adeegga Bulshada: Jaskaran iyo xaaskiisa Manpreet Sarao ayaa door firfircoona ku leh bulshadeena. Wuxuu guddoomiye u hayah Guddiga Adeegyada Aadanaha ee Bellevue wuxuuna ahaa Guddoomiyaha Ururka Xaafadda Norwood. Wuxuu soo hoggaanshay mashaariicda ururka SOCH, oo taageera bulshada bilaa hooyga ah. Jaskaran ayaa gacan ka gaystay abaabulka orodada 5K iyo dabaal degyada Afarta Luuliy, wuxuuna ahaa tababaraha ciyaaraha dhallinta iyo hoggaamiyaha ciyaarta ee labadiisa wiil, Chirag iyo Nihal.

Bayaanka: Jaskaran waa hoggaamiye bulsho oo dadaal badan kaasoo khibrad 20 sanno ah u leh teknolojiyada, kaasoo door qoto dheer ku leh adeegga bulshadeena. Hoggaamintiisa ayaa ku baahsan doorarka kala duwan, laga bilaabo hoggaaminta Guddiga Adeegyada Aadanaha ee Bellevue ilaa tababarka dhallinta ciyaaraha iyo siinta cuntooyin xarumaha hooyga maxalliga ah. Asagoo ku soo koray biloowgii hore nolol danyar ah wadanka Hindiya, Jaskaran ayaa fahmaaya caqabadaahay ay wajahaan dadka soo galootiga ah iyo Amerikaanka aadka u shaqeeyaa.

Ololihiisu wuxuu diiradda saarayaa arrimaha muhiimka ah: xoojinta badqabka dadweynaha, kor u qaadista natijooyinka waxbarashada, xal u helidda hooy la'aanta, iyo xallinta saamaynada xunxun ee siyaasadaha dadka asaga kasoo horjeeda abuureen. Jaskaran waxaa ka go'an inuu caqabadaahay u wajaho si xeeladaysan, xalal ku dhisan xog kuwaasoo xaqiijinaaya hufnaanta iyo isla xisaabtanka.

Dadaalka Jaskaran ee adeegguu waa mid caddeyn leh. Ma'aha keliya musharax; waa adeege bulsho kaasoo muujiiyah dadaalka doorka joogtada ah iyo hoggaaminta shaqooyinka bulshada. Khibradihiisa ayaa u tababaray fikradaha iyo xirfadaha muhiimka u ah inuu si hufan u matalo uuna ugu dagaalamo masaaliixda koowaad ee xubnaha bulshada oo dhan.

Haddii la doorto, Jaskaran ayaa ballan qaadaaya inuu noqdo codkiina adiga iyo carruurtiina ku matalaya Olympia, asagoo ku dadaalayaa inuu isbeddeleni maclu leh sameeyo kuwaasoo faa'iido noo leh hadda iyo mustaqbalka.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Tana Senn

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 369-1253

electtanasesenn@gmail.com

electtanasesenn.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka; Xubin ka tirsan Golaha Magaalada Mercer Island (hore)

Khibrad Xirfadeed Kale: Labaatan sanno oo waayo-aragnimada xirfadda isgaarsiinta iyo xiriirada dowladda ah ee hey'adaha aan faa'iido doon ahayn iyo ururada

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Sharciyada Guud & Maamulka ee Columbia University; Shahaado Jaamacadeedka Waxbarashada oon ka qaataay Washington University ee St. Louis

Adeegga Bulshada: Naadiyada Wiilasha & Gabdhaha ee Bellevue, xubin ka tirsan guddiga; Ururka Qaranka ee Sharci-dejiyeasha Yahuudda, Madaxweyne ku-xigeenka; UW Master of Arts ee cilmi-nafsiya ilamaha iyo qaan-gaarka, xubin ka tirsan guddiga la-talinta; Hopelink, xubin hore oo ka tirsan Guddiga

Bayaanka: Wakiilkaaga Gobolka ahaan, waxaan si guul leh u difaacyay sharci si wanaagsan u saamaynaya dhallinyarada, qoysaska, iyo bulshooyinka ku xeeran daryeelka ilmaha, mushahar siman, mas'uuliyadda hubka, caafimaadka maskaxda iyo naafanimada koriinka. Saxiixaankayga sharciga ee kalfadhiq sharci dejinta ee sannadkan wuxuu wanaajin doonaa caafimaadka carruurta iyo deegaanka isagoo kordhinaaya basaska korontada ee dugsiyada ee gobolkeena oo dhan. Weli wax badan ayaa la qaban karaa. Waxaan ku weydiisanayaa codkaaga.

Taageerada waxaa ka mid ah: Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la qorsheeyay), Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Tallaabada Ilaalinta Washington, Dimuqraadiyiinta Degmada King, Kooxaha Shaqaalaha, Sanduuna Ololaha Carruruuta, Xeer Ilaaliyaha Guud Bob Ferguson, Xubinta ka tirsan Golaha Degmada King County Balducci, Duqa Magaalada Bellevue Lynne Robinson, Duqa Maqaalada Sammamish Kali Clark, Duqa Magaalada Jasiiiradda Mercer Salim Nice, dheeraad ah.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqaad ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Emily Tadlock

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 417-9935

Tadlock4House@gmail.com

electemilytadlock.com



Khibrad Jago Loo Doortay: Wax macluumaad ah lama soo gudbin

Khibrad Xirfadeed Kale: Khibrad 40+ sanno ah oo ka shaqeeynaayay shaqooyin kala duwan: Kaaliyaha Sharciga ee Ka hortagga, Farsamo yaqaanka Cilad Bixinta Alaabta, Sarkaalka Ilaalinta Deynta Guryaha, Kaaliyaha Waax fulinta, Maamulaha Xafiiska ee shaqooyin kala duwan: Sharciga, Wax soo saarka, Dhismaha, Talo Bixinta Caafimaadka, iyo Dayamaha Guryaha. Mulkiilaha Ganacsi Yar Hadda

Waxbarashada: Washington State University, B.A. (Cilmiga Siyaasadda) University of Washington Ext. Program, Shahaadada Kaaliyaha Sharciga, Shahaadada Sarkaalka Barashada Ilaalinta Deynta Guryaha.

Adeegga Bulshada: Dugsiga Hoose ee Art Docent, Mutadawaca We Heart Seattle iyo 21-Acres

Bayaanka: Waxaan aqoon sare u leeyahay PNW waxaana xiiso u qabaa bil'aada. Anoo ah hooyo keligeed ah, waxaan bartay muhiimadda bulshooyin xoog badan iyo adeegyada bulshada oo diiradda saaraaya barashada isku haleyn taafaada. Halgankayga ayaa igu beeray awood, rajo, iyo dhiiri gelin aan ku qabo saaxiibadeey iyo qoyskayga. Haddii la i doorto, waxaan matali doonaa xiiseyaasha dadka aan matalo. Muhiimadahayga waxaan saarayaan badqabka dadweynaha, guusha tacliinta iyo dhiiri gelinta ganacsiyada yaryar. Waxaan burin doonaa siyaasadaha qofka ila tartamaaya kuwaasoo carqalad ku ah badqabka dadweynaha, waxbarashada iyo kor u kaca qimaha nolosha. Anoo ah Dimuqraadi isku beddelay Jamhuuri, waxaan abuuri doonaa tubaha lagu gaaraayo madax banaannida iyo xorriyadda waxaana abuuri doonaa isbeddello wanaagsan oo saamayn iyo awood idin siyya.



Wakiilka Jagada Lr. 2

My-Linh Thai

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

Electmylinh@gmail.com
www.mylinhthai.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka: Ku Xigeenka Hoggaamiyaha Aqlabiyyadda, Xubinta Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo Garsoorka, Xubinta Guddiga Dhaqaalah, Xubinta Guddiga Caafimaadka iyo Fayaqabka, Xubinta Guddiga Guriyeynta; Guddoomiyaha Hore ee Guddiga Degmada Dugsiga ee Bellevue; Guddoomiyeh Ku Xigeenka Ururka Agaasimeyaasha Dugsiga ee Gobolka Washington

Khibrad Xirfadeed Kale: Farmashilaha; Maamulaha, Shaqada Neerfaha Carruurta ee Wyoming; U doodaha Qaxootiga; Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada King; Macallinka, Barnaamijka Mastarka ee Kalkaalisada Fiyatnaam

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadeedka Cilmiga Sayniska ee Kulliyadda Daawada, University of Washington

Adeegga Bulshada: Guddiga Agaasimeyaasha, Xarunta Kheyraadka Caafimaadka Dhimirkha ee Carruurta; Guddiga Agaasimeyaasha, Hey'adda Deeqda Waxbarashada ee Fiyatnaamiiska; Xiriiriyyaha Guddiga Dugsiga: Hey'adda Dugsiga ee Bellevue, YouthLink, Eastside Pathways; Abaal Marinta Qareenka Hawlkarka ah ee PTA ee Gobolka Washington

Bayaanka: Waxaa sharaf ii ah inaan matalo qoysaska Eastside, anoo diiradda saaraaya bulshooyin badqab iyo taageero leh, dugsiyada dowladda oo tayo leh, daryeelka carruurta oo qiimo jaban, tallaabada isbeddelka cimilada. Anoo ah xirfad yahanka caafimaadka, waxaan u taaganahay ilaalinta xuquuqda taranka iyo helitaanka daryeelka caafimaadka ee qiiimaha jaban. Anoo ah qaxootigii koowaad ee loo doorto Baarlamaanka, waxaan qadariyya sharafta waxaana u doodaa bulsho caddaalad iyo sinan leh.

Marka aad i taageertaan, waxaan sii wadi doonaa inaan muhiimadda saaro faya qabka bulsho kasta anoo diiradda saaraaya guryaha qiiimaha jaban, adeegyada caafimaadka habdhaqanka, horumarinta shaqaalah, iyo horumarinta gaadiidka ee gobolkeena. Waxaan si xushmad leh idin ka codsanayaa codkiina.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqida ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Al Rosenthal

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(425) 785-3925
Alfrosenthal@aol.com
NorthWestAl.us



Khibrad Jago Loo Doortay: Midna

Khibrad Xirfadeed Kale: Injineerka Dhismaha Diyaaradaha laga Bilaabo 1977-2014 kana shaqeeyn jiray Grumman, McDonnell Douglas, iyo Boeing. Maadaama aan ahaa mulkiilaha maamulaha guryo ku yaala Degmada King muddo 29 sanno ah, waxaan markhaatiga koowaad u ahay sida maamul xumada hooy la'aanta ee wakaaladaha dowladda ay u abuurtay fashil.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Qaybta Cilmiga Injineernimada Dhismaha oo uu ka qaataay Manhattan College, Bronx, NY.

Adeegga Bulshada: Waxaan kasoo shaqeeyay Guddiga Hooy La'aanta ee Redmond sannadilii 2015-2017

Bayaanka: Xaaskayga, Wafa, iyo aniga ayaa ku noolayn Bellevue ilaa sannadkii 1991. Badqabka iyo ammaanka aan waagii hore ku hayasan halkaan ayaa sii xumaaday, sida ku cad warbixinnada joogtada ah ee rabshadaha, jabsiga guryaha, iyo boobka. Iska indho tirista dambiyada ayaa waxyello toos ah ku ah dhibaneyasha. libiyeyaasha Fentanyl waa in la marsiiyaa xukunno waajib ah. Waxaan aaminsanahay in hooy la'aanta iyo balwadda lagu maareeyo hannaan isku dheelitiran oo leh naxariis, isla xisaabtan, iyo daawayn qasab ah. Waxaan aaminsanahay in qadarinta go'aannada codbixiyeyaasha, ayna ku jiraan kuwa mucaarraddada badan, sida xaga ilmo iskavsoo ridista, taasoo ay codbixiyeyaasha reer WA ku go'aansheen Soo jeedintii 1991.

Waxaan u tartamayaan xafiiska si aan u adkeeyo ammaanka dadweynaha aana muhiimadda koowaad uga dhigto guusha waxbarashada.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Nicole Macri

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

nicole@votenicole.org
www.votenicole.org



Khibrad Jago Loo Doortay: Xildhibaanka Gobolka (2017-hadda)

Khibrad Xirfadeed Kale: Intaan aaha Agaasime Ku Xigeenka DESC (Xarunta Adeegga Xaaladda Degdeega ah ee Downtown), waxaan hagay siyaasadda waxaana gacan ka gaystay kormeerka miisaaniyad dhan \$120 milyan si loo bixiyo adeegyada Gurmadka Guryaha ee wadanka dhan laga aqoonsan yahay oo la siiyay 3,000 oo qof kuwaasoo soo maray hooy la'aan. Waxaan horey ula soo shaqeeyay dadka soo maray rabshadaha qoyska, dadka la nool xanuunnada dhimirkha, iyo naafada kobaca.


Waxbarashada: MPA, Evans School, University of Washington; BA, Cilmiga Bulshada, Rutgers University

Adeegga Bulshada: Guddoomiyaha Hore, Isbahaysiga Guryaha Danyarta reer Washington, Xubin, Guddiga Kormeerka Canshuurta Guryaha ee Seattle; Wax kasoo Guddoomiyay, Isbahaysiga Hooy La'aanta ee Seattle/ Degmada King; Wax ka Guddoonshay, Guddiga Miisaaniyadda Magaalada, Isbahaysiga Adeegyada Aadanaha ee Seattle; Xubin, Guddiga Dib U eegista Xarunta ee Seattle University.

Bayanka: Sharaf ayay ii tahay inaan noqdo Xildhibaankiina Gobolka. Waxaan sii wadi doonaa u olooleenta arrimaha muhiimka ah si daacadnimo ah waxaana idin ku matali doonaa mabaadiddeena Dimuqraadiga ah: yareynta hooy la'aanta, maal gelinta guryaha qiimaha jaban, balaarinta adeegyada caafimaadka habdhaqanka iyo caafimaadka dhimirkha, difaacidda helitaanka ilmo iska soo ridista, iyo ka hortagga isbeddelka cimilada.

Kal-fadhigaan ugu dambeeyay waxaan horumar weyn ka samaynay arrimahaan anagoo haddana kor u qaadnay badqabka dadweynaha, xal u helayna dhibaatada fentanyl, yaraynayna rabshada. Waxaa noo taalla shago badan si aan u balaarinno helitaanka iyo qiimaha jaban ee guryaha, xaqijinta helitaanka loo siman yahay ee waxbarashada dadweynaha, abuurista nidaamka gaadiidka oo sugaran, ilaalinta xuquuqda madaniga ah ee LGBTQ, iyo yareynta wasaqda kaarboonka.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.



Ku codee afka Shiinaha, Kuuriyaanka, Ruushka, Soomaaliga, Isbaanishka, ama Fiyatnamiiska!

Waxaad isku qori kartaa inaad hesho warqaddaada codbixinta iyo dhammaan agabka codeynta oo ku qoran luqadda dookhaaga ah.

Hal mar isku qor oo dhammaan doorashooyinka mustaqbalka waxaad heli doontaa:

- warqadaha codbixinta,
- buug-yaraha codbixiyeyaasha,
- warqadaha iyo isgaarsiinta,
- adeegga macaamiisha (taleefan/iimeel), iyo
- agabyada diiwaan gelinta codbixiyaha iyo waxbarashada

Booqo kce.wiki/languages
si aad isku qorto maanta!






Wakiilka Jagada Lr. 2

Shaun Scott

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 437-7826

Info@BetterWashington.org
BetterWashington.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha Ururka Ardayda, Shoreline Community College (2003); 43rd L.D (Degmada Sharci Dejinta 43-aad). Dimuqraadi P.C.O (Madaxa Guddiga Xaafadda) (2020-2022)

Khibrad Xirfadeed Kale: Hadda ah Madaxa Siyaasadda ee Shabakadda La dagaalanka Fakhriga ee Gobolka oo dhan, halkaasoo aan ka shaqeeyo balaarinta maaliyadda barnamijyada badqabka bulshada, aan dhaqan geliyo difaacyada macaamiisha, laguna maalgeliyo adeegyada guryaha la awoodi karo iyo naafada. Waagii hore: Taageeraha Bernie Sanders inuu noqdo Madaxweyne, Agaasimaha Goobta ee Gobolka WA; Abaabulaha Ololaha Pramila Jayapal oo u taagnayd Kongareeska; Tafatiraha Real Change News; Isku Duwaha Wacyigelinta ee Xafiiska Arrimaha Fanka iyo Dhaqanka ee Seattle; Wariye; Qoraa.

Waxbarashada: University of Washington (2003-2008); Shoreline Community College (2001-2003)

Adeegga Bulshada: Abaabulaha Shaqaalaha, Campaign Workers Guild. Qaataha Abaalmarinta Farshaxanka ee Shakhsga ah ee 4Culture. Qaataha deeqda Farshaxaniistaha Gaarka ah ee Xafiiska Duqa Magaalada u qaabilan Arrimaha Fanka iyo Dhaqanka. Taariikh yahanka dadweynaha.

Bayaanka: Waxaan ahay u ololeeyaha caddaaladda dhaqaalaha iyo hoggaamiyaha siyaasadda oo u taagan dhisidda Washington wanaagsan. Sannadkii 2021, waxaa sharaf ii ah inaan gacan ka gaystay Canshuurtu Faal'iida Raasumaalka iyo Canshuur Dhaafka Qoysaska Shaqeeya. Waxaan lasoo shaqeeyay Afhayeen Emeritus Frank Chopp si kor loogu qaado heerarka mulkiyadda guryaha ee dadka Madowga ah iyo dadka Kafeyga ah. Anoo kaashanaya taageeradiina, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo caddaaladda canshuuraha iyo qiimaha jaban ee guryaha, fursadda dhaqaalaha, tallaabada cimilada, iyo helitaanka adeegyada ee cid kasta, anoo ah wakiilkiina.

Waxaa taageeray: Afhayeen Emeritus Frank Chopp; Xubnaha Golaha Degmada King Girmay Zahilay iyo Teresa Mosqueda; Xildhibaannada Gobolka Nicole Macri, Darya Farivar, Liz Berry, dadka kale oo badan; Guddiga Shaqaalaha Gobolka Washington.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Andrea Suarez

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 200-8228

info@voteandreasuarez.com
www.voteandreasuarez.com



Khibrad Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda ee Dimuqraadiga, Dimuqraadiyiinta Degmada 43aad

Khibrad Xirfadeed Kale: Aasaasaha iyo Agaasimaha Fulinta, We Heart Seattle. Maamulaha, DHL Logistics.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Oregon State University.

Adeegga Bulshada: Sabab la xiriirta qalbi jab iyo quus aan ka qabo hoggaamiyeasha maxalliga ah, waxaan aasaasay urur kheyri ah oo la yiraahdo "We Heart Seattle" si aan u taageero carruurta iyo dadka waaweyn ee baahida qaba. We Heart waxay ka uruurisaa cirbadaha iyo qashinka goobaha dadweynaha. Waxaan sidoo kale caawinaad gaar ah siinnaa deriskeena bilaa hooyga ah anagoo xarigga ka jarna si ay guryo u helaan si degdeg ah oo hufan. Dadka qaba arrimaha balwadda, waxaan siinnaa daawooyin. Waxaan ogahay in khibraddayda shaqadu ay farqi wayn ka samayn doonto Olympia!

Bayaanka: Waxaan ahay Dimuqraadi qab leh oo soo huray kumanaan saacdood oo shaqada mutadawacnimada ah anagoo ka caawinayna dadka hooy la'aanta ah, balwadda, iyo kuwa dhimirka ka jiran. Way iska caddahay in nidaamkeenu uu ku fashilmay inuu caawiyo dadka ugu nugul bulshadeenaa. Waa lagu fashilmay waayo ma jirto khibrad shaqo, oo muuqata oo ka jirta maamulka Olympia. Waxaan diyaar u ahay inaan booskaas banaan buuxiyo.


Ka qof dumar ah ahaan, waxaa iga yaabiyyay duulaannada dhawwaan lagu soo qaaday xuquuqaha taranka. Waxaan u istaagi doonaa xaqa qofku u leeyahay xulashada. Waxaan sidoo kale qorshaynayaa u dagaalamidda kirada qiimaha jaban, sinnaanta badqabka dadweynaha, iyo ilaalinta bi'ada. Waxaan si xushmad leh idin ka codsanayaa codkiina.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Roger Goodman

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)



ROGER@ROGERGOODMAN.ORG
ROGERGOODMAN.ORG

Khibrad Jago Loo Doortay: Xildhibaanka Gobolka, 2007-hadda; Guddoomiye, Guddiga Baarlamaanka u qaabilسان Badbaadada Bulshada, Caddaaladda iyo Dib u Diwaan gelinta; Guddiga Xuquuqda Madaniga ah iyo Garsoorka; Adeegyada Aadanaha iyo Guddiga Waxbarashada Dhallaanka.

Khibrad Xirfaddeed Kale: Qareenka madaxa banaan; Ururka Bar ee Degmada King, 2000-08; Agasime, Guddiga Tilmaamaha Xukun Ridista ee Gobolka Washington 1998-2000; Guddiga talo bixinta Sharciga iyo Caddaaladda ee Gobolka Washington; Madaxa Shaqaalaha Kongareeska iyo Agaasimaha Sharciga; 1988-1995.

Waxbarashada: Dartmouth College, AB, Senior Fellow; George Washington University, JD (Shahaadada Sharciga); Harvard University, MPA.

Adeegga Bulshada: Hopelink, Guddiga Agaasimeyaasha; Guddoomiye, Kirkland's Lakeview Neighborhood Association; Rotary Club; Guddiga Maamulka Iisticmaalka Maandooriyaha ee Degmada King; active PTA dad, labo ilmood ayaa ii dhigata Dugsi Dowlaadeed.

Bayaanka: Waaan aad uga shaqeeyaa inaan noqdo Xildhibaani horyaal ah, oo lala xisaabtami karo, aana hoggaamiyo dadaallada gobolka oo dhan si kor loogu qaado badqabka dadweynaha si naxariis lehna loo caawiyu dadka dhibaatada ku jira. Waaan ansixiyay sharchiyo si loo difaaco dhabaneyaasha dambiga, loo yareeyo rabshadaha hubeysan, loo balaariyo daaweynta iyo adeegyada, korna loogu qaado agabka iyo tababarka booliiska.

Waxaan u doodayaa ardayda iyo qoysaska Eastside - maal gelinta dugsiyadeena dadweynaha, daryeelka carruurta oo qiiimo jaban, iyo tababarka shaqaalaha. Marka aan helo codkiina, waxaan sii wadi doonaa inaan u dagaalamo xalalka hooy la'aanta iyo guryaha qiimaha jaban, la dagaalanka dhibaatada isbeddelka cimilada, iyo u dagaalanka xuquuqda taranka. Aan ka wada shaqeyno isbeddel wanaagsan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Ma Ogtahay?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa ah habka ugu wanaagsan ee aad si toos ah warqaddaada codbixinta ugu soo celin karto Xarunta Doorashada. Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waa ammaan, ku habboon, oo furan ilaa daqiqadda ugu dambeysa! Warqadaha codbixinta ee lagu soo celiyo sanduuqa lagu rido Maalinta Doorashada ayaa loo dammaanad qaadaa in loo tixgeliyo inay ku yimaadeen wakhtigii loogu talagalay haddii lagu rido sanduuqa 8:00 p.m. ka hor.




Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido waa kuwo ka gaashaaman in la jabsado oo aan la burburin karin. Sanduuq kasta oo lagu rido wuxuu culayskiisu yahay 1,000 rodol waxaana lagu dhejiyya shubka.

Waxay ku qalabaysan yihiin astaamo badan oo amniga ah, oo ay ku jiraan ka hortagga dabka, habab badan oo qufullo ah, iyo shaabado sheegaaya haddii la jabsado kuwaasoo la geliyo diiwaan oona la baaro mar kasta oo ay shaqaale tababaray faarujiyaan sanduuqa.



Bas iskuul ayaa mar ku dhacay mid ka mid ah sanduuqyadeena rasmiga ah ee warqadda codbixinta!

Sanduuqa lagu rido waxba ma gaarin, laakiin sida ay sheegtag Agaasimaha Doorashooyinka, Julie Wise,
"Baska Iskuulka, sidaa ma uusan ahayn"





Wakiilka Jagada Lr. 2

Larry Springer

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 761-9025

larry@larryspringer.org

larryspringer.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Si sharaf leh ugu adeegaya sidii Wakiilkaaga Gobolka; Xubin hore oo ka tirsan Golaha Magaalada Kirkland, oo ay ku jiraan 4 sanno oo uu ahaa Duqa Magaalada ah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiilaha hore ee dukaanka khamriga ee Grape Choice oo ku yaala Kirkland muddo 40 sanno ah. Larry ayaa dugsiga hoose soo dhigay ka hor intuusan bilaabin ganacsigaisa.

Waxbarashada: Dugsiga Sare Bellevue, Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Waxbarashada Western Washington State College; Shahaado Jaamacadeedka Mastarka, University of Oregon.

Adeegga Bulshada: Xubinta Hore ee Guddiga Hopelink, Kirkland Performance Center iyo Kirkland Arts Center, Xubin wax ka aasaasay Leadership Eastside, Xubinta Hore ee Guddiga Horumarinta Dhaqaalaha ee Seattle-Degmada King, Iskaashatada Gaadiidka ee Eastside, Guddiga Gobolka ee Puget Sound iyo Guddoomiyaha Ururka Magaaloooyinka Magaalada Hareeraheeda (Suburban Cities Association).

Bayanka: Horey u ahaan jiray mulkiile ganacsiyada yar, Duqa Hore ee Kirkland iyo macallin, Larry ayaa fahmaaya caqabadahe haysta qoysaskeena iyo bulshooyinkeena. Wuxuu ku hoggaamiyaa wada shaqeyn iyo dareen macquul ah si kor loogu qaado badqabka dadweynaha, loo maal gelio guryaha qiimaha jaban, iyo taageerada carruurta iyo dugsiyada.

Marka aad u codeysaan, Larry ayaa sii wadi doona horumarinta siyaasaadka ka dhiga bulshadeena kuwo badqab badan, caawinaaya dadka dhibaatada ku jira, iyo ka hortagga rabshadaha hubeysan. Wuxuu gacan ka gaysan doonaa u dagaalanka balaarinta waxbarashada dhallaanka iyo daryeelka carruurta ee qiimaha jaban. Larry ayaa mar kasta ilaalil doona helitaanka daryeelka caafimaadka ee tayada leh, oo qiimo jaban iyo xuquuqaha taranka dumarka. Waxaa i taageeray Duqa Magaaloooyinka ee Eastside, shaqaalaha dab-damiska, kalkaalooyinka, macallimiinta, iyo dadka kale. Aan ku hayno Larry booska si uu noogu sii shaqeyyo!!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Melissa Demyan

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 765-6537

melissa@melissademyan.com

melissademyan.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Waxaa la ii doortay Goleyaasha Gobolka WA iyo Degmada King. Xildhibaanka Guddiga Fulinta ee Xisbiga Dimuqraadiga ee Gobolka, Xubinta Guddiga ee Degmo Doorashadeena.

Khibrad Xirfadeed Kale: Horumarinta nolosha dadka caadiga ah. Hadda: Abaabule, Ururka Caalamiga ah ee Farsamo Yaqaannada iyo Shaqaalaha Diyaaradaha. Horey: Isbahaysiga Tubeysteyaasha iyo Sifeeyeyaasha Tubooyinka; Shaqaalaha SEIU-United Healthcare; Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay; League of Conservation Voters.

Waxbarashada: Wax ku bartay Jaamacadda Seattle waxaana ka qaataay Shahaadada Midaysan ee Falsafadda, Siyaasadda, Dhaqaalaha, iyo Cilmiga Bulshada Trinity College Dublin, Ireland. Daraasadda xuquuqda aadanaha.

Adeegga Bulshada: Adeegga Ka qaybgalka inta aan noolahay ah; kasoo shaqeeeyay xarunta hooy la'aanta ee ROOTS; Ergaya Xuquuqda Aadanaha kasoo noqday Rwanda; Kooxda Gurmadka Xaaladda degdegga ah ee Bulshada (FEMA); waxaan ku qaataay abaal marinta Catholic Archdiocesan ee adeegga bulshada.

Bayanka: Waxaa sharaf ii ah inaan ahay musharaxa keliya ee uu taageeray Xisbiga Dimuqraadiga iyo Golaha Shaqaalaha ee Gobolka Washington AFL-CIO. Bulshadeenu waxay u baahan tahay hoggaan *cusub*; qof u codeyn *doona* maal gelinta dugsiyadeena dowladda; xuquuqda taranka ee dumarka; *guryo* qiimo jaban iyo daryeelka caafimaadka; iyo *xaddidaada* isbeddelka cimilada. Wuxaan u baahan nahay qof hor istaagi kara maal qabeennada iyo dadka u ololeeya- ee ma'aha qof ayaga la safta. *Si wadajir ah, intaan ka badan ayaan qaban karnaad!*

Taageerooyinka: Dimuqraadiyiinta Degmada 45-aad iyo Degmada King, Isbahaysiga Ameeriaanka Hawlgabka ah, Ururada Waxbarashada ee Lake Washington iyo Northshore, Guddiga Horumarinta Muslimiinta Mareykanka, Farsamo Yaqaannada Degmada 751, WA Progressive Caucus, Ganacsiyada Dhismaha ee Seattle/Degmada King, iyo *dad kale oo badan!*



Wakiilka Jagada Lr. 1

Gerry Pollet

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

info@gerrypollet.com
www.gerrypollet.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilkiina Gobolka ilaa 2012

Khibrad Xirfadeed Kale: Xarunta Dugsiga Caafimaadka Dadweynaha ee UW; Agaasimaha iyo qareenka danaha bulshada ee Heart of America Northwest, dadaallada hoggaaminta kooxda muwaadiniinta ee nadiifinta Hanford.

Waxbarashada: UW School of Law (Dugsiga Sharciga ee UW)

Adeegga Bulshada: Waxaa toddoba jeer lagu sharxay "Xildhibaanka Sannadka" ee hoggaaminta dadaallada helitaanka jaamacad la awoodi karo, kala duwanaanshaha, xuquuqda dadka naafada ah iyo dowladnimada furan; Abaal marinta Ururka "Sunshine in Government" Codbixiyeyaasha Dumarka ah ee Dowladnimada Furan; Isbahaysiga Washington ee Dowladnimada Furan, Guddiga; Kulliyadda Caafimaadka Dadweynaha ee UW, Abaal Marinta Adeegga Bulshada; Samafallaha muddada dheer ee PTSA, maal gelinta dugsiyada gobolka oo dhan, iyo waxbarashada gaarka ah "U ololeeyaha ugu sareeya ee sharci dejinta ee waxbarashada gaarka ah" – Idaacadda KING5

Bayaanka: Waaan codsanayaa inaan sii wado shaqada Wakiilkiina Gobolka si aan taageero buuxda u siyo dugsiyada dadweynaha, uga dhigo jaamacadaha kuwo qimo jaban, ula dagaalamo isbeddelka cimilada, ugana dhigo nidaamkeena canshuuraha mid caddaalad ah. Waaan ka shaqeynayaa xaqijintta in ubadkeena ay awoodi karaan inay ku noolaadaan Seattle waayeelkuna ay ku noolaadaan inta noloshooda ka dhimman. Waxaan abuuray aana ansixiyay sharci bud-dhig ah oo xallinaaya dhibaataynta galmaada ee ka jirta jaamacadda, ka hortagga uurka ee xaaladda degdegga ah, iyo caafimaadka dadweynaha.

Waxaan mar kasta u dagaalamaa masaaliixa gaarka ah si aan u sameeyo wawa saxda ah. Waa kaas Ballanqaadkaygu. Waxaa i taageeray: Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay); Hey'adda Ilaalinta Bii'ada Washington; Guddiga Shaqaalah, Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka; Xildhibaannadda Kongareeska Pramila Jayapal; Dimuqraadiyiinta Degmada King; macallimiinta, kalkaalisooyinka, shaqaalah daryeelka caafimaadka; iyo boqolaal dadka deriska ah.

Beth Daranciang

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 979-1543
bethforstate@gmail.com
www.bethforstate.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiyaha, Jamhuuriyinta Degmada 46-aad; Guddoomiye Ku-Xigeenka; Xisbiga Jamhuuriga ee Degmada King; Madaxa Guddiga Xaafadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Maamulaha Barnaamijka ee Ka Hortagga Rabshada iyo Dhaawaca, Caafimaadka Dadweynaha—Seattle iyo Degmada King; Isku duwaha Harborview Medical Center; waxaan kasoo qayb galay daraasaadka saamaynta ku yeeshay xeerarka caafimaadka dadweynaha iyo caawinaadda ku aaddan isticmaalka khamrada ee xarumaha daaweynta maskaxda; Mulkiilaha, oo ay leedadahy ninkeeda qaba, Ditos Built, shirkadda dib u naqshadaynta guryaha.

Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Caafimaadka Dadweynaha, University of North Carolina at Chapel Hill; Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Bayoolajiga, Wheaton College, Illinois

Adeegga Bulshada: Khasnjiga Dugsiga Sare ee Friends of Graham iyo Dugsiga Sare ee Nathan Hale PTSAs; Dumarka Jamhuuriga ee Bothell/Waquooyiga King; Isku Duwaha Qaaraan Ururinta, Boy Scout Troop 167

Bayaanka: Waaan u tartamayaa inaan codbixiyeyaasha siyo dookh kale. Waaan taageeraa canshuuraha in la dhimmo, badqabka dadweynaha, xuquuqaha galmaada ee dumarka iyo gabdhaha, xuquuqda waalidiinta iyo xorriyadaha First Amendment (Wax ka Beddelka Dastuurka ee Koowaad). Codbixiyeyaa badan, oo anoo kale ah, ayay iska indho tireen wakiillada gobolkeena. Waxaan dareemaynaa inaan nala dhagaysan maadaama siyaasiyinttu ansixiyaan kordhinta canshuuraha ayadoo uu jiro sicir barar, xaddidaada booliiska ayadoo ay cirka isku shareereen dambiyada, iyo xaddidaada xuquuqaha waalidiinta ayadoo ay jiraan waajibaadka manhajka dugsiyada dadweynaha.

Waxaan u taaganahay sixidda waxyaabaha ka halaabay Washington, ayna ku jiraan taageeridda liixa hindise ee macnaha samaynaaya oo sannadkaan lasoo gudbiyay si loo soo celiyo shaqada booliiska, xaqijintta ogeysiiska waalidka iyo jarrista canshuuraha. Waan idin kaga mahad celinaya codkiina.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Darya Farivar

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

info@daryaforhouse.com
daryaforhouse.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Darya waa Wakiilka ka tirsan Gobolka Washington ee LD 46-aad iyo haweeneydii ugu horeysay ee Bariga Dhexe ka soo jeeda ee loo doorto sharci-dejinta Gobolka Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Maamulaha Ka-qaybgalka Bulshada ee Xuquuqda Naafada Washington ahaan, Darya Farivar waxay ka shaqeysaa inay daboosho baahiyaha dadka nugul ee gobolka oo dhan. Darya waxa ay aaminsan tahay in adeegga dadweynuhu uu ka badan yahay cod u noqoshada kuwa nugul – waxay ku saabsan tahay kor u qaadidda *dhammaan* codadka.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, University of Redlands.

Adeegga Bulshada: Guddiga Haweenka Seattle, Guddoomiye Ku-Xigeenka; Golaha La-talinta Waxbarashada Gaarka ah ee Gobolka, Guddoomiyaha Sharciiga; PeyVand, Xubin ka tirsan Guddiga; Isbahaysiga Washington ee La Xisaabtanka Booliska, Xubin ka tirsan Guddiga. Iyo loo caleema-saaraaha Hoolka Caanka ah ee Hagida Naafada Qaranka.


Bayaanka: Ka Wakiilkaaga Gobolka ahaan, Darya Farivar waa xoog weynaha Olympia, horseed u ah dadaallada wax looga qabanayo caqabadaaha adag ee bulshadeena. Laga soo bilaabo la dagaalanka hoy la'aanta ilaa hubinta helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirkha, Darya waxa ay u doode aan daalin u ahayd kuwa inta badan la ilduufo. Gabadha soogalootiga ah ee ka soo jeeda liraan, waxay u keentaa aragtii cusub maamulka, iyada oo mudnaanta siinaysa dareenkia iyo ka-qaybgalka. Iyada oo leh diliwaan keenista natijjooyinka iyo himilada Washington xooggan, adkaysi badan, Darya ayaa durba horumar dhab ah ka samaynaysa Olympia. *Waxaa taageeray: Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka, Degmada Dimuqraadiyiinta 46aad, xaga doorashada ee Washington, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, iyo Xildhibaannada Kongareeska Jaypal.*

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Simone Barron

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 371-1810
Barron4WA@gmail.com
barron4wa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Madaxa Guddiga Xaafadda

Khibrad Xirfadeed Kale: Simone waa xirfad yahanad dhanka Hoteellada oo leh khibrad ka badan soddon sanno ayadoo 8 sanno ka shaqeynaysay u doodista shaqaalaha maqaayadaha adeegga buuxa, difaacaysayna xorriyaddoda, fursadaha wakhtiga iyo dakhligooda.

Waxbarashada: Ka dib markii ay Shahaadada Jaamacadda Sayniska Tiyaatarka ka qaadatay Ball State University, safarka u doodista ee Simone ayaa ku hoggaamiyey University of Washington, halkaas oo ay ku daba joogto inay qaadato Shahaadada Mastarka ee Sharciiga oo taqasuskeedu yahay Sharciiga shaqaalaha.

Adeegga Bulshada: Wax ka aasaastay Agaasimena ka ah, Isbahaysiga Shaqaalaha ee Adeegga Buuxa; Guddoomiye Ku-Xigeen, Dumarka Jamhuuriyiinta Degmada Bothell/North; Wax ka Aasaasay iyo Xubinta Guddiga, Shaqaalaha Maqaayadda ee Mareykanka; Aasaasaha iyo Agaasimaha, Tiyaatarka Intimate Space.

Bayaanka: Kharashka nolosha ayaa noqonaaya masiibo dhammaanteen aan wada dareemayno. Haddana nahay shaqaale, mulkiileyaasha ganacsiga, iyo canshuur bixiyeasha, waxaan fahmaynaa waxyeellada ay siyaasadda xun ku leedahay dakhliyadeena, qimaha nolosha, iyo badqabka.

Dhibaataada maanta na haysata ayaa u baahan hoggaamiye leh khibradda adduunyada dhabta ah. Wuxaan u tartamayaan inaan gacan ka gaysto soo celinta caqliyada shaqeynaysa ee bulshooyinkeena annagoo diiradda saarayna soo celinta shaqooyinka, taageerayna ganacsiyada yaryar, soona celinayna ammaanka dadweynaha. Li codeeya si aad u heshaan Washington nolol qimo jaban leh! Marka aad i doorataan inaan idin ku matalo Olympia, waxaan ka shaqeyn doonaa inaan soo celiyo adeegyada bulshadeena maalinta koowaad.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Debra Jean Entenman

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(206) 375-6298
info@electdebraentenman.org
electdebraentenman.org



Khibradda Jago Loo Doortay: Golaha Wakiilada Gobolka, Anoo matalaaya Degmada 47-aad, Soo shaqeeyay 3 muddo-xilleed.

Khibrad Xirfadeed Kale: Debra ayaa muddo 12 sanno ah kasoo shaqeysay Xafiiska Xubinta Kongareeska Adam Smith, ayadoo soo hoggaaminaysa dadaaladiisa wacyigelinta ee Koonfurta Degmada King ahaydna Agaasimaha Degmada saddexdii sanno ee ugu dambeysay.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka ee Cilmiga Siyaasadda Seattle University

Adeegga Bulshada: Debra ayaa loo magacaabay Xubinta Guddiga Kulliyadda Farsamada ee Renton sannadkii 2017, halkaas oo ay wali ka shaqeysyo, ayna xubin ka tahay Urban League of Metropolitan Seattle. Horey waxay uga soo shaqeysay guddiyada Guryaha Xaafadda iyo Adeegyada Dhallinyarada yo Qoyska ee Kent.

Bayaanka: Shaqooyinka guddiga waxaa ka mid ah: Xuquuqaha Madaniga ah iyo Garsoorka, Guriyeenta, Gaadiidka, Guddoomiye Ku-Xigeenka Waxbarashada Dugsiga Sare Ka Dib iyo Horumarinta Shaqaalaha. Waxaa intaas dheer, waa guddoomiye Ku-Xigeenka Kooxda Shaqada ee Caafimaadka Habdhaqanka ee dhalmada ka hor ilaa iyo 5 jir

Sharaf bay ii ahayd inaan u adeego dadkii is soo doortay ee Degmada Sharci Dejinta 47-aad. Marka aad i taageertaan waxaan sii wadi doonaa inaan dhegysto walaacyadiina aadna dhiibataan codad la wargeliyay.

Kyle Lyebyedyev

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 349-7851
kyle@peopleforkyle.com
www.peopleforkyle.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Ma khusayso

Khibrad Xirfadeed Kale: Mulkiilaha ganacsi yar, ganacsi abuure.

Waxbarashada: Dugsiga Sare ee Tababarka Shaqada, Yukrayn (Ukraine)-Qalin jebiyay 1999. 1 sanno oo aan dhiganaayay Shahaado Jaamacadeedka Cristian School of Leadership (Dugsiga Hoggaaminta Cristian).

Adeegga Bulshada: Qoyska hayay qaxootiga reer Yukrayn, Agaasimaha Dugsiga Axada, Barnaamijka Wacyigelinta Dhallinyarada, Qaban qaabiyyaha Bulshada.

Bayaanka: Wuxaan u tartamayaa xafiiska si aan fikir cusub iyo hoggaamin isbeddel leh u soo kordhiyo. Wuxaan aaminsanahay maalgelinta guusha ubadkeena iyo taageerista dookha dugsiga ee waalidinta. Mulkiilaha ganacsi yar, aabbe, iyo nin xaas leh, wuxaan u taaganahay abuurista shaqooyinka iyo horumarinta dhaqaalaheena maxalliga ah anagoo xoojinayna bi'o ganacsiga ku fiican maalgelinna ku samaynayna kaabayaasha. Khibraddayda adeegga bulshada aaya ii sahashay inaan si fiican idii matalo. Wuxaan u taaganahay hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo xaqijinta in cod kasta la dhegysto. Wuxaan taageerayaa dhimmista qiimaha gaaska, difaaca hawlgabka, hoos u dhigista canshuuraha.

Si wadajir ah, wuxaan u dhisi karnaa mustaqbal ifaaya. Wuxaan si xushmad leh idin ka codsanayaan codkiina.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Chris Stearns

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(253) 388-3701

chris@chrisstearns4wa.com

chrisstearns4wa.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka ee Hadda; Guddoomiye Ku-Xigeenka, Guddiga Gobolka iyo Dowladda Hoose; Xubin hore ee Golaha Magaalada Auburn

Khibrad Xirfadeed Kale: Shaqada Sharciga iyo Caddaaladda - La shaqeynta qabiillada, reer miyiga, iyo bulshooyinka la takooro si loo abuurro shaqooyinka, si loo maal geliyio tamarta nadifita ah, loona difaaco xuquuqda madaniga ah; Madaxweyne Clinton ayaa u magacaabay Agaasimihii ugu horeeyay ee Arrimaha Hindida, Waaxda Tamarta ee Mareykanka; Xubinta Hore ee Shaqaalaha Kongareeska

Waxbarashada: Cornell Law School (Dugsiga Sharciga ee Cornell), Shahaadada Sharciga; Williams College, Shahaado Jaamacadeedka Adabka

Adeegga Bulshada: Guddiga Guryaha La Awoodi Karo ee Degmada King; Guddiga Kormeerkha Caafimaadka Dhimirka iyo Balwadda Daroogada ee Degmada King; Guddiga Hawlgalka ee Raadinta Dumarka Maqan iyo Kuwa la Dilay ee Dadka Asaliyiinta ah ee Gobolka WA; Guddoomiyaha Hore, Guddiga Caafimaadka Hindida Seattle.

Bayaanka: Anoo codkiina Olympia ah, waxaan ku hoggaamiyey mudnaanteena: badqabka dadweynaha; guryo qiimo jaban; daaweynta daroogada iyo caafimaadka dhimirka; iyo maal gelinta daryeelka carruuta, K-12, iyo waxbarashada shaqada. Haddii aad sii wadaan taageeradayda, waxaan sii wadi doonaa inaan abuurro xeerar ka caawinaaya qoysaska inay gaaraan xasillooni dhaqaale, ilmuuhu ay si fiican wax u bartaan, ganacsiyada yaryrna kobac sameeyaan. Waxaan ahay codka adag ee difaaca hawadeena, biyaheena, kaymaha iyo dhul beereedka-waxaan mar kasta u taagnaan doonaa xuquuqaha taranka iyo gaarista go'aanka caafimaadka ee gaarka ah.

Waxaa i taageeray: Machinists (Ururka Shaqaalaha) 751; Guddiga Shaqaalaha ee Gobolka WA; Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay); Codbixiyehaasha ilaalinta bii'ada; Kalkaalisooyinka; Dimuqraadiyiinta 47-aad LD; Duqa Magaalada Auburn Backus, Duqa Magaalada Kent Ralph, Duqa Magaalada Covington Wagner; dadka kale!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Ted Cooke

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(206) 779-8495

Ted.Cooke@outlook.com

www.TedCooke.org



Khibradda Jago Loo Doortay: PCO COV 3244, COV 1127, 2009 ilaa hadda; Guddiga Agaasimeyaasha Timberlane HOA, Covington, 2010-2011; Guddoomiye Ku-Xigeenka 2-aad ee KCGOP, 2020-2022

Khibrad Xirfadeed Kale: Tijaabiyaha Sare ee Softiweerka, Hogaanka Kooxda, Maamulaha Mashruuca ee Shahaadaysan

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Kirishtaanka, Beacon University

Adeegga Bulshada: Horey uga tirsanaa Guddiga Agaasimeyaasha ee Portable Academic Lapdesk (hey'ad samafal oo waxbarasho); Shaqada hore ee mutadawacnimada: Cops With Cancer, Boots & Badges, Echo Glen Children's Center, Green Hill School, Vine Maple Place Women's Shelter, Union Gospel Mission, Maple Valley Food Bank, Timberlane iyo Maple Valley Earth Day cleanups, American Indian Fellowship Northwest Network (Colville Reservation), Dugsiga Hoose ee Miguel de Cervantes, Nicaragua, iyo Kulliyadda Rainbow Evangelical, Fiji.

Bayaanka: Wuxaan u tartamayaan inaan dowladda ku soo koobo badqabka dadweynaha, sharciga ganaaxa macquulka ah, maamulidda adeegyada dabiiciga ah ee dowladda keliya maamusho sida waddooyinka iyo biyaha, iyo inay bixiso waxbarashada aasaasiga ah ee akhriska, wax qorista, xisaabta, sayniska adag iyo taariikhda Ameerika. Dowladdu waa inaysan far gashan go'aannadiina nolol maalmeedka, sida gaariga ama shoolada aad doorato, ama sida aad u maamulaysaan hantidiina. Lacag kasta oo dowladdu bixiso waxaa laga soo qaadaa qof wax soo saar leh, taasoo yaraynaysa isku gudubka adeegyada iyo badeecooyinka qof kasta. Carruurteena aayaan awoodin inay degmadeena ku noolaadaan wakhti xaadirkaan. Sidoo kalena kuma noolaan karaan waayeelekeena hawlgabka ah. Waxaan doonayaa inaan taas beddeelo. Fadlan u codee Ted Cooke.



Wakiilka Jagada Lr. 1

Vandana Slatter

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 777-0579

friendsofvandanaslatter@gmail.com
vandanaslatter.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka (2017 - Hadda); Guddoomiyaha, Guddiga Waxbarashada Dugsiga Sare Ka dib iyo Shaqaalaha; Xubinta, Guddiga Qoondeynya iyo Bii'ada iyo Tamarta; 2021-24 Xildhibaanka Sannadka ee Ururka Ardayda WA; Guddoomiyaha Labaad, Ururka Sayniska, Hal Abuurka iyo Teknolojiyada; Xubinta Hore ee Golaha Magaalada Bellevue.

Khibrad Xirfadeed Kale: 20+ sanno iyo ka badan saynisyahanka caafimaadka ee shirkadaha waaweyn ee teknolojiyada caafimaadka ayna ku jiraan Amgen and Genentech; farmashiile haysta ruqsad.

Waxbarashada: Dhakhtarka Daawooyinka, UW; Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW; Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Sayniska, Daawada, UBC.

Adeegga Bulshada: Guddiga Hopelink; Guddiga Maamulka Dugsiga UW Evans; Guddiga Talo Bixinta ee Ruckelshaus Center; Guddiga Adeegyada Bii'ada; Guddiga Youth Link; Guddiga Hey'adda Isbitalka Overlake; Guddiga Farmashiga ee Gobolka; Guddiga Hey'adda NARAL ProChoice; Beerta Lake Hills Urban.

Bayaanka: Intaan ahaa Wakiilka, waxaan u adeegay mustaqbal muujinaaya hal abuurka, kala duwanaanta, iyo mabaadii'da guud ee bulshadeena—badqabka bulshada, isbeddelka cimilada, helitaanka daryeelka caafimaadka ee qof kasta. Waaan u dagaalamay xuquuqda taranka iyo caafimaadka habdhaqanka; xalalka guriyeynta iyo gaadiidka; qiiamaha jaban ee waayeeleka; iyo fursadda ardayda iyo shaqaalaha. Waaan sii wadi doonaa inaan adeegsado khibradda aan u leeyahay hoggamiyaha teknolojiyada caafimaadka, xirfadle caafimaad, iyo hooyo si aan u dhiso bulshooyin badqab, iyo caafimaad leh iyo dhaqaale qof kasta ka faa'iideysan karo.

Waxaa i taageeray: Shaqaalaha dab-damiska; Kalkaalinta; Planned Parenthood (Ururka Waalidnimada la Qorsheeyay); Codibixiyeyasha Ilaalinta Bii'ada; Isbahaysiga Mas'uulyadda Hubka; Guddiga Shaqaalaha Gobolka; APACE; Dimuqraadiiyinta xaafadda 48; Guddoomiyaha Hore ee Locke; Xeer Ilaaliyaha Guud Ferguson; Bellevue, Redmond, Kirkland iyo dad kale!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Lynn Trinh

(Dookh Ahaan Xisbiga Jamhuuriga)

(901) 877-4877

info@lyntrinh.com
www.lyntrinh.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Guddoomiye Ku-Xigeenka LD48 GOP; PCO Khibrad Xirfadeed Kale: Aasaasaha Barnaamijka Waxbarashada dhallinyarada kaasoo xoojinaya ilmaha da'da dugsiga si ay u bartaan Xadaaradaha Reer Galbeedka, Dastuurka Mareykanka, iyo suugaanta qadiimiga ah; Mulkiilaha ganaci yar; Injineer dhismo oo ku taqasusay naqshadaynta guryaha la degan yahay iyo mashruucyada dayactirka goobaha taariikhiga ah

Waxbarashada: University of Minnesota: Shahaadada Mastarka ee Dhismaha, Shahaadada Jaamacadda ee Dhismaha

Adeegga Bulshada: Macallinka suugaanta qadiimiga ah iyo dhaqanka Shiniinha muddo 12 sanno ah; Xubinta Guddiga la Magacaabay ee Guddiga Farshaxanka lyo Dhaqanka ee Redmond; Aasaasaha Laanta Seattle ee Hey'adda Arrimaha Bulshada ee Ameerikaanka Eeshiyaanka Jasiradda Baasifiga (APAPA), hey'ad aan faa'iido doon ahayn, oo ka shaqeysa wada shaqeysta bulshada iyo hoggaamtina madaniga ah ee dhallinta Eeshiyaanka Mareykanka; Art Docent; Guddiga PTSA

Bayaanka: Anoo ah soo galooti Shiinees ah, waxaan si buuxda ula jaanqaaday riyada Ameerikaanka ee fursadaha tiro beelka ah ee nolosha wanaagsan. Nasiib doro, siyaasadaha ku dhisan ajeendhaha gaarka ah ayaa keenay sannado badan oo ay jireen sharchiyo wax burburinaaya, canshuuro curyaamin ah iyo xeerarka qalafsan ee dhanka tamarta, gaadiidka iyo waxbarashada. Dhammaan waxay caqabad ku yihiin awooodda horumarka bulshada.

Waxaan muhiimadda saari doonaa faya qabkeena anoo si dhab ah idii matalaya, si firfircoo u dhegaysanaayo walaacyadiina oona xoojin doona codkiina. Waaan ballan qaadaya Soo celinta waxbarasho tayo leh, Soo celinta Xuquuqda Waalidka, Soo celinta badqabka dadweynaha, Yareynta taraafikada waddooyinka iyo Soo celinta xorriyadda shacabka iyo barwaqada dhaqaalaha. Fadlan igula soo biira inaan isbeddel bulsho ka keeno Olympia.



Wakiilka Jagada Lr. 2

Amy Walen

(Dookh Ahaan Xisbiga Dimuqraadiga)

(425) 381-1909

amy@amywalen.com

amywalen.com



Khibradda Jago Loo Doortay: Wakiilka Gobolka; Duqa Magaalada Kirkland 2014-2018; Xubinta Golaha Magaalada Kirkland 2009-2019

Khibrad Xirfadeed Kale: Khibrad in ka badan 20 sanno oo aan ahaa mulkiilaha iyo madaxa fulinta ee ganacsiyada qoyskeena

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda ee Sharciga, University of Queensland Law School; Shahaadada Jaamacadda, Cilmiga Siyaasadda, University of Queensland

Adeegga Bulshada: Wuxaan mar kasta ka shaqeeyay inaan horumariyo nolosha dadka bulshadeena, anoo kasoo shaqeeyay shaqooyinka mutadawaca iyo madaniga ee ururada sida Food Lifeline, Youth Eastside Services, PorchLight iyo Studio East, iyo u abuurista deeqo waxbarasho ardayda dhigata Machadka Teknoloyiyada ee Lake Washington Anoo kasoo badbaaday kansarka, waxaan sidoo kale muhiimadda saaraa adeegyada taageerada ee qoysaska saamaynta kasoo gaartay kansarka.

Bayaanka: Wuxaan abaal idinkaga hayaa taageeradiina iyo wada shaqeeytiina inta aan ka shaqeeyayno badqabka, guriyeenta, iyo muhiimadaha caafimaadka dhimirka. Wuxaan ku faraxsanahay inaan u codeeyay maalgeshiyada hooya degdega ah iyo guriyeenta rasmiga ah, tababarka iyo kheyraadka sharci fulinta, daryeelka la balaariyay iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka ee dhallinyarada.

Anoo ka mid ah mulkiileyaasha kooban ee ganacsiyada yaryar ee Olympia, waxaan u dagaalamaa horumarinta shaqaalaha, kobaca joogtada ah ee dhaqaalaha, iyo shaqooyinka tamarta nadiifta ah. Hormuudka ka hortagga rabshadaha hubeysan, waxaan sii wadi doonaa dadaalkayga sugista ammaanka carruuta iyo bulshooyinka. Cod u ahdadka xaafadda ee LGBTQ iyo caafimaadka taranka, waxaan mar kasta u dagaalami doonaa xuquuqdeena iyo sirteena.



Garsoore Maxkamadda Sare Jagada Lr. 2

Sal Mungia

(206) 375-1374
info@salforjustice.com
www.salforjustice.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Dacwoode shaqo oo leh khibrad maxkamadeyn iyo rafcaan oo kala duwan; Karaani hore ee sharciga, Maxkamadda Sare ee Washington iyo Maxkamadda Degmada Federaalka ee Galbeedka Washington; Dhedhexaadiyaha Maxkamadda Sare ee Degmada Pierce ee hadda; Guddoomiyihii hore, Ururka Qareennada Gobolka Washington & Ururka Qareennada Degmada Tacoma-Pierce.

Khibrad Xirfadeed Kale: Macallin, Emory School of Law, Barnaamijka Kessler-Eidson ee Farsamooyinka Maxkamadeynta; Macallin, Machadka Qaranka ee u doodista Maxkamadeynta.

Waxbarashada: Jaamacadda Pacific Lutheran—Shahaado Jaamacadeedka Cilmiga Siyaasadda, Magna Cum Laude; Xarunta Sharciga ee Jaamacadda Georgetown-J.D. (Shahaadada Sharciga), Cum Laude.

Adeegga Bulshada: Guddiga Regents, Jaamacadda Pacific Lutheran; Guddiga Vestry, Kaniisadda St. Luke's Episcopa; Guddoomiyihii hore, Kaalmada Sharci ee Washington; Guddoomiyihii hore, Guddiga Helitaanka Caddaaladda; Hoggaamiyihii hore, Guddiga Xuquuqul Insaanka Tacoma.

Bayaanka: Anigu waxaan ahay musharaxa keliya ee ay anxiyeen 8-eed ka mid ah 9-ka Garsoore ee Maxkamadda Sare ee Washington. In ka badan 100 garsoore ayaa aaminsan inaan ahay musharaxa ugu qalma xafiiskan. Sidoo kale waxaan ahay musharaxa keliya ee leh khibrad rafcaan oo la taaban karo ka dib markii aan ku dooday heer kasta oo maxkamadaha rafcaanka gobolka iyo federaalka oo ay ku jirto Maxkamadda Sare ee Mareykanka.

Waxaan ku soo barbaaray qoys ah dabaqada shaqeeya oo deganaa Lakewood. Waalidkayga waxay i bareen qiimaha ay leeyihiin dadaalka, caddaaladda, qoyska, iyo iiamaanka. Had iyo jeer dib ayaan wax ugu celiyya bulshada, oo ay ku jiraan inaan dadka u matalo si bilaash ah markii ay awoodi waayeen inay qareen helaan, u adeegista guddiyada agaasimeyaasha aan faa'iido doonka ahayn ee u heellan horumarinta helitaanka caddaaladda, iyo u ololeeynta sharci-dejiyeasha si ay u kordhiyaan maalgelinta gargaarka sharciga madaniga ah. Kor u qaiddida sinnaanta nidaamka sharciga waxay ahayd qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadayda.

40-kii sanno ee la soo dhaafay qareen ahaan waxaa la igu aqoonsaday xirfaddayda sharci, oo ay ku jirto in la igu magacaabay "Qareennada ugu Fiican Mareykanka" ilaa 2011kii. Waxaa "Saa'id Ugu Qalma" igu qiimeeyay lix urur oo ururka qareennada aha, waxaana i anxisisay Golaha Shaqaalaha ee Washington, Guddoomiye Inslee, Xeer Ilaaliyaha Guud Ferguson, iyo in ka badan 40 hoggaamiyeeyaa kale oo la doortay.

Waan idii kaga mahad celinaya taageeradiina, iyo codkiina.

Dave Larson

(206) 805-4024
campaign@larsonforwa.org
larsonforwa.org



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore Larson waa garsooraha keliya ee u tartamaaya jagadan; 16 sanno oo uu garsoore ahay iyo 23 sanno oo qareen maxkamadeed ahay.

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddiyada Garsoorka: Sharci-dejinta, Maxkamadaha Daaweynta, iyo Golaha Maxkamadaha Madaxa Banaan. Xubin ka tirsan Golaha Waxbarashada Madaniga ah, Garsooraha helay Abaalmariinta William Nevins ee waxbarashada madaniga ah, iyo Abaalmariinta Guddoomiyaha DMCJA ee ilaalinta madax-banaannida garsoorka.

Waxbarashada: Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Maamulka Dadweynaha, University of Puget Sound; J.D. (Shahaadada Sharciga), Dugsiga Sharciga ee Seattle University.

Adeegga Bulshada: 2022 "Hoggaamiyaha Bulshada ee Ugu Fiican", 2018 iyo 2020 "Geesiga" Dugsiyada Federal Way. Wuxuu dhigay St. Vincent DePaul Parish. Xubinta Kiwanis, halkaas oo uu ka aasaasay Aktion Club, oo loogu talagalay dadka qaba naafanimada koriinka.

Bayaanka: Garsoore Dave Larson waa musharaxa keliya ee leh khibrad garsoore. Garsoore Larson waa musharaxa keliya ee leh diiwaanka ka ilaalinta dambiyada ee bulshadeena. Garsoore Larson waa musharaxa keliya ee wada obole dhaqameed laba xisbi ah. Garsoore Larson waxa uu ogyahay in Washington ay leedahay dastuurka gobolka ee ugu wanaagsan Mareykanka, kaas oo siinaya ilaalintu xooggan xuquuqdeenna madaniga ah marka loo eego dastuurka Mareykanka. Wuxuu ilaalintu doonaa xuquuqda shahsiga.

Dhammaanteen waynu ognahay in dambiga uu yahay arrin halis ah oo Garsoore Larson wuxuu haystaa rikoor ku dhawwaad labaatan sanno ah inuu naga ilaalinyo dambiyada ka garsoore maxkamadeed ahaan. Dib-u-habeyntisa cusub ayaa laga aqoonsaday dalka oo dhan; qaar badan oo ka mid ah fikradihiisa waxaa qaatay sharci-dejinteen. Dib-u-habeyntaan waxa taageeray garsooreyaal kale, taliyeyaasha booliiska iyo sharifyada, duqa magaalooyinka, sharci-dejinta, iyo dadka sida tooska ah ula shaqeeya kuwa qaba ku tiirsanaanta darioogada iyo cudurrada dhimirka ee aan la daaweyn.

Garsoore Larson waa musharaxa keliya ee wada obole ku wajahan Dimuqraadiyiinta iyo Jamhuuriyiinta, Shaqaalaha iyo Ganacsiga, Bariga iyo Galbeedka Washington, iyo muwaadiniinta maalin walba. Waxaan ku noqon karnaan nidaam maxkamadeed oo siyaasad yar oona la aaminni karo haddii aad u codeyso Garsoore Larson.

Hoggaanka Garsoore Larson, hal-abuurnimadiisa, caqligiisa, anshaxiisa, iyo u heellanaanta caddaaladda ayaa ka dhigaysa waxa aan uga baahanahay Maxkamadda Sare ee gobolkeena.

Maxkamadda Sare ee Gobolka

79



**Garsoore Maxkamadda Sare
Jagada Lr. 8**

Steve Gonzalez

(206) 682-7328
info@justicegonzalez.com
justicegonzalez.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Hadda iyo Garsoore ilaa 2012. Toban sanno oo garsooraha Maxkamadda Sare ee Degmada King ah. Kaaliye Hore oo Qareenka Mareykanka ah, Dacwad ooje Xadgudubyada Qoyska ah, iyo qareen dhanka ganacsiga ah.

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiyaha Labaad ee Guddiga Maamulka Garsoorka. Guddoomiye Hore, Guddiga Helitaanka Caddaaladda gobolka, Guddiga Tarjumaannada iyo Maxkamadda Safra iyo Guddiyada Amniqa Maxkamadaha. Macallin qaran oo qaabilسان dacwadaha argagaxisada caalamiga ah. Macallin dhanka Sharciga Dastuurka Gobolka ah Jaamacadda Gonzaga.

Waxbarashada: JD, UC Berkeley. Shahaado Jaamacadeedka Adabka oo Sharaf la socoto, Pitzer College. Aqoonyahanka Dhaqaalaha ee Rotary International. Abaalmarinta Shahaadada Jaamacadda Ugu Sareysa oo uu ka qaataj Gonzaga iyo University of Puget Sound.

Adeegga Bulshada: Xubin guddiga, Machadka Hoggaaminta Washington, Carwada Shaqooyinka ee Northwest Minority. Wuxuu dugsiyada ka dhigaa maadada cilmiga bulshada, wuxuuna tababaraa ardayda.

Bayaanka: Garsoore Maxkamadda Sare Steve Gonzalez waa nin xaas leh oo aabbe ah kaasoo xirfad gaar ah u leh u adeegista bulshada Washington iyo ilaalinha hufnaanta nidaamkeena garsoorka. Wuxuu qoraa aragtiyo cadcad kuwaas oo taageeraya xaquuqaheena iyo sharciga.

Wuxuu tobanaan sanno ku qaataj Garsooraha Maxkamadda Sare ee Degmada King wuxuuna sharaf ku helay inuu ahaa u halgamaa helitaanka caddaaladda iyo sinnaanta. Ka qareen ahaan, wuxuu eedeeyay argagaxisanimo, fal dambiyeedyada nacaybkha ah, iyo dhibaatooyinka qoysaska. Wuxuu sidoo kale ahaa qareen ganaci wuxuuna si joogto ah u sameeyay shaqo bilaash ah oo loogu tala galay dadka aan iska bixin karin.

Garsoore Gonzalez waxaa loo magacaabay "Tababaraha Sannadka" iyo Garsooraha ugu Wanaagsan Sannadka" waxaana u magacaabay dhowr urur, oo ay ku jiraan Washington State Bar. Waxaa lagu qiimeeyay "U qalmidda Wanaagsan ee aan Caadiga ahayn" waxaana ku qiimeeyay toban urur, waxaana ka mid ah Veterans Bar, Joint Asian Bar, iyo Qareenada Dumarka ah ee Washington.

Garsoore Gonzalez wuxuu haystaa taageerada labada xisbi. Waxaa taageeray saaxiibadiisa Maxkamadda Sare iyo garsooreyaasha iyo hoggaamiyeeyasha la doortay ee gobolka oo dhan. Wuxuu sidoo kale haystaa taageerada balaaran ee bulshada. Liis dheer oo taageereyaashiisa ah ayaa laga heli karaa JusticeGonzalez.com.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.



**Garsoore Maxkamadda Sare
Jagada Lr. 9**

Sheryl Gordon McCloud

(425) 466-0619
[justicesherylmcccloud@gmail.com](mailto:justicesherylmccloud@gmail.com)
justicesherylmcccloud.org



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Loo doortay Maxkamadda Sare ee Washington sannadkii 2012 dib loo doortay 2018 ayadoo in ka badan 25 sanno qareen guul gaar; waxay macallin kasoo noqotay nus gelin Kulliyadda Sharciga ee Seattle University

Khibrad Xirfadeed Kale: Guddoomiyaha, Guddiga Maxkamadda Sare ee Jinsiga iyo Caddaaladda; Xiriiriyya Golaha Difaaca Dadweynaha Ururka Bar; Xubin, Guddiga Xeerarka Maxkamadda, oo mas'ul ka ah maamulka dacwadaha dhammaan gobolka - sida xeerarka diiradda saaraaya takoorka isirka ee xulashada golaha garsoorka; qaataj abaal marinnada Qareennada Dumarka Washington iyo Ururka Cardozo

Waxbarashada: J.D. (Shahaadada Sharciga), Kulliyadda Sharciga ee University of Southern California; Shahaadada Jaamacadda ee Adabka, State University of New York at Buffalo

Adeegga Bulshada: Hadal jeediyaha joogtada ah ee munaasabahaha dugsiga, bulshada, sharciga, iyo munaasabahaha maxkamadaha

Bayaanka: Garsoore McCloud ayaa kasoo qayb gashay kiisaa waaweyn oo ay Maxkamadda ka shaqeysay tobankii sanno ee lasoo dhaafay. Go'aanadeeda ayaa tixgelin gaar ah siinaaya xuquuqda dastuuriga ah iyo xorriyadda madaniga ah. Madax banaannida garsoorka ee McCloud waxaa tiir dhexaad u ah shaqadeeda muddada dheer ee qareenka, ayadoo kasoo biloonday qareenka dadweynaha. Waxay markasta wakhti siisaa u adeegsiga macaamiisha asaliyiinta ah, oo badanaa loolanka ugu adag la gala dowladda.

Ka garsoore ahaan, cadaaladdeeda, shaqada adag, qoraalka qeexan, iyo garaadka ayay ku heshay abaal marino, taageerooyin, iyo toban qiimeynada "Leh Khibradda Khaaska ah" oo ay ka heshay kooxaha kala duwan ee daafaha gobolka. Waxaa taageera Dimuqraadiyiinta, Jamhuuriyiinta, Dadka madaxa Banaan, iyo hoggaamiyeeyasha Bulshada - kuwaasoo dhammaantood aaminsan muhiimadda garsoor madax banaan iyo qaunuunka sharciga.

Taageerada waxaa ka mid ah 12 ka mid ah garsooreyaasha hore iyo kuwa hadda ee Maxkamadda Sare; 150 garsooreyaasha gobolka oo dhan ah; Golaha Siyaasadda Dumarka Gobolka ee Washington; Xeer Ilaaliyaha Guud ee Hore ee Rob McKenna, Duqa Hadda ee Magaalada Seattle Bruce Harrell; Ururka Garsooreyaasha Qabiilka ee Waqooyi-Galbeed; Guddiga Shaqalaha Gobolka Washington; Ururka Ilaalinta Bii'ada ee Washington; Ururada Waxbarashada ee Washington PAC; Dimuqraadiyiinta Degmada King, Pierce, iyo Snohomish. Liiska buuxa ee qiimeynada iyo taageerooyinka ka fiiri: www.justicesherylmcccloud.com



Garsoore Jagada Lr. 4

Leonard J. Feldman

(425) 466-0619
feldmancampaign@gmail.com
feldmancampaign.org



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore Maxkamadda Rafcaanka ee Washington, la doortay lana magacaabay 2013; Barafasoor, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle, 2020-hadda; qareen hawlaha gaarka ah oo leh khibrad balaaran oo kala duwan, oo ay ku jiraan doodaha Maxkamadda Sare ee Mareykanka, 1992-2022; Karaaniga Sharciga Garsoorka, Maxkamadda Rafcaanka Qaybta Sagaalaad, 1991-1992

Khibrad Xirfadeed Kale: Machadka Qareennada Rafcaannada ee Mareykanka; Ururka Qareennada Rafcaanka ee Washington; King County Bar Association Qaybta Hawlaha Rafcaanka

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, Harvard Law School, magna cum laude, 1991; Shahaadado Jaamacadeedka Cilmiga, University of Washington, summa cum laude, 1987

Adeegga Bulshada: Mutadawac joogto ah xagga hoy' la'aanta; 2006 qaatay Abaalmarinta Washington State Bar Association Pro Bono (Lacag La'aan Ku Adege) taasoo ku saabsanayd dadaalka aan caadiga ahayn ee lagu bixinayo adeegyada sharciga bilaashka ah ee la siinayo kuwa aan qareenka lacagtiiisa iska bixin karin

Bayaanka: Garsoore Feldman waxaa Maxkamadda Rafcaanka u magacaabay Guddoomiyaha Gobolka wuxuuna xilkaas haystay ilaa laga gaarayay doorashadii 2023-kii dhacday. Markii hore, Garsoore Feldman wuxuu ahaa qareen guuleystay oo rafcaannada qaabilسان kaasoo leh khibrad ka badan 30 sanno oo ah qaybo kala duwan oo balaaran, oo ay ka mid yihiin ilaalinta macaamiisha, xuquuqaha bulshada, tallaabootiyinka fasalka, caymisyada, iyo xuquuqaha naafanimada. Wuxuu ka dooday tobanaan jeer maxkamadaha rafcaanka ee Mareykanka iyo kuwa Washington iyo laba jeer oo Maxkamadda Sare ee Mareykanka ah.

Garsoore Feldman wuxuu sidoo kale khibraddiisa sharciga keenay Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle halkaas oo uu macallin ka ahaa fasallada sannadka koowaad iyo kuwa sareba wuxuuna sii wadaa barista fasallada sare ee habeenkii la dhigto. Wuxuu daabacay maqaalo badan oo ku saabsan mawduucyada sharciga ee kala duwan wuxuuna wax ka qoray buug ku saabsan sharciga waxyeellada qofka.

Garsoore Feldman waxaa aad uga go'an adeegga bulshada. Wuxuu si mutadawacnimo ah uga shaqeeyay tabbare rafcaannada ah iyo isku Duwaha barnaamijka pro bono, wuxuu si joogto ah adeeggiisa u siinayay si bilaash ah dadka aan awoodin inay iska bixiyaan caawinaadda sharciga, wuxuuna shaqadaan ku helay abaal marino fara badan.

Waxaa taageeray: Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo Dimuqraadiyiinta Degmada 1-aad, 5-aad, 33-aad, 41-aad, iyo 48-aad

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayannada cabbirka.



Garsoore Jagada Lr. 7

Janet S. Chung

(425) 312-3840
retainjudgejanetchung@gmail.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsooraha Maxkamadda Rafcaanka tan iyo 2022. 25+ sanno oo gargaarka sharciga rayidka ah; u qareemidda caddaaladda jinsiga ee aan faa'iido doonka ahayn; shuruucda ganacsiga gaarka ah iyo shaqaalah; karaaniga sharciga federaalka.

Khibrad Xirfadeed Kale: Barafasoor, qorista shuruucda iyo siminaarka tababarka sharci dejinta, Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Seattle. Bare, barnaamijka waxbarashada rayidka ee D.C.

Waxbarashada: Shahaadado Jaamacadeedka Adabka, Jaamacadda Yale; Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda Columbia; Sharciga Dumarka iyo wehelnimada Siyaasadda Dadweynaha, Dugsiga Sharciga Jaamacadda Georgetown.

Adeegga Bulshada: Wuxaan ka shaqeeyay guddiyo ururo badan, Guddiga Talo Bixinta Xeerarka Shaqaalaha Seattle, Sinnaanta Jinsiga iyo Lacagta Xoogsatada ee Magaalada Seattle, iyo guddiyada Qareennada Dumarka ah ee Washington, Garfield HS PTS, Eeshiyaanka Amerika ee Jasiradda Baasifigga ee Xoojinta Madaniga, PEPS.

Bayaanka: Garsoore Chung waxay safka kusoo kordhinaysaa khibrad gaar ah ka ahaan sharci dejije iyo u qareeme siyaasadda gargaarka sharciga madaniga iyo kooxaha ka shaqeeyaa danaha bulshada ee aan faa'iido doonka ahayn. Waxay si dhow ula socotaa baahiyaha aan la daboolin ee adeegyada sharciga iyo bulshada ee dadka dakhligoodu hooseeyo iyo sida sinnaan la'aanta kheyraadka u samaynayo dadka dhinaca nidaamka sharciga. Garsoore Chung waxay garowsan tahay muhiimadda dimuqraadiyadda bulshadu ay u leedahay sharciga, madax banaannida garsoorka iyo hufraanta, iyo xuquuqaha sharciga ee waxbarashada. Waxaa ka go'an ka shaqeeynta hiigsiga helitaanka caddaalad si aad loogu wada siman yahay oo sharciga dadkoo dhan ay ku helaa.

Garsoore Chung waxay xirfaddeeda inta badan ku bixisay u qareemidda dib u habeynta nidaamka si loo kordhiyo helitaanka daryeelka caafimaadka, caawinta dadka ka badbaada xadgudubka jinsiga ku salaysan, sare u qaadista ilaalinta hagaagsanaanta goobta shaqada, iyo xaqijintu la tacaamulidda bini'aadantinimo ee dadka xabsiyada ku jira. Waxaa loo aqoonsadyab aabdalmarino badan oo ku saabsan shaqadeeda ku aaddan sare u qaadista dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay ee ku jira xirfadda sharciga.

Waxay hadda ka shaqeysaa guddiga shuruucda Maxkamadda Rafcaanka iyo golaha gobolka u qaabilسان mashruuca Machadka Maxkamadaha Qaranka iyo Sayniska ee ku saabsan cilmiga yogta iyo Al-da. Garsoore Chung waa xubin loo doortay Machadka Sharciga Mareykanka.

Garsoore Chung waa gabar uu dhalay soo galooti reer Kuuriya ah, qareen jiilkii koowaad ah, iyo hooyo laba wiil leh.



Paul M. Crisalli

(360) 768-4489

judgepaulcrisalli@gmail.com

judgepaulcrisalli.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsoore Paul Crisalli waxaa Maxkamadda Sare ee Degmada King u magacaabay Guddoomiye Jay Inslee sannadkii 2023. Ka hor magacaabistiisa, wuxuu kasoo shaqeeyay in ka badan toban sanno Kaaliyaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Washington.

Khibrad Xirfadeed Kale: Wuxuu Karaani u soo noqday Garsooraha Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington Mary Fairhurst, iyo Garsooraha Maxkamadda Rafcaannada ee Washington Joel Penoyar iyo Labo Guddoomiye Kale oo Rafcaan.

Waxbarashada: Shahaadada Jaamacadda, Willamette University; J.D. (Shahaadada Sharciga), University of Oregon School of Law

Adeegga Bulshada: Waxaan guddoomiye u soo noqday Guddiyada Ururka Qareennada ee Gobolka ee Xeerarka Maxkamadda iyo Taloooyinka Garsoorka; Xubinta Hore ee Guddiga Ururka Bar ee Degmada King iyo Guddoomiyaha Waaxda Rafcaanka; wuxuu hoggaanshaa barnaamijyo baraya nidaamka maxkamadda ardayda da'da dugsiga; wuxuu si joogto ah u tababaraa ardayda sharciga iyo qareennada da'yarta ah.

Bayaanka: Judge Crisalli ayaa shaqadiisa dhan ku qaataj adeegga bulshada. Ka garsoore ahaan, wuxuu ku go'aamiya kisisaka dhex-dhexaadnimo, caddaalad, iyo qadarinta dhammaan dadka maxkamadda hor yimaada. Wuxuu si taxaddar leh u dhegaystaa dhammaan dhinacyada doodooda u soo gudbinaaya Maxkamadda, wuxuuna xaqijiyyaa in xukunkiisu yahay mid wakhtigisa dhaca, la heli karo, oo qeexan.

Ka hor intuusan maxkamadda ku biirin, Crisalli ayaa ku soo matalay Gobolka arrimo badan oo la xiriira fulinta maaliyadda ololaha, badqabka shaqaalaha, difaaca daryeelka caafimaadka taranka, xuquuqda soo galootiga, iyo kasoo kabashada waxyeellada duurjoogta iyo lacagaha gunnada shaqo la'aanta aafada caabuqa ee la xaday. Wuxuu u soo garsooray kiisas la xiriira dacwada gobolka iyo federaalka iyo maxkamadaha rafcaanka dhammaan Washington.

Judge Crisalli waxaa taageeray Garsoore kasta oo Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington ka mid ah; mid kasta oo ka mid ah 53 qof ee kala soo shaqeeyay Maxkamadda Sare ee Degmada King; Xeer Ilaaliyaha Guud Bob Ferguson; Dimuqraadiyinta Degmada King; Dimuqraadiyinta Xaafadaha 46-aad, 41-aad, 36-aad, 33-aad, 12-aad iyo 5-aad; iyo dhowr iyo toban kale oo garsooreyaasha hadda iyo kuwa hawlgabka ah iskugu jira, ururada, iyo hoggaamiyeayaasha bulshada. Garsoore Crisalli waxaa inuu Xirfad Qaas ah leeyahay u aqoonsaday Ururka Qareennada ee Latino/a ee Washington, waxaana inuu xirfad sare leeyahay u Aqoonsaday Ururka Qareennada ee Degmada King, QLAW, Guddiga Isku dhafka ah ee Garsoorka ee Eeshiyaanka, iyo Ururka Cardozo.

Wuxuu jecel yahay inuu wakhti la qaato xaaskiisa iyo labadiisa gabdhood ayagoo soo daawada Pacific Northwest.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Andrew C. Schach

(509) 800-7037

judgeandrewschach@gmail.com

judgeandrewschach.com



Khibradda Sharciga/Garsoorka: Garsooraha Sharciga Maamulka Schach wuxuu khibrad u leeyahay aagag badan oo sharci ah waxaana loo doortay guddiyo agaasimeyaal badan.

Khibrad Xirfadeed Kale: Garsooraha Sharciga Maamulka (ALJ), Xafiiska Dhegaysiga Maamulka ee Gobolka Washington; Mulkiilaha iyo Maamulaha Xeer Ilaaliyaha, shirkad sharci socdaalka qaabilسان oo gaar loo leeyahay

Waxbarashada: Shahaadada Sharciga, University of the Pacific; Shahaado Jaamacadeedka Mastarka ee Maamulka, University of Missouri; Shahaadada Jaamacadda ee Cilmiga Maamulka Duulista, University of Central Missouri

Adeegga Bulshada: ALJ Schach waa xubin firfircoo oo bulshada ka tirsan, oo ay ku jirto u adeeggida qareenka socdaalka bilaashka. Wuxuu xubin ka ahaa waxna kasoo baray Kulliyadiisa Sharciga iyo tababareyaasha sharciga ee shakhsiyadka ah.

Bayaanka: Ka Garsoore Sharci Maamul (ALJ), ALJ Schach wuxuu u adeegaa dadka degan Washington. ALJ Schach wuxuu raadiyaa inuu sheeko dhammaystiran ka helo ka qayb galeyaasha dhegaysiga, weydiinaya su'aalo si ay u helaan xaqiiqooyin khuseeya, oo ku dabaga xaqiiqooyinkaas sharciyada gobolka. ALJ Schach wuxuu guddoomiyey ku dhawwaad kun dhagaysi. Xukunka garsoorku waa in aanu noqon mid ku dhisan fikrada shakhsi ah, laakiin waa in lagu saleeyo daacadnimada garsoorka, madax banaannida garsoorka, naxariista iyo ixtiraamka sharciga.

Ka hor inta uusan noqon Garsoore Sharci Maamul, ALJ Schach wuxuu laaha shirkad sharci oo uu ka aha qareen difaaca socdaalka. Ka Qareenka socdaalka ahaan, ALJ Schach wuxuu difaacyad dadka magangalyo doonka ah, isaga oo ku hagaya shakhsiyadka nidaamka socdaalka si ay ugu biiraan waddankeena quruxda badan.

ALJ Schach waxaa ka go'an u adeeggida dadweynaha. ALJ Schach waxa hore loogu magacaabay Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington Pro Bono Publico Honor Roll ka dib markii uu ka shaqeeyay in ka badan konton saacadood bilaash ah sannadkii. Sidoo kale waxaa loo xushay 2024 Liisaska Xidigtan Rising Washington ee ay magacaabaan Super Lawyers (Qareenno Sare).

ALJ Schach wuxuu ku dhashay Magaalada Kansas, Kansas. Waa qareen jiiikii koowaad. Hadda wuxuu raadinayaa inuu ugu adeego dadka degan Degmada King si caddaalad ah, dhedhexaad ah, iyo si daacad ah.

Hal shay oo ay

SHAQAALAHAD DOORASHADA dooneyaan inaad ogaaato...

Codeyntu maaha keliya mudnaan iyo mas'uuliyad, waxay sidoo kale gacan ka geysataa qaabaynta iyo qeexidda degmadeena, gobolkeena, iyo qarankeena. Mudnaanta Doorashooyinka Degmada King waa in meesha laga saaro caqabadaha luqadda iyo bixinta doorashooyin sax ah, ammaan ah, oo la heli karo.



Signe C.

Isku-duwaha Helitaanka
Luqadda iyo Wacyigelinta -
Khabirka Luqadda Shiinaha

Isku day sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta oo cusub! Haddii midka aad mar walba u tagto uu yahay mid ciriiri ah, waxay u badan tahay in ay jirto dookh ah mid taraafik yar oo kuu jirta dhowr baloog. Wuxaad si sahlan ah u heli kartaa meelaha kuugu dhow ee sanduuqa lagu rido adiga oo hubinaaya webseedkeena ama si fudud u eega lifaaqa warqadda codbixinta ee ku jira xirmadaada warqadda codbixinta.



Mallori D.

Hogaamiyaha Ururinta
Warqadda Codbixinta

Ardayda jaamacadda ee ka tagaaya aagga waxay ka qayb qaadan karaan doorashooyinkooda maxalliga ah ee halkan Degmada King! Way nala soo xiriiri karaan waxaana hubin doonaa inay warqadahooda codbixinta ka helaan qolalka ay seexdaan.



Darivanh V.

Khabirka Doorashooyinka

Sanduuqyadeena rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ayaa ah ikhtiyaar weyn oo loogu talagalay codbixiyeasha. Sanduuqyada lagu rido ayaa ah hab ku habboon oo lagu hubinaayo in warqaddaada codbixinta tahay mid sugar oo loo tiryo wakhtigii loogu talagalay. Keliya iska hubi inaad halkaas tagto ka hor 8 p.m. oo fiidnimo Maalinta Doorashada!



Joseph B.

Hogaamiyaha Habeynta
Warqadda Codbixinta

Xarunta doorashooyinka ayaa ujeeddo ahaan loo dhisay si loogu habeeyo warqadaha codbixinta! Sida saamanka oo ku soo laabanaaya guriga, warqad codbixin kasta oo lagu codeeyay waxaa lagu soo celiyaa Xarunta si loogu habeeyo xarunteena casriga ah, xarun aamin ah oo ay wataan shaqaale tababaran oo u heellan bixinta doorasho sax ah, sugar, oo la heli karo ee dhammaan codbixiyeasha Degmada King.



Courtney H.

Khabirka Isgaarsiinta



Garsoore Jagada Lr. 7

Peter Peaquin

(425) 466-0619
judgepeterpeaquin@gmail.com
judgepeterpeaquin.com



Waxbarashada: JD (Shahaadada Sharciga), Tulane University; BA (Shahaado Jaamacadeedka Adabka), Western New England College; National Judicial College, 2023

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayaanka: Garsoore Peaquin waxaa loo magacaabay kursiga maxkamadda degmada isagoo aqlabiyyad buuxda ay ugu codeeyeen Golaha Degmada King bishii Nofeembar 2023. Waxaa loo qiimeeyay inuu yahay mid "Si Gaar ah u Qalma" oo ay u qiimeeyeen Ururka Qareennada Degmada King iyo 5 Urur Qareen oo dheeraad ah.

Waxa uu ku soo kordhinaya garsoorka in ka badan 30 sanno oo ah waayo-aragnimo qareen, asagoo shaqo ahaan ku taqasusay difaaca shakhsiyaadka lagu soo eeddeeyay fal-dambiyeedka yar iyo dambiyada weyn - wax kasta oo laga soo bilaabo dambiyay yaryar ilaa dil -- wuxuuna ka shaqeeeyay ilaa boqolaal dacwo oo la horgeeyay xeerbeegto. Wuxuu qareen u noqday dadweynaha danta yar kana soo jeeda dadka laga badan yahay, waxay Garsoore Peaquin u suurto gelisay inuu barto dhibaatooyinka la soo gudboonaada kuwo badan oo hor yimaada Maxkamadda Gobolka. Markuu qareen u noqday dadka dareemaaya arrimaha caafimaadka habdhaqanka iyo ku tiirsanaanta maandooriyaha, wuxuu leeyahay aqoon ku aaddan sida ay u qalaf santayah masiibada haysata bulshadeena.

Ka hor inta aan loo magacaabin garsoorka, Garsoore Peaquin wuxuu ahaa garsoore ku meel gaar ah, kana soo noqday dhowr maxkamadood oo ah kuwa dowladda hoose, wuxuu kaloo guddoomiye maxkamad ka haa Maxkamadda Degmada, iyo isagoo soo noqday Garsooraha Sharciyada Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington.

Garsoore Peaquin wuxuu ku nool yahay Kirkland isaga iyo xaaskiisa oo ay is qabeen 32 sanno. Waxa taageeray Dimuqraadiyiinta Degmada King iyo dhammaan ururada ku jira Degmada Sharci Dejinta ee Eastside, iyo sidoo kale Ururka Shaqaalaha Ironworkers Local 86 iyo Machinists (IAM 751).

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiiqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.



Garsoore Jagada Lr. 1

Raul Martinez



(425) 466-0619
judgeraulmartinez@gmail.com
www.judgeraulmartinez.org

Waxbarashada: JD (Shahaadada Sharciga), Seattle University School of Law, 2001; B.A. (Shahaado Jaamacadeedka Adabka), Law and Diversity (Sharciga iyo Kala Duwanaanta), Western Washington University, 1995

Shaqo iyo Xirfad: Garsooraha Maxkamadda Degmada ee Degmada King

Bayanka: Garsoore Martinez waxa loo magacaabay Maxkamadda Degmada ee Degmada King cod aqlabiyyad ah ee Golaha Degmada King Janaayo 2023. Waxaa loo qiimeeyay inuu yahay mid "Si Gaar ah u Qalma" oo ay u qiimeeyeen Ururka Qareennada Degmada King iyo shan Urur Qareen oo kale. Waxa si weyn u taageeray in ka badan 60 garsoore iyo saraakiil badan oo la soo doortay, qareenno, iyo hoggaamiyeysaasha bulshada.

Garsoore Martinez waxa uu fahamsan yahay caqabadaha adag ee horyaalaa maxkamadaha, sida cudurka faafa ee maandooriyaha obiyoodka ee taariikhiga ah, nidaamka caafirmaadka dhimirkha ee aan la maalgelin, iyo in dad badan aysan awood u lahayn inay qabsadaan qareenno. Waxaa uu rumaysan yahay in maxkamaddeenu ay u qalanto iskaashi, garsooreyaal aqoon sare leh oo ay ka go'an tahay caddaaladda si ay wax uga qabtaan caqabadahaan oo kale.

Taariikhda shakhsi ahaanneed ee garsoore Martinez ayaa ku beertay go'aan qoto dheer oo ku aaddan caddaaladda, sinnaanta, iyo badqabka dadweynaha. Waa wiil ay dhalleen shaqaale beeraley ah oo tahrilibeeyal ah, wuxuuna goob joog u ahaa colaad iyo balwad. Waxa kale oo uu keenayaa 21 sanno oo waayo-aragnimo xirfadeed oo kala duwan, isagoo ahaan jiray Ku-Xigeenka Dacwad Oogaha Sare ee Degmada King, u doode bulsho, qareenka rafcaanka, iyo la-taliyaha sharciga ee ganacsiyada iyo hey'adaha dowladda. Waayo-aragnimadiisa waxay ku war gelinaysaa shaqada uu qabto maalin kasta waxayna u oggolaataa inuu keeno go'aanno macquul ah oo caddaalad ah oo raacaaya sharciga.

Garsoore Martinez adeegyadiisii hore ee bulshada waxaa ka mid ah adeegga Guddiyada Mashruuca Caddaaladda ee Northwest iyo Ururka Qareennada Latin-ka ah. (Boards of Northwest Justice Project and the Latina/o Bar Association).

Seattle/Degmada King

HAGAHA CODBIXIYEYAASHA OO FIDIYOOW AH

Taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeeda ee degmada oo dhan iyo cabbirrada warqadda codbixinta ee Seattle iyo dhammaan degmada King oo dhan, Golaha Degmada King ee Magaalo Weynta, Dekedda Seattle, Magaalada Seattle, iyo musharaxiinta Guddiga Dugsiga Seattle waxaa lagu martiqaaday inay duubaan muuqaal laba daqiiqo ah oo sharaxaaya cidda ay yihiin iyo sababta ay u tartamayaan.

- Si toos ah uga dhegayso musharaxiinta!**
- Bayaannadu waa ilaa iyo laba daqiiqo oo lama tafatirin**
- Musharaxiinta waxay u kala horeeyaan sida ay ugu qoran yihiin warqadda codbixinta**



 seattlechannel.org/elections



Seattle King County




seattle
CHANNEL

Hagaha Codbixiyeyaasha ee Fiidiyowga ah ee aan xisbina raacsanayn waa wada shaqeynta Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle, TV-ga Degmada King, iyo Janaalka Seattle.

Ma isticmaashay Foojarradaada Dimuqraadiyadda?

Waa maxay Barnaamijka Foojarrada Dimuqraadiyadda?

Jago ayaa waxay ka banaannaatay Golaha Magaalada Seattle Jagada 8. Sannadka 2024-ka waxaa dhici doona doorasho lagu sii buuxinaayo jagadaas ilaa ay ka dhacayso doorashada caadiga ahayd ee 2025-ka. Jagadan waxaa doorta oo ay matashaa magaalada oo dhan.



Sababtoo ah waxaa magaalada Seattle sannadkan ka jira hal tartan oo keliya, Guddiga Anshaxa iyo Doorashooyinka ee Seattle waxay dadka degan siinayaan oo keliya laba, \$25 Foojarrada Dimuqraadiyadda ah.

Musharaxiintee ayaan siin karaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Iska hubi si aad u xaqijiso in musharaxa aad jeceshahay uu isticmaalaayo Foojarrada Dimuqraadiyadda. Ka hel liiska musharaxiinta ka qayb qaadanaya halka seattle.gov/democracyvoucher ama wac (206) 727-8855.

Goorma ayaan isticmaalaa Foojarradayda Dimuqraadiyadda?

Foojarradaada Dimuqraadiyadda waxaad isticmaali kartaa laga bilaabo wakhtiga aad hesho ilaa iyo Nofeembar 29, 2024. Laakiin, musharaxiinta ayaa waxay heli karaan oo keliya tiro xaddidan oo foojarrada ah. Haddii muddo dheer u sugto isticmaalka foojarrada, ayay u badnaan kartaa in musharaxiintaadu ay gaareen xadka foojarradooda.

Waxaa iga lumay Foojarradayda Dimuqraadiyadda. Ma codsan karaa foojarro cusub?

Haa! Wuxuu codsan kartaa Foojarro Dimuqraadiyad cusub adiga oo webseedka ka buuxinaaya foomka oonleenka, iimeel ugu dir halka democracyvoucher@seattle.gov, ama adigoo soo wacaya (206) 727-8855.

Haddii aan isticmaalo Foojarradayda Dimuqraadiyadda, macluumaadkaas ma loo shaaciyya dadweynaha?

Haa, ku-deeqidda ololeyaasha, oo ay ku jiraan Foojarrada Dimuqraadiyadda, waa macluumaad dadweyne. Tani waxay ka dhigan tahay in magacaaga (iyo laga yaabo ciwaankaaga guriga), qofka aad wax ugu deeqday, iyo caddadka lagu daabaci doono oonleenka.

Su'aalo? Nala soo xiriir!

seattle.gov/democracyvoucher | democracyvoucher@seattle.gov | (206) 727-8855



Golaha Jagada Lr. 8

Alexis Mercedes Rinck

(206) 705-9305
info@alexisforseattle.com
alexisforseattle.com



Waxbarashada: Shahaadada Mastarka ee Maamulka Dadweynaha, UW Evans School; Shahaado Jaamacadeedka Adabka, Syracuse University

Shaqqo iyo Xirfad: Kaaliyaha Agaasimaha Siyaasadda, Qorshaynta iyo Hawlgallada Gobolka, UW

Bayaanka: Siyaasadaha kala qaybsanaanta ayaa dhibaato ku ah magaaladeena, waddankeena, iyo mustaqbalkeena. Waaan u tartamaya si aan u mideeyo Seattle si aan horumar uga samayno in dadweynaha awood u yeeshaan inay helaan guryo la awoodi karo, wanaajinno amniga dadweynaha, anagoo ilaalinayna xuquuqda shaqaalaha iyo la horumariyo wax ka qabdarka cimilada.

Waayo bayaankanya isbeddelka wanaagsan- iyo waayo aragnimada aan u leeyahay horumarinta miisaaniyadda iyo dejinta xalalka iyo qorsheyaasha waxaan kasbaday *taageerada keliya ee* urur kasta oo ka tirsan Xisbiga Dimuqraadiga ee fadhiisu yahay Seattle iyo Golaha Shaqaalaha MLK.

Iyada oo aan ku shaqeeynaayo siyaasad ku dhisan xog iyo natijjooyin la gaari karo, waxaa si taas la mid ah ii wargelisa taariikhdayda shakhsii ahaanneed iyo waxaan soo arkay nolosha. Waxaa i dhalay dhallinyaro da' yar ah oo soo maray dhibaatooyin la xiriira dhacdooyinka burcadda hubeysan iyo isticmaalka maandooriyaha iyo hooy la'aanta, waxaan awooday inaan gaaro kartidayda taasoo aan uga mahad celinaayo awooowe iyo ayeeyo i jeclaa, macallimiin heer sare ah, iyo galbihii oo aan ka mid ahaa oo tagi jiray Boys & Girls Club (Naadiga Wililasha iyo Gabdhaha).

Halganka –qoyskayga laga bilaabo dhibaataada nooga timid maandooriyaha ilaa guri la'aanta na walwalisy- ayuu u eg caqabado badan oo ka taagan Seattle. Waan ka gudbi karnaa arrintaan soo noq noqotay anagoo dhisayna isbahaysi fikradha dhinac walba, si loo helo guryo la awoodi karo, iyo si aan u maalgashano amniga dadweynaha ee shaqeeya, oo aan hubinno in qof walba uu haysto fursad uu ku horumaro.

Marka aad ii codeyso, waxaan samayn doonaa iskaashiyo si xal loogu helo caqabada Seattle anoo adeegsanaaya xalalka la xaqiijiy iyo is fahan. Qorshe *amni dadweyne* yareeyaa dambiyada iyo dhibka, ilaaliya halista hubka, iyo hela shaqaalo ku filan inay qabtaan arrimahaan. *Guryo la awoodi karo* si ay dadka waayeellada, qoysaka danta yar, hawkarka ah, iyo kirysteyaasha aniga oo kale ah ay ugu noolaadaan magaalada aan jecel nahay oo ay u dhistaan hanti jil. Wax ka qabdarka *cimilada* oo ay ku jiraan xalal sida gaadiidka dadweynaha oo la isku halayn karo, waddada dadka maraan, iyo kaabayaasha dhqaalaha oo aan si xun u saamayn deegaanka (cagaaran). *Dakhli horumarka leh si loo dheelitiro* miisaaniyaddeenna- ilaalinaysa adeegga aasaasiga ah oo kor u qaadaya xaafado wanaagsan oo daryeel leh.

Marka laga soo tago kooxaha Dimuqraadiga waxaa i taageeraya Madaxa Fulinta Dow Constantine; Xubinta Golaha Degmada Teresa Mosqueda; Xubinta Golaha Degmada Tammy Morales; Senataryaasha Saldaña & Frame; Wakiilada Macri, Reed, Alvarado & Farivar; UAW 4121, UFCW 3000, SEIU 1199NW & ka badan! Waxaa sharaf ii ah inaan ahay musharaxa keliya ee ku jira tartankan ee ay "ansixiyeen" Isbahaysiga Mas'uuliyadda Hubka (Alliance for Gun Responsibility).

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiijqda ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Tanya Woo

(206) 657-6679
info@wooforseattle.com
wooforseattle.com



Waxbarashada: B.A. (Shahaado Jaamacadeedka Adabka), University of Washington.

Shaqqo iyo Xirfad: Xubinta Cusub ee loo magacaabay Golaha Magaalada, mulkiilaha ganacsii yar, u doodaha bulshada.

Bayaanka: Anigoo ku soo koray bartamaha Seattle, waxaan goob joog u ahaa xooggaa bulshadeena iyo xaaladda degdegga ah ee dhibaatooyinkeena. Shaqadayda Golaha Deegaanka waxaa dhaqaajiyaa run fudud: ma horumari karno ilaa aynu midba midka kale kor u qaadno mooyaane. Waxaan aaminsanahay magaalaa ay badqabka, fursadda, iyo caddaaladda aanay ahay hami oo kelya, balse waa xaqiijo jirta. Aragtidayda waa in aan dhisno Seattle adkaysi leh, naxariis badan, oo loo wada dhan yahay—goob qof kasta oo degan, laga bilaabo kuwa ugu yar ilaa inta noo nugul, ay ku noolaan karaan sharaf iyo rajo.

Dhinacyo iyo dhibaatooyin badan ayay Seattle la halgamaysaa. Dhibaataad guryo la'aanta iyo badqabka dadweynaha, waxaan wali aragnaa saameynta siyaasadiihii hore ee fashilmay.

Waxaan u baahanahay Golaha Magaalada oo aan ka cabsanayn inuu qabto shaqada. Hoggaamiye bulsho ahaan, waxaan abaabullay kooxo badbaado oo bixiya gargaar wadajir ah oo ku xira derisayadeena aan guriga lahayn adeegyada muhiimka ah. Waxaan maamulay Narcan iyo CPR; waxaan qabtagtad aan ka badbaadin xad-dhaafkooda maandooriyaha. Waxaan hubin doonaa hab dheelitiran oo maalgeliya barnaamijiyyada bulshada, gargaarka degdegga ee koowaad, iyo isbeddel kale ee la shaqeeya hey'adaha magaalada marka aan la dagaalamayno rabshadaha hubka.

Waxaan dhisay guryo la awoodi karo iyo, Golaha dhexdiisa, waxaan ka shaqeeyayaa inaan dhisoo guryo la awoodi karo oo dheeraad ah, oo taageero leh, oo buuxiya daldaloolada muhiimka ah. Waxaan codsan doonaa khabiirro badan oo ku taqasusay caafimaadka habdhaqanka inay ka shaqeeyaan waddooyinka iyada oo loo maraayo kooxda CARE ee la balaariy. Waxa kale oo la joogaa wakhtigii la beddeli lahaa sharciyada xaddidaaya wacyigelinta iyo in la caawiyo kuwa dhibaataaysan. Waa in aynaan sugin in wax dhaco si booliisku ay u bixiyaan caawinaad.

Waxaan u baahanahay hoggaamiyeaal aan ka cabsanayn inay maraan waddooyinka Seattle - hoggaamiyeasha garab istaaga bulshadeena wakhtiyada adag, dhegaysta, oo kuu dagaalami doona. Si wadajir ah, aan u dhisno Seattle badqab leh oo kor u qaadda oo awoodi siisa qof kasta!

Waxaa taageeraaya: Seattle Times, Saaxibada Golaha Magaalada Seattle (7 ka mid ah 8), Ururka Dab-damiska Seattle, Guddoomiyihii hore ee Gobolka Gary Locke, iyo qaar kale oo badan.

Cabbirka Hindisaha Lr. 2066

Cabbirka Hindisaha Lr. 2066 ayaa khuseeya nidaaminta adeegyada tamarta, oo ay ku jiraan gaaska dabiiciga ah iyo koronto-siinta.

Cabbirkan wuxuu dib uga noqonayaan ama mamnuucayaa sharciyo iyo qawaaniinno qaarkood oo niyad jab ku ah isticmaalka gaaska dabiiciga ah iyo/ama kor u qaadaaya koronto-siinta, wuxuuna qaar ka mid ah adeegyada iyo dowladaha hoose uga baahan yahay inay gaaska dabiiciga ah siiyan macaamiisha u qalma.

Ma tahay in cabbirkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Xoghayaha Gobolka mas'uul kama aha waxa ku jira nuxurka bayaannada ama doodaha (WAC 434-381-180).

Bayaanka sharaxaadda

Waxaa qoray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

Sannadkaan horaantii, Golaha Sharci-dejinta Washington waxa uu ansixiyay sharci nidaaminaaya Puget Sound Energy (PSE), oo ah adeeg weyn oo gaaska iyo korontada siyya macaamiisha. Sharciagaas waxaa loo yaqaan "Xeerka Kaarboonka Lagu Baabi'inaayo ee Washington."

Xeerka Kaarboonka lagu baabi'inaayo wuxuu xoojiya warbixinta iyo qorshaynta tirada badan ee PSE oo uu isugu geeyo hal qorshe, kaas oo ay tahay in loo gudbiyo Guddiga Adeegga iyo Gaadiidka Washington (Washington Utilities and Transportation Commission, UTC). Qorshuu waa inuu saadaaliyaa baahida tamarta macaamiisha oo uu bixiyaa hindise qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse) looga dhimmayo hawlgalladiisa. Qorshaha PSE waa inuu sharaxaa sida ay uga gudbi doonto gaaska dabiiciga ah uguna gudbi doonto koronto si qaab kharash-kuool ah iyo sida ay ula jaan qaadi doonto tamarta deegaanka marka ay beegsanayso aag koronto dheeri ah. Go'aaminta in la aqbalo ama la diido qorshaha, UTC waa inay tixgelisaa inay yarayso qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo, buuxiya bartilmaameedyada waxtarka tamarta, oo ay kharash macquul ah u keento macaamiisha.

Xeerka Kaarboonka lagu baabi'inaayo ayaa sidoo kale ka mamnuucaya PSE inay siiso macaamiisha lacag celin ama dhiiragelin si ay u iibsadaan qalabka isticmaala gaaska dabiiciga ah. Taa beddelkeeda, PSE waa in ay macaamiisheeda bartaa faa'iidooyinka u-guurka korontada iyo helitaanka lacag-celin ama dhiiragelin qalab koronto oo tayo leh.

Xeerka Kaarboonka lagu baabi'inaayo ayaa sidoo kale dejija shuruudaha sida ay UTC u go'aamiso qiimaha macaamiisha PSE. Tusaale ahaan, waxay beddeli doontaa sida UTC ay tahay inay u xisaabiso qiimo-dhaca dhirta gaaska marka la go'aaminayo qiimaha.

Saamaynta Cabbirka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixiyo

Haddii la oggolaado, Cabbirka Hindisaha Lr. 2066 ayaa dib uga noqon doona ama wax ka beddeli doona qodobbada qaarkood ee Xeerka Kaarboonka lagu baabi'inaayo. Gaar ahaan, Cabbirka Hindisaha Lr. 2066 wuxuu mamnuucayaa qorsheyaasha heerka PSE ee xaddidaaya gelitaanka adeegga gaaska iyo shuruudaha qorshaynta ee ka dhigaaya adeegga gaaska mid aan la awoodi karin. Waxay PSE u oggolaan doontaa inay bixiso lacag celin si ay u iibsadaan alaabta gaaska dabiiciga ah ama qalabka oo PSE loogama baahna inay macaamiisha barto faa'iidooyinka koronto-siinta ama helitaanka lacag-celinta qalabka tamarta waxtarka leh. Wuxa kale oo ay meesha ka saari doontaa shuruudaha PSE ay bar tilmaameedsanayso meelaha qaarkood ee koronto-siinta iyo isku-dubaridka adeegga tamarta ee maxalliga ah si loo sii kordhiyo.

Cabbirka ayaa sidoo kale hey'adaha adeegga tamarta gaaska iyo dowladaha hoose uga baahnaan doona inay gaaska dabiiciga ah siyaan macaamiisha dalbanaaya, xitaa haddii adeegyada kale ee tamarta ama ilaha tamarta la heli karo. Waxay kaloo dowladaha hoose, wakaaladaha xakamaynta wasakhowga hawada, iyo Golaha Xeerka Dhisitaanka ee Gobolka ka mamnuuci doontaa inay mamnuucaan, ciqaabaan, ama ay niyad jabiyaan isticmaalka gaaska.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka Saamaynta Maaliyadda

Waxaa qoray Xafiiska Maamulka Maaliyadda. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo www.ofm.wa.gov/ballot

SAAMAYNTA MAALIYADDA OO LA SOO KOOBAY

Haddii codbixiyeyashu ay ansixiyaan Hindisaha 2066, waxaa jiri doona koror saafi ah oo kharashaadka gobolka ee hawlaho xeer-dejinta ee wakaaladaha gobolka oo dhan \$29,100. Waxaa jiri kara koror dakhliga gobolka sababtoo ah Shirkadaha Adeegga Tamarta sida gaaska oo u baahan inay iibsadaan gunnooyinka xaraashka kaarboonka iyo kororka dakhliga canshuuraha tamarta dadweynaha, laakiin caddadka dakhliga kordhay lama garanaayo. Dowladaha hoose waxay yeelan doonaan kharash kordin si ay dib ugu habeeyaa qaar ka mid ah shaqada qorshaynta Xeerka Maareynta Kobaca, laakiin wadarta kharashyada sidaas lagu samaynayo waa kuwo aan go'aamin. Laba magaalo oo ka shaqeeya tamarta gaaska ayaa kordin kara kharashyada gunnooyinka xaraashka kaarboonka, laakiin kharashyadas sidoo kale waa kuwo aan la go'aamin.

Malaynta Guud

- Taariikhda dhaqan galka waa Diseembar 5, 2024.
- Qodobbada hindisaha waxay khuseeyaan mustaqbalka, maaha kuwo dib-u-dhac ah.
- Qiyaasaha ayaa isticmaalaya sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julaay 1 ilaa Juun 30. Sannad xisaabeedka gobolka 2025 waa Julaay 1, 2024, ilaa Juun 30, 2025

Dakhliga Gobolka

Waaxda Deegaanka

Marka loo eego Sharciga Ballanqaadka Cimilada, Waaxda Deegaanka ayaa maamusha barnaamijka Cap-and-Invest (Xaddid-oo-Maalgeli), kaas oo dejinaaya guud ahaan qiiqa kaarboonka ee gobolka oo u baahan ganacsiyada inay helaan gunnooyinka qiiqa kaarboonka oo la mid ah qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee daboolan. Sida ku cad barnaamijka, gaas kasta oo mas'uul ka ah 25,000 metric ton ama in ka badan oo ah qiiqa kaarboon laba ogsaydh u dhigma sannadkii ayaa looga baahan yahay si uu u helo gunnooyin qiiq ah oo la mid ah qiiqiisa. Hey'adaha gaaska ayaa hadda helaya gunnooyin siideynta bilaashka ah si ay uga caawiyaan yaraynta culayska kharashka ee ka guurista shidaalka. Sannadka 2024, adeegyada waxay helayaan gunnooyin la mid ah 86% ka mid ah qiiqa wasakhda ah ee ay isticmaalaan, lacagtaasna waxay hoos u dhacaysaa 7% sannadkii oo socda.

Initiative 2066 waxa ay ka mamnuuci doontaa adeegyada gaaska dabiiciga ah in ay u fidyaan macaamiisha dhiirigelin si ay u joojiyaan adeeg gaaska dabiiciga ah oo u baahan yahay adeegga tamarta bixinta gaaska dabiiciga ah si ay u bixiyaan adeegga gaaska dabiiciga ah kuwa dalbaday. Isbeddelkaan waxa uu keenni karaa in adeegga tamarta looga baahan yahay inay iibsadaan gunnooyin ka badan intii la filaayay sida uu dhigaayo sharciga hadda jira, taasoo keentay in baahi weyn loo qabo xaraashyada gunnada, taas oo kordin karta qiiimaha lagu bixiyo gunnooyinka oo ay dhaliso kororka dakhliga xaraashka kaarboonka ee gobolka. Sababtoo ah baahida mustaqbalka ee gaaska dabiiciga ah lama garanaayo, isbeddel kasta oo ku yimaada dakhliga gobolka waa mid aan go'aamin.

Waaxda Dakhliga

Sida hindisahan qabo, waxaa jiri kara saamayn ku aaddan canshuuraha tamarta dadweynaha ee la ururiyo. Waaxda Dakhliga ma go'aamin karto inta macaamiil isticmaali doonta gaaska dabiiciga ah ama inta ay ku qaadanayo tas-hiilaadka si ay u siyaan dhammaan isticmaalaayasha aagga adeeggooda; sidaas darteed, wadarta guud ee saamaynta ay ku yeelanayo dakhliga canshuuraha tamarta ee gobolka waa mid aan la cayimin.

Kharashaadka Gobolka

Kharashaadka hey'adaha dowladda ayaa lagu qiyaasay inay yihiiin

wadarta guud ee \$29,100 shanta sanno ee maaliyadeed ee gobolka natijada hindisaha. Kharashyada iyo keydka wakaaladda waa:

Shaxda 1. Kharashyada wakaaladda (Sanduuqa Guud ee Gobolka iyo Xisaabta Wareegga ee Adeegyada Dadweynaha)

	SFY 2025	SFY 2026	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029
Golaha Xeerka Dhismaha Gobolka	\$5,400	\$43,700	\$0	\$0	\$0
Guddiga Adeegyada Tamarta iyo Gaadiidka	(\$20,000)	\$0	\$0	\$0	\$0
WADARTA	(\$14,600)	\$43,700	\$0	\$0	\$0

Golaha Xeerka Dhisitaanka Gobolka

Hindisaha wuxuu u baahan doonaa Golaha Xeerka Dhismaha Gobolka (SBCC) inuu wax ka beddelo tamarta kala duwan iyo xeerarka dhismaha ee xaddidaaya isticmaalka gaaska dabiiciga ah. Si wax looga beddelo xeer-hoosaadkaas, SBCC waxa ay ku qabanaysaa shirar kooxeed la-talin farsamo, shirar guddiyo, shirar golaha, iyo dhiegaysi dadweyne oo meelo kala duwan oo gobolka ah. Waaxda Adeegyada Ganacsiga waxay ku qiyaastay in wadarta kharashka hawlaahaan uu ku noqon doono \$49,100

Guddiga Adeegyada Tamarta iyo Gaadiidka

Sharciga gobolka ee hadda jira (Cutubka 351, Sharciyada 2024) wuxuu uga baahan yahay Guddiga Adeegga iyo Gaadiidka (UTC) inay bilaabaan xeer-dejin. Haddii hindisaha la ansixyo, hawlaho xeer-dejinta ee hadda loo baahan yahay ee la xiriira qiiimaha dhimmista kaarboon iyo tallaabooyinka korontada looma baahna. Tani waxay hoos u dhigi doontaa kharashaadka UTC ee xeer-dejintaas ku dhawwaad \$20,000.

Waaxda Canshuurta Dakhliga

Waaxdu waxa laga yaabaa inay lahaato kharashyada maamul ee ugu yar, kuwaas oo aan la cayimin wakhtigan.

Kharashka Maxalliga ah

Barnaamijada Maxalliga ah

Saamaynta dakhliga iyo kharashka ee dowladaha hoose waa kuwo aan go'aamin.

Hindisahan waxa uu saamayn ku yeelan doonaa qorshaynta Xeerka Maareynta Kobaca ee 108 ka magaalo iyo degmo ee ugu waaweyn. Si loo gaaro yoolalka dhimmista qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (GHG) ee looga baahan yahay GMA, magaaloooyinka iyo gobollada waxay ku talagaleen inay ka baxaan gaaska dabiiciga ah qorshahooda. Haddii hindisaha la ansixyo, ma qaadan karaan joojinta gaaska dabiiciga ah si loo gaaro yoolka qiiqa GHG. Sidaa darteed, shaqada qorshaynta ee GMA ee ay dhammaystireen magaaloooyinka iyo degmooyinka ee yoolka dhimmista qiiqa GHG waxay u baahan doontaa in dib loo habeyo. Dib u eegista waxaa ku jiri doona suuq geyn iyo wacyigelin ku saabsan yoolalka cusub ee qiiqa GHG, dib u eegis iyo dhaqan gelinta xeerarka maxalliga ah, iyo wax ka beddelka qorsheyaasha maxalliga ah, kuwaas oo ku kala duwanaan doona magaalo iyo degmo. Maadaama doorsomeyaa badan aan la garanayn, kharashyada waa kuwo aan la garanayn.

Laba degmo oo Washington ah waa bixiyeyaa gaaska dabiiciga ah waxaana looga baahan yahay inay ka qaybaataan barnaamijka xaddid-oo-maalgeli ee Sharciga Ballanqaadka Cimilada: Magaalada Enumclaw iyo Magaalada Ellensburg. Haddii I-2066 la ansixyo, magaaloooyinkaan waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay iibsadaan gunnooyin deheri ah ee qiiqa kaarboonka si ay u gutaan waajibaadkooda hoos yimaada Sharciga Ballanqaadka Cimilada si loo yareeyo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo wakhti ka dib. Si kastaba ha ahaatee, wadarta guud ee saamaynta ay ku leeyihiin adeegyadaan lama ogaan karo wakhtigan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka lagu taageerayo

Ku codee "Haa" si aad u Ilaaliso Dookha Tamarta oo aad u Joojiso Mamnuucidda Gaaska

Waxaad u qalantaa dookha ah inaad gaas dabiici ah oo nadiif ah oo hufan u isticmaasho *kulaylinta* iyo *karinta*. Dowladda iyo shirkadaha waaweyn ee adeegga tamarta ayaa wada heshiisyoo lagu mamnuucayo adeegga gaaska dabiiciga ah ee dhamaan guryaha iyo ganacsiyada. I-2066 wuxuu *ilaaliya* awooddaah ah isticmaalka gaaska dabiiciga ah - kaasoo ku *siinaya* xakamaynta dookhaaga adeegga tamarta.

Mamnuucidda Gaaska Waxay Dhaawacdaa Qof Walba

Mamnuucidda gaaska waxay saamayn doontaa qof walba, haddii aad leedahay ama aad kireysato gurigaaga. Waxay kor u qaadaan biilasha adeegga tamarta, taas oo dhibaato u ah dadka dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa go'an. Sharciga hadda jira wuxuu u baahan yahay mulkiyeeyaha guri inay bixiyaan *dhammaan* Qiimaha beddelka ee loogu beddelo gaaska oo loo beddelo qalabka korontada - celcelis ahaan \$40,000 gurigiiba. Qofna waa in aan waligeed la *qasbin* si aad u beddesho dhamaan qalabka korontada ku shaqeeya. Codeynta "Haa" ee ku aaddan I-2066 waxay joojisaa beddelka qasabka ah waxayna u oggolaataa dadka inay doortaan naftooda inay rabaan gaaska ama qalabka korontada guriga.

Ganacsiyada Yaryar Waxay u Baahan Yihiiin Gaaska Dabiiciga ah

Kumanaan ganacsi ayaa ku tiirsan gaaska dabiiciga ah. Makhaayado aan tiro lahayn, warshado wax-soo-sameeya, cuntooyinka dhaqanka, warshadeeyeyaasha, iyo kuwa kale waxay u baahan yihiiin gaas si ay u sameeyaan cuntada iyo badeecadaha heer caalami ee Washington caan ku tahay. I-2066 waxay ka dhigtaa ganacsiyadaan inay furmaan, waxay ilaalisaan shaqooyinka, waxayna hoos u dhigtaa kharashaadka macaamiisha.

Gaaska Dabiiciga ee Nadiifka ah Waa Ammaan oo La Isku Halayn Karo

Ilaali helitaanka kulaylinta iyo karinta cuntada marka ay korontada baxdo. Shirkadaha waaweyn ee adeegga tamarta ayaa ku wargeliyay macaamiisha inay jarayaan korontada marka (ma aha haddii) shabakadaha bixinta korontada ay xad dhaaf noqdaan, xitaa inta lagu jiro qaboowga, jiilaalka muddiga. Washington waxay u baahan tahay gaas dabiici ah oo nadiif ah oo la isku halayn karo si loogu sugnaado diirin oo loo kariyo. Ku codee "Haa!"

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

I-2066 waa mid aad u fudud. Waxay ilaalisaan dookhaaga inaad hesho adeegga gaaska dabiiciga ah. Mucaaradku waxay rabaan inay ku jahawareeriyaan. Ma sheegaan gaaska dabiiciga ah sababtoo ah waxay og yihiiin inay tahay dookha macaamiilk ee caanka ah. Waxay doonayaa inay mamnuucaan ilaha tamarta nadiifka ah oo aad adiga bixiso kharashaadka. Maxaaad samayn doontaa marka korontada ay go'odo? Mamnuucidda gaaska ayaa horeba u sii dhacaysay, markaa ku codee "Haa" ku aaddan I-2066 si aad u ilaaliso dookha gaaska ee kulaylinta iyo karinta cuntada.

Waxaa qoray

Tiffany Turner, Mulkiilaha Hoteelka Boutique iyo Makhaayad; Tod Sakai, Guri-dhise iyo dib-u-habeeye; RJ Whitlow, Mulkiilaha Warshadda Khamriga; Alexa Lee, Mulkiilaha guri iyo hooyo; Dean Stoneburner, Injineerka Hawlgalka, IUOE 302 Xubinta Ururka Shaaqalaah; Jaz Mataru, MD Cudurrada Sambabada iyo Dhakhtarka Daryeelka Halista ah

Xiriirka: (360) 352-7800; contact@protectenergychoice.com;
ProtectEnergyChoice.com

Bayaanka looga soo horjeedo

Ku Codee Maya Si Aad Uga Hortagto Biilasha Sare ee Tamarta

2066 waxay ka dhigan tahay biilasha tamarta oo qarash badan noqda. Waxay u baahnaan doontaa in shirkadaha tamarta ay sii wadaan maalgelinta teknolojiyada gabooobay iyo kaabayaasha sii gabooobaya, kharashaadkana waxaa loo gudbin doonaa qoysaska iyo ganacsiyada. Codeynta "Maya" waxay ka dhigaysaa tamarta mid la awooddi karo, iyadoo ilalinaya dhammaan dadka reer Washington, oo ay ku jiraan waayeellada iyo qoysaska ku nool dakhli hooseeyo.

Ku Codee Maya Si Aad u Ilaaliso Waxtarka Tamarta

2066 waxay dib uga noqonaysaa heerar casri ah oo macquul ah oo ka dhigaaya guryaha iyo ganacsiyada tamar hufan. Dhismeyaasha waxtarka leh waxay hoos u dhigaan biilasha tamarta waxayna caawiyaan korontada inay sii socoto inta lagu jiro duufaannada, cimilada aadka u duran, iyo mowjadaha kulaylka ee sii kordhaaya. Ku codeynta "Maya" waxay hoos u dhigaysaa kharashaadka qoysaska, waxay dadka ku joogteynaysaa badqab, ka dhigaysaa guryaha kuwo raaxo leh, oo ay hubin doonta in la helo koronto la isku halayn karo.

Ku Codee Maya Si Aad U Difaacdoo Tamarta Nadiifka Ah Iyo Hawada Nadiifka Ah

2066 waxa ay wiiji doontaa dariiqyada tamarta nadiifka ah iyo dacifinta Sharcigeena Hawada Nadiifka ah, taasoo khatar ku ah ilaalinta caafimaadka ee wasakhogwa hawada waxyeellada leh. Waxay mamnuuci doontaa bulshooyinka maxalliga ah iyo shirkadaha adeegga tamarta inay sameeyaa qorsheyaan mas'uuliyadeed si loo yareeyo isticmaalka shidaalka wasakhaysan. Wakhtiga loo baahan yahay in la bilaabo qorshaynta waa hadda: Ku codeynta "Maya" waxay nagu hayn doontaa waddadlii aan ku heli lahayn tamar ka sii nadiifsan tii hore, oo la awooddi karo.

Ku Codee Maya Si Aad Bulshooyinka u Geliso Doorka Koowaad Oo Aad u Joojiso Kooxaha Danaha Gaarka ee Awoodda Leh

2066 waa qayb ka mid ah dadaalka dalka oo dhan oo ay wadaan shirkadaha shidaalka iyo kooxaha sida wanaagsan loo maalgeliyay kuwas oo doonaya in ay sameeyaan lacag inta ugu badan ee suurto galka ah halka qoysaska Washington ay bixiyaan biilasha sare ee Tamarta. Ku codeynta "Maya" waxay ka ilaal doontaa kuwa danaha gaarka ah ee leh awoodda inay sii kordhistaan faa'iidooyinkooda ka yimaada kharashkeena. 2066 way u xun tahay Washington.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Sharciga gobolku wuxuu horey u dammaanad qaadayaa in dadku ay heli karaan gaaska dabiiciga ah haddii ay rabaan. Kooxaha awoodda badan ee danaha gaarka ah leh ee kharash garaynaaya 2066 waxay doonaan bay iska sheegaayaan si ay lacag nooga dul sameeyaan. Waa hindisahan jahawareerka ahi uu dhab ahaantiit uu qaban doono waa ka joojinta tuulooyinka, magaaloooyinka iyo degmooyinka inay gaaraan go'aannada sida ugu wanaagsan ugu shaqeeya bulshadooda. Waxay kor u qaadi doontaa kharashaadka, waxay khatar gelinaysaa waxtarka tamarta, waxayna waxyeelynaysaa qoysaska. Taasi waa sababta kalkaliyeyaa, ganacsiyada yaryar, iyo kuwa wax dhisa ay u yiraahdaan "Maya" si loo ilaalio awoodda tamarta.

Waxaa qoray

Jenny Rae, Dhiseyaasha Chuckanut, Bellingham; Marcy Bowers, ExecDir, Shabakadda Waxqabdarka Saboolnimada ee Gobolka oo dhan; Devin Leingang, Maareeye Goboleedka, Ururka Shaaqalaah Saqafyada Birta ee 66; Mark Vossler, MD, Dhakhtarka Wadnaha, Dhakhaatiirta Washington ee Mas'uuliyadda Bulshada; Paul Tabayon, ExecDir, Isbahaysiga Jasirradaha Baasifigga Aasiya ee Yakima; Sabar Malaba, ExecDir, Guddiga Horumarinta Guryaha ee Seattle-King County
Xiriirka: (206) 981-3896; info@no2066.org; www.no2066.org

Su'aalaha Soo Noqnoqda ee Sanduuqa Rasmiga ah ee Warqadda Codbixinta

Ma jiraa sanduuq rasmi ah oo lagu rido warqadda codbixinta oo aniga ii dhow?


Haa! Waxaad lifaaqa ka heli kartaa 5 sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow, isla bogga uu ku qoran yahay istikarkaaga Waan Codeeyay.

Gudaha Degmada King, in ka badan 97% ee codbixiyeysaasha firfircoor ayaa ku sugar goob 3 mayl u jirta sanduuq rasmi ah ee lagu rido warqadda codbixinta. Liiska buuxa ee dhammaan sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ayaa laga heli karaa barta kce.wiki/DropBox.



Meeqa sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ayaa ku yaala Degmada King?

Waxaan hadda leenahay in ka badan 80 sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido oo ku wada yaala aagagga degmada. Laga soo bilaabo 2016, waxaan ku soo darnay in ka badan 70 sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta agagaarrada degmada!



Yaa warqadaha codbixinta ku ridi kara sanduuqa rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta?


Marka loo eego sharciga gobolka Washington, qof kasta ayaa warqadaha codbixinta ku ridi kara sanduuqa lagu rido! Waxaan kugula talineynaa inaad warqaddaada codbixinta adiga geysato, ama keliya aad u oggolaato qof aad ku aaminayo codeyntaada inuu kuu geeyo.



Sidee baan ku ogaan karaa in warqaddayda codbixinta ay ammaan tahay oo la tirin doono?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta ee Degmada King ayaa culayskoodu dhan yahay 1,000 rodol waxaana lagu dhejiyya shubka oo lagula dhejiyo musmaaro cabbirro culus leh. Sanduuqyada ma laha dalolo laga furi karo oo halka lagu soo celiyo warqadda codbixinta waxaa si gaar ah loogu naqshadeeyay inuu ku habboon yahay warqadda codbixinta oo keliya aan ahayn wax kale la gelin karin.

Sanduuqyada lagu rido ayaa waxaa si joogto ah u faarujiya shaqaale tababarantaa inta lagu jiro xilliga codeynta. Habeenka Doorashada, kooxaha tababarantaa ee shaqaalahaa Doorashooyinka oo xiran jaakadaha amniiga iyo shaarar summad leh ayaa goobta jooga si ay u caawiyaan codbixiyeysaasha iyo in ay xiraan oo qufullaan sanduuqyada lagu rido isla markiiba markay tahay 8:00 p.m. oo gaw ah.



Goorma ayay sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta furmaan?

Sanduuqyada rasmiga ah ee lagu rido warqadda codbixinta waxay furmaan maalin ka dib marka warqadaha codbixinta boostada lagu soo diro, waxayna furnaadaan 24 saac maalintii ilaa iyo 8:00 p.m. oo gaw ah Habeenka Doorashada.

Ku raad-raac warqaddaada codbixinta digniimaha warqadda codbixinta!

Waxaan kugula talineynaa inaad warqaddaada codbixinta ka raad-raacdoo halka kce.wiki/TrackMyBallot si aad u daawato horumarkeeda marka ay nidaamka ku dhix socoto. Wuxuu kala oo aad isku qori kartaa digniimaha warqadda codbixinta si aad u hesho digniimo qoraal taleefan ama iimeel oo toos ah marka warqaddaada codbixinta la habeeyo oo la tiriyo. Iska qor barta kce.wiki/BallotAlerts.



Cabbirka Hindisaha Lr. 2124

Cabbirka Hindisaha Lr. 2124 ayaa khuseeya caymiska daryeelka muddada-dheer ee gobolka.

Cabbirkan ayaa bixin doonaa in shaqaalaha iyo dadka iskood u shaqeysta ay doortaan in ay caymiska ku sii jiraan sida ku xusan RCW 50B.04 oo ay ka bixi karaan wakhti kasta. Waxaa kale oo uu dib uga noqonayaa sharciga xukumaaya ka dhaafitaanka loogu talagalay shaqaalaha. Cabbirkan wuxuu hoos u dhigi doonaa maalgelinta barnaamijka caymiska dadweynaha ee Washington oo bixisa dheefta iyo adeegyada daryeelka muddada-dheer.

Ma tahay in cabbirkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Xoghayaha Gobolka mas'uul kama aha waxa ku jira nuxurka bayaannada ama doodaha (WAC 434-381-180).

Bayaanka sharaxaadda

Waxaa qoray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

2019kii, Sharci-dejinta Washington waxa ay abuurtay barnaamijka daryeelka muddada-dheer ee dadweynaha kaas oo caadi ahaan loo yaqaan "WA Cares (Washington Way Danaysaa)." Barnaamijka wuxuu dadka buuxiya shuruudihiisa siinayaa ilaa iyo \$36,500 (oo lagu daraayo kororka ku saleysan sicir bararka) si ay u bixiyaan adeegyada daryeelka muddada dheer qaarkood, sida daryeelka caafimaadka ee guriga lagu kalkaaliyo.

Barnaamijka caymiska waxaa lagu maalgeliyya tabarucaadka qasabka ah ee ka yimaada inta badan shaqaalaha Washington. Loo-shaqueeyeyaasha waa inay ka jarraan 0.58 boqolkiiba mushaharka shaqaalaha. Ka qayb qaadashada waa qasab inta badan shaqaalaha hadday yihiin shaqaale buuxa, kuwo wakhti dhimman shaqeeya, ama shaqaale ku meel gaar ah. Ka jarrista mushaharka waxay bilaabatay Julaay 1, 2023.

Qaar ka mid ah shaqaalaha Washington ayaan wax ku tabarucin barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer mana u qalmaan dheefta barnaamijka. Guud ahaan, shaqaalaha federaalka, shaqaalaha qabiillada laga aqoonsan yahay dowladda federaalka, iyo dadka iskood u shaqeysta kama qayb qaataan barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer. Si kastaba ha ahaatee, qabiillada dowladda federaalku aqoonsan tahay iyo dadka iskood u shaqeysta ayaa dooran kara inay ka qayb qaataan.

Shaqaalaha qaarkood ayaa laga yaabaa inay codsadaan ka-dhaafitaanno ikhtiyaari ah ee ku aaddan ka qaybgalka barnaamijka. Shaqaalaha codsan kara ka-dhaafitaanka ikhtiyaariga ah waxaa ka mid ah halyeyadid hore ee leh naafanimo ku xiran adeegga militariga, lammaanaha ama lammaanayaasha diiwaan gashan oo qoys ahaan ula degan xubin ka tirsan militariga ee hadda ku jira adeeg militari, shaqaale ku meel gaar ah oo haysta fiisaha aan soo galootiga ahayn, iyo, isbeddelo dhawwaan lagu sameeyay sharciga, shaqaalaha ciwaankooda joogtada ah uu yahay meel ka baxsan Washington. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha helay caymiska daryeelka muddada-dheer ee gaarka ah ka hor Nofeembar 2021 waxay xaq u leeyihii inay codsadaan ka-dhaafitaan ilaa Diseembar 2022.

Ka qayb galeyaashu waa inay wax ku biiriyaan barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer ugu yaraan tiro sannado ah ka hor intaysan u qalmin inay codsadaan dheefaha. Guud ahaan, ka qayb galeyaashu waa inay wax ku biiriyaan mid ka mid ah (1) ugu yaraan toban sanno, iyada oo aan lahayn farqi shan sanno ama ka badan oo isku xigta, ama (2) saddex ka mid ah lixdii sanno ee la soo dhaafay ka hor taariikhda uu qofku codsanayo dheefaha. Qofka dhashay 1968 ka hor wuxuu heli karaa dheefta qayb ahaan iyadoo loo eegayo inta sanno ee uu ku darsaday barnaamijka.

Dheefta caymiska daryeelka muddada-dheer waxaa heli kara oo keliya shakhsiyadka u baahan in laga caawiyo ugu yaraan sadex hawlood oo nolol maalmeedka ah, sida wax cunista, ka soo degista sariirta, labiska, qaadashada daawooyinka, ama mayrashada. Intaa waxaa dheer, qofku wuxuu xaq u leeyahay dheefta keliya haddii ay da'doodu ka yar tahay 18 sanno. Dadka degan Washington, dheefaha ayaa marka ugu horeysay la heli karaa Julaay 1, 2026.

Saamaynta Cabbirka La Soo Jeediyyat Haddii La Ansixiyo

Haddii la ansixiyo, Cabbirka Hindisaha Lr. 2124 (I-2124) ayaa beddeli doona sida ka qayb qaadashada barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer u shaqeeyo. Shaqaalaha iyo dadka iskood u shaqeysta

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

ee hadda ka qayb qaadanaya barnaamijka waxay awoodi karaan inay joojiyan wakhti kasta. Qofkii doorta inuu ka baxo wax kharash ah kuma biirin doono barnaamijka mana u qalmi doono dheefta ah \$36,500.

I-2124 waxay sidoo kale u baahnaan doontaa in shaqaalaha ama dadka iskood u shaqeysta ee Washington ay doortaan inay ku sii jiraan caymiska hoos yimaada barnaamijka.

Cabbirkanka ma sheegaayo wakhtiga ama hannaanka shaqaalaha ama dadka iskood u shaqeysta ay midkood "u doortaan caysanaanta" ama ay ka baxaan barnaamijka. I-2124 waxa ay siin doontaa Waaxda Amniga Shaqaaleynya awood ay ku ansixiso xeerar si loo hirgeliyo shuruudaha cabbirka.

I-2124 waxay kale oo ay dib uga noqon doontaa sharcigii abuuray ka-dhaafitaanka ikhtiyaariga shaqaalaha iibsaday caymiska daryeelka muddada dheer ka hor Nofeembar 2021.

Bayaanka Saamaynta Maaliyadda

Waxaa qoray Xafiiska Maamulka Maaliyadda. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo www.ofm.wa.gov/ballot

SAAMAYNTA MAALIYADDA OO LA SOO KOOBAY

Haddii codbixiyeyashu ay oggolaadaan Hindisaha 2124, waxaa jiri doona kharashyo dheeraad ah oo gobolka ah oo ay ugu wacan tahay kharashyada maamulka. Kharashyada la qiyasay ee saddexda sanno ee xisaabeedka gobolka ee ugu horeeya marka la isku duro waxay u dhexeeyaa \$12,623,250 ilaa \$31,215,960. Waxaa jira hoos u dhac loo maleeyay inuu ku yimid dakhliga gobolka taas oo ay ugu wacan tahay shaqaalihii ka baxay barnaamijka oo aysan bixinin lacagta. Lama oga inta shaqaale ee hadda iyo kuwa mustaqbalka dooran doona inay sii wadaan ka qaybgalka barnaamijka. Sidaa darteed, wadarta guud ee saamaynta dakhliga iyo kharashka barnaamijka, oo ay ku jирто caddadka lagu bixinayo faa'iidooyinka mustaqbalka, waa kuwo aan go'aamin. Ma jiraan wax saamayn ah oo maaliyadeed oo dowladda hoose ah oo la og yahay.

Malaynta Guud

- Taariikhda dhaqan galka waa Diseembar 5, 2024.
- Kuwa dooranaya inay ka baxaan, ururinta lacagta qaaliga ah waxay joogsanaysaa maalinta koowaad ee rubaca kalandarka ka dib marka la codsado ka bixidda.
- Qodobbada hindisaha waxay khuseeyaan mustaqbalka, maaha kuwo dib-u-dhac ah.
- Shaqaalaha aan haysan ka-dhaafitaanka barnaamijka Adeegyada Muddada-dheer iyo Taageerada (LTSS) waxay sii wadi doonaan bixinta khidmadaha ilaa iyo inta ay si dhab ah uga baxayaan barnaamijka.
- Qiyaasaha waxay isticmaalaan sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julaay 1 ilaa Juun 30. Sannad xisaabeedka gobolka 2025 (SFY25) Julaay 1, 2024, ilaa Juun 30, 2025.

DAKHLIGA

Dakhliga Gobolka

Haddii aysan si kale uga dhaafin barnaamijka LTSS, Waaxda Amniga Shaqaaleynya (ESD) waxay ka ururisa khidmadaha qasabka ah ee shaqaalaha Washington iyadoo la raacayo heerka hadda ah 0.58% ee mushaharka shaqaalaha. Kharashyada la ururiy waxaa lagu meeleeyaa Koontada Aaminaadda Adeegyada Muddada-dheer iyo Taageerada si ay u daboosho lacag-bixinta waxtarka iyo kharashyada maamulka. Shaqaalaha doorta inay ka baxaan barnaamijka haddii hindisaha la ansixyo waxba kuma kordhin doonaan kharashaadkan mana heli doonaan faa'iidooyin.

Saadaasha dhabta ah ee hadda jirta waxay u malaynaysaa in dakhliga barnaamijka uu gaaraayo \$952 milyan sannadka maaliyadeed ee gobolka 2025, ku filan inay dabooshoo lacag-bixinta dhoeffaha laga bilaabo sannad-maaliyadeedka gobolka 2027 marka lagu daro khidmadaha hore looga soo ururiy Koontada Aaminaadda ee Adeegyada Muddada-dheer iyo Taageerada. Haddii hindisaha la ansixyo, lama garanayo inta shaqaale ee dooran doonta inay ka baxaan barnaamijka. Sidaa darteed, saamaynta dakhliga waa mid aan la go'aamin. Ujeeddooyin tusaaleyn ah oo keliya, haddii 25% ka yar ee khidmadaha la ururiyo, sannad-maaliyadeedka gobolka 2025 dakhliga wuxuu noqonayaa \$714 milyan. Haddii 75% ka yar ee khidmadaha la ururiyo, sannad-maaliyadeedka gobolka 2025 dakhliga wuxuu noqonayaa \$238 milyan.

Falanqeynta uu sameeyay Xafiiska Gobolka Dowladdu waxay muujinaysaa in haddii heerarka ka-qaybgal la'aantu ay aad u sareeyaa, Koontada Kalsoonida ee Adeegyada Muddada-dheer iyo Taageerada ay noqon karto lacag horaanta sannad-maaliyadeedka gobolka 2027.

Marka faa'iidooyinka ay helaan ka qaybgalayaasha LTSS ee xaqa u leh bisha Julaay 2026, waxaa jiri kara keyd macquul ah barnaamijka Medicaid ee la xiriira dib u dhigista isticmaalka adeegyada daryeelka muddada-dheer iyo taageerada ay bixiso Medicaid. Saamaynta suuerto galka ah ee hindisahan ee keydka Medicaid kasta waa mid aan go'aamin sababta oo ah saamaynta la saadaaliyay ee faa'iidada lacag bixinta lama qexxi karo mar haddii qaabka tirakoobka ee kuwa dooran lahaa inay ku sii jiraan barnaamijka aan la garanayn.

KHARASHKA

Hadda waxaa jira 4.1 milyan oo shaqaale ah gobolka Washington, iyadoo 3.9 milyan ay ka qayb qaadanayaan barnaamijka LTSS. Lama oga inta ka mid ah shaqaalahaas dooran doona inay ku sii jiraan barnaamijka. Sidaa darteed, kharashyada lagu qiyasay faa'iidooyinka iyo kharashyada maamulka waa kuwo aan go'aamin. Sababtaas awgeed, falanqeyntaan waxay tilmaamaysaa kharashyada la xiriira xaalado kala duwan, min 25%, 50% iyo 75% shaqaalaha dooranaya inay ka baxaan barnaamijka. Dhammaan kharashyada lagu xusay falanqeyntaan waxay ka iman doonaan dakhliga ku jira Koontada Aaminaadda ee Adeegyada Muddada-dheer iyo Taageerada.

Taageerada macaamiisha (Kharashyada aan la cayimin: SFY25: \$1,310,000; SFY26: \$584,000; SFY27 oo socota: \$236,000; iyo kharashyoo aan la cayimin)

Kooxo taageero macmiil oo dheeri ah ayaa looga baahan doonaa labadaba Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) iyo Waaxda Amniga Shaqada (ESD) si ay wax uga qabtaan kororka socda ee wicitaannada iyo weydiimaha dadweynaha. Hey'adaha ma filayaan hoos u dhac ku yimaada kharashaadkooda adeegga macaamiisha haddii ay dad yar doortaan inay ka qaybqaataan barnaamijka.

DSHS waxay bixisaa adeegga macaamiisha waxayna ka hadashaa su'aalaha iyo cabashooyinka barnaamijka LTSS, oo ay ku jiraan u gudbinta macaamiisha gaarka ah wakaaladaha kale ee ku habboon. Iyada oo ku xiran boqolleyda shaqaalaha doorta inay ka baxaan, oo loo maleeyo in 10% shakhsiyadkaas ay la xiriiri doonaan DSHS wicitaan shan daqiqo soconaysa, kororka kharashyada shaqaaluhu wuxuu bilaabmayaa Diseembar 2024.

Tirada shaqaalaha loo baahan yahay iyo kharashyada ku salaysan 25% ilaa 75% ee shaqaalaha dooranaya inay ka baxaan:

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

	SFY25	SFY26	SFY27
Tirada Shaqaalaha	5.3 ilaa iyo 13.5	7.3 ilaa iyo 17.9	4.7 ilaa iyo 10
Qiyaasta Qiimaha	\$577,000 ilaa \$1,409,000	\$740,000 ilaa \$1,775,000	\$483,000 ilaa \$994,000

Kharashyadan ka sokow, DSHS waxay u baahan doontaa inay iibsato adeegyada software iyo adeegyada la-talinta farsamada ee looga baahan yahay si loo hirgeliyo tignoolajiyada xarunta wicitaanka, oo ku kacaysa \$1,000,000 sannad-maaliiyadeedka gobolka 2025.

ESD waxay ururisaa oo qiimeysaa khidmadaha barnaamijka LTSS ee shaqaalaha. Sidaa darteed, ESD waxay u malaynaysaa in shaqada soo socota loo baahan doono:

- Sii adeegga macaamiisha shaqaalaha, oo ay ku jiraan shakhsiyadka iskood u shaqeysta, su'aalaha ku saabsan ilaalinta iyo ka bixista caymiska.
- Marka la codsado, u dir dukumeentiyada shaqaalaha laga yaabo inay siyyaan loo shaqeyeyasha ee ku saabsan ilaalinta caymiska barnaamijka.
- Ku taageer loo shaqeyeyaha warbixinta iyo lacag-bixinnada sare. ESD waxay ka baaraan degi doontaa lacag-celinta loo-shaqeyeyasha si khalad ah uga reebay shaqaalahooda.

ESD waxay u malaynaysaa in sannadka ugu horeeya, 15% macaamiisha ka baxay barnaamijka ay la xiriir doonaan waaxda su'aalo ama inay codsadaan caawinaad farsamo, iyada oo xiriir kasta lagu qiyasay 15 daqiyo. Sannadaha soo socda, heerkaas shakhsiyadka u baahan caawinaadda waxay hoos ugu dhici doontaa 10% kuwa doorta inay ka baxaan. Iyada oo la adeegsanayo 25%, 50% iyo 75% ee kala-duwanaanshaha, ESD waxay u malaynaysaa in kororka kharashyada shaqaaluuhu uu bilaabmayo Diseembar 2024.

Tirada shaqaalaha loo baahan yahay iyo kharashyada ku salaysan 25% ilaa 75% ee shaqaalaha doorta inay ka baxaan:

	SFY25	SFY26	SFY27
Tirada Shaqaalaha	18.8 ilaa iyo 66.6	24.5 ilaa iyo 89.5	18.8 ilaa iyo 71.9
Qiyaasta Qiimaha	\$1,921,890 ilaa iyo \$6,711,045	\$2,508,012 ilaa iyo \$8,990,311	\$1,940,348 ilaa iyo \$7,213,604

Kharashka SFY27 wuu sii socon doonaa sannad kasta ka dib.

Qiyaasahani waxay sidoo kale u malaynayaan in siddeed boos oo hadda jira oo ka shaqeeyaa ka-dhaafitaannada dib loo soo celin doono si ay u bixiyaan adeegga macaamiisha. Si loo taageero shaqaalaha adeegga macaamiisha ee dheeraadka ah, ESD waxay qiyastay inay u baahan tahay shan shaqaale oo dheeraad ah si ay u tababarto, qaabaynta hababka hawlalka, taageerada maaliyadeed iyo fulinta tallaabooyinka maamulka. Kharashyada shaqaalaha taageerada waa \$310,000 sannad xisaabeedka gobolka 2025, \$584,000 sannadka xisaabeedka gobolka 2026 iyo \$236,000 ee sannad xisaabeedka gobolka 2027 oo socda.

Kobcinta Teknolojiyada Macluumaadka (Kharashyada aan la cayimin: SFY25: \$883,000; SFY26 oo socota: \$31,000)

ESD waxay horumarin doontaa shaqeysta nidaamka IT si ay ugu oggolaadu shaqaalaha Washington awood ay kaga baxaan barnaamijka LTSS. Kobcinta nidaamkaan waxay qaadan doontaa ku dhawwaad 12 toddobaad in la dhiso oo la hirgeliyo, ESD-na waxay shaqaaleysiin doontaa shaqaalaha IT-ga iyo kooxaha iibiyeyasha si ay u dhammaystiraan shaqadan laga bilaabo Diseembar 2024 ilaa Febraayo 2025, oo lagu qiyasay inay ku kacayso \$835,000 sannad-maaliiyadeedka gobolka 2025 oo ay ku jiraan 3.4 shaqaale ah. Adeegyada iibiyeyasha iyo kooxaha shaqaalaha IT-ga ee loo baahan yahay waxaa ka mid noqon

doona horumarinta, waxqabadka, amniga iyo maamulka. Kharashyada kaabayaasha IT-ga waxaa lagu qiyasaa inay noqdaan \$48,000 sannad-maaliiyadeedka gobolka 2025 ee jawi tijaabo oo dheeri ah iyo awoodda xogta. Kharashadka socda ee awoodda xogta waa ku dhawwaad \$31,000 sannadkiiba laga bilaabo sannad xisaabeedka gobolka 2026.

Maaraynta badeecada (Kharashyada aan la cayimin: SFY25: \$587,000)

ESD waxay shaqaaleysiin doontaa kooxda maaraynta alaabta, oo ka kooban 4.3 shaqale ku meel gaar ah oo shaqeynaya ilaa Juun 30, 2025, oo ku kacaya \$587,000 sannadka xisaabeedka gobolka 2025, si loo hubiyo in sharciga si guul leh loo hirgeliyo iyadoo la isu dheelitirayo qiimaha, isticmaalka, suurtagalnimada, khataraha waaraaya iyo la shaqeysta daneeyayaasha.

Isgaarsiinta (Kharashka aan la cayimin: SFY25: \$426,000; SFY26: \$262,000; SFY27 oo socota: \$178,000)

ESD waxay ay horumarin doontaa oo ay hirgelin doontaa qorshayaasha isgaadhiinta si ay ugu diyaariso loo shaqeyeyaha iyo wakiilada loo shaqeyeyaha, sida bixiyayaasha mushaharka-bixinta dhinac saddexaad, isbeddelada shuruudaha xaraynta mushaharka. Kharashka aburista iyo faafinta macluumaadka iyada oo loo marayo maareeyayaasha 183,000 loo-shaqeyeyayaasha ayaa la filayaa inay noqoto \$89,000 boostadaba. ESD waxa ay filaysaa in ay diraan afar waraaqood sannad xisaabeedka gobolka 2025 (\$89,000 x 4 = \$356,000) iyo laba warqado sannadkiiba sannad xisaabeedka gobolka 2026 iyo sannad kasta ka dib (\$89,000 x 2 = \$178,000). Intaa waxa dheer, ESD waxa ay qorshayaasha in ay shaqaaleysiiso la taliye dhinaca xiriirka ah hal sanno oo ka bilaabmaysa Diseembar 2024 si ay ugu war geliso shaqaalaha iyada oo loo maraayo loo shaqeyehooda awoodda ay ku ilaalinayaan iyo ka bixista barnaamijka iyo in ay ku wargeliyaan loo shaqeyeyaha sida loo maareeyo caymiska barnaamijka shaqaalahooda iyo isbeddelada shuruudaha warbixinta.

Adeegyada sharciga, rafcaanka, xeer samaynta (Kharashyada aan ahayn kuwa cayiman: SFY25: \$90,000; iyo kharashyada cayiman)

Xafiiska Dhegaysiga Maamulka waxa laga yaabaa inuu la kulmo hoos u dhaca rafcaannada la saadaaliyay haddii shaqaale yar ay ka qaybqaataan barnaamijka. Sidaa darteed, keydinta qiyastii \$55,000 ilaa \$165,000 ayaa laga yaabaa in la xaqiijiyo iyadoo ku xiran boqolkiiba shaqaalaha doorta inay ka baxaan.

ESD waxa loo oggolaaday inay dejiso xeerar khuseeya isbeddelka barnaamijka ee lagu sameeyo hindisaha. Xeer-dejinta ayaa la filayaa inay ku kacyo \$90,000 sannad xisaabeedka gobolka ee 2025. Lama garanaayo heerka hagitaan sharcieedka ESD uga baahan doono Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si loo fuliyo xeerkarka iyo hindisaha. Sidaa darteed, kharash kasta oo la xiriira hagida sharciga waa mid aan go'aamin.

Lacagaha Faa'iidadda (Qiimaha aan la cayimin)

Faa'iidooyinka waxay heli karaan ka qaybgalayaasha xaqa u leh laga bilaabo sannad-maaliiyadeedka gobolka 2027. Saadaasha dhabta ah ee hadda jirta waxay u malaynaysaa in lacag bixinta dheefaha barnaamijka ay ku kacayso ku dhawwaad \$1.837 bilyan sannadka maaliyadeed ee dowladda ee 2027. Saamayn kasta oo hindisahan laga yaabo inuu ku yeesho faa'iidooyinka mustaqbalka ama kharashyada maamulka ee la xiriira waa kuwo aan la cayimi karin wakhtigan maadaama aan la garanay qaabka tirakoobka ee kuwa dooran lahaa inay ku sii jiraan barnaamijka.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka lagu taageerayo

Haa ku aaddan I-2124 waxay barnaamijka canshuurta mushaharka ee daryeelka muddada-dheer ka dhigaysaa dookh ikhtiyaari ah.

Barnaamijka daryeelka muddada-dheer waa canshuur mushahar oo qasab ah oo si toos ah looga maalgeliya jeegga mushaharka shaqaalaha. Shaqaalaha Washington waa inay lahaadaan dookha ah in lacagtooda sida adag ay kasbadeen loo qaato in lagu maalgeliyo barnaamijka. Codeynta "Haa" waxay canshuurta mushaharka ka dhigaysaa mid ikhtiyaari ah waxayna shaqaalaha siinaysaa dookha ah inay ku sii jiraan ama ay ka baxaan barnaamijka.

Haa ku aaddan I-2124 waxay siinaysaa qof kasta doorasho.

Waxaa jira taageero ka socota labada xisbi si loo ansixyo I-2124. In ka badan 500,000 oo shaqaalaha Washington ayaa mar hore doortay inay ka baxaan barnaamijka. Muddadii loogu talagalay ee ka bixitaanka barnaamijka ayaa ka xiran inteen kale. Codeynta "Haa" waxay muddadii loogu talagalay ee ka bixitaanka dib ugu furaysaa qof walba.

Haa ku aaddan I-2124 waxay abuuraysaa dabacsannaanta daryeelka muddada-dheer.

Marka loo eego qoysas badan, barnaamijka daryeelka muddada-dheer wuxuu dabooli doonaa oo keliya dhowr bilood oo daryeel ah. Waxaa laga yaabaa inay shaqaaluhu barnaamijka ku bixiyaan lacag ka badan inta ay waligood ka isticmaali doonaan. Lammaanaha is qaba, faa'iidooyinka looma wareejin karo lammaanaha. Shaqaalaha shaqeeya wakhtiga dhimman, dadka waayeellada, iyo qof kasta oo shaqeeya wax ka yar 500 saacadood/Sannadkii waa la canshuuri karaa oo waligiis ma heli doono dheefaha. Codeynta "Haa" waxay qof walba u abuurtaa dabacsannaanta daryeelka muddada-dheer.

Haa ku aaddan I-2124 waxay yaraynaysaa culayska maaliyadeed ee canshuurta mushaharka.

Sicir bararka ayaa durba saamayn ku yeelanaya dakhliga na soo gala oo nagu qasbaaya inaan go'aanno dhaqaale oo adag ku qaadano miiska jikada. Canshuur aan la jeclayn oo leh barnaamijk dowladeed oo aan caddaalad ahayn xal maaha. Codeynta "Haa" waxay yaraynaysaa culayska dhaqaale waxayna kordhisaa dakhliga qoyska.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

I-2124 waxay dhammaan shaqaalaha Washington siisaa ikhtiyaarka ah inay ka qayb galaan ama ka baxaan barnaamijka gobolka iyo canshuurta mushaharka ee qasabka ah. Ololaha danaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka waa inuuusan go'aamin go'aamada adiga iyo qoyskaaga kuugu fiican. Codbixiyeyasha Washington waa kuwo caqli badan oo ku filan inay go'aan ka gaaraan waxa naftooda u wanaagsan, qof kasta oo qaba xaalad hore ayaa ku jiri kara barnaamijka. Ku codee Haa I-2124 si aad shaqaalaha Washington u siiso kontaroolka daryeelkooda caafimaad ee muddada dheer.

Waxaa qoray

Mark Mullet, Senatarka Gobolka, Dimuqraadi; Curtis King, Senatarka Gobolka, Jamhuuri; Peter Abbarno, Wakiilka Gobolka, Jamhuuri

Xiriirk: (800) 562-6000; peter.abbarno@leg.wa.gov; www.RepresentativePeterAbbarno.com

Bayaanka looga soo horjeedo

I-2124 waxay naga qaadysaa dheefaha aan u baahanahay taasoo ay sababtay dhaawacyo, jirro, naafanimo, ama da'.

Khubarada ayaa sheegaaya I-2124 waxay naga qaadi doontaa barnaamijka caymiska daryeelka muddada-dheer ee Washington kaas oo na daboola marka aan naafo nahay, jirrano, ama da' gaarno. Waxay naga qaadi doontaa caymiskeena keliya ee la awoodi karo iyo dammaanadda aan haysano sababtoo ah Medikeerka iyo caymiska caafimaadka gaarka ah ma bixiyaan daryeelka muddada-dheer, kaas oo 70% naga mid ah u baahan doono mar uun.

I-2124 waxay kordhisaa kharashaadka, waxay in badan oo naga mid ah ku riixdaa deynta

I-2124 waxay ka qaadi doontaa lacagaha faa'iidda daryeelka muddada-dheer waxayna 3.9 milyan oo qof oo shaqeeya uga tagi doontaa suuqa caymiska daryeelka muddada-dheer ee jabay oo ah ikhtiyaarka keliya oo ay leeyihiin. Caymiska gaarka ah wuxuu kordhiyaa khidmadaha qaaliga ah, diida sheegashada caymiska, wuxuuna takooraa haweenka, isagoo ku dalacaaya ilaa 70% in ka badan ragga.

I-2124 waxay inta badan dhaawacdaa dumarka

In ka badan 800,000 oo reer Washington ah, oo u badan dumar, ayaa hadda ah daryeelyaal waalid oo aan mushahar la siin, soddogga, xaaska, ama qof kale oo la jecel yahay. I-2124 waxay kordhin doontaa cadaadiska haweenka si ay uga kala dhex shaqeeyaan shaqada, qoyska, oo ay siiiyan daryeel aan lacag lagu siin kuwa ay jecel yihii ee u baahan, taasoo saamaynaysa awooddooda dakhli.

I-2124 waxay waxyello u geysataa dadka taariikh ahaan leh kansarka, cudurka sokorta, ama dhiig karka

Marka loo eego I-2124, malaayiin qof oo leh xaalado hore u jiray ayaa laga tagi doonaa iyada oo aan lahayn ikhtiyaaro caymis ah maadaama shirkadaha caymiska gaarka ah ay si joogto ah u diidaan kuwa naga mid ah ee leh xaaladaha hore u jiray. I-2124 waxaa ka soo horjeeda Ururka Kalkaaliyeeyasha Gobolka Washington, AARP, Leukemia & Lymphoma Society, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington, U-doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan, Ururka Haweenka Codbixiyeyasha.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

I-2124 waa marin habaabin. Taasi waa sababta ay si adag uga soo horjeedaan Ururka Kalkaaliyeeyasha Gobolka ee WA, AARP, Ururka Haweenka Codbixiyeyasha, Leukemia & Lymphoma Society, iyo 100 ururo kale oo mataleya dhakhaatiirta, daryeel-bixiyeyasha, dadka waaweyn, haweenka, iyo dadka qaba xaalado hore u jiray. Medikeer ma bixin doono daryeelka muddada dheer oo I-2124 ayaa meesha ka saari doona oo keliya, caynsanaanta la awoodi karo ee 3.9 milyan ee dadka Washington ah, taasoo nooga tagaysa ikhtiyaarka keliya ee ah caymiska gaarka loo leeyahay ee daryeelka muddada dheer oo qaali ah. Ku Codee maya.

Waxaa qoray

Marguerite Ro, Dhakhtarka Caafimaadka Dadweynaha, Agaasimaha, AARP Washington; Justin Gill, APRN, RN, Madaxweynaha, Ururka Kalkaaliyeeyasha Gobolka Washington; Clark Hansen, Agaasimaha Maamulka, Ururka ALS; Charles Mayer, MD MPH, Dhakhtarka Qoyska; Adam Zarrin, Ururka Leukemia & Lymphoma; Courtney Normand, Agaasimaha Gobolka Washington, U-doodeyaasha Isbahaysiga Waalidnimada ee Qorsheysan

Xiriirk: (206) 801-0179; NoOn2124.org

Cabbirka Hindisaha Lr. 2117

Cabbirka Hindisaha Lr. 2117 ayaa khuseeya ka ganacsiga deynta canshuurta kaarboonka.

Cabbirkan wuxuu wakaaladaha gobolka ka mamnuuci doonaa inay soo rogaan nooc kasta oo ka mid ah ka ganacsiga deynta canshuurta kaarboonka, wuxuuna dib uga noqonayaa sharci aasaasaya xaddidaad iyo barnaamijka maalgashiga si loo yareeyo qiiqa gaaska ah ee ka soo baxa aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse). Cabbirkan wuxuu hoos u dhigi doonaa maalgelinta loogu talagalay maalgashiga gaadiidka, hawada nadiifka ah, tamarta la cusboonaysiin karo, dhowrista, iyo dhimmista qiiqa.

Ma tahay in cabbirkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Xoghayaha Gobolka mas'uul kama aha waxa ku jira nuxurka bayaannada ama doodaha (WAC 434-381-180).

Bayaanka sharaxaadda

Waxaa qoray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

2021-kii, Sharci-dejinta Washington waxa ay meel mariyeen Xeerka Ballanqaadka Cimilada, kaas oo faray Waaxda Deegaanka in ay naqshadayo oo ay hirgeliso barnaamij xaddid-oo-maalgeli ah si loo yareeyo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse) ee gobolka oo dhan. Barnaamijka wuxuu u shaqeeyaa isagoo dejinaaya xadka qiiqa, ama xaddidin, ka dibna hoos u dhigaaya wakhtiga xaddidaada ka dib si loo hubiyo in Washington ay buuxiso ballanqaadyada dhimmista gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee hore loogu dejiyay meel kale oo sharciga gobolka ah. Sida uu dhigaayo Xeerka Ballanqaadka Cimilada, sii daayeyaasha gaaska waaweyn ee wasakhaysan ee ku jira barnaamijka waa in ay yareeyaan qiiqa kaarboonka ama ay bixiyaan "gunno" si ay u daboolaan qiiqa.

Barnaamijka xaddid-oo-maalgeli (cap-and-invest) waxa uu khuseeyaa qaar ka mid ah soo-daayeyaasha waaweyn ee wasakhowga gaaska aqalka dhirta lagu koriyo, oo ay ku jiraan tas-hiilaadka waaweyn, kuwa shidaalka keena, gaaska dabiiciga ah iyo adeegga tamarta korontada, tas-hiilaadka qashinka-tamarta (laga bilaabo 2027), iyo waddooyinka tareennada (laga bilaabo 2031). Guud ahaan, hey'adaha leh qiiqa sannadlahaa eh ee ka hooseeya 25,000 metrik ton oo kaarboon laba ogsaydh u dhigma looma baahna inay helaan gunnooyin ay ku dabooslaan qiiqooda. Kaarboon laba ogsaydh u dhiganta waa cabbir loo isticmaalo isbarbardhingga qiiqa ka imaanaya gaasaska aqalka dhirta lagu koriyo ee kala duwan iyadoo lagu salaynaayo awooddooda kulaylka caalamiga ah. Intaa waxaa dheer, qiiqa ka soo baxa xarumaha qaarkood iyo noocyada shidaalka qaarkood ma hoos yimaadaan sharciga. Kuwaas waxaa ka mid ah qiiqa ka soo baxa shidaalka loo isticmaalo beeraha ama gaadiidka wax soo saarka alaabta beeraha, shidaalka duulista, shidaalka badda ee lagu gubay meel ka baxsan Washington, iyo shidaalka laga dhoofiyi Washington. Sharcigu waxa kale oo uu ka dhaafayaa qiiqa xarumaha amniga qaranka iyo qaar ka mid ah meelaha qashinka adag ee dowladda hoose.

Sii daayeyaasha waaweyn ee wasakhowga gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee uu daboolo barnaamijka waa inay helaan gunnooyin la mid ah qiiqa ay daboolayaan. Gunnada waxaa lagu heli karaa xaraashyada ay maamusho Waaxda Deegaanka. Qiimaha gunnooyinka lagu iibiyoo xaraashyada waa isbeddelaa iyadoo ay ku xiran tahay baahida suuqa. Gunnada sidoo kale waxaa lagu iibsan karaa ama lagu iibin karaa suuqyada sare wakhti kasta iyadoo lagu salaynaayo qimaha suuqa. Qayb kasta oo ka mid ah waajibaadka u hoggaansanaanta wasakheeyaha ayaa sidoo kale laga yaabaa in la buuxiyo iyada oo la adeegsanayo dhibcaha dhimmista, kuwaas oo sidoo kale laga soo iibsado laguna sii iibiyoo suuq sare. Dhibcaha dhimmista waxaa laga soo iibsadaa kuwa horumariya mashaariicda ay Waaxda Deegaanka xaqiijisay in ay keenayso dhimmista gaaska aqalka dhirta lagu koriyo oo joogto ah. Saddex nooc oo ah wasakheeyaha ayaa la siyyaa gunno bilaash ah oo loo isticmaali karo in lagu daboolo qaar ama dhammaan qiiqooda: Warshado "soo-saar badan, oo ku tiirsan ganacsiga" warshadaha, gaaska dabiiciga ah, iyo adeegga tamarta korontada.

Dhammaan kuwa wasakheeyaha ah ee uu daboolayo barnaamiju waa in ay ka war bixiyaan qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo oo ay u soo gudbiyaan gunnadooda ama qalabyada kale ee u hoggaansanaanta Waaxda Deegaanka si waafaqsan jadwal gaar ah. Ku guul daraysiga in la soo gudbiyo tirada Gunnada ee loo baahan yahay wakhtiga kama dambeysta ah ee lagu dabaqi karo waxay keenaysaa ciqaab toos ah oo looga baahan yahay wasakheeyaha inuu soo gudbiyo afar gunno mid kasta oo maqan. Ku guul daraysiga in aad u hoggaansanto shuruudaha

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

kale ee barnaamijka xaddid-oo-maalgeli waxa uu muteysanayaan ganaax dhan \$50,000 xadgudub kasta, maalintii.

Dakhliga ka soo baxa xaraashyada gunnada waxaa qoondeeyya sharcidejinta waana in lagu maalgeliya mashaariicda cimilada gobolka oo dhan, oo ay ku jiraan mashaariicda lagu kordhinayo adkeysiga cimilada, maalgelinta barnaamijaya deeqda gaadiidka beddelka ah, iyo caawinaadda Washington ee u gudubka dhaqaalaha kaarboonhoose. Wakaaladaha gobolka ee hela lacagaha xaraashyada ah waa in ay sameeyaan qiimeynat caddaaladda deegaanka marka ay qoondelnayaan lacagahaas, si waafaqsan shuruudaha lagu dejiyay meel kale ee sharciga gobolka. Ugu yaraan 35% lacagta xaraashyada ah ayaa loo baahan yahay in loo isticmaalo mashaariicda siinaya dheef toos ah dadka ku nool bulshooyinka ay saameeyeen waxyellada deegaanka. Intaa waxaa dheer, ugu yaraan 10% lacagta xaraashyada ah waa in loo adeegsadaa mashaariicda leh taageerada Qabiilka. Waaxda Deegaanka waxaa looga baahan yahay inay bixiso warbixin sannadle ah oo ay siiso Sharci-dejinta oo koobaysa sida dakhliga xaraashyada loo isticmaaly iyo haddii mashruuc kastaa soo saaray dhimmista qiiqa oo la xaqiijin karo. Sannadkii 2023, xaraashyada xaddid-oo-maalgeli ayaa kor u kacay \$1.8 bilyan.

Intaa waxaa dheer in la sameeyo barnaamijka xaddid-oo-maalgeli (cap-and-invest) si loo yareeyo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo, Xeerka Ballanqaadka Cimilada wuxuu kaloo u dejiyaa barnaamij loogu talagalay Waaxda Deegaanka si loo yareeyo qiiqa wasakhowga hawada qaarkood (walxaha qaybsan, ozone, naytarojin laba ogsaydh, kaarboon hal ogsaydh iyo salfar laba ogsaydh) ee bulshooyinka ay Waaxda Deegaanka ay go'aamisay inay ka buuxaaan culays badan oo ay aad u saamayo wasakhowga hawada. Qaybtan sharciga ka mid ah waxay u baahan tahay Waaxda Deegaanka inay ururiso xogta loo baahan yahay si loo go'aamiyo ilaha ugu badan ee gacan ka gaysta wasakhowga hawada bulshooyinkaan. Xeerka Ballanqaadka Cimilada ayaa markaa u baahan Waaxda Deegaanka inay la shaqeyso wakaaladaha hawada si ay u falanqeeyaan xogtan oo ay u isticmaalaan si ay u horumariyan oo ay u xoojiyaan heerarka tayada hawada ee adag halka ay ku habboon tahay.

Saamaynta Cabbirka La Soo Jeediyyay Haddii La Ansixiyo

Haddii la oggolaado, Cabbirka Hindisaha Lr. 2117 wuxuu dib uga noqonayaa Xeerka Ballanqaadka Cimilada, wuxuuna ka mamnuucayaa hey'adhaa dowladda inay fuliyan barnaamijaya ka-ganacsiga canshuurta kaarboonka. Dib uga noqoshada Xeerka Ballanqaadka Cimilada waxay meesha ka saaraysaa barnaamijaya tayada hawada iyo cimilada ee kor lagu tilmaamay iyo sidoo kale ilaha maalgelinta ee mashaariicda cimilada ee gobolka oo dhan.

Bayaanka Saamaynta Maaliyadda

Waxaa qoray Xafiiska Maamulka Maaliyadda. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo www.ofm.wa.gov/ballot

Xogta Kooban

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyashu, Hindisaha 2117 waxa uu hoos u dhigayaa \$3.8 bilyan dakhliga gobolka ee xaraashka gunnada kaarboonka waxaana uu hoos u dhigayaa kharashaadka dowladda \$1.7 bilyan inta u dhexeysa taariikhda dhaqan gelinta hindisaha iyo Juun 30, 2029. Tani waxay yaraynaysaa ama meesha ka saari doontaa maalgelinta barnaamijyo iyo mashaariic badan, oo ay ku jiraan: Dhimmista qiiqa gaadiidka; gaadiidka, badqabka dadka lugaynaya; doomaha iyo korontada gaadiidka kale; hagaajinta tayada hawada; tamar la cusboonaysiin karo oo nadiif ah; Casriyanta xarkaha iyo dhisidda lagu dhimmayo kaarboonka; kordhinta adkeysiga cimilada ee biyaha gobolka, kaymaha iyo nidaamyada kale ee deegaanka; ka

hortagga dabka iyo caafimaadka kaynta; iyo soo celinta iyo hagaajinta deegaanka saamanka. Saamaynta maaliyadeed ee dowladda hoose waa mid aan la cayimin.

Saadaalinta guud

- Taariikhda dhaqan galka waa Diseembar 5, 2024.
- Xaraashka gunnada kaarboonka ee loo qorsheeyay inay dhacdo Diseembar 4, 2024, ma dhacayo, maadaama shahaadada xaraashka iyo nidaamka xallinta maaliyadeed uu dhaafi doono maalinta hindisaha hirgaloo.
- Qodobbada hindisaha waxay khuseeyaan mustaqbalka, maaha kuwo dib-u-dhac ah.
- Qiyaasaha ayaa isticmaala sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julaay 1 ilaa Juun 30. Sannad maaliyadeedka gobolka 2025 waa Julaay 1, 2024, ilaa Juun 30, 2025.

Saamaynta dakhliga gobolka

Xogta Kooban

Hindisaha 2117 waxa uu dib uga noqonayaa sharciga u baahan Waaxda Deegaanka (ECY) si ay u qabato xaraashka gunnada kaarboonka, ee loo yaqaan Sharciga Ballanqaadka Cimilada; sidaas darteed, gobolku kama soo ururin doono dakhliga xaraashkaas. Sharciga Ballanqaadka Cimilada ayaa sidoo kale sameeyay suuq labaad oo loogu talagalay dhinacyada gaarka loo leeyahay si ay uga ganacsadaan gunnada oo ay u dhimmaan dhibcaha; sidaa awgeed, gobolku kama soo ururin doono dakhliga ganacsiga iyo canshuurta shaqada (B&O) ee lagu qiimeeyay wax kala iibsiiga suuqa sare.

Sharciga Ballanqaadka Cimilada Xaraashka gunnada kaarboonka ayaa bilaabmay Febraayo 2023 waxayna soo saarreen \$2.15 bilyan dakhli intii u dhexeysa markaa iyo xaraashka Juun 5, 2024. Hindisaha, xaraashka ugu dambeeyaa wuxuu dhici doonaa Septembar 4, 2024. Saddexda xaraash ee haray ee loo qorsheeyay sannad xisaabeedka gobolka 2025 waa la tirtiri doonaa. Sannad-maaliyadeedka gobolka 2025 ilaa 2029, dhimmista la saadaaliyay ee dakhligu waa \$3.9 bilyan xaraashka la joojiyay (\$3.8 bilyan) iyo luminta canshuur ururinta B&O (\$40 milyan). Saadaasha dakhliga xaraashka waxaa lagu xisaabiyyaa iyadoo la isticmaalaayo saadaasha dakhliga ECY ee Juun.

Saamaynta dakhliga la saadaaliyay ee Gobolka Washington

Koontada	SFY 2025	SFY 2026	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029
Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka	(\$672,271,000)	(\$71,823,000)	(\$71,823,000)	(\$71,823,000)	(\$71,823,000)
Koontada Barnaamijyada Gaadiidka Cimilada	\$0	(\$201,106,000)	(\$201,106,000)	(\$201,106,000)	(\$201,106,000)
Koontada Gaadiidka Cimilada Firfircoor	\$0	(\$86,188,000)	(\$86,188,000)	(\$86,188,000)	(\$86,188,000)
Koontada Maalgelinta Cimilada, qaybo ka mid ah waxaa loo qaybiyya Koontada Ballanqaadka Cimilada iyo Koontada Xallinta Cimilada Dabiiciga ah	(\$79,285,000)	(\$472,765,000)	(\$422,789,000)	(\$402,426,000)	(\$301,837,000)
Koontada Hagaajinta Tayada Hawada iyo Farqiga Caafimaadka	(\$2,500,000)	(\$10,000,000)	(\$10,000,000)	(\$10,000,000)	(\$10,000,000)
Maalgelinta Guud-Gobolka	(\$3,400,000)	(\$7,100,000)	(\$7,400,000)	(\$7,800,000)	(\$8,100,000)
Koontada Maalgelinta Waxbarashada Shaqaalahaa	(\$600,000)	(\$1,200,000)	(\$1,200,000)	(\$1,300,000)	(\$1,400,000)
Wadarta	(\$758,056,000)	(\$850,182,000)	(\$800,566,000)	(\$780,643,000)	(\$680,514,000)

Wareejinnada saamaynta dakhliga iyo maalgelinta haraaga sannad xisaabeedka gobolka 2025

Khasaarahaa dakhliga ee la saadaaliyay wuxuu noqon doonaa \$758.1 milyan sannad xisaabeedka gobolka ee 2025. Saddex ka mid ah afarta xaraashka kaarboonka sannadlaha ah ma dhacayaan oo iibk gunnada ee dhalisa canshuuraha B&O way dhammaan doontaa.

Hindisaha ayaa meesha ka saaraya shan xisaabood oo lagu sameeyay Sharciga Ballanqaadka Cimilada. Haddii hindisaha la oggolaado, lacagaha soo haray ee shanta xisaabaad waxa loo wareejin doonaa laba xisaabood oo cusub: (1) Koontada dhimmista qiiqa Kaarboonka Gaadiidka iyo (2) Xisaabaadka Cimilada ee Isku-dhafan (ESHB 2134, Qaybta 614, Cutubka 310, Sharciyada 2024 iyo ESSB 5950, Qaybta 907, Cutubka 376, Sharciyada 2024).

Sharciga Ballanqaadka Cimilada iyo miisaaniyadda hawlgalka iyo gaadiidka ee gobolka ayaa haga qaybinta dakhliga xaraashka gunnada kaarboonka waxayna sameeyaan wareejino kala duwan inta u dhexeysa shan xisaabaadka Sharciga Ballanqaadka Cimilada iyo xisaabaadka gaadiidka kale. Hindisaha, ma jiri doono dakhli ku filan si loo sameeyo dhammaan qaybinta dakhliga iyo wareejinta miisaaniyadda loo baahan yahay. Wareejintan waxaa loo kala horumariiyat sida soo socota: (1) Qaybinta sharciga ah iyo (2) taariikhda lacag wareejinta ee lagu qeexay miisaaniyadda hawlgalka iyo gaadiidka 2023-25.

Qiyaastii \$1 milyan ilaa \$300 milyan ayaa lagu wareejin doonaa Koontada Dhimmista qiiqa Kaarboonka Gaadiidka, \$700 milyan ilaa \$900 milyan ayaa lagu wareejin doonaa Koontada Isku-dhafka ah ee Cimilada. Lacagahaan ayaa la heli karaa si loo isticmaalo ilaa Juun 30, 2025.

Caddadka saxda ah ee maalgelinta lagu wareejin doono labada xisaabood ee cusub ayan la garanayn, sababtoo ah caddadka waxay ku salaysnaan doonaan: Kharashaadka dhabta ah ee wakaaladda ilaa Disembar 5, 2024; dakhliga laga soo ururiyay xaraashka la qorsheeyay Sebtembar 4, 2024; iyo hirgelinta lacagaha kala duwan ee wareejinta.

Saamaynta dakhliga kale

Laga bilaabo sannad-maaliyadeedka gobolka 2025, Ganacsiga iyo Shaqada (B&O) iyo canshuuraha tas-hiilaadka dadweynaha laguma soo ururin doono gadashada, iibinta ama ka-ganacsiga gunnooyinka kaarboonka iyo dhibcaha ka-dhaafitaanka ka-qaybgalayaasha suuqa guud, taasoo keentay hoos u dhaca dakhliga gobolka.

Wakhtigan xaadirka ah, ka-qaybgalayaasha suuqa guud kuma qasbana

inay iihsadaan gunno, si iskood ah uma ay qaadan waajibaad u hoggaansanaan iyagoo dooranaya barnaamijka, umana qalmaan inay gobolka ka helaan gunno kharash la'aan. Ka-qaybgalayaasha suuqa guud waa inay bixiyaan canshuurta B&O ama canshuurta tamarta dadweynaha wax kala iihsiga. Ka-qaybgalayaashaan waxaa ku jiri kara bangiyada maalgashiga, maalgelinta hedge-ka, shirkadaha ganacsiga, iyo shirkadaha doonaya inay maalgashadaan mashaariicda la dhimmay. Canshuuraha B&O waxaa lagu tiriya Sanduuqa Guud ee gobolka, kaas oo maalgeeliya hey'adaha iyo hawlaha kala duwan ee dowladda, iyo Xisaabaadka Maalgelinta Waxbarashada xoogga shaqada, kaas oo bixiya barnaamijyada waxbarashada iyo tababaraka. Ujeeddooyinka la qiyaasi karo, hoos u dhaca canshuuraha tamarta dowliga ah ee la ururiyo ayaa leh saamaynta ugu yar. Dhammaan saamaynta waxa lagu muujiyay canshuurta B&O.

Saamaynta kharash gareynta gobolka

Xogta Kooban

37 hey'adood oo dowlaadeed ayaa awood dhaqaale ka haysta sharciga Ballanqaadka Cimilada ee barnaamijyada, mashaariicda, iyo deeqaha dowladaha hoose, kooxaha bulshada, degmooyinka dugsiyada iyo qabiillada. Hindisaha 2117 wuxuu meesha ka saaraya ilaha dakhliga ee bixiya barnaamijyadaan. Lacagaha soo haray ee horeba loo ururiyay waxa lagu wareejin doonaa Koontada dhimmista qiiqa Kaarboonka Gaadiidka iyo Xisaabta Cimilada ee Isku-jirta. Gaadiidka dheeriga ah ee 2024-ka, hawlgelinta iyo miisaaniyadda raasumaalka ayaa tilmaamaya barnaamijyada iyo mashaariicda u qalma maalgelintaan haddii hindisaha dhaafso. Awood ku bixista \$1.7 bilyan ee sannad-maaliyadeedka gobolka 2025 hadda ma sii jiri doonto sababtoo ah qoondeynta miisaaniyadda waa la tirtirayaa iyada oo la tirtirayo xisaabaadka.

Awood kharash gareynta \$230.4 milyan ayaa lagu heli karaa Koontada Dhimmista Hawada Cimilada Gaadiidka iyo awooddha kharashka \$653.8 milyan ayaa lagu heli karaa Koontada Cimilada Isku-jirta. Waxaa loo malaynayaa in maalgelinta lagu shubayo xisaabaadka cusub ay sii socon doonto in la isticmaalo ilaa dhammaadka sannad-maaliyadeedka dowlad-goboleedka ee hadda socda ama inta dakhligu ka dhammaanayo.

Wadarta saafiga ah ee ku dhow \$2.6 bilyan ee awooddha kharash-bixinta ee sannad-maaliyadeedka gobolka 2025-2029 hadda ka dib ma heli doono hindisaha lagu hawlgelinayo barnaamijyada iyo

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

bixinta deeqaha gobolka hawlgelinta, raasumaalka iyo miisaaniyadda gaadiidka.

Intaa waxaa dheer, qorshaha kharashka gaadiidka ee ay ansixiyeen Sharci-dejintu wawa uu u malaynaya in \$1 bilyan la heli karo sannadaha xisaabaadka gobolka 2026-2029 mashruucyada lagu horumarinayo gaadiidka, korontada doomaha, horumarinta tareenka xawaarahaa ku socda iyo dadaallada lagu wanaajinayo badqabka dadka lugaynaya. Lacagtaan mar dambe lama heli doono.

Hadda, Dakhliga Xaraashka Ballanqaadka Cimilada wawa lagu kharash gareeyaa xisaabaadyo badan oo leh ujeeddooyin kala duwan.

Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka

- Koontada dhimmista qiiqa Kaarboonku wawa ay heshaa qeybta ugu horeysa ee dakhliga, caddadka sharciga ah, waana in loo adeegsadaa si loo dhimmo qiiqa kaarboonka ee qaybta gaadiidka, sida mashaariicda lagu dhimmayo hal-ku-jooge gaadhiga rakaabka ah ee mayl-kaxaynta; kaabayaasha shidaalka iyo barnaamijaya dhiirigelinta; barnaamijaya dhimmista qiiqa gaadiidka xamuulka; iyo doonyaha iyo hawlahaa kale ee badda iyo dekdedda.
- Toddoba hey'adood ee gobolka ayaa awood kharash-bixinneed ka haysta koontada hadda jirta, taas oo ay ku jirto maalgelinta wax u dhigma in ka badan saddex shaqaale wakhti-buuxa ah. Wakaaladuhu waxay lumin doonaan awoodda ay ku kharash gareeyaan \$205.2 milyan sannadahan, iyo \$230.4 milyan ee awoodda kharash gareynta ayaa loo wareejin doonaa Koontada Dhimmista qiiqa Kaarboonka Gaadiidka.
- Laba akoon ayaa maalgelin ka hela oo keliya Koontada Dhimmista qiiqa Cimilada: Koontada Gaadiidka Firfircoone Cimilada (CATA) iyo Koontada Barnaamijaya Gaadiidka Cimilada (CTPA). Xisaabaadkan lama tirtiri doono hindise; si kastaba ha ahaatee, hindisaha wuxuu meesha ka saarayaa isha keliya ee dakhli ee xisaabaadkan.
- Maalgelinta lagu bixiyo CATA iyo CTPA ayaa wali la isticmaali karaa ilaa dhammaadka biennium-ka, Juun 30, 2025. Deeq-lacageedkani waxa uu bixiyaa barnaamijaya deeqda sida Waddooyinka Badqabka ah ee Dugsiyada, Gaadiidka Qabiillada, gaadiidka firfircoone ee mashaariicda maxalliga ah iyo taageerada hey'adaha gaadiidka iyo bixiyeyasha kale ee u adeegga dadka naafada ah, waayeelka, carruurta iyo dadka ku nool meelaha miyiga ah.

Koontada Maalgelinta Cimilada

- Dakhliga xaraashka waxaa lagu shubaa Koontada Maalgelinta Cimilada ka dib qaybinta loo baahan yahay ee Koontada Dhimmista Kaarboonka waxaana loo isticmaali karaa maarynta Sharciga Ballanqaadka Cimilada, daba-galka kharashaadka iyo warbixinta, iyo deeqaha awoodda Qabiilka.
- Toddoba hey'adood oo dowlad-goboleed ayaa awood kharash-bixinneed ka haysta koontada hadda jirta, taas oo ay ku jirto maalgelinta oo u dhiganta ku dhawwaad 116 shaqaale wakhti-buuxa ah.
- Wakaaladuhu waxay lumin doonaan awoodda ay ku kharash gareeyaan \$12.2 milyan inta ka hartay biennium-ka, iyo \$23.1 milyan ee maamulka kharashaadka ayaa loo wareejin doonaa Koontada Cimilada ee Isku-jirta. Si kastaba ha ahaatee, qayb muhiim ah oo ka mid ah maalgelintaas ayaa loogu talagalay hawlahaa uu u baahan yahay Sharciga Ballanqaadka Cimilada, iyo hindisaha, hawlahani way joogsan doonan.
- Ka dib markaad keydiso qadarka maamulka Sharciga Ballanqaadka Cimilada, lacagaha ku jira Koontada Maalgelinta Cimilada waxaa loo qaybiyya Koontada Ballanqaadka Cimilada iyo Koontada Xalalka Cimilada ee Dabiiciga ah.

Koontada Ballanqaadka Cimilada

horumarinta tamar la cusboonaysiin karo oo nadiif ah, casriyanta khadka, dhisidda kaarboonaynta, hufnaanta warshadaha, dakhliga hoose iyo caawinta shaqaalaha, yaraynta isbeddelka cimilada ee Qabiillada, Qorshaynta Xeerka Maareynta Kobaca, iyo Lacagta Canshuurt Qoysaska Shaqeeya.

• Soddon hey'adood oo dowlad-goboleed ayaa awood kharash-bixinneed ka haysta koontada hadda jirta, taas oo ay ku jirto maalgelinta oo u dhiganta ku dhawwaad 136 shaqaale wakhti-buuxa ah. Wakaaladuhu waxay lumin doonaan awoodda ay ku kharash gareeyaan \$419.7 milyan inta ka hartay biennium-kan, iyo \$476.5 milyan ee maamulka kharashaadka ayaa loo wareejin doonaa Koontada Cimilada ee Isku-jirta.

Koontada Xalalka Cimilada Dabiiciga ah

- Koontada Xalalka Cimilada Dabiiciga ah waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo barnaamijaya iyo mashaariicda kordhinaaya adkeysiga biyaha gobolka, kaymaha iyo nidaamyada kale ee deegaanka ee saameynta isbeddelka cimilada; ilaalinta dhulka kaymaha ah; iyo kordhinta cimilada dabiiciga ah ee kaarboon-wasakhowga-yaraynta awoodda.
- Laba iyo tobab hey'adood oo dowlad-goboleedka ah ayaa awood kharash-bixinneed ka haysta koontada hadda jirta, taas oo ay ku jirto maalgelinta wax u dhigma in ka badan 58 shaqaale wakhti-buuxa ah. Wakaaladuhu waxay lumin doonaan awoodda ay ku kharash gareeyaan \$147.3 milyan inta ka hartay biennium-ka, iyo \$134.9 milyan ee maamulka kharashaadka ayaa loo wareejin doonaa Koontada Cimilada ee Isku-jirta.

Koontada Maalgelinta Tayada Hawada iyo Farqiga Caafimaadka

- Koontada Maalgelinta Tayada Hawada iyo Kala-duwanaanta Caafimaadka waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo mashaariicda kormeeraaya oo hagaajinaya tayada hawada iyo dhimmista kala duwanaanshaha caafimaad ee bulshooyinka culeyska badan.
- Koontadu waxay heshaa dakhli xaraashka ka dib qaybinta loo baahan yahay ee Koontada Dhimmista qiiqa Kaarboonka. Xeerku ma qeexayo qaddarka; si kastaba ha ahaatee, Sharci-dejintu waxay sheegeen inay damacsan yihiin in aan ka yarayn \$20 milyan labadii sanno ee la soo dhaafay lagu wareejyo akoonnada.
- ECY waxay hadda haysaa lacag dhan \$21.8 milyan oo awood kharash-bixinneed oo ka timid akoontada, taas oo ay ku jirto maalgelinta wax u dhigma ku dhawwaad shan shaqaale wakhti-buuxa ah.
- Sida ku cad hindisaha \$19.3 milyan ee maamulka kharashka ayaa lagu wareejin doonaa Koontada Cimilada ee Isku-jirta.

Saamaynta Kharashka Ku Baxaya ee Gobolka Washington:

Koontada	SFY 2025	SFY 2026	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029
Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka	(\$435,594,125)	(\$1,387,000)	(\$1,387,000)	(\$1,387,000)	(\$1,387,000)
Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka Gaadiidka	\$230,354,125	\$0	\$0	\$0	\$0
Koontada Gaadiidka Cimilada Firfircoo	(\$0)	(\$9,533,500)	(\$9,533,500)	(\$9,533,500)	(\$9,533,500)
Koontada Barnaamijyada Gaadiidka Cimilada	(\$0)	(\$179,850,000)	(\$179,850,000)	(\$179,850,000)	(\$179,850,000)
Koontada Maalgelinta Cimilada	(\$35,256,884)	(\$35,443,000)	(\$35,443,000)	(\$35,094,000)	(\$35,094,000)
Koontada Ballanqaadka Cimilada	(\$896,196,884)	(\$102,620,000)	(\$97,523,000)	(\$66,026,000)	(\$64,389,000)
Koontada Xalalka Cimilada Dabiiciga ah	(\$282,251,136)	(\$25,392,000)	(\$27,953,000)	(\$22,956,000)	(\$25,853,000)
Koontada Maalgelinta Tayada Hawada iyo Farqiga Caafimaadka	(\$19,333,611)	\$0	\$0	\$0	\$0
Koontada Cimilada ee Midaysan	\$653,797,443	\$0	\$0	\$0	\$0
Maalgelinta Guud-Gobolka	(\$6,349,000)	(\$6,152,000)	(\$6,364,000)	(\$7,500,000)	(\$7,700,000)
Sanduuqa Guud-Federaalka	(\$45,000,000)	(\$70,000,000)	(\$70,000,000)	(\$70,000,000)	(\$236,700,000)
Wadarta	(\$835,829,954)	(\$430,377,000)	(\$428,053,500)	(\$392,346,500)	(\$590,506,500)

Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka

Saamaynta ay ku leedahay Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka Labada Sanno ee hadda:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saarayaa	Maamulka kharash gareynta waxaa lagu wareejinaya Koontada Dhimmista Qiiqa Kaarboonka Gaadiidka
Waaxda Ganacsiga	(\$5,000,000)	\$0
Waaxda Deegaanka	(\$4,000,000)	\$0
Waaxda Adeegyada Ganacsiga	(\$13,500,000)	\$0
Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah	\$0	\$671,724
Guddiga Gaadiidka ee Wadajirka	(\$477,000)	\$2,243,091
Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington	(\$182,263,000)	\$227,439,310
Guddiga Madadaalada & Beeraha ee Gobolka Washington	\$0	\$0
Wadarta	(\$205,240,000)	\$230,354,125

Hawlaha muhiimka ah ee ku baabi' doona SFY 2025 iyada oo la raacayo hindisaha:

- Dhismaha doomaha korontada-isku-dhafan iyo koronto-dhalliyaha doonta- \$42 milyan, Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington (WSDOT)
- Iskaashiga dowliga iyo kuwa gaarka ah, oo ay ku jiraan maalgelinta lagu daray 2024 ee gaadiidka eber-sii deynya ah iyo barnaamijyada deeqda kaabayaasha ee baabuurta ganacsiga, dab-damiska iyo baabuurta adeegga tamarta; mashaariicda maxalliga ah si loo hagaajiyo waddooyinka nabadoon ee dugsiyada; iyo badqabka lugta iyo baaskiilk - \$40.9 milyan, WSDOT
- Mashaariicda tareennada, oo ay ku jiraan Qabiilka Puyallup iyo Anacortes korontada dekdedda - \$35.5 milyan, WSDOT
- Mashaariicda raasumaalka, oo ay ku jirto maalgelinta lagu dhammaystirayo beddelkeeda doontii Jasiiradda Guemes - \$32.9 milyan, WSDOT
- Mashaariicda tas-hiilaadka basaska dadweynaha iyo gaadiidka - \$29.9 milyan, WSDOT
- Kaabayaasha qalabka sahayda gaadiidka aan sii deyn ee wakaaladaha

gobolka - \$13.5 milyan, Waaxda Adeegyada Ganacsiga (DES)

• Deeq lacageed oo loogu talagalay doomaha korontada ku shaqeeya ee Qabiillada, Shirkadaha Qabiillada iyo Xubnaha Qabiillada ee federaalku aqoonsan yahay - \$ 5 milyan, Waaxda Ganacsiga (COM)

• Deeqaha gaadiidka ardayda aan sii deyn - \$ 4 milyan, ECY

• Qorshaynta gaadiidka ee Koobka Adduunka 2026 - \$1 milyan, WSDOT

• Daraasadda saamaynta ku leh hirgelinta heerarka qiiqa ee maraakiibta badweynata - \$477,000, Guddiga Gaadiidka Wadajirka ah

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY 2029:

WSDOT waxa ay lumin doontaa maalgelinta iyo awoodda kharash gareynta mustaqbalka ee barnaamijyada socda ee ku dhaw \$2.8 milyan labadii sanno ee la soo dhaafay, oo ay ku jiraan:

• Qiimaha doomaha bilaashka ah ee dhallinyarada,

• Qiimaha dhallinyarada ee bilaashka ah ee Amtrak, iyo

• Kaalmada iyo waxbarashada wakaaladda gobolka ee isticmaalka shidaalka beddelka ah.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqaad ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Intaa waxaa dheer, lacag looma heli doono mashaariicda gaadiidka mustaqbalka. Qorshaha kharashka gaadiidka miisaaniyadda dheeriga ah ee 2024, oo ay ansixieen Sharci-dejinta loona isticmaalo horumarinta miisaaniyadaha mustaqbalka, ayaa qorshaynaya in \$1 bilyan lagu kharash gareeyo mashaariic kala duwan. Mashaariicdan waxaa ka mid ah deeqaha gaadiidka si loo hagaajijo badqabka iyo dhaqdhaqaqa u dhow dugsiyada, markabka doonyaha iyo korontada terminaalka, mashaariicda korontada ee Qabiillada, horumarinta waddada tareenka xowliga ku socda, iyo dadaallada lagu hagaajinaayo badqabka dadka lugaynaya.

Koontada Gaadiidka Firfircoon ee Cimilada iyo Xisaabaadka Barnaamijyada Gaadiidka Cimilada

Saamaynta Gaadiidka Firfircoon ee Cimilada iyo Xisaabaadka Barnaamijyada Gaadiidka Cimilada ee labada bilood ee hadda jira:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saarayaa	Maamulka kharash gareynta ayaa la sii haysan doonaa
Guddiga Hagaajinta Gaadiidka	\$0	\$7,067,000
Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington	\$0	\$322,984,552
Wadarta	\$0	\$330,051,552

Hawla muhiimka ah ee ku baabi' doona SFY 2025 iyada oo la raacayo hindisaha:

Midna

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY 2029:

Ujeeddooyinka bayaanka saameyn ta maaliyadeed, waxaa loo malaynayaa in kharashka mustaqbalka ee xisaabaadka uu dhammaan doono marka haraaga sanduuqa haray uu dhammaado. Lama garanayo waxa maalgelinta la heli karo si loo kharash gareeyo wixii ka dambeeyaa Juun 30, 2025.

Tusaalooyinka barnaamijyada iyo maalgelinta laga helo biennium-ka hadda jira ee aan mar dambe haysan doonin maalgelinta waxaa ka mid ah:

- Deeqaha loogu talagalay hawlgelinta wakaaladda gaadiidka iyo kharashyada raasumaalka - \$188.9 milyan, WSDOT, CTPA
- Mashaariicda hagaajinta dariqa lugeynta iyo baaskiil wadayaasha - \$82.2 milyan, WSDOT, CATA
- Deeqo lagu joogteeyo laguna balaariyo adeegyada gaadiidka dadka naafada ah, waayeeleka, carruurta iyo dadka ku nool meelaha miyiga ah - \$60.1 milyan, WSDOT, CTPA
- Mashaariicda Horey u Dhaqaq ee gaadiidka dadweynaha ee Washington - \$46.6 milyan, WSDOT, CTPA
- Deeqo lagu kordhiyo socodka badqabka leh iyo waddooyinka baaskiilkha ee dugsiyada, oo ay ku jiraan hagaajinta isgoosyada, maaraynta xawaarah, waddooyinka dhinacyadeeda, waddooyinka baaskiilkha, waddooyinka isticmaalka la wadaago, nalalka waddooyinka, hagaajinta ADA, waxbarashada iyo hawla dhiirigelinta - \$45.4 milyan, WSDOT, CATA
- Maalgelinta hey'adaha gaadiidka ee mashaariicda raasumaalka ah ee waxtarka leh ee yaraynaya xoojinta kaarboon ee nidaamka gaadiidka Washington - \$39.4 milyan, WSDOT, CTPA
- Deeqaha lagu taageerayo gaadiidka iyo tas-hiilaadka gaadiidka - \$38 milyan, WSDOT, CTPA
- Mashruucyada lagu horumarinayo isku xirkka gaadiidka firfircoon ee

Iugaynaya iyo guud ahaan waddooyinka hadda jira iyo kuwa hore ee gobolka ee bulshooyinka culayska badan - \$25 milyan, WSDOT, CATA

• Deeqaha iyada oo loo marayo Barnaamijka Waddooyinka Dhammaystiran ee mashaariicda waddooyinka magaalada ama waddooyinka degmada ee hagaajinaya ama ku daraya tas-hiilaadka dadka lugaynaya, baaskiil wadayaasha iyo isticmaalayaasha gaadiidka si loo hagaajijo gelitaanka badqabka - \$ 19.1 milyan, Guddiga Horumarinta Gaadiidka, CTPA

• Taageerada hadda jirta iyo adeegyada gaadiidka ee dadka naafada ah iyo dadka waayeeleka ah ee ku nool miyiga iyo magaaloooyinka yaryar ee gobolka - \$18 milyan, WSDOT, CTPA

• Maalgelinta Barnaamijka ku saabsan Waxbarashada Badqabka Baaskiil-ku-salaysan ee dugsiyada dadweynaha ee gobolka Washington; tababarka badqabka iyo xirfadaha; iyo agabka waxbarashada oo ay ku jiraan baaskiillo lagu tago degmooyinka dugsigi, degmooyinka adeegga waxbarashada iyo ururada bulshada - \$16.8 milyan, WSDOT, CATA

Koontada Maalgelinta Cimilada

Saamaynta Koontada Maalgelinta Cimilada Labada Sanno ee hadda:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saarayaa	Maamulka kharash gareynta ayaa waxaa lagu wareejiyay Isku-Tagga Koontada Cimilada ee Isku -Duuban
Waaxda Deegaanka	(\$12,081,799)	\$21,058,099
Waaxda Caafimaadka	\$0	\$489,012
Waaxda Leesanka	\$0	\$0
Xafiiska Dhegaysiga Iisticmaalka Deegaanka & Dhulka	\$0	\$838,354
Xafiiska Maamulka Maaliyadda	(\$2,370)	\$565,450
Xafiiska Madadaalada iyo Dhawridda	\$0	\$116,800
Guddiga Dhawridda Gobolka Washington	(\$105,000)	\$0
Wadarta	(\$12,189,169)	\$23,067,715

Hawla muhiimka ah ee ku baabi' doona marka la raaco hindisaha:

- Deeqaha ayaa lagu daray 2024 ee awoodda qabiilka si ay uga qayb galaan ugana shaqeeyaan mashaariicda cimilada - \$5 milyan, ECY
- Maalgelinta si loo sii wado isku xirkha suuqa kaarboonka Washington iyo suuqa California/Quebec - \$1.8 milyan, ECY

Hawla ku istaagi doona SFY 2025 marka la raaco hindisaha:

- Dhaqan gelinta Sharciga Ballanqaadka Cimilada, oo ay ku jiraan xaraashka gunnada kaarboonka, qoondeynta gunnooyinka kharash-l'aanta ah, kormeerka suuqa sare, nidaaminta mashaariicda

dhimmista, la socodka dhimmista qiiqa ay soo saarto kharashyada xaraashka xaraashka, iyo shaqada keydinta gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee gobolka oo dhan - \$9.1 milyan, ECY, Xafiiska Dhegaysiga Iisticmaalka Deegaanka iyo Dhulka

- Samaynta marinka xogta iyo xeeladaha kale ee lagu wanaajinayo fahamka dadweynaha ee kharashaadka ka imaanaya xisaabaadka Sharciga Ballanqaadka Cimilada - \$2.6 milyan, ECY, Xafiiska Maamulka Maaliyadda (OFM)
- Deeqaha la siiyo dowladaha Qabiillada si ay u taageeraan horumarinta mashaariicda ka-saarista kaarboon - \$2 milyan, ECY
- Dejinta heerar adag oo teknolojiyada loo isticmaalo si loo xaddido qiiqa ka imaanaya ilaha qiiqa taagan ee ah kuwa ugu badan ee ka qaybqaata wasakhowga hawada ee bulshooyinka culayska badan - \$1.5 milyan, ECY
- Kordhinta la socodka tayada hawada ee bulshooyinka culayska badan ee ay si aad ah u saamaysay wasakhowga hawada, iyo qiyaasaha saamaynta caafimaad ee la xiriira tayada hawada ee lagala kulmay bulshooyinka culayska badan - \$557,476, ECY, Waaxda Caafimaadka (DOH)

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY 2029:

ECY iyo wakaalado kale ayaa lumin doona awoodda kharash gareynta mustaqbalka ee barnaamijyada socda ee ku dhow \$35 milyan labadii sanno ee la soo dhafay si loo maamulo Sharciga Ballanqaadka Cimilada. ECY waxay lumin doontaa maalgelinta aan looga baahayn maamulka barnaamijka xaddid-oo-maalgeli. ECY waxay lumin doontaa maalgelinta si ay u balaaris shabakadda la socodka tayada hawada ee gobolka oo ay wanaajiso heerarka tayada hawada ee bulshooyinka aadka u culus ee ay sida aadka ah u saamaysay wasakhowga hawada.

ECY waxay sidoo kale waayi doontaa \$31.5 milyan deeqaha la siiyo Qabiillada si loo kordhiyo awoodda hawlgelinta iyo ka shaqeeynta mashaariicda cimilada la xiriira iyo horumarinta mashruuca kaarboonka iyo \$3.8 milyan si loo horumariyo agabka Washington ee gaaska aqalka dhirta lagu sii daayo.

Koontada Ballanqaadka Cimilada

Saamaynta ay ku leedahay Koontada Ballanqaadka Cimilada ee biennium-ka hadda:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saarayaa	Maamulka kharash gareynta ayaa waxaa lagu wareejiyay Koontada Cimilada ee Isku-Duuban
Central Washington University	(\$16,973,000)	\$1,300,473
Guddiga Gorge River ee Columbia	\$0	\$70,250
Waaxda Dhismaha iyo Ilaalinta Taariikhiga ah	\$0	\$506,755
Waaxda Carrurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska	\$0	\$3,199,000
Waaxda Ganacsiga	(\$269,919,794)	\$303,908,217
Waaxda Asluubta	(\$600,000)	\$1,600,000
Waaxda Deegaanka	(\$9,792,103)	\$17,917,345
Waaxda Adeegyada Ganacsiga	(\$1,617,575)	\$0
Waaxda Caafimaadka	\$120,000	\$79,236,333
Waaxda Shaqada & Warshadaha	\$0	\$3,463,669
Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah	(\$862,000)	\$5,423,409
Waaxda Canshuurta Dakhliga	\$0	\$281,500
Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka	(\$9,958,915)	\$0
Waaxda Arrimaha Halyeeyadii Hore	\$0	\$200,000
Golaha Qiimeynta Goobta Xarunta Tamarta	(\$68,000)	\$4,561,612
Waaxda Amniga Shaqada	\$0	\$329,837
Eastern Washington University	(\$9,998,000)	\$50,000
Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ee u Qaabilsan Arrimaha Hindida Mareykanka	\$0	\$495,218
Xafiiska Maamulka Maaliyadda	(\$875,000)	\$3,240,284
Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha	(\$30,000,000)	\$7,525,000
The Evergreen State Collage	\$0	\$0
University of Washington	(\$39,053,000)	\$9,055,869

Guddiga Jaamacadaha Bulshada iyo Farsamada ee Gobolka Washington	(\$2,475,000)	\$5,781,000
Guddiga Dhawriidda Gobolka Washington	(\$3,048,483)	\$22,400,000
Waaxda Beeraha ee Gobolka Washington	(\$3,407,000)	\$2,553,592
Waaxda Kaluunka & Duurjoogta ee Gobolka Washington	\$0	\$1,056,113
Guddiga Madadaalada & Jardiinooyinka ee Gobolka Washington	(\$950,000)	\$1,462,443
Washington State University	(\$13,000,000)	\$352,823
Western Washington University	(\$7,000,000)	\$0
Guddiga Tababarka Shaqaalahaa	\$0	\$508,273
Wadarta	(\$419,717,870)	\$476,479,014

Hawla muhiimka ah ee ku jira SFY 2025 ee baabi' doona iyada oo la raacayo hindisaha:

- Maalgelinta lagu taageerayo hufnaanta tamarta iyo hagaajinta dhimmista kaarboonka ee guryaha qoysaska badan iyo guryaha ganacsiga - \$ 100 milyan, COM
- Mashaariicda iyo teknolojiyada lagu dhimmayo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee bulshooyinka maxalliga ah, gaar ahaan bulshooyinka culayska badan - \$74.1 milyan, COM
- Mashaariicda cusboonaysiinta tamarta ee guud ahaan xarumaha Jaamacadda Washington (UW) iyo nidaamka isbitaalada - \$38.9 milyan, UW
- Deeqo la siyo dugsiyada K-12 ee qiimeyeenta tayada hawada gudaha iyo nidaamka sifaynta hawada - \$30 milyan, Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada (OSPI)
- Isbarbardhiga lacagaha lagu taageerayo ka-qaybgalka barnaamijka deynta Waaxda Tamarta ee federaalka ee horumarinta tamarta balaaran - \$25 milyan, COM
- Deeqaha lagu kobcinayo dhaqaalaha wax soo saarka tamarta nadiifka ah ee Washington - \$21.5 milyan, COM
- Deeqo lagu wanaajiyoo horumarka gobolka ee ku wajahan yoolalka dhimmista qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee warshadaha adag in la gooyo - \$13 milyan, COM
- Balaarinta wax soo saarka tamarta geothermal ee Central Washington University (CWU) - \$12.5 milyan, CWU
- Naqshadaynta iyo dhisidda dheefshiidka caanaha si loo soo saaro tamar la cusboonaysiin karo iyo compost laga helo ilaha digada, cuntada ka dib isticmaalka iyo qashinka la burburin karo - \$ 10 milyan, Jaamacadda Gobolka Washington (WSU)
- Isboortiga iyo Xarunta Madadaalada horumarinta hufnaanta tamarta - \$10 milyan, Jaamacadda Bariga Washington
- Maalgelinta lagu taageerayo dowladaha hoose si loo hirgeliyo qorshooyinka dhimmista gaaska aqalka dhirta lagu koriyo - \$10 milyan, COM
- Taageerada Lummi Indian Business Council mashaariicda tamarta nadiifka ah - \$7.6 milyan, COM
- Beddelka warshad uumiga ee Jaamacadda Western Washington (WWU) ee leh nidaamka kuleylka ku saleysan inta badan koronto iyo biyaha - \$ 7 milyan, WWU
- Bixinta qalabka guryaha, madadaalada ama tas-hiilaadka waxbarashada si loo horumariyo tayada hawada ee Degmada King - \$6 milyan, ECY
- Beddelka daaqadaha Dugsiga Yakima Valley si loo kordhiyo waxtarka tamarta - \$5.1 milyan, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS)
- Deeqaha lagu taageerayo shabakadaha tamarta kulaylka aan soo kicin - \$5 milyan, COM
- Bixinta maalgelinta si loo yareeyo qashinka cuntada iyo taageeridda gargaarka gaajada iyo baahiyaha gargaarka cuntada - \$4.8 milyan, ECY, Waaxda Beeraha ee Gobolka Washington (WSDA)
- Waxtarka tamarta oo la hagaajiyay ee Dhismaha Sayniska ee CWU - \$4.5 milyan, CWU
- Deeqo lagu caawiyo ururada bulshada ku salaysan, dowladaha hoose, Qabiillada iyo hey'adaha kale ee xaqa u leh inay qoraan, maamulaan deeqaha federaalka iyo la socdaan fursadaha deeqda - \$3.6 milyan, COM
- Maalgelinta si loo caawiyo macaamiisha inay helaan oo ay ka faa'iideystaan maalgelinta horumarinta tamarta guriga - \$3.5 milyan, COM
- Maalgelinta lagu bixinayo waxbarashada, qorshaynta, kaalmada farsamada, iyo ka qaybgalka bulshada si loo suurta geliyo helitaanka tamar nadiif ah - \$3 milyan, COM
- Samaynta qiimeyeenta hufnaanta tamarta dhismaha - \$3 milyan, DHS
- Maalgelinta si loo dhimmo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo ee la xiriir hababka maaraynta digada ee beeraha caanaha iyo xoolaha - \$3 milyan, Guddiga Ilaalinta Gobolka Washington (SCC)
- Maalgelinta horumarinta dhimmista kaarboonka ee kambaska - \$3 milyan, WSU
- Kaalmada ururada bulshada, dowladaha hoose, Qabiillada iyo hey'adaha kale si ay u helaan dhiirigelinta canshuuraha tamarta nadiifka ah ee federaalka - \$2.9 milyan, COM
- Deeqaha lagu kordhinayo dib u isticmaalka qashinka warshadaha - \$2.1 milyan, COM
- Deeqaha lagu hagaajinaayo hufnaanta tamarta ee dhismeyaasha jaamacadaha bulshada iyo farsamada - \$2 milyan, Guddiga Gobolka ee Bulshada iyo Kulliyadaha Farsamada

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY 2029:

Lix iyo tobantay oo dowladeed ayaa lumin doona awooddha kharash-bixinta mustaqbalka ee barnaamijada socda ee ku dhow \$200 milyan ee sannad-maaliyadeedka gobolka 2026-2027 iyo \$130 milyan ee sannad-maaliyadeedka gobolka 2028-2029 hawlo badan oo ay ka mid yihiin horumarinta tamarta nadiifka ah, shaqada caddaaladda deegaanka iyo qorshaynta la qabsiga cimilada.

Koontada Xalalka Cimilada Dabiiciga ah

Saamaynta Koontada Xalalka Cimilada Dabiiciga ah labada sanno ee hadda:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saaraya	Maamulka kharash gareynta ayaa waxaa lagu wareejiyay Koontada Cimilada ee Isku-Duuban
Waaxda Ganacsiga	(\$7,975,000)	\$2,600,546
Waaxda Deegaanka	(\$2,079,963)	\$21,451,072
Waaxda Adeegyada Ganacsiga	\$0	\$0
Waaxda Caafimaadka	\$0	\$22,828
Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah	(\$54,594,358)	\$26,464,652
Waaxda Militariga	\$0	\$84,022
Xafiiska Madadaalada iyo Dhawridda	(\$72,006,000)	\$57,279,700
University of Washington	\$0	\$486,602
Guddiga Dhawridda Gobolka Washington	(\$5,603,713)	\$24,331,293
Waaxda Beeraha ee Gobolka Washington	(\$5,000,000)	\$114,884
Waaxda Kaluunka iyo Duurjoogta ee Gobolka Washington	\$0	\$1,145,241
Guddiga Madadaalada & Jardiinooyinka ee Gobolka Washington	(\$75,000)	\$936,263
Wadarta	(\$147,334,034)	\$134,917,102

Hawlahu muhiimka ah ee ku jira SFY 2025 ee baabi' doona iyada oo la raacayo hindisaha:

Ilaalinta dhulka kaymaha iyo xeebaha:

- Maalgelinta Quinault Indian Nation (Qaranka Hindida Mareykanka ee Quinault) si ay u iibsadaan dhulka kaynta - \$25 milyan, Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah (DNR)
- Maalgelinta lagu iibsanaayo dhulka kaymaha ee loogu talagalay dhowrista iyo ilaalinta noocaya dabar-go'aya - \$15 milyan, DNR
- Iibka guryaha si loo geliyoo xaaladda dhowrista - \$10.8 milyan, DNR
- Deeqaha soo celinta xeebaha iyo adkeysiga - \$7.9 milyan, Xafiiska Madadaalada iyo Ilaalinta (RCO)
- Algae iyo mashaariicda kale ee kaarboonka buluugga ah - \$7 milyan, COM
- Deeqaha lagu taageerayo kaymaha beesha - \$5.8 milyan, RCO
- Deeqaha lagu hagaajinaayo keydinta kaarboonka ee dhul-beereedka - \$5 milyan, WSDA

Ka hortagga dabka iyo caafimaadka kaynta:

- Maalgelinta daaweynta caafimaadka kaynta si loo kordhiyo adkeysiga dabka - \$3 milyan, DNR
- Deeqo la siyo dowladaha hoose iyo mulkiileyaasha gaarka ah ee mashaariicda lagu kordhinayo caafimaadka kaynta iyo u adkeysiga dabka duurjoogta ee bulshada - \$2.5 milyan, SCC
- Dhimmista khatarta dabka duurjoogta ah ee bulshada ku salaysan iyo hawlahu caafimaadka kaynta, sida la-hawlgalayaasha mulkiileyaasha, ka saaridda alaabta khatarta dabka iyo nadifinta coosaska - \$2 milyan, SCC
- Aagga dooxada iyo ilaalinta deegaanka saamanka:
- Soo celinta iyo ilaalinta deegaanka saamanka - \$25 milyan, RCO

- Mashaariicda ka saaridda caqabadaha marinka kaluunka - \$22.2 milyan, RCO
- Soo celinta deegaanka Estuary iyo saamanka - \$11.1 milyan, RCO

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY 2029:

Sagaal heyadood oo dowladeed ayaa lumin doona awoodda kharash-bixinta mustaqbalka ee barnamijaya socda ee ku dhow \$50 milyan sannad kasta si ay u sii wadaan shaqada barnamijaya iyo mashaariicda kordhinaaya adkeysiga biyaha gobolka, kaymaha iyo nidaamyada kale ee deegaanka ee muhiimka u ah saamaynta isbeddelka cimilada; ilaalinta dhulka kaymaha ah; iyo in la kordhiyo awoodda yaraynta kaarboon-wasakhowga dabiiciga ah.

Koontada Maalgelinta Tayada Hawada iyo Farqiga Caafimaadka

Saamaynta ay ku leedaday Koontada Maalgelinta Tayada Hawada iyo Kala-duwanaanta Caafimaadka ee labada sanno hadda jirta:

Wakaaladda	Maamulka kharash gareynta ayaa meesha laga saaraya	Maamulka kharash gareynta ayaa waxaa lagu wareejiyay Koontada Cimilada ee Isku-Duuban
Waaxda Deegaanka	\$0	\$19,333,611
Wadarta	\$0	\$19,333,611

Hawlaha ku jira SFY 2025 ee baabi' doona iyada oo la raacayo hindisaha:

- Midna

Saamaynta mustaqbalka ee SFY 2026-SFY2029:

Koontada waa la tirtiri doonaa iyada oo ay weheliso \$40 milyan oo maalgelin mustaqbalka la filayo oo loogu talagalay barnaamijyada socda ee ay maamusho ECY si loo horumariyo tayada hawada loona yareeyo kala duwanaanshaha caafimaadka ee bulshooyinka culayska badan.

Saamaynta kharash gareynta kale ee wakaaladda gobolka

Qiimaha u hoggaansanaanta:

Jaamacadda Washington (UW) iyo Jaamacadda Gobolka Washington (WSU) waa hey'ado hoos yimaada Sharciga Ballanqaadka Cimilada waxaana looga baahan yahay inay iibsadaan ama helaan agabka u hoggaansanaanta (gunnada sii deynta kaarboonka iyo dhibcaha dhimmista) si loogu xisaabtamo qiiqa gaaska lagu koriyo ee daboolan. Hindisaha, shuruudahaan waa la tirtiri doonaa. UW waxay badbaadin doontaa qiyastii \$3.4 milyan sannad maaliyadeedka gobolka 2025 iyo \$3.8 milyan sannad walba sannad xisaabeedka gobolka 2026-2029. WSU waxay badbaadin doontaa \$3.3 milyan sannad xisaabeedka gobolka 2025 iyo \$3.7 milyan sannad walba sannad xisaabeedka gobolka 2026-2029.

Labada jaamacadoodba waxay helaan maalgelin dowlaadeed si ay u dabooشو qayb ka mid ah kharashka waajibaadkan. Inta soo hartay waa in lagu bixiyaa ilo kale oo maalgelin ah. UW waxay hadda heshaa \$1,733,000 Sanduuqa Guud ee Gobolka sannad xisaabeedka kasta oo ay ku bixiso qayb ka mid ah waajibaadkooda. WSU waxay hadda heshaa \$1,718,000 Sanduuqa Guud ee Gobolka sannad xisaabeedka kasta oo ay ku bixiso qayb ka mid ah waajibaadkooda. Miisaaniyadda hawgelinta ee 2024 ee dheeriga ah waxay siisay \$4.3 milyan oo dheeraad ah sannad xisaabeedka gobolka 2024 iyo \$2.6 milyan sannadka xisaabeedka gobolka 2025 oo laga helo Sanduuqa Guud ee Gobolka ee WSU si ay u bixiyaan waajibaadkooda.

Xeer-dejinta:

Qorshahaan, ECY waxa ay samayn doontaa xeer dejin laga bilaabo Janaayo 2025 ilaa Diseembar 2027 si loo baabi'iyo xeerarka Sharciga Ballanqaadka Cimilada iyo in wax laga beddeko xeerarka ku saabsan ka warbixinta gaaska aqalka dhirta lagu koriyo. Kharashaadka la qiyasay ayaa ah \$1.2 milyan oo ka imaanaya Sanduuqa Guud ee Gobolka ee shaqaalaha si ay u qabtaan xeer-dejinta iyo taageerada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud.

Qiimaha ijaarka:

WSU waxay kiraysatay dhisme ku yaal Richland, Washington si ay u dejiso Machadka Mustaqbalka Tamarta Waqooyi-galbeed waxayna ku bixinaysaa ijaarkan iyada oo maalgelinaysa Sharciga Ballanqaadka Cimilada. WSU waxaa qandaraas ahaan ku waajib ah kharashyada mustaqbalka ilaa Diseembar 1, 2026. Hindisaha, maalgelintaan waa la baabi'in doonaa, WSU waxay u baahan doontaa inay hesho lacag kale si ay u bixiso kharashyadan. Kharashka waxaa lagu qiyasaa \$810,000 sannad xisaabeedka gobolka 2026 iyo \$809,000 ee sannad xisaabeedka gobolka 2027 oo ay u badan tahay in lagu bixiyo Sanduuqa Guud ee Gobolka.

Maalgelinta Federaalka:

Dhowr wakaaladood oo dowlad-goboleed iyo dowladaha hoose waxay u isticmaalaan maalgelinta Sharciga Ballanqaadka Cimilada sidii ciyaar loo baahnaa si ay u helaan maalgelinta dowladda dhexe, iyo

maalgelinta ciyarta inta badan waxa loo baahan yahay ka hor inta aan la codsan deeqaha dowladda dhexe. Hindisaha dhediisa, deeqaha federaalku waxay ahaan doonaan khatar haddii aan la beddelin lacagaha Sharciga Ballanqaadka Cimilada. Si dhab ah looma oga inta ay le'eg tahay maalgelinta federaalka ee gobolka ama dowladaha hoose ay heli doonaan taas oo la mid noqon doonta maalgelinta Sharciga Ballanqaadka Cimilada mustaqbalka. Sidaa darteed, saameynta suurtagalka ah ee hindisaha ku yeelan karo caddadka maalgelinta federaalka ee ay heli lahaayeen dowlad-goboleedka iyo dowladaha hoose waa mid aan la go'aamin. Tusaalooyinka qaar ayaa lagu daray.

Wakhtigan xaadirka ah, Qaanunka Gaadiidka iyo Baahiyaha Gaarka ah ayaa bixiya mashaariicda maxalliga ah waxay isticmaalaan maalgelinta Sharciga Ballanqaadka Cimilada ee la mid ah federaalka. Caddadka dowladda dhexe ee aan la maalgelin doonin sannad-maaliyadeed kasta waa ku dhawwaad \$12 milyan. Mashaariicda dhaq-dhaqaqa miyiga, caddadka waa ku dhawwaad \$8 milyan sannad xisaabeedka kasta.

Barnaamijka Tareenka Xawaarahaa Sare ee Cascadia waxaa lagu aqbalay barnaamijka Aqoonsiga iyo Horumarinta Waddada (CID), kaas oo ah hannaanka deeqda federaalka ee muddada dheer. Maalgelinta dowladda dhexe ee tallaabooyinka xiga ee Barnaamijka Tareenka Xawaarahaa Sare wuxuu u baahan yahay lacag la mid ah gobolka. Barnaamijka waxa uu hadda kala xaafoonaya maamulka dowladda dhexe ee tareennada lacagta deeqda CID. Wadaxaajoodyadani waxay u malaynayaan in la heli karo \$25 milyan oo ah maalgelinta Ballanqaadka Cimilada ee muddada labada bilood ah ee ciyarta gobolka - iyo awooodda lagu kordhinayo kharashka, haddii loo baahdo - si loo waafajiyo wareegga lacag-celinta deeqda federaalka. Sida ku cad hindisaha, WSDOT ma awoodi doonto inay aqbasho \$391.7 milyan ee maalgelinta federaalka sannad maaliyadeedka gobolka 2025-2029 iyada oo loo maraayo Barnaamijka CID iyada oo aan la helin maalgelin kale.

Hantidhawrka waxqabadka:

Sida hindisaha ah, Guddiga Wadajirka ah ee Hantidhawrka iyo Dib-u-eegista Sharci-dejinta (JLARC) ma samayn doonaan xisaab-xir hawleedka fulinta ee Sharciga Ballanqaadka Cimilada kaas oo loo baahan yahay Diseembar 1, 2029. Qiyaasta keydka ee JLARC waa \$200,000 oo ka timid Sanduuqa Guud ee Gobolka ee sannad xisaabeedka gobolka 2029.

Saamaynta dowladda hoose

Barnaamijyada deeqaha iyo abaalmarinta

Gudbinta hindisaha waxay yaraynaysaa maalgelinta Sharciga Ballanqaadka Cimilada ee ay bixiyaan wakaaladaha dowladdu dowladaha hoose iyo dugsiyada dadweynaha ee K-12. Hadda, magaalooyinka, degmooyinka, dugsiyada K-12 iyo hey'adaha kale ee maxalliga ah waxay ka heli karaan deeqo, deyn ama maalgelin qandaraas ku dhawwaad 130 barnaamij oo ka kooban daraasiin hey'ado dowlaadeed ah. Hindisaha, dhammaan barnaamijyadaan waxay lumin doonaan maalgelinta ee dhaafay Juun 30, 2025. Inta u dhexeysa Diseembar 5, 2024, iyo Juun 30, 2025, ku dhawwaad 50 barnaamij iyo \$415.7 milyan waa la tirtiri doonaa. Lama garanaayo dowladaha hoose ee codsan doona deeqaha ama deymaha iyo in la siin doono maalgelin, ama caddadka abaalmarinnahaas ee lagu baabi'in doono hindisaha.

Barnaamijyada muhiimka ah ee ku jira SFY 2025 ee baabi' doona iyada oo la raacayo hindisaha:

- Mashaariicda gaadiidka raasumaalka ee maxalliga ah, oo ay ku jiraan kaabayaasha wax-soo-saarka eber; mashaariicda gaadiidka dadweynaha; ganacsiga, dab-damiska iyo gaadiidka dadweynaha iyo kaabayaasha; korontada dekdedda; iyo kaabayaasha tamarta nadifka
 - ah - \$119 milyan, WSDOT
- Mashaariic lagu dhimmayo qiiqa gaaska aqalka dhirta lagu koriyo iyo qorshaynta taageerada - \$91 milyan, COM
- Horumarinta hufnaanta tamarta ee dhismeyaasha ganacsiga iyo qoysaska badan - \$45 milyan, COM
- Mashruucyada soo kabashada iyo soo celinta saamanka iyo durdurrada - \$37.2 milyan, RCO, SCC
- Degmada Dugsiga Tayada Hawada Gudaha & Barnaamijka Wuxtarka Tamarta - \$30 milyan, OSPI
- Ka saarista xannibaadaha marinka kaluunka - \$23.2 milyan, COM, RCO
- Caafimaadka kaynta, ka hortagga dabka iyo barnaamijka deeqda xikmadda leh ee dabka - \$13.2 milyan, DNR, RCO, SCC
- Soo celinta dhul xeebeedka iyo barnaamijka u adkeysiga - \$7.9 milyan, RCO
- Yaraynta tayada hawada ee degmada King - \$6 milyan, ECY
- Deeqaha dhimmista qashinka cuntada - \$4.8 milyan, ECY, WSDA
- Deeqaha gaadiidka ardayda aan sii deyn - \$4 milyan, ECY
- Barnaamijka deeqda kaynta beesha - \$3 milyan, DNR
- Deeqaha Beeraha & Goobaha Waara barnaamijka - \$3 milyan, SCC
- Caafimaadka kaynta iyo barnaamijka deeqda xikmadda leh - \$2.4 milyan, SCC

Saamaynta ay ku leedahay adeegyada tamarta ee gaaska dabiiciga ah ee ay dadweynuhu leeyihiin

Laba magaalo oo Washington ku yaal waxay gaaska dabiiciga ah siiyaaan qiimo bixiyeyaasha maxalliga ah. Waxay ka qaybqaataan barnaamijka xaddid-oo-maalgeli ee Sharciga Ballanqaadka Cimilada sababtoo ah heerka qiiqa kaarboonka: Magaalada Enumclaw iyo Magaalada Ellensburg. Hindisuhu wuxuu dib uga noqonayaa barnaamijka xaddid-oo-maalgeli, labadaan magaalona loogama baahna inay helaan gunnooyin ama dhibco la mid ah heerarkooda qiiqa kaarboonka. Barnaamijka xaddid-oo-maalgeli ayaa hadda labada magaalo siinaya gunnooyin bilaash ah oo marka hore daboolaya dhammaan qiiqa ay soo saaraan ka dibna hoos u dhacaya 7% sannadkii ilaa 2030 iyo 2% sannadkii ka dib 2030. Haddii tas-hiilaadkaan hoos u dhigaan qiiqa (dhimmaan kaarboonka) si ka dhakhso badan 7% sannadkii, waxay ku soo celin karaan qiiimaha lacageed ee gunnooyin kasta oo aan la isticmaalin ee ku aaddan qiimo bixiyeyaashooda. Sida ku cad hindisaha, ilaa 2030, wadarta qiiimaha gunnooyinka bilaashka ah ee aanay magaaloooyinkani heli doonin waxaa lagu saadaaliyay \$13.4 milyan.

Saamaynta ay ku leedahay adeegyada korontada ee ay dadweynuhu leeyihiin

Hadda, 53 magaaloooyin, degmooyin iyo hey'ado kale si guud bulshadu u leedahay oo koronto siyya bixiyeyaasha maxalliga ah ayaa ka qaybqaata barnaamijka cap-and-invest (xaddid-oo-maalgeli) ee lagu baabi'in doono hindisaha. Hadda, adeegyadan waxay helayaan gunnooyin bilaash ah si ay u daboolaan wadarta kharashka u hoggaansanaanta, oo ay ku jiraan kharashyada maamulka iyo kharashyada helitaanka gunnooyinka ama dhibcooyinka dhimmista oo la mid ah qiiqa kaarboonka ee ka imaanaya dhirta korontada ee u adeegta qiimo bixiyeyaasha. Adeegyadaan waxay isticmaali karaan gunnooyinka bilaashka ah si ay u daboolaan waajibaadkooda u

hoggaansanaanta kobaca iyo maalgashiga. Taas beddelkeeda, waxay isticmaali karaan qaar ka mid ah qiiimaha gunnada bilaashka ah si ay u hirgeliyaan barnaamijyo ka faa'iidayasanaya qiimo bixiyeyaasha. Sida ku cad hindisaha, ilaa 2030, wadarta qiiimaha gunnooyinka bilaashka ah ee aanay hey'adahaan heli doonin waxaa lagu saadaaliyay \$1.3 bilyan.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka lagu taageerayo

Ku codee "Haa" ku aaddan I-2117 si dib looga noqdo canshuurta kaarboonka CO2 (Kaarboon Laba Ogsaydhka) ee qaaliga ah, caddaalad darada ah iyo qasaarada badan ee Washington

Canshuurta CO2 waxay kordhisaa qiimaha shidaalka iyo adeegga tamarta waxayna kor u qaaddaa qiimaha wax kasta oo aan iibsanoo. Canshuur qarsoon oo dhib u geysata dadka dakhligoodu hooseeyo iyadoo deeqyo baaxad weyn siinaysa dad danno gaar ah leh. Taasi waa sababta koox saynisyahanno cimilada ah oo labada xisbi ka tirsan, beeralayda, mulkiileyaasha ganacsiga yaryar, iyo u-dodeyeaasha caddaaladda deegaanka ay ugu codeynayaan "Haa" ku aaddan I-2117 si loo dhimmo qiimaha adeegga tamarta loona ilaaliyo shaqooyinka.

Canshuurta CO2 waxay ku dhisan tahay ballanqaadyo la jebiyay

Siyaasiyiinta aaya ballanqaad in canshuurta CO2 ay ka dhigi doonto qiimaha shidaalka kor u kaca "Sentiyo." Taa beddelkeeda, canshuurta CO2 waxay ku dartay ku dhawwaad 40 senti gaalankiiba barta shidaalka laga shubto, taasoo ka dhigaysa shidaalka Washington qaar ka mid kuwa *ugu qaalisan qaranka*. Waxaa dheer, canshuurtu *laba laabmi doonta* dhowr sanno gudahood.

Sicir bararka adeegga tamarta aaya si xun u saameeya qoysaska dakhligoodu yar yahay

Iyadoo qoysaska shaqeeyaa ay la halgamayaan qiimaha sare, siyaasiyiintu waxay bixiyaan calaamado, "deyn" sannadka doorashada si ay u qariyaan kharashka dhabta ah ee canshuurta. Gobolku wuxuu xitaa *sharci darro* ka dhigay in Shirkadaha Adeegga Tamarta inay dadka u sheegaan in canshuurta CO2 ay tahay waxa kor u qaadaaya biilashooda. Canshuurtaan waa caddaalad darro waxayna dishaa ganacsiyada yaryar iyo shaqooyinka wanaagsan.

Canshuurta CO2 waxay inta badan aadda dowladda iyo kuwa danaha gaarka ah leh - lama dagaalamayso isbeddelka cimilada

Canshuurta CO2 waxay *bilyanno* siisaa hawl wadeennada dowladda, iyada oo ay wax yar u soo harraan wax ka qabashada qiiqa wasakhda iyo isbeddelka cimilada. Lacag badan oo loogu talagalay danno gaar ah, laakiin ku dhawwaad waxba uma soo harrin joojinta dabka duurka ama hagaajinta tuyada hawada. Ku codee "Haa" si aad u taageerto ficalka deegaanka ee mudnaanta siyya meeraha ee maaha siyaasad.

Bayaanka looga soo horjeedo

I-2117 ayaa ah marin hababin ula kac ah, hindise qoraal ah oo liidata oo aan samayn doonin shay lagu dammaanad qaadayo hoos u dhiga kharashyada ee qoysaska shaqeeyaa. Waxay halis gelin doontaa caafimaadkeena iyo badqabkeena waxayna wax u dhimmaysaa nidaamkeena gaadiidka.

I-2117 waxay khatar ku tahay hawadeena, dhulkeena iyo biyaheena - taasoo khatar gelinaysa caafimaadkeena.

I-2117 waxay khatar gelinaysaa ilaalinta muhiimka ah ee marin biyoodkeena, oo ay ku jiraan webiyada, harooyinka iyo durdurrada. Waxay ka dhigan tahay wasakh badan oo sun ah hawada aan neefsaneyno, taasoo keenaysa dad badan oo waaweyn iyo carruur leh neef iyo jirro. Waxay daminaysaa barnaamijyada bulshooyinkeena ka ilaalintaya dabka duurjoogta ah waxayna meesha ka saaraysaa dadaallada lagu taageerayo soo kabashada salmonka iyo deegaanka kaluunka.

I-2117 waxay halis gelinaysaa badqabka, shaqeeynta la isku halayn karo ee nidaamkeena gaadiidka oo dhan.

I-2117 waxay dhimmaysaa saddex-meelood meal maalgelinta qorshaha gaadiidka ee hore u fidsan ee gobolkeena, taasoo ka dhigaysa cirriiga taraafikada oo ka sii dari doonta safarrada xitaa dheer. Ka jarkan ba'an waxay saamayn doontaa gees kasta oo ka mid ah gobolkeena, iyadoo gelinaysa waddooyin waaweyn iyo mashruucyo buundooyin oo wax ka qabanaya cirriiga, badqabka iyo dhaqdhaqaqa xamuulka khatarta dib u dhac weyn ama baabi'in toos ah. I-2117 waxay yaraynaysaa maalgelinta lagu soo celinaayo nidaamka doonyaha mar horeba dhibaato ku jiray waxayna si weyn u dhimmi doontaa adeegga gaadiidka.

Isbahaysi aan hore loo arag aaya ka soo horjeeda I-2117.

Waxyeellada ba'an ee I-2117 keenni lahayd waxay soo saartay isbahaysi si gaar ah u balaaran oo kala duwan oo ku midaysan mucaaradka. In ka badan 350 urur - oo ay ku jiraan dab-damiska, ganacsiyada yaryar, shirkadaha hormuudka ah, dhakhaatiir, kalkaaliiyeaal, ururada shaqaalahi iyo hoggaamiyeyaasha deegaanka - iyo Qaramada Qabiillada aaya ku biiray si ay si adag uga soo horjeestaan I-2117. *Maya* oo ah wasakh badan. *Maya* oo ah ciriri badan oo taraafik. *Maya* oo ah I-2117. Waa heshiis xun Washington.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

U doodeyeaasha canshuurta CO2 - canshuurta tamarta ugu weyn taariikhda gobolka - waxay sheeganayaan inaysan kordinayn kharashka tamarta. Waxay *ogyihii* inay tani been tahay. Dhammaanteen waxaan dareennay waxyeellada ka dhalatay sicir bararka shidaalka. Ka noqoshada canshuurta waxay hoos u dhigtaa qiimaha. Taageerayaasha canshuuraha waxay kaloo *ogyihii* in sharcigu uu mamnuuco in canshuuraha lagu dayactiro waddooyinka iyo buundooyinka. Joojinta canshuurta *ma dhaawaci doonto* gaadiidka. Yaysan ku sirin xeeladaha cabsida ee aan daacadda ahayn. Ku codee "Haa" si aad wax yar u bixiso oo aad u ilaaliiso dadka Washington ee dakhligoodu yar yahay.

Waxaa qoray

Nichole Banegas, Hoggaamiyaha Caddaaladda Deegaanka; Cliff Mass, Professor Cilmiga Cimilada; Ben Tindall, Agaasimaha Fulinta ee Save Family Farming; Sheri Call, Madaxweynaha & Maamulaha Guud, Ururada Gaadiidka Xamuulka ee Washington; Todd Myers, qoqaa deegaanka, Xubin hore oo Puget Sound Salmon Recovery; Matt Boehnke, Senatarka Gobolka, Degmada Sharci-dejinta ee 8-daad Xiriirka: Wax macluumaad ah lama soo gudbin.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Dadka ka dambeeyaa I-2117 waxay sameeyaan sheegashooyin badan oo marin hababin ah. Haddii taageerayaasheeda ay rabaan inay hoos u dhigaan qiimaha gaaska, waxay ahayd inay riixaan hindise lagu dhimmayo canshuurta gaaska. Ma jiro wax ku jira hindisaha I-2117 kaas oo dammaanad qaadaya qiimaha gaaska oo hooseeyaa - laakiin wuxuu micnaheedu noqon *doonaa* wasakh sii badan oo ku saaqa hawadeena iyo marin biyoodka, iyo xanuunka neefta iyo jirrooyinka oo sii badan. Waxay burburin *doontaa* nidaamkeena gaadiidka, kororka cirriiga taraafikada iyo wakhtiyada safarka, iyo kharashyada shaqooyinka. Yaan lagu sirin. Ku codee *Maya* ee ku aaddan 2117.

Waxaa qoray

Mark Riker, Xoghayaha Fulinta, Golaha Ganacsiga Dhismaha & Dhismaha ee Washington; Leonard Forsman, Guddoomiyaha Qabiilka Suquamish, Qabiillada ku xiran Hindida Dhaladka ee Northwest; Maia Bellon, Ilaalinta Dabeecadda ee Washington, Guddoomiyaha Guiddiga, Tumwater; Richard de Sam Lazaro, Isbahaysiga Doorashada Gaadiidka, Guddoomiyaha Guiddiga; Lindsey Kirsch, Kalkaalisaada Caafimaadka Carruuriye ee Diwaan Gashan; Jason Wilkins, Golaha Gobolka ee Dab-damiska, Spokane, Hoggaamiye Hawleedka Duurjoogta

Xiriirka: (206) 331-3969; info@no2117.com; no2117.com

Cabbirka Hindisaha Lr. 2109

Cabbirka Hindisaha Lr. 2109 ayaa khuseeya canshuuraha.

Cabbirkan wuxuu dib uga noqon doonaa canshuurta la saaro badeecada gudaha ee lagu soo rogay iibsashada ama is-dhaafsiga qaar ka mid ah hantida raasumaalka ee muddada-dheer ee shakhsiyadka haysta faa'iidooyinka raasumaalka ee ka badan \$250,000. Cabbirkan wuxuu hoos u dhigayaa maalgelinta waxbarashada K-12, waxbarashada dugsiga sare ka dib, dhisitaanka dugsiga, waxbarashada goorta hore, iyo daryeelka carruurta.

Ma tahay in cabbirkan loo hirgeliyo sharci ahaan?

Haa

Maya

Xoghayaha Gobolka mas'uul kama aha waxa ku jira nuxurka bayaannada ama doodaha (WAC 434-381-180).

Bayaanka sharaxaadda

Waxaa qoray Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Sharciga Sida uu Hadda u Jiro

Gobolka Washington waxa uu soo rogaa canshuuro kala duwan si kor loogu qaado dakhliga si loo maalgeliyo dowladda gobolka. Canshuurahaas waxaa ka mid ah canshuurta iibka tafaariiqda, ganacsiga iyo canshuurta shaqada, canshuurta hantida ee gobolka, iyo canshuuraha kale ee kala duwan ee gobolka. 2021-kii, sharci-dejinta wuxuu meel mariyay sharci abuuraya canshurr ku aaddan iibinta ama beddelidda hantida raasumaalka ah ee muddada-dheer, oo badanaa loo yaqaan "canshuurta faa'iidata raasumaalka."

Canshuurta faa'iidata raasumaalka waxay khusaysaa qaar keliya noocyada hantida raasumaalka ah ee la hayo wax ka badan sannad, sida suuqa saamiyada, curaarta, biraha qaaliga ah, ama farshaxanka. Canshuurtu ma khusayso iibinta hantida qaar, oo ay ku jiraan:

- hantida ma guurtada;
- koontooyinka keydka hawlgabka ama koontooyinka magdhowga ee dib loo dhigay;
- lo'da, fardaha, ama xoolaha la dhaqdo haddii in ka badan 50 boqolkiiba dakhliga canshurr bixiyaha uu ka yimid beerashada ama dhaqashada xoolaha;
- hanti qimmaheeda jaban yahay ama loola dhaqmo sidii kharash marka loo eego sharciyada canshuuraha federaalka ee la aqoonsaday;
- geedaha alwaaxa ama dhulka geedaha alwaaxa, oo ay ku jiraan iibinta alwaaxa ama dhulka alwaaxa taasoo keenta qaybinta ama qaybinta hantida maalgashiga hantida ma guurtada ah;
- Qaar ka mid ah mudnaanta kalluumeyisiga ganacsiga; iyo
- libinta hantida aan muuqan laga helay iibka u qalma ee xarunta iibinta baabuurga.

Canshuurta faa'iidata raasumaalka waxay canshurr bixiye kasta u oggolaataa \$250,000 sannadkii, taas oo micnaheedu yahay in canshuurtu khusayso keliya canshurr bixiyeyasha kuwaas oo sameeya faa'iidooyin raasumaal ah oo ka badan \$250,000 sannad canshuureed kasta. Lammaanaha iyo lammaanaha qoyska, isku darka dhimmista caadiga ah waxay ku xaddidan tahay \$250,000, ayadoon loo eegin haddii ay xareeyaan soo celin canshurr wadajir ah ama mid gaar ah.

Heerka canshuurtu waa boqolkiiba toddoba faa'iidooyinka la daboolay. Haddaba, tusaale ahaan, haddii uu qofku iibsado \$150,000 oo keyd ah oo uu toban sanno ka dib ku iibyo \$500,000, wuxuu heli lahaa faa'iido saafi ah oo ah \$350,000. \$250,000-ka ugu horeeya ee faa'iidataas waa laga dhaafsi doonaa canshuurta, canshurr bixiyaha waxaa lagu yeelan doonaa canshurr gaaraysa boqolkiiba toddoba inta ka hartay \$100,000-ka ee faa'iidata, taasoo ah wadar guud oo gaaraysa \$7,000 oo ah canshuurta faa'iidata raasumaalka.

Canshuurta faa'iidata raasumaalka waxay sidoo kale oggolaataa dhimmis dhowr kale, oo ay ku jiraan:

- faa'iidooyinka laga helo iibinta ama wareejinta ganacsi qoys uu leeyahay oo u qalma oo dakhligoodu ka yar yahay \$10 milyan inta lagu guda jiray sannadkii la soo dhaafay; iyo
- deeqaha samafalka ah ee ka sareeya \$250,000, ilaa ugu badnaan dhimmis ah \$100,000.

Sharciga ayaa sidoo kale qeexaaya sida loo maamulo canshuurta. Waxaa ka mid ah qodobbada loo qoondeynayo faa'iidooyinka Washington iyo gobollada kale, deynta canshuuraha qaarkood ee la siyo gobollada kale, hababka xareynta canshurr celinta, iyo ganaaxyada ku aaddan

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

isku dayga ka leexashada bixinta canshuurta. Tirooyinka qaarkood, sida heerka \$250,000 ee dhimmista, u qalmidda dakhliga guud ee ka dhimmista ganacsiga yaryar, iyo caddadka tabarucaadka deeqaha, ayaa sannad walba la hagaajiyaa iyadoo lagu salaynaayo sicir bararka.

\$500 milyan ee ugu horeysa ee laga ururiyo canshuurta faa'iiddada raasumaalka sannad walba ayaa lagu shubaa koontada dhaxalka waxbarashada, taas oo taageerta waxbarashada K-12, balaarinta helitaanka waxbarasho sare, oo bixisa maalgelinta waxbarashada goorta hore iyo barnaamijyada daryeelka carruurta. Caddad kasta oo ka badan \$500 milyan oo lasoo ururiyo ayaa lagu dabaaqaa koontada dhismaha dugsiga ee la wadaago, taasoo maalgelisa dhismaha xarumaha dugsiyada la wadaago.

Saamaynta Cabbirka La Soo Jeediyay Haddii La Ansixyo

Haddii la ansixyo, cabbirkhan wuxuu dib uga noqon doonaa sharciga faa'iiddada raasumaalka, oo Gobolka Washington kuma soo rogi doono canshuurta iibinta ama beddelka hantida raasumaalka ee muddad-dheer. Tani waxay sidoo kale meesha ka saari doontaa maalgelinta laga soo ururiyo canshuurta hadda ku baxda waxbarashada K-12, tacliinta sare, waxbarashada hore, xanaanada carruurta, iyo dhismaha dugsiga.

Bayaanka Saamaynta Maaliyadda

Waxaa qoray Xafiiska Maamulka Maaliyadda. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo www.ofm.wa.gov/ballot

SAAMAYNTA MAALIYADDA OO LA SOO KOOBAY

Haddii ay ansixiyaan codbixiyeyashu, Hindisaha 2109 waxa ay keenni doontaa in lagu qiyaaso in uu khasaarayo dakhliga gobolka \$2.2 bilyan in ka badan shanta sanno ee maaliyadda gobolka. Tani waxay yaraynaysaa maalgelinta loogu talagalay waxbarashada K-12, waxbarashada sare, waxbarashada hore iyo daryeelka ilmaha. Dhimmista mustaqbalka ee lacagaha loogu talagalay dhismaha dugsiga K-12 waa suurtagal laakiin hadda lama saadaaliyo. Qiyaasta keydadka saafiga ah ee kharashaadka maamulka ee laba hey'adood oo dowlaadeed waa \$10.1 milyan marka loo eego shanta sanno ee maaliyadda gobolka. Ma jiro wax saamayn ah oo maaliyadeed oo dowladda hoose ah oo la ogahay.

MALAYNTA GUUD

- Taariikhda dhaqan galka waa Diseembar 5, 2024.
- Qodobbada hindisaha waxay khuseeyaan mustaqbalka, maaha kuwo dib-u-dhac ah.
- Waaxda Canshuuraha Dakhliga (DOR) waxay joojisaa dhammaan hawlahu ururinta taariikhda dhaqan galka ah, oo ay ku jiraan hawlahu socda.

Saamaynta Dakhliga Gobolka

Shaxda 1. Lumista dakhliga soo gala, koonto ahaan

	SFY 2025	SFY 2026	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029
Waxbarashada Legacy Trust (Koontada Dhaxalka)	(\$424,000,000)	(\$398,000,000)	(\$422,000,000)	(\$447,000,000)	(\$472,000,000)
Caadiyan Dugsiga Dhismaha Koontada	\$0	\$0	\$0	\$0	\$0
WADARTA	(\$424,000,000)	(\$398,000,000)	(\$422,000,000)	(\$447,000,000)	(\$472,000,000)

- Qiyaasta waxay isticmaashaa sannad-maaliyadeedka gobolka (SFY) ee Julaay 1 ilaa Juun 30. Sanad xisaabeedka gobolka 2025 waa Julaay 1, 2024, ilaa Juun 30, 2025.
- Sannad kalandarka waxa loola jeedaa Janaayo 1 ilaa Diseembar 31.

DAKHLIGA

Dakhliga Maxalliga

Hindisaha ma saamayn doono dakhliga gudaha.

Dakhliga Gobolka

Hindisaha ayaa lagu qiyaasay inuu keeno dakhli lumis \$2,163,000,000 in ka badan shan sanno oo maaliyadeed laga soo bilabo Koontada Aminka Dhaxalka Waxbarashada (Education Legacy Trust Account). \$500,000,000 ee ugu horeysa, ee lagu tilmaamay sicir-bararka, waxaa lagu shubaa Koontada Aminka Dhaxalka Waxbarashada sannad-maaliyadeed kasta. Koontada Aminka Dhaxalka Waxbarashada waxay taageertaa waxbarashada K-12, waxay balaarisaa helitaanka tacliinta sare waxayna bixisaa maalgelinta waxbarashada goorta hore iyo barnaamijyada daryeelka ilmaha. Dakhli dheeri ah ayaa lagu shubaa Koontada Dhismaha Dugsiga Guud si loo maalgeliyo dhismaha xarunta dugsiga K-12.

MALAYNTA DAKHLIGA GOBOLKA

Qiyaasta dakhliga waxay ku salaysan tahay xogta canshuurta canshuuraha ee DOR iyo Golaha Saadaasha Dhaqaalaha iyo Dakhliga (ERFC) Juun 2024 faa'iiddada dakhliga canshuurta raasumaalka. Sannad canshuureedka faa'iiddada raasumaalka waxaa loola jeedaa sannadka kalandarka. Malaynta dheeraadka ah ee soo socda ayaa loo sameeyay ujeeddooyin xisaabeed:

- Canshuuraha faa'iiddada raasumaalka ah ee la saadaaliyay ee sannadka canshuurta 2024, ee ku beegan Abriil 2025, lama ururin doono oo waxay keenni doontaa khasaare dakhli sannad maaliyadeedka gobolka 2025.
- Heerka kobaca muddada-dheer ee la isticmaalay waa heerka ay saadaalisay ERFC Juun 2024.
- Bisha Juun 2024 faa'iiddada canshuuraha saadaasha canshuurta waxay u malaynaysaa faa'iido raasumaal eber dakhliga canshuurta ee Koontada Guud ee Dhisitaanka Dugsiga; sidaas darteed, ma jiraan wax saamayn ah oo dakhli ah oo ku yimaada koontadaan sababtoo ah hindisaha.

KHARASHKA DOWLADDA GOBOLKA

Qiyaasta Kharashka Hirgelinta Wakaaladda Gobolka

Keydinta wakaaladda gobolka waxa lagu qiyaasaa inay tahay wadarta saafiga ah ee \$10,147,700 shantii sanno ee maaliyadda gobolka taas oo ka dhalatay hindisaha. Keydinta wakaaladda waa:

Shaxda 2. Kharashyada, ee wakaaladda (Sanduuqa Guud ee Gobolka iyo Xisaabta Wareegga ee Adeegyada Sharciga)

	SFY 2025	SFY 2026	SFY 2027	SFY 2028	SFY 2029
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud	(\$23,000)	(\$23,000)	(\$23,000)	(\$23,000)	(\$23,000)
Waaxda CanshuurtaDakhliga	\$0	(\$2,364,900)	(\$2,433,800)	(\$2,604,600)	(\$2,629,400)
WADARTA	(\$23,000)	(\$2,387,900)	(\$2,456,800)	(\$2,627,600)	(\$2,652,400)

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (AGO) wuxuu badbaadin doonaa \$23,000 sannad xisaabeeedka gobol kasta laga bilaabo 2025 ilaa 2029. Tani waxay u dhigantaa wadarta keydka \$115,000 muddada shanta sanno ah.

AGO waxay qiyaastay keydadka sababtoo ah dacwadaha oo yar iyo baahida adeegyada la-talinta macmalka oo yar. AGO waxay rajeynaysaa DOR inay u baahan tahay la-talin sharchiyeedka ugu yar maadaama waaxdu la tacaalayo kiisaa gaar ah oo ay canshuurbixiyeyaashu raadsadaan lacag celin. Waxaa loo malaynayaa in kiisaska ka soo horjeeda qiimeynata canshuuraha faa'iiddada raasumaalka ah ee aan hore loo bixin ay meesha ka baxayaan, sababtoo ah wasaaradda ma qaadi karto canshuurta la qiimeeyay.

Waaxda Canshuurta Dakhliga

Waaxdu waxay badbaadin doontaa wadarta lafaha oo dhan \$10,032,700 muddada shanta sanno ah ee u dhexeysa 2025 ilaa 2029. Waxaa loo malaynayaa in qoondeynta Sanduuqa Guud ee Gobolka ee hadda jira ee lagu maamulayo canshuurta faa'iiddada raasumaalka ay dhammaan doonto laga bilaabo Juun 30, 2025. Sannad-maaliyadeedka gobolka 2025, caddadka horey loo bixiyay ayaa ku filan in lagu maamuloo canshuurta faa'iiddada raasumaalka iyada oo aan la helin maalgelin dheeraad ah. Sanad maaliyadeedka gobolka 2026 ilaa 2029, keydinta \$2,703,000 sannad xisaabeeedka gobolka waxaa loo qaadanayaa faa'iidooyinka raasumaalka waajibaadka maamulka canshuuraha oo aan loo baahnayn. Waaxdu waxay kaloo bixin doontaa kharash dhan \$779,300 inta lagu jiro muddadan sida hoos lagu sharxay. Waajibaadka waaxdu si ay u maamusho canshuuraha waxa ka mid ah ilaalinta diwaannada, habeynta lacag celinta iyo ka caawinta canshuur bixiyeyaasha dib u soo celinta ilaa shan sanno oo canshuureed ka hor. Sidaa darteed, waaxdu waxay sii wadi doontaa inay lahaato kharashyada la xiriira maamulka canshuurta faa'iiddada raasumaalka iyo canshuurta ganacsiga iyo shaqada ee la xiriira (B&O) canshuur buuxiyeyaasha faa'iiddada raasumaalka sannadaha canshuuraha 2022 ilaa 2023 ilaa Disembar 31, 2028. Laga bilaabo Janaayo 1, 2029, DOR waxay yeelan doontaa kharashyo dheeraad ah si ay u baabi'iso canshuurta faa'iiddada raasumaalka iyo deynta canshuurta B&O ee nidaamyada kombuyutarrada. Waxaa la qiyaasayaa in Sanduuqa Guud ee Gobolka uu noqon doono isha maalgelinta shaqadaan.

Sannad-maaliyadeedka gobolka 2025, DOR waxay yeelan doontaa kharashyo lagu bixin doono lacagaha jira ee hawlaha soo socda:

- Cusboonaysiinta ogeysiisaya gaarka ah iyo la-talinta canshuuraha,

baabi'inta bayaannada hagida ku-meel-gaarka ah iyo cusboonaysiinta macluumada kale ee canshuurta faa'iidooyinka raasumaalka ee bogga internetka.

- Wax ka beddelka laba xeer maamul.
- Maareynta isbeddelada nidaamka kombuyutarka iyo tijaabinta canshuurta faa'iiddada raasumaalka iyo dhibcaha canshuurta B&O ee la xiriira.

Sannadaha maaliyadeed ee gobolka 2026, 2027, 2028 iyo 2029 waaxdu waxay yeelan doontaa kharashyada hawlaha soo socda:

- Hawlaha xisaabaadka ee la xiriira canshuurta faa'iiddada raasumaalka.
- Hagaajinta iswaydaarsiga warqadaha, ka jawaabista fariimaha webseedka, ka jawaabista su'aalahale taleefanka iyo ka caawinaadda canshuur bixiyeyaasha ka warbixinta iyo isticmaalka bogga webseedka.

- Hagaajinta soo celinta, lacag-bixinta iyo dhammaan alaabta shaqada ee la xiriira, oo ay ku jирто soo-celinta lacag-bixinta dheeraadka ah.
- Dhegaysiga dib u eegis maamul oo siinaya canshuur bixiyeyaasha hab aan rasmii ahayn, oo aan ahayn habka xallinta khilaafadka ee dib u eegista ficiika waaxda lagu muransan yahay, sida diidmada codsiga lacag celinta ama xukunka canshuurta. Waaxdu waxay geli doontaa kharash dheeraad ah haddii khilaafka ku sii socdo Guddiga Rafcaanka Canshuuraha ama Maxkamadaha.

Samaynta isbeddelada nidaamka kombuyutarka ee lagama maarmaanka ah iyo samaynta tijaabada nidaamka kombuyutarka ee loo baahan yahay sida xirmooyinka adeegga iyo casriyaynta nidaamka aasaasiga ah ayaa dhacaya.

Sannad-maaliyadeedka gobolka ee 2029, waaxdu waxay sidoo kale yeelan doontaa kharash si ay u baabi'iso canshuurta faa'iiddada raasumaalka ah iyo deynta canshuurta B&O ee nidaamka kombuyutarka iyo inay qabato imtxaannada la xiriira nidaamka kombuyutarka.

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka lagu taageerayo

"Haa" ku aaddan I-2109 waxay dib uga noqonaysaa canshuurta cusub ee dakhliga ee Washington ee xagga dambe laga soo geliyey.

Dadka Washington ayaa si xad dhaaf ah u diiday canshuurta dakhliga 11 jeer, haddana sharci-dejyeyaasha way iska indho tireen rabitaanka codbixiyeyaasha oo waxay ansixiyeen canshuurta dakhliga raasumaalka. Codeyn "Haa" ee ku aaddan I-2109 waxay ilaalinyasaan rabitaanka dadka. IRS, gobol kasta oo kale, iyo qaamuuska aaya waxay faa'iidaa raasumaalka u qeexaan dakhlii ahaan.

"Haa" ku aaddan I-2109 waxay ilaalinyasaan iibka guriga iyo keydka hawlgabka balaarinta canshuurta.

Iyadoo taageerayaasha ay sheeganayaan in "Keliya kuwa hodanka ah ay bixin doonaan," raasumaalka wuxuu helayaa canshuurta dakhliga si cad loogu talagalay in lagu balaariyo oo loo furo waddada canshuurta dakhliga ee gobolka oo dhan. Qoraaga Senatka wuxuu yiri, "Hirgelinta canshuurta faa'iidaa raasumaalka waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu wanaagsan ee aan samayn karno si aan gacan uga geysano horumarinta suurtagalnimada canshuurta dakhliga ee gobolkeena." Ilalii gurigaaga iyo hawlgabka adiga oo ku codeynaya "Haa."

"Haa" ku aaddan I-2109 waxay ilaalinyasaan dammaanad qaadka maalgelinta waxbarashada Gobolka.

Dastuurka Washington wuxuu farayaa maalgelin buuxda oo loogu talagalay waxbarashada dadweynaha. Nidaamkeena waxbarashada dadweynaha wuxuu helaa in ka badan \$18,500 ardaygiiba sannadkii, oo ah mid ka mid ah kuwa ugu sareeyaa dalka. Ku codeyn "Haa" ee I-2109 waxay hubisaa in waxbarashada carruurteena si buuxda loo maalgeliyo canshuur cusub la'an.

"Haa" ku aaddan I-2109 waxay ilalisaa qoysaska shaqeeyaa, ganacsiga yaryar, iyo hal-abuurka farsamada.

Haddii aan ku sii socono dariqaan, waxaan halis gelinaynaa in aan ka saarno shaqooyinka mushaharka qoyska iyo shaqo-abuureyaasha Washington marka ay u guuraan gobollo leh canshuur hoose. Codeyn "Haa" ee ku aaddan I-2109 waxay caawisaan hubinta in Washington ay sii ahaanayso xarunta hal-abuurka, fursadaha, iyo shaqooyinka mushaharka qoyska.

Bayaanka looga soo horjeedo

Maya oo ah 2109: Jooji Jaritaannada Ku Aaddan Waxbarashada, Dhisitaanka Dugsiga, iyo Xanaanada Carruurta

I-2109 waxay meesha ka saaraysaa bilyanno doolar oo waxbarasho ah - taaso ka sii daraysa xisadda maalgelinta dugsigeena, yaraynta helitaanka daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore ee la awoodi karo, iyo dhimmista maalgelinta dugsiyada burbursan. I-2109 waxa kale oo ay meesha ka saartaa lacagaha laga helo pre-K, waxbarashada gaarka ah, tababarka shaqada, iyo kulliyadaha bulshada. Jaritaannada waxay ku qasbi doontaa luminta shaqada ee daryeelka carruurta iyo waxbarashada wakhtiga aan u baahannahay taageero dheeraad ah ee ku aaddan carruurta iyo qoysaska - ma yara.

In Ka Yar 1% Dadka Washington Waxay Bixiyaan Canshuru Faa'iidooyin Aan Caadi Ahayn

Lacagta hawlgabka, hantida ma guurtada ah, ganacsiyada ay qoyska yar leeyihin, iyo beeraha dhammaantood waa laga dhaafay canshuurta faa'iidaa raasumaalka. Dhab ahaantii, in ka yar 1% dadka Washington ayaa bixin doona canshuurtaan; waxay khusaysaa oo keliya iibka saamiyada faa'iidooyinka in ka badan \$250,000 sannadkii.

Diid Xeerka Canshuurta Kor u kaca ee Washington

Washington waxay leedahay koodka canshuurta labaad ee ugu rogan qaranka, iyadoo qoysaska dabaqada dhexe ay bixinayaan saddex laab ka badan dakhligooda canshuuraha gobolka iyo kuwa maxalliga ah marka loo eego qoysaska ugu qanisan. *Dadka qaniga ah ee Washington waa inay bixiyaan qayb caddaalad ah oo loogu talagalay waxbarashada iyo waxbarashada hore.*

Macallimiinta iyo Bixiyeyaasha Xanaanada Carrurta: "Ha u Oggolaan Milyanneerka Maalgelinta Hedge-ka (Hedge Fund Millionaire) Inuu libsado Doorashadaan"

I-2109 waxa kafaalo qaaday maalqabeenka hedge fund ee Brian Heywood, kaas oo shakhsii ahaan ka faa'iideysan doona hindisan. Macallimiinta, bixiyeyaasha xanaanada carruurta, khubarada waxbarashada goorta hore, hoggaamiyeysaasha K-12, waalidiinta, iyo mulkiileyaasha ganacsiga yaryar waxay ku midaysan yihiin inay kugu booriyan inaad ku codeyso Maya. Ha siin maalqabeennada sare canshuur dhimmis taas oo waxyeello u geysan doonta carruurta, oo biilkanshuurta ku wareejin doonta inteen kale.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Sharci-dejinta ayaa dasturiyan looga baahan yahay inay maalgeliyaan waxbarashada waxayna haystaan dhaqaale badan. Markii canshuurtaan la ansixiyay, waxaan haysanay \$3 bilyan oo dheeri ah oo ay ku xigto \$15 bilyan sannadkii xigay. Maalgelin ku filan ayaa jirta. Iyadoo canshuurta hadda jirta ay leedahay ka-dhaafitaanno, waxay si cad u tahay jaranjaro loo maro canshuurta dakhliga mushaharka gobolka oo dhan. Ku codee haa, sida ay codbixiyeyaasha ugu codeeyeen 11 jeer hadda ka hor, si aad gurigaaga iyo hawlgabnimada uga ilaaliso canshuuro dheeraad ah iyo in la hubiyo in abuureyaasha shaqooyinka ay u sii wadaan inay yimaadaan gobolkeena.

Waxaa qoray

Suri Reddy, Mulkiilaha Ganacsiga Yar; Marcus Charles, Neumos, Croc 2.0, Local 360, Aasaasaha Labaad CHBP; Rob McKenna, Xeer Ilaaliyihii hore ee Gobolka Washington; Vijay Boyapati, Injineer Software; Chris Gildon, Senatarka Gobolka, Jamhuuri, Puyallup; Todd Allred, Ururka Qandaraasleyaasha Tubooyinka, Kulayliyaha iyo Qaboojinta

Xiriirk: (425) 403-8185; info@letsgowa.com; Letsgowa.com

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Waa kuwaan xaqiyooyinka: 99.8% dadka Washington kama bixin doonaan faa'iidaa raasumaalka faa'iidaa ay ka sameeyaaan saamiyada aan caadiga ahayn - waxay keliya khusaysaa iibka saamiyada *macaashka* ee ah wiixii ka badan \$250,000 sannadkii. Sharcigu wuxuu si cad uga dhaafayaan keydadka hawlgabka iyo jaamacadda, iyo sidoo kale iibka ee hantida ma-guurtada ah, beeraha, iyo ganacsiyada yaryar. Ku biir mulkiileyaasha ganacsiga yaryar iyo hoggaamiyeysaasha horumarinta xoogga shaqada ayagoo ku xisaabtamaaya daryeelka carruurta ee la awoodi karo ee shaqalaha, iyo caddaaladda canshuurta qoysaska dakhliga dhexe-fadian u codee Maya.

Waxaa qoray

Stephan Blanford, Ed.D, Agaasimaha Fulinta, Isbahaysiga Carrurta; Holly Lindsey, Hooyo, Mulkiilaha, Kids Ranch Daycare, Longview; Jenny Slagle, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Guddiga Dugsiga Spokane; April Sims, Madaxweyne, Golaha Shaqaalaha Gobolka Washington; Jacob Vela, Guddiga Codbixiyeyaasha ee Ururka Waxbarashada; Katie Baird, Ph.D, Professor of Economics, UW Tacoma

Xiriirk: (206) 659-6421; info@no2109.org; No2109.org;

Soo Jeedinta Lr. 1

Kor-U-Qaadidda Canshuurta

Golaha Magaalada ayaa hirgeliyay Xeerka 1796 ee khuseeya bixinta lacagta maalgelinta si loo joogteeyo oo loo kordhiyo adeegyada badqabka dadweynaha.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan ayaa Magaalada u oggolaanaysa inay kordhiso qiimaha canshuurta caadiga ah ee hantida ee sannadka 2025 ilaa iyo heer aan ka badnayn \$1.40/\$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay. Kordhintaa ka sareysa qiimeyaasha 2024 waxaa lagu maalgelin doonaa joogtaynta iyo kordhintaa heerarka adeegga badqabka dadweynaha ee hore u jira, sii haysashada jagooyinka saraakiisha booliiska, iyo kordhintaa badqabka dadweynaha iyo shaqaalaha booliiska, sida lagu sharxay Xeerka. Xaddidaadyada canshuurta ee xiga ayaa lagu salayn doonaa heerka ugu sareeya ee la oggolaan karo ee canshuurta 2025. Waayeellada, halyeeyadii hore, iyo kuwa kale ee u qalma ayaa laga dhaafi doonaa sida ku cad Cutubka 84.36 RCW.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee cabbirkana ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
 Soo Jeedinta Lr.1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Magaalada Des Moines waxay soo jeedinaysaa kor u qaadid canshuur si ay u kordhiso wadarta guud ee canshuurta hantida caadiga ah sannadka 2025 si loo joogteeyo loona kordhiyo heerarka adeegga badqabka dadweynaha ee hore u jira, sii haysashada jagooyinka saraakiisha booliiska, iyo inay bixiso kharashyada kale ee kordhay ee la xiriira badqabka dadweynaha iyo shaqaalaha booliiska. Gaar ahaan, Golaha Magaaladu waxa uu filayaa in sannadka 2025, kororka uu maalgelin doono sii haysashada afar jago oo booliis ah oo hore u jiray, jagada khibradlaha ka jawaabista dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka, jagada falanqeeyaha dambiyada; waxay maalgelin doontaa ku daritaanka afar jago oo kale oo booliis ah iyo jagada sarkaalka fulinta xeerka; waxayna maalgelin doontaa kharashyada badqabka dadweynaha ee dheeraadka ah.

Haddii ay codbixiyeyaashu ansixiyaan, soo jeedintaan waxa ay Magaalada u oggolaanaysaa inay canshuuraha hantida qaaddo 2025 halka ah ugu badnaan \$1.40 ee \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, taasoo ah koror ku dhaw \$0.50 ee \$1,000 marka loo eego heerka canshuurta ee 2024. Tani waxay noqon doontaa koror ah ku dhawwaad \$20 bishii (qiyaastii \$250 sannadkii) oo lagu soo rogo guri qiimihiisu yahay \$500,000.

Kor u qaadidda canshuurta waxay dib u dejinaysaa xadka canshuurta ee hoos yimaada xaddidaada 101% iyo kordhintaa sannadaha soo socda waxaa lagu salaysan doonaa caddadka canshuurta ee ugu badan ee 2025. Canshuuraha mustaqbalka waxa lagu xaddidi doonaa xadadka sharciga ah, oo ay ku jiraan xaddidaada canshuuraha ee 101%.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkana, la xiriir:

Taria Keane
 Karaaniga Magaalada
 (206) 870-6552
 tkeane@desmoineswa.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Bettina Carey
askbettina@gmail.com

Saraakiisha Booliska ee Des Moines waxay ku sugar yihiin jiidda hore 24/7, laakiin maalgelinteenahadda maaha mid la jaan qaadaysa baahiyaha sii kordhaaya ee bulshadeena. Xaafad badqab leh keliya ma ilaalso adiga iyo qoyskaaga waxay sidoo kale kor u qaadaysaa qiimaha hantidaada. Marka magaaladeena ay la kulanto kororka dadweynaha iyo heerka dambiyada oo sii kordhaaya, baahida adeegyada booliska ayaa sii kordhaysa. Hase yeesh, miisaaniyadda magaaladu ma taageeri karto adeegyadaan muhiimka ah iyada oo aan la helin maalgelin dheeraad ah.

Hadda, heerka canshuurta hantida waa \$0.90 ka mid ah \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay. Canshuurta Kor-U-Qaadidda ee Badqabka Dadweynaha ee la soo jeediyay ayaa tan kor u qaadi doonta ilaa iyo \$0.50 sannadka 2025, taasoo u oggolaanaysa magaalada inay sii haysato saraakiisha hadda jirta, lagu soo daro afar sarkaal oo booliis ah, oo ay dabootsho kharashaadka muhiimka ah sida baabuurta booliska iyo adeegyada maxkamadda. Hanti qiimaheeda yahay \$600,000 oo hanti ah, kororkaan wuxuu gaarayaa 82 senti oo keliya maalintii - maalgashi ku aaddan badqabka iyo daryeelka Des Moines.

Cabbirkana waxa uu wanaajinayaa hufnaanta ka jawaabista waxaana uu xoojinayaa joogitaanka booliska, taasoo kor u qaadaysa badqabkaaga, iyo qoyskaaga. Canshuurtaan la'aanteed, waxaan halis weyn ugu jirnaa dhimmis weyn oo ku yimaada ciidamadeena booliska, taasoo suurtagal ah in ay keento wakhtiyajawaab celin ah oo sii tartiibsan. Codeyn ah *Haa* ee Soo jeedinta Lr. 1 waa codeyn ah in Des Moines lagu sii hayo badqab iyo ammaan. Aan siino booliskeenna agabka ay u baahan yihiin si ay u ilaaliyaan bulshadeena. Kaa dhaafitaanka canshuurta ayaa laga yaabaa inay heli karaan waayeellada, dadka naafada ah, iyo halyeyadii hore ee naafada ah.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Canshuurtaan badqabka dadweynaha ayaa lama huraan u ah ilaalinta badqabka bulshadeena. Waxay booliskeenna ka gaashaamaysaa dhimmista miisaaniyadda waxayna ilaalinaysaa badqabka dadweynaha in laga gooyo meelaha kale ee sanduuqa guud. Canshuurtu waa kordhin 3.85% oo keliya ah oo ku aaddan wadarta canshuurtaada hantida, iyadoo lacagaha lagu haynaayo sanduuqa badqabka dadweynaha ee u go'an si loo helo daah furnaan buuxda. U codeynta canshuurta waa u codeynta badqabka, amniga, iyo wanaaggaa sii socda ee Des Moines.

Bayaanka looga soo horjeedo

Susan White
susandrdo@aol.com

Bishii Nofeembar ee la soo dhaafay, Golaha Magaaladuwu iska dhega tiray digniimaha, waxayna ansixiyeen miisaaniyad khaldan, qoraagana waxay ku abaal mariyeen xaq-bixin sagootin shaqo oo gaaraysa \$450,000. Ka dib, waxay soo qateen 24 milyan oo deyn ah oo aan wax tixgelin yar laga siin dib u bixinteeda. Waxay hadda filayaan canshuur bixiyeyaasha inay daboolaan jaahilnimadda, *iyagoo xitaa sii wato ku khasaarinta malaayiin mashaariic* aan dakhli soo saarayn sida doonta rakaabka dadweynaha iyo Jaran-jarada Dekedda yar (Marina Steps).

Kordhintan ah 57% ee canshuurta maxalliga ah waa culays aan la aqbali karin oo saaran qoysaska shaqeeyaa. Dhibaatada dhabta ah ee jira waa Golaha Magaalada oo sii wada *maamul-xumada maaliyadeed iyo daah furnaan la'aanta*. Daah furnaanta waxay abuurtaa kalsooni, iyo in lacagtaan la soo ururinayo lagu dhex qariyo inay tahay arrin ku saabsan badqabka dadweynaha waxay taas dhaawacaysaa daacadnimadabooliiska iyo Golaha. Iyo hanjabaadaha ah in la burburinaayo jardiinooyinka iyo xarumaha madada-looyinka waa eedsiin iyo xumaan. Waan ka daalnay in nalagu cannaanto "*faham la'aanteenda*" miisaaniyadda marka uu Goluuhu qarinayo xaqiqada oo uu diido in la tixgeliyo mudnaanta muwaadinka.

Waxaan horeba u soo muujinay ka soo horjeeditaankeena bishii Agoosto, *Goluhuna wax dadaal ah ma uusan samayn ee wax ka badalid habkooda ama soo jeedintaan*. Isla Xub-nihii Golaha ee dhega la'aanta ka ah codka ee taageeray masiibada maaliyadeed ayaa weli wax maamulaya. Halkii ay dib ugu noqon lahaayeen inay canshuurta kordhiyaan, waa in ay diiradda saaraan habab wax soo saar leh si kor loogu qaado dakhliga loona dhimmo kharashaadka khasaaraaha leh. Mar kale ku Codee Maya.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Soo jeedinta 1 waa Faashadayn (Band-Aid) meel looga baahan yahay qallin weyn. Xitaa haddii la ansixyo, magaaladu waxay saadaalisay *hoos u dhac dhaqaale oo ah tobanka sanno ee soo socda oo dhan*. Isbeddel aasaas ayaa loo baahan yahay, ama waxaan dib u soo celin doonaa waalnimadaan dhowrkii sannaba mar. Taasi waxay ciqaabaysaa booliska iyo sidoo kale codbixiyeyaasha. Ansixin miisaaniyad way adagtayah; *in la iska indho tiro waxa muuqda waa dayac*. Sida ugu dhakhsaha badan ee aan u bilowno ku noolaanshaha gudaha intii aan awoodno, ayaa ka sii wanaagsan. Jooji mashaariicda aan waxtarka lahayn oo ku sii soco waxyalaha kale ee beddelaad ah ee kor u qadaaya dakhliga ee *aad haysato*.

Soo Jeedinta Lr. 1

Cusboonaysiinta Canshuurta Hantida ee Loogu Talagalay Gaadiidka

Duqa Magaalada iyo Golaha Magaalada ee Seattle ayaa ansixiyay Xeerka 127053, ee khuseeya beddelaadda maalgelinta loogu talagalay dayactirkha gaadiidka ee magaalada oo dhan iyo horumarinna.

Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay beddeli doontaa canshuur wakhtigeedu dhammaanayso si loo maalgeliyo mashaariicda badqabka iyo marin u helitaanka, sida: laamiga, dayactirkha geesaha waddada iyo buundada, iyo casriyaynta kaabayaasha; horumarinna gaadiidka; hagaajinta isku xirka tareenka fudud; geesaha waddada oo cusub; iyo dhimmista wasakhda.

Waxay oggolaanaysaa canshuur kordhin siddeed-sanno ah oo ururinta laga bilaabi doono sannadka 2025 oo ah qiyasahaan \$0.65/\$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, ilaa iyo ugu badnaan \$2.71/\$1,000. Xaddidaadaha canshuurta ee 2026-2032 waxa lagu xisaabin doonaa iyadoo la isticmaalaayo caddadka canshuurta caadiga ah ee 2025. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee dadka muwaadiniinta waayeellada iyo naafada ayaa khuseeya.

Ma tahay in canshuurtaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka cabbirkan oo dhammaystiran ayaa laga heli karaa laga bilaabo bogga 133.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr.1

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyyad fudud (RCW 84.55.050)

Bayaanka sharaxaadda

Soo jeedinta Seattle 1 waxay beddelaysaa canshuurta gaadiidka ee wakhtigeedu dhammaanayso, taasoo soo xaraynaysa ugu badnaan \$1,550,000,000 muddo siddeed sanno gudahood si loogu kharash gareeyo 11 qaybood oo barnaamij la xiriira gaadiidka oo 11 qaybood ah. Xeerka 127053, Qaybta 6 iyo Lifaaqa A, ee xagga dambe kaga jira buug-yaraahan, ayaa sharaxaaya qaybahaan iyo caddadyada lacagta loo qoondeeyay.

Qayb kasta caddadkeeda ayaa laga yaabaa in uu xeerka beddelo – iyadoo la adeegsanayo aqlabiyyad fudud oo Golaha Magaalada ah, haddii uu isbeddelku yahay boqolkiiba tobantama ka yar, iyo 3/4 aqlabiyyad haddii isbeddelka uu ka sareeyo boqolkiiba tobant. Guddi kormeereed oo uu hoggaaminayo deganaha ayaa kormeeri doona oo ka warbixin doona horumarka barnaamijka.

Si gooni ah, soo jeedintaan waxay Magaalada uga baahan tahay inay si ku habboon u qoondeeyso ugu yaraan \$50,740,000 sannadkii (oo loogu talagalay ujeeddooyinka gaadiidka, iyadoo la isticmaalaayo dakhliga Sanduuqa Guud).

2025, sannadka ugu horeeya ee ururinta soo jeedintaan, wax ka badan \$187,000,000 ayaan la soo gelin doonin. Heerka canshuurta dheeraadka ah ee la xiriira kororka soo jeedintaan ee mulkiilaha guri kasta waxa uu noqonayaa ku dhawwaad \$0.65 ee ka mid ah \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, iyo heerka ugu badan ee wadarta canshuurta guud waa \$2.71/\$1,000. Ka dhaafitaanka RCW 84.36.381 ee dadka muwaadiniinta waayeellada iyo naafada ayaa khuseeya.

Canshuuraha uu codbixiyuu ansixiyo la'aantood, Magaaladu ayaa guud ahaan wuxuu sharciga gobolka ku xaddidaa inay kordhiso canshuuraha hantida ee sannadlahaa ah oo aan ka badnay boqolkiiba hal ka sareeyaa caddadka ay Magaaladu heshay sannadkii ka horeeyay. Ka dib marka soo jeedintaan ay dhammayso canshuur qaadista sannadka 2032, ugu badnaanta kororka ah boqolkiiba hal ayaa waxaa loo xisaabin doonaa sida in soo jeedintaan aan lasoo ansixin.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Bill LaBorde

Maamulaha Xiriirka Golaha & Dowladda,
SDOT
(206) 684-7623
bill.laborde@seattle.gov

Bayaanka lagu taageerayo

Katie Garrow, Bruce Harrell, Rachel Smith
keepseattlemoving.com

Soo jeedinta 1 waxay *Seattle ku hayn doontaa inay socoto* iyada oo maalgelinta muhiimka ah lagu samaynayo jidadka gabowga ee magaaladeena iyo buundooyinka, maalgelinta la dedejiyey ee geeska waddooyinka, isku xirkas badqabka leh ee dugsiyada iyo gaadiidka, iyo badqabka iyo waaraitaannada muhiimka ah ee horumarka. Cabbirkhan wuxuu sii dhisi doonaa guusha laga gaaray canshuurta hadda jirta, ee wakhtigeedu dhammaanayo, oo ay ku jiraan:

Diirad Saarista Badqabka Degdegga ah iyo Baahiyaha Dhaqdhaqa-aqa: Dib u habeyn 15 waddo oo si weyn loo isticmaalo Seattle oo dhan; ku buuxi godadka 72 saacadood gudahood; cusboonaysiinta badbaadada iyo makaanikada 3 Buundooyinka Kanaalka Maraakiibta; dayactirkha Ballard, Magnolia, iyo buundooyinka kale ee gabowga; dhis 500 baloog oo cusub oo laamiyo ah; iyo hagaajinta iftiinka, isuduwwidda calaamadaha, iyo jidadka magaalada oo dhan.

Hagaajinta Isku Xirkha, Helitaanka Gaadiidka meel uu maro, iyo Joogtaynta: Hagaajinta isku xirkha xarumaha tareennada fudud ee dadka lugeeyaa iyo gaadiidka dadweynaha, dugsiyada, iyo meelaha bulshada ay aadaan; maalgelinta 160 tareen "mashruuc goob" si loo dedejiyo basaska loona hagaajiyo iftiinka, aragtida, iyo badqabka goobaha ay basaska Metro istaagaan; xiritaanka goobo koronto oo la heli karo oo lagu buuxiyo gawaarida elektarooniga oo ku yaalla maktabada, jardiinooyinka, iyo xarumaha bulshada; hagaajinta badqabka jidadka baaskiilkha ee gaarka ah; oo ay beerraan kumanaan geedo cusub oo hareeraha waddooyinka ah.

Xirmadaan 8-da sanno ah waxay heli doontaa kormeer dadweyne oo madax-banaan si loo xaqijiyo la xisaabtanka iyo bixinta mashruuca. Taageerooyinka waxaa ka mid ah Duqa Magaalada Harrell oo leh taageerada Golaha oo loo dhan yahay; Golaha Shaqaalaha MLK; Seattle Metropolitan Chamber (Aqalka Magaalo Weynta ee Seattle); Transportation Choices Coalition (Ururka Dookhyada Gaadiidka); Downtown Seattle Association (Ururka Bartamaha Magaalada ee Seattle); Xuquuqda Naafada Washington, Naadiga Baaskiilkha Cascade; Seattle Neighborhood Greenways (Waddooyinka Cagaaran ee Xaafadaha Seattle); iyo qaar kaloo badan!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Muddo 18 sanno ah, canshuurtaan waxay ay bixinaysay badqabka, dayactirkha, iyo hagaajinta gaadiidka ee xaafad kasta oo Seattle ah, iyada oo leh kormeer madax-banaan oo hubinaaya isla xisaabtanka. Dib-u-cusboonaysiinta waxay diiradda saaraysaa dayactirkha buundada iyo waddooyinka, iyadoo la maalgelinayo waddooyinka, tareenka fudud, iyo mudnaanta korontada.

Canshuurta la'aanteed, buundooyinka, waddooyinkeena, iyo geesaha waddada way sii xumaan doonaa, taasoo horseedaysa dayactir qaali ah mustaqbalka. Ku codee Haa si aad u hesho waddooyin ammaan ah, ciriiriga gawaarida oo yaraada, iyo magaalo isku xiran oo loogu talagalay dadka oo dhan ah. Mustaqbalka Seattle way u qalantaa!

Bayaanka looga soo horjeedo

Nina Martinez, Margaret Pageler, Alex Pedersen

Seattle, ku dheganaada boorsooyinkiina. Haddaan nahay hoggaamiyeeyasha madaniga ah ee ka madax banaan siyaasadda, waxaanu ku boorinaynaa deriska inay canshuurtaan gaadiidka ee xun ku *codeeyeen Maya*. Maxaad u bixin doonto canshuurta ugu weyn ee taariikhda magaalada, marka ay ka dhigto buundooyinka, waddooyinka, iyo geesaha waddooyinka kuwo leh burburka ugu khatarsan iyada oo ay sii xumaanayso ciriiriga taraafikada?

Lama awoodi karo: \$1.55 bilyan -- koror ka badan 75% -- waa kharash aad u badan waxanya dadka Seattle ee leh dakhliga darajada dhexe u isticmaalsaa sida mashiinka ATM-ka.. Keliya guri lagu qiimeeyay qimo dhex dhexasaad, taasi waa \$500 aad u weyn sannadkii oo aad u haysan karto ka kharashyadaada gaadiidka ahaan.

Caddaadal daro iyo sinnaan la'aan: Mulkiileyyasha guryaha ayaa kugu shubi doona kororka canshuurtaan hantida sida ka kiro sii sareysa ahaan. Siyaasiyiintu waxay iska indho tireen fursad ay ku maalgelinayaan canshuurtaa kala bar ayagoo adeegsanaya canshuuraha saamaynta leh ee ay isticmaalaan 70 magaalo oo kale. Aqalka Magaalada ayaa ku guul daraystay falanqeeynta sinnaanta sababto ah sahankooda wuxuu muujinayaa dadka midabka leh intooda badan inay kasoo horjeedaan canshuurtaan.

Aan waxtar lahay: Sida *Seattle Times* ka digtay, haddii dadku oggolaadaan canshuurtaan, "waddooyinka Seattle waxaa laga yaabaa in ay ku noqdaan xaalad ka sii xun sida ay maanta yihiin." Waxay khatar gelinaysaa badbaadada iyadoo meeshaa ka saaraysa Injineerkii Buundada. U ololeeyeyaasha waxay canshuurta ka buuxiyeen mashruucyo aan loo baahnayn - oo ay ku jiraan waddooyinka baaskiilada oo si naadir ah loo isticmaalo oo carqaladeeyaa ganacsiyada yaryar. *Maya ugu codee Soo Jeedinta 1* si Hoolka Magaalada dib loogu celiyo aag qorshe dejin. *Seattle waxay u qalantaa si ka sii fiican.*

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Wax walba oo ay sheegaan siyaasiyiinta iyo dadka u ololeeyaa ayaa hagaajin karin Soo jeedinta 1. Waxay si been abuur ah u sheeganayaan inay tahay "dib u cusboonaysiir" balse *waxay tirtireen Gargaarka Saxmadda!* Marin habaabinta "ka dhaafitaanka" waxay ku guul daraysatay inay ilaaliso kiraysteyaasha, oo ay ku jiraan waayeellada ku jira guryaha hawlgabka. Xubnaha Golaha waxay awoodaan *soo aqal-oobedde* oo si xun ugu isticmaalaan lacagta dhammaan jidadka baaskiilkha ee ay rabaan hadhowto. Dadka lugaynaya ayaa la kulma dhimashada ugu badan ee gaadiidka, laakiin keliya 9% ayaa loo qoondeeyay geesaha waddooyinka?

Kooxaha danaha gaarka ah leh ee taageera canshuurtaan ayaa lacag ka suaaya -- lacagtaada. *Ku codee Maya ee Soo Jeedinta 1.*

Soo Jeedinta Lr. 1

Curaarta Waajibaadka Guud ee Dhisitaanka Dugsiga iyo Horumarinnada Xarunta - \$532,100,000

Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Auburn Lr. 408 ayaa ansixiyay soo jeedin ku aaddan curaarta. Soo Jeedintaan, waxay Degmada u oggolaanaysaa inay beddesho oo ay qalabayso Dugsiga Dhexe ee Cascade iyo Dugsiga Hoose ee Alpac; in la dhiso oo la qalabeeyo Dugsi Dhexe Lr. 5 oo cusub; in la sameeyo horumarinnada dugsiga iyo xarunta taageerada si loo yareeyo buuxdhaafka loona hagaajiyo badqabka iyo nidaamyada dhismaha; in la bixiyo \$532,100,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan muddo 20 sanno gudahood, iyo in la qaado canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 1394. Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr.1

Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyaashii dhiibtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Auburn Lr. 408 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1394 oo ansixinaaya soo jeedin loogu talagalay curaarta si loo yareeyo buuxdhaafka oo loona hagaajiyo badqabka iyo nidaamyada dhismaha ee muhiimka ah. Tani waxay Degmada u fasaxaysaa inay beddesho oo ay qalabayso Dugsiga Dhexe ee Cascade; beddelidda iyo qalabaynta Dugsiga Hoose ee Alpac; in la dhiso oo la qalabeeyo dugsi dhexe oo cusub #5; in la sameeyo horumarinnada raasumaalka duggiyada iyo taageerada dhismeyaasha Degmada oo dhan, inay bixiso \$532,100,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan muddo 20 sanno gudahood, iyo in la ururiyo canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, sida lagu sheegay Qaraarka Lr. 1394.

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato in aad u qalanto, la xiriir qiimeeyaha Degmadaada.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Cindi Blansfield

Ku-Xigeenka Kormeeraha Guud, Ganacsiga & Hawlgallada
(253) 931-4930
2024bond@auburn.wednet.edu

Bayaanka lagu taageerayo

Cari Manry, Jason Wright, Maggie Keller
auburncitizens4schools@gmail.com

Waxaan ku boorinaynaa codeynta *Haa* ah ee curaartaan. Waxay bixin doontaa dugsi dhexe oo cusub oo lagama maarmaan ah si loo daboolo tirada sii kordhaysa ee ardayda oo lagu beddelo Dugsiga Dhexe ee Cascade iyo Dugsiga Hoose ee Alpac.

Maamulidda miisaaniyad sannadeedka caqli galka ah ee maamulka Degmada Dugsiga ee Auburn, hawlgabnimada deynta, iyo dhisitaan ah wakhtigii loogu talagalay iyo miisaaniyaddii loo qoondeeyay ayaa muujinaaya isla xisaabtanka ay ka qabaan codbixiyeyaasha degmada. Iyada oo ku saleysan siyaasadahan maaliyadeed ee caqliga leh, saameyn taada waxay noqon doontaa \$810 oo ka mid ah \$1,000 ee qiimeynat la qiimeeyay, ama \$37.13 bishii guri qiimihiisu yahay \$550,000.

Codbixiyeyaasha degmadu waxay wakhti kasta iyo mar kale soo bandhigeen taageerada baaxadda leh ee maalgelinta dugsiga; waxaan kaa codsanaynaa inaad mar kale maalgeliso kaabayaasha dugsiyadeena si aan u ilaalino horumarka carruurteena. Ma jiro wax gargaar ah ama qorshe oo ka socda Olympia oo si buuxda u maalgeliya waxbarashada gudaha gobolka. Auburn ayaa had iyo jeer maalgashtay waxbarashada iyo guusha ardaydeena - Fadlan curaartaan u codeey *Haa* sii aan dugsiyada Auburn ugu hayno inay ahaadaan kuwo xooggan.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Codbixiyeyaasha Auburn SD waa inaysan leexsan ra'iyada ka baxsan degmada, ra'iyada iyo qiyaasitaanka ka baxsan deegaanka ee baahiyaha bulshadeena.

Canshuurta raasumaalka maaha mid wax ku ool ka ah gudaha Auburn. Qiimaha la qiimeeyay ee guryuhu kuma filna in lagu dhiso dugsiyadaan loo baahan yahay. Degmadu waxay kala fogeysay curaarta si ay u uga dhigto heerka canshuurta sida ugu macquulsan mid aan kor u kacayn. Fadlan mudnaanta sii carruurta adiga oo hubinaaya inay haystaan deegaan waxbarasho oo wanaagsan. AuburnCitizens4schools@gmail.com

Bayaanka looga soo horjeedo

Jeff Heckathorn
BondNo.com

Degmada waxay heshay xubnaha guddiga taageeridda laakiin ma aysan helin xubnaha guddiga kasoo horjeedidda oo loogu talagalay buug-yaraha codbixiyeyaasha. Markaa waxaan si mutadawacnimo ah oo aan u soo maray degmada isugu xilqaamay si aan gacan uga geysto bixinta dheelitirnaan si codbixiyeyaasha loo soo bandhigo labada dhinac ee arrinta - sida dimuqraadiyadda oo kale.

Falanqeeynta kharashka degmadu qiyas ahaan wuxuu aad u hooseeyaa ilaa iyo 150%. Mulkiilaha leh hanti gaaraysa Canshuurta Sannadka 2024 ee qiimeynat la qiimeeyay oo dhan \$550,000, waxa uu filan karaa waajib canshuureed, curaartaan oo keliya, \$1,200 sannadkii celcelis ahaan 22-ka sanno ee soo socda.

Curaartaan ayaa la wadaa sannad aad uga horeeya wakhtiga. Jadwalka curaarta wuxuu muujinayaa in ururinta canshuuraha aan la bilaabi doonin ilaa iyo 2026. Sidoo kale, Auburn SD waa in ay ka guurtaa curaarta dulsaarka sare leh oo ay adeegsato qorshe wanaagsan, faa'iido badan, dulsaar la'aan, 6-sanno, canshuuraha raasumaalka sida degmooyinka kale ay u dhaqmaan. Shirkadda maamulka curaarta ayaa ku qiyaastay dulsaarka curaarta oo keliya inuu noqon doono \$459M marka lagu daro lafaha curaarta la xayasiisay ee \$532M oo noqonaysa wadarta dhabta ah ee canshuur bixiyeyaasha hantida maxalliga ah oo gaaraysa \$991M.

Iyo canshuur bixiyeyaasha hantida maxalliga ah ayaa isla markiiba horey gacanta kula jira si ay u sii wadaan bixinta lacagaha curaarta ee hadda jira oo ah \$612M oo aan si buuxda loo bixin doonin ilaa 2040. Wixii macquul ah, falanqeeynta qiimaha xisaab ahaan sax ah, eeg BondNo. com

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Waa wax laga xumaado in la maqlo degmooyinka dugsiyeedka oo xisaab qaldan isticmaalaya dooddooda maaliyadda ee ku aaddan cabbirradooda canshuuraha. Tani waa sababta ay u jiraan kormeero iyo dheelitirnaan sida guddiyada taageeridda iyo ka soo horjeedidda. Tani waa sababta sharci-dejiyeeyasha ugu baahan yihiin inay curaarta iyo canshuuraha degmada ku dabaqaan siyaasadaha Sharciga Xaqiqa Deenta (Truth In Lending Act (TILA)). Canshuur-bixiyeyaasha waxay mudan yihiin macluumaaad sax ah. Uma codeynayno heerarka canshuurta mustaqbalka ee la qiyaasay. Waxaanu u codeynaynaa caddad doolar ah.

Soo Jeedinta Lr. 1

Curaarta Waajibaadka Guud - \$642,345,000

Guddiga Agaasimeyaasha Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1223 oo ansixinaaya soo jeedinta curaarta. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay casriyayo dhismeyaasha, samayso kor-u-qaadidda badqabka iyo amniga, tayaynta tas-hiilaadka ee ku aaddan tamar waxtar leh, hagaajinta iyo ku kordhinta tas-hiilaadka ee xarumaha ciyaaraha fudud ee Degmada oo dhan, oo ay ku jiraan nalalka, dhisidda iyo qalabaynta dugsi sare oo dhammaystiran iyo samaynta horumarinnada raasumaal kale; inay bixiso \$642,345,000 oo ah curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan muddo 20 sanno gudahood, iyo in la ururiyo canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, sida ku cad Qaraarka Lr. 1223.

Ma tahay in soo jeedintaan la:

Ansixiyo

Diido

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa inaad
Ansixiso ama Diido
Soo Jeedinta Lr.1

Shuruudaha ansixinta: 60% codeyn haa ah iyo soo bixitaanka ugu yaraan 40% ee codbixiyeyashii dhiibbtay warqadaha codbixinta doorashadii guud ee ugu dambeysay (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(b))

Bayaanka sharaxaadda

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1223 oo ansixinaaya soo jeedinta curaarta. Tani waxay Degmada u oggolaanaysaa inay samayso casriyaynta lagama maarmaanka u ah badqabka iyo amniga gudaha iyo dibadda, beddellassa, iyo kor u qaadista; in la sameeyo hagaajinnada ee xarunta Degmada oo dhan, kobcinta waxtarka tamarta, casriyaynta, iyo/ama dayactirka, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, saldhigiyada laga buuxiyo dhalada biyaha; Dhisitaanka beddelaad cusub iyo/ama dib-u-qaabaynta ee Dugsiga Sare ee Gibson-Ek, Dugsiga Sare ee Issaquah, Dugsiga Sare ee Liberty, iyo Dugsiga Sare ee Skyline si loogu oggolaado balaarin loogu talagalay goobaha hal-abuurnimada iyo diyaarinta shaqada; dhisidda iyo qalabaynta dugsi sare oo dhammaystiran; dhismo dheeraad ah iyo/ama dib u habeyn lagu sameeyo aagga la wadaago iyo meelaha garoonnada lagu ciyaaro si kor loogu qaado badqabka iyo gelitaanka; in la sameeyo cusboonaysiinta lagama maarmaanka ah iyo horumarinta Degmada oo dhan si loo abuurro jawi waxbarasho oo dabacsan oo hawl badan iyo dareen loo dhan yahay; in la casriyeeyo goobaha manhajka iyo ciyaaraha ee Degmada oo dhan si loo kordhiyo isticmaalka iyo waxtarka; in la dhiso oo la qalabeeyo goobaha dabaasha oo Degmada oo dhan ah si loo kordhiyo bixinta manhajka iyo ciyaaraha fudud; ku daritaanka nalalka ee dugsiyada soo socda: Dugsiga Dhexe ee Cougar Mountain, Dugsiga Dhexe ee Beaver Lake, iyo Dugsiga Dhexe ee Pacific Cascade si loo kordhiyo isticmaalka iyo waxtarka manhajka iyo goobaha ciyaaraha; iyo in la bixiyo maaraynta mashruuca horumarinta hore loo soo sheegay, si loo soo saaro \$642,345,000 ee curaarta waajibaadka guud oo ku buuxsamaya ugu badnaan 20 sanno gudahood, iyo in la ururiyo canshuuraha hantida ee xad dhaafka ah sannad walba si dib loogu bixiyo curaarta, sida lagu sheegay Qaraarka Lr. 1223.

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato haddii aad u qalanto, wac Qiimeeyaha Degmada King (206) 296-7300.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Martin Turney

Madaxa Maaliyadda iyo Hawlgallada
(425) 837-7011
turneym@issaquah.wednet.edu

Bayaanka lagu taageerayo

Dawn Peschek, Wright Noel, Korista Smith-Barney
www.visitvote.org

Haa ugu codee Carruurteena iyo Badqabka Dugsiyada! Mustaqbalkeenu wuxuu ku xiran yahay waxbarashada ubadkeena.

Guddi muwaadiniin ah oo ka kooban 60 qof oo madax-banaan oo ka kala socda bulshadeena ayaa dib u eegis ku sameeyay soo jeedinta curaartan.

Dugsiyo Badqab leh: Curaartan waxay wanaajin doonaa badqabka iyo amniga iyada oo la cusboonaysiinaayo tas-hiiilaadka si ay uga hor tagto tuugada soo galaaya dugsiyada. *Dayactirka iyo cusboonaysiinta dhismeyaasha iyo galabka sii gabooxaya:* 27 dhismeyaal dugsi ayaa u baahan in saqfkooda la beddelo! *U diyaarinta ardayda shaqooyin wanaagsan:* Curaartan waxay hirgelin doontaa barnaamijyada waxbarashada farsamada ee diiradda saaraya shaqada oo ay ku jiraan shaqooyinka xirfad-baradka, shahaadooyin iyo waayo-aragnimada shaqada ee dhinacyada sida daryeelka caafimaadka, naqshadaynta, wax soo saarka, iyo STEAM. Tani waxay ka dhigan tahay fursado dheeraad ah oo loogu talagalay dhammaan ardayda haddii qorshahooda ay ku jiraan kulliyad, dugsi farsamo ama gelitaanka xoogga shaqada markay qalin-jabiyaan. *Hubitaanka in ay si siman u heli karaan dhammaan ardayda:* Curaartan waxay wanaajinaysaa helitaanka oo waxay maalgelinaysaa goobo cusub ee waxbaraso iyo ciyaaraha oo loogu talagalay ardayda naafada ah. Curaartan *waxay yaraynaysaa buuxdhaafka* Dugsiyada Sare ee Issaquah iyo Skyline iyo waxay taageeraysaa hadafka ISD ee dhimmista saamaynta deegaanka iyo kordhinta waxtarka tamarta.

Curaartan waxay fududeyn doontaa ujeeddada Degmada Dugsiga Issaquah School ee ah in ay taageerto ardayda oo dhan iyada oo aan loo eegayn heerka dakhligooda, qoomiyadahooda, jinsigooda, ama diintooda. Dadku waxay u soo guuraan halkan si ay ardaydooda u dhigtaan dugsiyadeena wanaagsan. Nagu soo biir si aan u xoojino bulshadeena anagoo taageerayna dhammaan ardayda. Ku Codee Haa!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Ha u oggolaan in qaar ka mid ah kuwa dhaha maya ay ku khiyaameeyaan. Tabarruceyaasha matalaaya dhammaan aagagga iyo tirakoobka degmada ayaa ku taliyay curaarta: <https://www.isd411.org/about-us/bondsandlevies/bond-committee>. \$44-ka milyan ayaa dib loogu soo jeediyay kulan dadweyne si wax looga qabto badqabka degdegga ah, amniga, iyo baahiyaha waxbarasho. Dhammaan ardayda dugsiyada sare ayaa sare uga dhaafay xadka iyadoo lasii saadaalinaayo arday badan oo kale. ISD waxay u baahan tahay dugsi sare oo cusub.

Iyo guri lagu qiimeeyay \$1M curaartu waxay keliya mulkiilaha ugu kici doontaa \$24 bishii. Ku biir bulshada, ku codee Haa!

Bayaanka looga soo horjeedo

Sam Lin, Daniel Sreebny, Michele Williams
ccare98027.com

Waxaan nahay waalidiin iyo barreyaal khibrad leh. Waa xaa taageernaa maalgelinta u adeegaysa baahiyaha dhabta ah ee ardayda iyo macallimiinta - laakiin waxaanu ka soo horjeednaa been-abuurka maaliyadda iyo isticmaalka xun ee canshuur bixiyeyaasha. Nasiib darro, soo jeedintaan ayaa tuaale u ah labadaba. *Ku Codee Maya!*

Dugsiga Issaquah wuxuu lumiyay kalsoonidii oo uma qalmo codkaaga. Waxay sii wadaan inay ku adkaystaan inay wax u qabtaan sidii hore oo kale. Waxay si aan habboonayn ugu qoondeeyeen \$44,000,000 Dugsiga Sare ee cusub ee aad u codeysay 2022. Hadda waxay ku weydiisanayaan isla lacagtaas mar kale. Curaartan waxay ku daraysaa \$182,700,000, taasoo ka dhigaysa wadarta kharashka Dugsiga Sare ee cusub in ka badan \$300,000,000. *Ku Codee Maya!*

Soo jeedinyaasha khaldan iyo siyaasadaha guul daraystay ee Degmada Dugsigu mulkiileyaasha guryaha ku dabaqi doontaa kumanaan kun oo doolar oo canshuuro dheeraad ah, oo loogu tala galay dhismo cusub oo saadaasha diiwaan gelinta aysan qil u yeeli karin. Taasi waa marka la dulsaarro \$814,000,000 ee weli lagu bixinaayo Curaarta 2016. Soo jeedintaan kama hadlayso baahiyaha dhabta ah ee ardayda. *Ku Codee Maya!*

Guddiga Dugsiga iyo Maamulka ma aysan dhagaysan dadka ay u adeegaan. Ka codso siyaasiyiinta iyo shaqaalaha xafiisyada inay ixtiraamaan tabashooyinka dadka ay matalaan. Mustaqbalka carruurteena ayaa halis ku jira. Tani waa fursaddaada ugu fiican ee aad codkaaga ku samayn karto. Fadlan *ku Codee Maya!*

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Soo jeedintaan waxay ku guul daraysatay inay si waaffi ah wax uga qabato baahiyaha dhabta ah ee ardayda iyo macallimiinta. Hawl wadeennada ISD waxay rabaan inaad illowdo sida xun oo ay u maamuleen kana leexiyeen doolarada canshuur bixiyeyaasha wakhtiyadii la soo dhaafay.

U sheeg degmada dugsiga inay dib ugu noqdaan miiska qorshaynta oo ay abuuraan soo jedin ka wanaagsan oo si dhab ah u taageerta baahiyaha waxbarasho ee muhiimka ah ee ardaydeena. *Ku Codee Maya* llaa inta hawl wadeennada degmada ay soo bandhigaan soo jedin macquul ah oo leh mas'ul maaliyadeed. Intaa ka dib, waa *lacagtaada*.

Soo Jeedinta Lr. 1

Canshuurta Mashaariicda Raasumaalka iyo Teknolojiga

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Kent Lr. 415 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1680 ee khuseeya soo jeedin ku aaddan canshuurta beddelaadda ee mashaariicda raasumaalka iyo teknolojiga. Haddii la ansixiyo, soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay qaaddo canshuuraha xad dhaafka ah ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada, si ay u bixiso maalgelinta mashaariicda raasumaalka ee loogu talagalay badqabka ardayga, amniga, waxbaridda, adeegyada fasalka iyo taageeridda, iyo baahiyaha teknolojiga.

Sannadka Ururinta	Qiyaas Ahaan Qiimaha Canshuurta/\$1,000	Caddadka Canshuurta
2025	\$0.72	\$32,200,000
2026	\$0.70	\$32,600,000
2027	\$0.68	\$33,000,000

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa

Maya

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta Lr.1

